GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LA-SOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

# WARBIXIN

## FAAHFAAHINEYSA SOOJEEDINTA WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 5AAD ILAA 9AAD EE DASTUURKA

JANNAAYO 2026

**DIYAARIYEY:**
GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGELINTA DASTUURKA (GMDHD)

**ANSIXIYEY:**
GUDDIGA DIB-U-EEGISTA IYO LASOCODKA HIRGELINTA DASTUURKA

## Tusmo


Kalmadda Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka ....8
Hordhac ....11
Guulihii la gaaray: Ansixintii cutubyada 1aad – 4aad ....11
Tabtii loo maray ansixintii cutubyada 1aad – 4aad ee Dastuurka ....11
Casharrada laga bartay hawshii cutubyada 1aad ilaa 4aad ....13
Diyaarinta Cutubyada 5aad ilaa 9aad ....15
Habraaca diyaarinta wax-kabeddelka loo maray ....15
Tallaabooyinka uu qaaday iyo tabta uu maray GMDHD ....15
Noocyada wax-kabeddelka ee uu sameeyay GMDHD ....16
Heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaran ....17
Latashiyada Soojeedinta Cutubyada 5aad – 9aad ....18
Latashiyada Wejiga 1aad: ....19
Latashiyada Gobolka Banaadir ....19
Daahfurka Barnaamijka Danabeysan ....20
Dawlad Goboleedka Galmudug ....21
Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed ....23
Dawlad Goboleedka Hirshabeelle ....25
Maamulka SSC-Khaatumo ....25
Latashiyada Wejiga 2aad ee Soojeedinta Cutubyada 5aad – 9aad ....26
Latashiyada Qurbojoogta Soomaaliyeed ....28
Shirka Latashiga Hay'adaha Dastuurka Heer Federaal, Heer Dawlad Goboleed iyo Maamulada Kale ....29
Kulammada Wacyigelinta ....30
U Bandhigidda Guddiga Lasocodka Dastuurka Soojeedinta Wax-kabeddelka cutubyada 5aad – 9aad ee Dastuurka ....34
Cutubka Shanaad: Nidaamka Federaalka iyo Baahsanaanta Awoodda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ....36
Madaxa 1aad: Qaabdhismeedka Dawladda ....38
Qodobka 61aad: Heerarka Dawladda ....38
Cilmibaaris: Qaabdhismeedka Dawladda ....39
Qodobka 62aad: Dhismaha Dawlad Goboleedyada iyo Soohdimahooda ....39
Cilmibaaris: Dhismaha Dawlad Goboleedka ....40

Qodobka 63aad: Maqaamka Caasimadda ....41
Tusaalooyinka Caasimadaha Dalalka Federaalka Ah....42
Cilmibaaris: Magaalamadaxda ....43

Madaxa 2aad: Iskaashiga Heerarka Dawladda ....44
Qodobka 64aad: Mabaadii'da Federaalka....44
Cilmibaaris: Mabaadii'da Federaalka ....44
Qodobka 65aad: Xiriirka Iskaashi ee u Dhexeeya Heerarka Kala duwan ee Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ....46
Cilmibaaris: Xiriirka Iskaashiga Heerarka Dawladda....47
Qodobka 66aad: Heshiisyada Iskaashiga ee Heerarka Dawladda....47
Cilmibaaris: Heshiisyada Iskaashiga Heerarka Dawladda....48

Madaxa Saddexaad: Dawlad Goboleedyada....48
Qodobka 67aad: Dastuurka Dawlad Goboleedyada ....49
Cilmibaaris: Dastuurrada Dawlad Goboleeyada ....49
Qodobka 68aad: Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedyada ....49
Cilmibaaris: Golaha Wakiillada Dawlad Goboleeyada....51
Qodobka 69aad: Golaha Fulinta Dawlad Goboleedyada ....52
Cilmibaaris: Golaha Fulinta Dawlad Goboleeyada....53

Madaxa Afaraad: Astaynta Awoodaha ee Heerarka kala duwan ee Dawladda....54
Qodobka 70aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawladda Federaalka ....54
Cilmibaaris: Awoodaha u gaarha Dawladda Federaalka....55
Qodobka 71aad: Awoodaha Wadaagga ah....55
Cilmibaaris: Awoodaha Wadaagga ah ....56
Qodobka 72aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawlad Goboleedyada....57
Cilmibaaris: Awoodaha u gaar ah Dawlad Goboleedyada ....58
Qodobka 73aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawladaha Hoose ....58
Cilmibaaris: Awoodaha u gaar ah Dawlad Goboleedyada ....58
Qodobka 74aad: Awoodaha Haraagga ah....59
Cilmibaaris: Awoodaha Haraagga ah ....59
Qodobka 75aad: Erginta Awoodaha....59
Cilmibaaris: Erginta Awoodaha ....60
Qodobka 76aad: Dhexgalka Dawladda Federaalka ....61
Qodobka 77aad: Habraaca Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka....61
Cilmibaaris: Nidaamka Dhexgalka....62
Qodobka 78aad: Xaddidaadda Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka....62
Cilmibaaris: Xaddidaada Dhexgalka ....63
Qodobka 79aad: Korjoogtaynta Aqalka Sare ee Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka ....63
Cilmibaaris: Korjoogtaynta Aqalka Sare ee Dhexgalka ....64

Jaantuska 1aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 5aad....65

Cutubka Lixaad: Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya....67

Madaxa Koowaad: Qodobbo Guud ....67
Qodobka 80aad: Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka ....67
Cilmibaaris: Goleyaasha Baarlamaanka ....68
Qodobka 81aad: Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka ....69
Cilmibaaris: Xilka Xubnaha Baarlamaanka ....70
Qodobka 82aad: Tirada Xubnaha Baarlamaanka Federaalka ....71
Cilmibaaris: Tirada Xubnaha Baarlamaanka ....72
Qodobka 83aad: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka....75
Cilmibaaris: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka....76
Qodobka 84aad: Sababaha Lagu Lumiyo Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka .78
Cilmibaaris: Sababaha lagu lumiyo xubinnimada Baarlamaanka ....80
Qodobka 85aad: Dhaarta Xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka....82
Qodobka 86aad: Xasaanadda iyo Xuquuqda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka ...82
Cilmibaaris: Xasaanadda Xildhibaanka ....83
Qodobka 87aad: Doorasho Xilligeedda Laga Soo Hormariyey ....85
Cilmibaaris: Kala Dirista Baarlamaanka ....86
Qodobka 88aad: Xeer Hoosaadyada Baarlamaanka....88

Madaxa Labaad: Kalfadhiyada iyo Maamulka Baarlamaanka Federaalka ....88
Qodobka 89aad: Kalfadhiyada Baarlamaanka ....88
Cilmibaaris: Kalfadhiyada Baarlamaanka ....89
Qodobka 90aad: Shuruudaha Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka. ....91
Cilmibaaris: Shuruudaha Doorashada Guddoonka ....93
Qodobka 91aad: Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka ....95
Cilmibaaris: Doorashada Guddoonka ....96
Qodobka 92aad: Xilwaayidda Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka ....98
Cilmibaaris: Xilwaayidda Guddoonka ....98
Qodobka 93aad: Kulammada Wadajirka Labada Gole ....100
Cilmibaaris: Kulammada Wadajirka Labada Gole....102
Qodobka 94aad: Guddiyada Baarlamaanka Federaalka ....104
Cilmibaaris: Guddiyada Baarlamaanka ....104
Qodobka 95aad: Guddiga Adeegga Baarlamaanka ....106
Cilmibaaris: Guddiga Adeegga Baarlamaanka....107

Madaxa Saddexaad: Awoodaha Labada Gole Baarlamaanka Federaalka. ....109
Qodobka 96aad: Awoodaha u Gaarka ah Golaha Shacabka....109
Cilmibaaris: Awoodaha Golaha Shacabka....111
Qodobka 97aad: Awoodaha u Gaarka ah Golaha Aqalka Sare ....113
Cilmibaaris: Awoodaha Golaha Aqalka Sare ....114
Qodobka 98aad: Awoodaha Wadaagga ee Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka..116
Cilmibaaris: Awoodaha Wadaagga Labada Gole....117
Qodobka 99aad: Korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka Federaalka....120

Cilmibaaris: Awoodda Korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka......................121
Qodobka 100aad: Heshiisyada Caalamiga ah ..........................................................122
Cilmibaaris: Heshiisyada Caalamiga ah....................................................................123

Madaxa Afaraad: Xeerdejinta Baarlamaanka ..........................................................125
Qodobka 101aad: Hindise Xeereed ..........................................................................125
Cilmibaaris: Hindise Xeereed..................................................................................127
Qodobka 102aad: Soo Bandhigidda iyo Curinta Hindise Xeereed...........................130
Cilmibaaris: Curinta Hindise Xeereed.....................................................................131
Qodobka 103aad: Xallinta Khilaafka ee Hindise Xeer ...........................................133
Cilmibaaris: Xallinta Khilaafaadka Hindise Xeereed ..............................................135
Qodobka 104aad: Hindise xeereed Ka Billowday Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ..............................................................................................................136
Cilmibaaris: Hindise Xeereed Ka Billowday Golaha Shacabka...............................138
Qodobka 105aad: Hindise Xeereed ka Billowday Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka .......................................................................................139
Cilmibaaris: Hindise Xeereed Ka Billowday Golaha Aqalka Sare...........................141
Qodobka 106aad: Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka ..................................................142
Cilmibaaris: Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka..........................................................143
Qodobka 107aad: Dhaqangalidda Xeerarka ............................................................145
Cilmibaaris: Dhaqangalka Xeerarka........................................................................146
Qodobka 108aad: Durid Xeer...................................................................................148
Cilmibaaris: Durid Xeer ..........................................................................................149

Jaantuska 2aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 6aad..............151

Cutubka Toddobaad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ............153
Qodobka 109aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ...........153
Qodobka 110aad: Shuruudaha Doorashada Xilka Madaxwaynaha.........................154
Cilmibaaris: Shuruudaha Doorashada Xilka Madaxweynaha .................................156
Qodobka 111aad: Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ...........................................................................................................157
Cilmibaaris: Doorashada Madaxweynaha.................................................................159
Qodobka 112aad: Dhaarta Madaxweynaha...............................................................160
Qodobka 113aad: Xasaanadda Madaxweynaha .......................................................160
Cilmibaaris: Xasaanadda Madaxweynaha.................................................................160
Qodobka 114aad: Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ..................................................................................................................................162
Qodobka 115aad: Soo Saarista Digreetooyinka .......................................................163
Cilmibaaris: Digreetooyinka Madaxweynaha...........................................................164
Qodobka 116aad: Muddada Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ............................................................................................................166
Qodobka 117aad: Eedaynta iyo Maamuus Kaxayuubinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ..................................................................166
Cilmibaaris: Xil-kaxayuubinta Madaxweynaha........................................................167

Qodobka 118aad: Kusimaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ....168
Qodobka 119aad: Bannaanaanta Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya ....168

Jaantuska 3aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 7aad....170

Cutubka Siddeedaad: Xukuumadda ....172
Qodobka 120aad: Golaha Wasiirrada....172
Cilmibaaris: Golaha Wasiirrada ....172
Qodobka 121aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada ....174
Cilmibaaris: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada ....175
Qodobka 122aad: Xilwaayidda Xubinaha Golaha Wasiirrada ....177
Cilmibaaris: Xilwaayidda Xubnaha Golaha Wasiirrada ....178
Qodobka 123aad: Waajibaadka Golaha Wasiirrada ....178
Qodobka 124aad: Xilka iyo Awoodaha Ra'iisul Wasaaraaha ....179
Qodobka 125aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Ra'iisulwasaare Kuxigeenka....179
Qodobka 126aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Wasiirka, Wasiiru Dawlaha iyo Wasiir Kuxigeenka....180
Qodobka 127aad: Dhaarta Golaha Wasiirrada....180
Qodobka 128aad: Xil-kaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada ....180
Cilmibaaris: Xilkaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada....181
Qodobka 129aad: Xukuumadda Xilgaarsiinta ....182
Cilmibaaris: Xukuumadda Xilgaarsiinta....183

Jaantuska 4aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 8aad....185

Cutubka Sagaalaad: Garsoorka....187

Madaxa Koowaad: Qodobbo Guud....188
Qodobka 130aad: Mabaadi'da Garsoorka....188
Qodobka 131aad: Madaxbannaanida Garsoorka ....188
Cilmibaaris: Madaxbannaanida Garsoorka....189
Qodobka 132aad: Habka Dacwad Qaadista Maxkamadaha ....191

Madaxa Labaad: Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka....191
Qodobka 133aad: Qaabdhismeedka Maxkamadaha Dalka ....191
Cilmibaaris: Taariikh Kooban ee Garsoorka Soomaaliya....192
Nidaamkii Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii Kowaad (1960-1969)....192
Nimaadka Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii 2aad (1969-1991) ....193
Nidaamkii Garsoorkaa iyo Jamhuuriyaddii 3aad (2000-2022) ....193
Noocyada Hannaanka Federaalaynta Garsoorka....194
Hannnaanka Garsoorka Midaysan (Unified Judiciary System) ....195
Hannaanka Is-barbar socda (Dual Judiciary structure)....195
Hannaanka Isku dhafka ah (Integrated Judiciary System)....197
Hannaanka Garsoorka ee ku Habboon Soomaaliya....197

Heshiiskii Jowhar ....197
Mawqifka XFS ee Hannaanka Garsoorka 2018 ....198
Soojeedintii Guddiyadii Dib-u-eegista Dastuurka: ....198
Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran ....199
Nooca ugu habbnoon Dalka Soomaaliya ....199
Qodobka 134aad: Maxkamadda Sare ee Federaalka ....200
Qodobka 135aad: Maxkamadda Dastuurka ....201
Dhismaha Maxkamadda Dastuurka ....202
Dhisidda Maxkamadda Dastuurka ee ku habboon Soomaaliya. ....203
Qodobka 136aad: Maxkamadaha Kore ....204
Qodobka 137aad: Maxkamadda Racfaanka ee Dawlad Goboleedka ....204
Qodobka 138aad: Maxkamadaha Darajada Kowaad ....204
Qodobka 139aad: Garsoorka Ciidammada ....205
Qodobka 140aad: Habraaca Magacaabista Garsooreyaasha iyo Kaaliyeyaasha ....205
Qodobka 141aad: Dhaarta Garsoorka ....205
Qodobka 142aad: Muddada Xil Haynta iyo Da'da Hawlgabka ....206
Qodobka 143aad: Xilwaayidda Garsooraha ....206

Madaxa Saddexaad: Xeer-Ilaalinta Guud ....207
Qodobka 144aad: Dhismaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka ....207
Qodobka 145aad: Magacaabista iyo Xil Ka Qaadsita Xubnaha Xafiiska Xeer-ilaalinta ....207
Qodobka 146aad: Madaxbannaanida Xafiiska Xeer-ilaalinta ....207
Qodobka 147aad: Xilka iyo Awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka ....208
Qodobka 148aad: Awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Dawlad Goboleedka. ....208

Madaxa Afaraad: Maamulka Garsoorka ....208
Cilmibaaris: Maamulka Garsoorka: Golaha Sare ee Garsoorka ....209
Qodobka 149aad: Dhisidda Golaha Sare ee Garsoorka ....211
Qodobka 150aad: Xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka ....211
Qodobka 151aad: Shuruudaha iyo Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka ....212
Qodobka 152aad: Waajibaadka Golaha Sare ee Garsoorka ....212
Qodobka 153aad: Sanduuqa Garsoorka ....213
Cilmibaaris: Sanduuqa Garsoorka ....213
Qodobka 154aad: Fadhiyada Golaha Sare ee Garsoorka ....214
Jaantuska 5aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 9aad ....214

JADWALKA 2A: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLADDA FEDERAALKA .215

JADWALKA 2B: AWOODAHA WADAAGGA AH ....216

JADWALKA 2C: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLAD GOBOLEEDKA ....216

JADWALKA 2D: AWOODAHA U GAARKA AH ....217

DAWLADAHA HOOSE ....217

## Kalmadda Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka



Bismillaahi Raxmaani Raxiim.

Marka aan dib u eegno marxaladaha kala duwan ee ay soo martay hannaanka dib-u-eegista Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxa ay si cad u muujinayaan go'aanka dawladda iyo shacabka Soomaaliyeed ee ku aaddan dhammaystirka Dastuurka. Dadaalladaas waxaa saldhig u ah hirgelinta nidaam dawladnimo oo xasilloon, ku dhisan sarraynta sharciga, kuna salaysan rabitaanka shacabka.

Dastuurka KMG ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu soo maray dib-u-eegis socotay muddo ka badan saddex iyo toban sano. Xilligii Baarlamaannadii 9aad iyo 10aad ma suurtogelin in la horkeeno soojeedinta dib-u-eegista Dastuurka ee la diyaariyay.

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD), Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka iyo Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaanka Federaalka ee u xilsaaran dhammaystirka Dastuurka waxaa u suurtogashay in ay si guul leh ku soo gabagabeeyeen cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka oo uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ansixiyay 30kii Maarso 2024, madaxweynuhu saxiixay, laguna soo saaray faafinta rasmiga ah.

GMDHD isagoo gudanaya waajibkiisa qaran, waxa uu si mug leh u fuliyay hawsha dib-u-eegidda iyo dib-u-habaynta cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka si loo dhammaystiro Dastuurka Federaalka oo shaqadiisu socotay muddo dheer. Guddigu waxa uu diyaariyay soojeedinta wax-kabeddelka shanta cutub ee kor ku xusan. Cutubyada warbixintani khusayso waxay diiradda saarayaan tiirarka muhiimka ah ee dawladnimada sida nidaamka federaalka, awoodaha xeerdejinta, fulinta, iyo garsoorka.

GMDHD waxa uu si nidaamsan oo hufan dib-u-eegis ugu sameeyay cutubyada 5aad ilaa 9aad isaga oo adeegsanaya khibradda dastuurradii Soomaaliya yeelatay iyo khubaro sharciyaqaanno ah. Waxaa kale oo la adeegsaday latashiyo ballaaran oo heer qaran ah oo lala yeeshay bulshada qaybaheeda kala duwan iyo hay'daha dawladda heer Federaal, heer Dawlad Goboleed, Gobolka Banaadir iyo SSC-Khaatumo. Waxaa kale oo lagu soo dhafay heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaran iyo cilmibaarisyo ku salaysan tusaalayaal caalami ah oo laga soo ururiyay waddamo kala duwan.

Ujeeddada ugu weyn ee soojeedinta wax-kabeddelka lagu sameeyay cutubyadan waa in la xaqiijiyo dawladwanaagga, xoojinta kalsoonida muwaadiniinta, kala xadaynta awoodaha hay'adaha, iyo in la abuuro nidaam caddaalad iyo isla xisaabtan ku dhisan. Dastuurka waa heshiiska ugu sarreeya ee bulshada Soomaaliyeed wada leedahay, mana hirgeli karo haddii uusan noqon mid dadku si buuxda uga qayb qaataan.

Waxaa mahad ballaaran mudan dhammaan hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka oo iska kaashaday hawshan muhiimka ah, gaar ahaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Guddiga Baarlamaanka ee Lasocodka Dastuurka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, , bulshada rayidka iyo shacabka Soomaaliyeed ee si firfircoon uga qaybqaatay latashiyada iyo hay'adaha caalamiga ah ee UNDP iyo Midowga Yurub. Waxaan sidoo kale u mahadcelinayaa madaxda Akademiya Goboleedka Af Soomaaliga "AGA", oo guddiga ka caawiyey dhanka sixidda qoraalka.

Waxaan iyana aan halkan laga tegi karin inaan xuso Marxuum Mudane Maxamed Sheekh Cusmaan Jawaari.

Marxuum Jawaari wuxuu ahaa shaqsi astaan u ahaa dadaallada Dastuurka iyo dawlad-dhiska Soomaaliya, isagoo door aad u wayn ka qaatay, islamarkaana aad noola shaqeeyay. Waxaanan mar walba ku xasuusanaynaa aqoonta, dulqaadka iyo waddaniyadda uu nagula shaqeenayay, kuna hagayay shaqadiisa, isagoo mar walba u taagnaa in dastuur mideeya shacabka Soomaaliyeed la helo. Ilaahay ha u naxariisto, jannadii firdowsana ha ka waraabiyo.

Waxaan rajeynayaa in shaqadan ay horseed u noqoto dhammaystirka Dastuur dhammaystiran, mid mideeya ummadda Soomaaliyeed, kana turjumaya rabitaankooda, xaqiijinayana dawladnimo ku dhisan sarraynta sharciga oo suurtagelisa nabad waarta, caddaalad iyo horumar.

**Avv. Burhaan Aadan Cumar**
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

## HORDHAC

## GUULIHII LA GAARAY

## DIYAARINTA
## CUTUBYADA 5AAD ILAA 9AAD

## LATASHIYADA

## Hordhac

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD) oo gudanaya waajibaadkiisa si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaa uu billaabay dib-u-eegidda cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka KMG ah, kaddib markuu ka guddoomay Guddiga Dib-u-eegista iyo Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. GMDHD waxuu dib-u-eegid ku sameeyay cutubyada 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad ee Dastuurka KMG ah. Warbxintan waxay la socotaa soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada kor ku xusan ee uu diyaariyay GMDHD.

Warbixintu waxay faahfaahinaysaa wax-kabedellada la soojeediyay iyo sababaha loo cuskaday wax-kabeddelkaas. Sidoo kale, waxaa la caddaynayaa haddii sidii asalka Dastuurka KMG ah uu ahaa loo qaatay, ama la tirtiray iyo sababta loo cuskaday in go'aankaas la qaato. Qodobbada wax-kabeddelka lagu sameeyay iyo kuwa cusub ee la soo kordhiyay ee loo arko in ay u baahanyihiin sharraxaad dheeri ah, waxaa lagu daray faahfaahin iyo tusaalooyin dalal kale haddii loo baahdo.

## Guulihii la gaaray: Ansixintii cutubyada 1aad – 4aad

### Tabtii loo maray ansixintii cutubyada 1aad – 4aad ee Dastuurka

Kaddib markii uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya labadiisa Gole ay anisixiyeen soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka, wuxuu GMDHD intii ay socdeen dooddaha Baarlamaanka ka diyaariyay maxdarqoraal faahfaahsan oo lagu minguuriyey xildhibaan walba aragtidii uu ka dhiibtay kulammada Baarlamaanka oo looga doodayey soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka. Sida ku cad jaantuska hoose, GMDHD wuxuu kulan kasta ee Baarlamaanka oo looga doodayay soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ka diyaariyay nuqul muuqaal, maqal iyo qoraalba leh, kuwaas oo la diiwaangeliyay lana kaydiyay.

**Cutubka 1aad**: Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo dooddiisu socotay intii u dhaxaysay 14[kii] – 20[kii] Febraayo, 2024, oo ahaa afar kulan *(kulammada 12aad, 13aad, 14aad iyo 15aad ee wadajirka labada aqal)* waxaa wadar ahaan ra'yigooda iyo soojeedimmahooda ka dhiibtay sideetan iyo toddoba (87) mudane oo isugu jiray xildhibaannada labada gole ee Baarlamaanka federaalka Soomaaliya sida ku cad shaxda hoose.



**Cutubka 2aad**: Xuquuqda Aasaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaaddinka waxay ka doodistiisu socotay intii u dhaxeysay 24$^{kii}$ Febraayo – 2$^{dii}$ Maarso, 2024, oo ka koobnaa afar kulan *(kulammada 17aad, 18aad, 19aad iyo 20aad ee wadajirka labada aqal)* waxaa wadar ahaan ra'yigooda iyo soojeedimmahooda ka dhiibtay siddeetan iyo shan (85) mudane oo isugu jiray xildhibaannada labada gole ee Baarlamaanka federaalka Soomaaliya sida ku cad shaxda hoose.




**Cutubka 3aad**: Dhulka, Hantida iyo Deegaanka waxay ka doodistiisu socotay intii u dhaxaysay 6$^{dii}$ – 9$^{kii}$ Maarso, 2024, oo ahaa laba kulan *(kulammada 22aad iyo 22aad ee wadajirka labada aqal)* waxaa wadar ahaan ra'yigooda iyo soojeedimmahooda ka dhiibtay labaatan iyo sagaal (29) mudane oo isugu jiray xildhibaannada labada gole ee Baarlamaanka federaalka Soomaaliya sida ku cad shaxda hoose.




**Cutubka 4aad**: Matalaadda Shacabka waxay ka doodistiisu socotay intii u dhaxeysay 11$^{kii}$ – 23$^{kii}$ Maarso, 2024, oo ahaa lix kulan *(kulammada 24aad, 25aad, 26aad, 27aad, 28aad iyo 29aad ee wadajirka labada aqal)* waxaa wadar ahaan ra'yigooda iyo soojeedimmahooda ka dhiibtay boqol iyo shan (105) mudane oo isugu jiray xildhibaannada labada gole ee Baarlamaanka federaalka Soomaaliya sida ku cad shaxda hoose.



Kaddib markii ay soo gabagaboowday ka doodistii soojeedimmaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka oo ay ka ra'yi dhiibteen kana doodeen xildhibaanno tiradoodu tahay 306 mudane oo isugu jiray xildhibaannada Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka, labada Guddi ee Dastuurka waxay Kalfadhiga 4aad kulankiisa 31aad ee wadajirka labada gole ee Baarlamaanka federaalka oo qabsoomay Maarso 30, 2024 xildhibaannada u soo bandhigeen nuqulka rasmiga ah ee soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad 4aad oo lagu soo dhafay soojeedimmaha xildhibaannada labada aqal iyo natiijada latashada si ay xildhibaannada ugu coddeeyaan nuqulka kama dambeysta ah. Xildhibaannada labada aqal kaddib markii ay dhegeysteen soojeedimmaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka, waxay coddayn u dhacday si cutub cutub ah iyo mid gole walba uu gaarkiisa ugu codeeyay sidatan:




| CODAYNTA GOLAHA AQALKA SARE | | | |
|---|---|---|---|
| Cutubyada | Oggol | Diiday | Ka aamustay |
| 1aad – 4aad | 42 | 0 | 0 |

| CODAYNTA GOLAHA SHACABKA | | | |
|---|---|---|---|
| Cutubyada | Oggol | Diiday | Ka aamustay |
| 1aad – 4aad | 212 | 0 | 0 |

## Casharrada laga bartay hawshii cutubyada 1aad ilaa 4aad

Hawsha ballaaran ee diyaarinta soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad iyo ansixinta labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka waxaa laga bartay casharro baaxad leh oo wax weyn ka tari doona diyaarinta cutubyada dhiman oo dib-u-eegista lagu samayn doono. Casharrada laga bartay waxaa kamid ah in guul kasta lagu gaari karo adkaysi. Inkasta oo ay jireen xaalad adag iyo caqabado, haddana waxaa lagu guulaystay in la gaaro horumar la taaban karo, taas oo ay sabab u tahay adkaysiga hoggaamiyayaasha siyaasadeed ee Soomaaliyeed, laga billaabo madaxda fulinta ee heer Federaal iyo Dawlad Goboleed, iyo hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka. Waxaa sidoo kale muhiim ah in la xuso in horumarkan la gaaray xilli taageerada beesha caalamka ay ahayd mid aad u kooban.

Casharka labaad oo laga bartay waxaa kamid ah muhimadda lahaanshaha hannaanka dib-u-eegista Dastuurka iyo taageerada siyaasadeed ee ay muujiyeen madaxda Soomaaliyeed, gaar ahaan shirarkii Golaha Wadatashiga Qaran ayaa door muhiim ah ka qaatay guusha

laga gaaray ansixinta cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka bishii Maarso 2024. Casharka saddexaad oo laga bartay waa muhimadda wadashaqaynta hay'daha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka.Waxaa markhaati laga yahay heerkii ugu sarreeyey ee iskaashi iyo wadashaqayn dhexmarta hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka: Guddiga Lasocodka , Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. Waxaa sare u kacay fahamka iyo ixtiraamka loo hayo doorarka iyo waajibaadka hay'ad kasta, taasoo keentay in si wadajir ah loogu shaqeeyo himilo wadaag ah.

Casharka kale oo laga bartay anxisinta cutubyada 1aad ilaa 4aad waa muhimadda in shaqada qayb qayb laga dhigo, lana sugo oo la xaqiijiyo guul kasta oo la gaaro. Istiraatiijiyadda la dajiyay sanadihii la soo dhaafay ayaa ahayd in la sugo lana xaqiijiyo horummarka la gaaray, lana ansixiyo cutubyada la dhammaystiray halkii laga sugi lahaa dhammaan cutubyada Dastuurka oo dhan in hal mar la dhammaystiro. Guusha la gaaray ee ku aaddan ansixinta afarta cutub ee hore waxay tusaale cad u tahay wax-ku-oolnimada istiraatiijiyaddan.

Inkastoo ay jiraan dhaliilo sheegaya in geeddisocodka dib-u-eegista Dastuurka aanu ahayn mid hufan, xaqiiqda dhabta ah waa in hannaanka uu ahaa mid aad uga hufan kuwii kore. Go'aammada la gaaray dhammaan waxaa lagu ansixiyay la-tashi iyo oggolaansho labada Gole ee Baarlamaanka, sida jadwalkii doodaha Baarlamaanka iyo habraacii ansixinta wax-kabeddelka Dastuurka ee la meelmariyey Janaayo 2024, kaddib wadatashi muddo ka badan lix bilood socday. Kulammada Golaha Wadatashiga Qaranka ee hagaya arrimaha qotada dheer ee dib-u-eegista Dastuurka sidoo kale waxay soo saareen war-murtiyeedyo dadweynuhu heli karaan si ay u arkaan go'aammada la gaaray iyo jihada la qaaday.

Dhaliil kale ayaa ahayd in geeddisocodku aanu ahayn mid bulshawaynta lala tashaday. Taasi waa mid kale oo aan xaqiiq ahayn. La-tashiyo ballaaran ayaa laga qabtay guud ahaan dalka Soomaaliya. Inta badan waxay ku dhacayeen iyadoo dhaqaalaha la helay mid uu ahaa mid aad kooban. Haddii la heli lahaa maalgelin dheeraad ah, hay'adaha dib-u-eegista Dastuurka waxay qaban lahaayeen la-tashiyo intaa ka badan, sida loo qabtay latashiyada cutubyada 5aad – 9aad. Cutubyada 1aad ilaa 4aad waxaa lala tashaday qaybaha kala duwan ee bulshada sida haweenka, dhallinyarada, aqoonyahannada, culimada, mas'uuliyiin dawladda ah, iyo xildhibaannada iyo wasiirrada dawlad goboleedyada.

Waxaa sidoo kale muhiim ah in la caddeeyo in Baarlamaanka Soomaaliya uu ka dooday soojeedinta wax-kabeddelka loo soo gudbiyay oo ayna iska raacin go'aammo meel kale uga yimid. Dhab ahaantii, dhammaan go'aammada waxaa sal u ahaa wadahadallo siyaasadeed oo dhexmaray Madaxweynaha Jahmuuriyadda Federaalka iyo madaxda Dawlad Goboleedyada ee Golaha Wadatashiga Qaran. Go'aammo badan ayaa dib loo eegay, qaarkoodna waa la diiday, iyadoo lagu saleeyay faallooyinka iyo talooyinka xubnaha Baarlamaanka. Tusaalayaasha waxaa ka mid ah:

- Go'aankii ku xadidaadda xisbiyada siyaasadeed laba keliya;
- Soojeedintii madaxweyne iyo madaxweyne kuxigeen oo meesha looga saarayo jagada ra'iisulwasaaraha si loo dhiso nidaam madaxweyne oo dhammaystiran; iyo
- Abuurista Guddiga Qaran ee Dhulka oo maamula lahaanshaha iyo maaraynta dhulka.

Tani waxay muujinaysaa in go'aanka u dambeeya uu leeyahay aaarlamaanka federaalka Soomaaliya oo matalaya dhammaan shacabka Soomaaliyeed iyo dawlad goboleedyada. Go'aanka mudanayaasha labada gole waa mid ka tarjumaya wadahadal, daahfurnaan iyo mas'uuliyad siyaasadeed.

## Diyaarinta Cutubyada 5aad ilaa 9aad

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka (GMDHD), wuxuu taariikhdu markay ahayd Maajo 2, 2024 Guddiga Lasocodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS ka guddoomay cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka, wuxuu si degdeg ah u billaabay diyaarinta soojeedinta wax-kabeddelkooda, isagoo garowsan ahmiyadda weyn ee ay u leedahay dawladnimada Soomaaliya, isla markaasna tixraacaya qorshaha hay'adaha Dastuuriga ah oo ay ku heshiiyeen bishii Maajo 2023. Si loo sahlo diyaarinta wax-kabeddelka dhammaan cutubyada Dastuurka KMG ah, waxaa 15[ka] cutub ee Dastuurka KMG ah loo kala qaybiyay saddex qaybood oo kala ah:

(a) Cutubyada 1aad ilaa 4aad; oo uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ansixiyay Maarso 30, 2024;

(b) Cutubyada 5aad ilaa 9aad oo la diyaariyay soojeedinta wax-kabeddelkooda, waxbixinnida ay khuseyso; iyo

(c) Cutubyada 10aad ilaa 15aad.

## Habraaca diyaarinta wax-kabeddelka loo maray

GMDHD, asagoo raacaya jihaynta Guddiga Lasocodka, wuxuu u maray diyaarinta cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka KMG ah tabta iyo axkaamta ku xusan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, wuxuuna saldhig uga dhigay:

- Warbixinnadii iyo soojeedintii dib-u-eegista Dastuurka ee xilligii 1aad iyo xilligii 2aad ee (2016 iyo 2020);
- Cilmibaarisyo uu GMDHD sameeyay isagoo kaashanaya khuburo ku xeeldheer arrimaha dastuur samaynta ee heer caalami iyo heer qaranba, isla markaana uu isbarbardhig ku sameeyay siyaabo kala duwan 95 dastuur, oo ay leeyihiin dalal badan oo ay ka mid yihiin kuwo ku dhaqma nidaamka federaalka kuna kala yaal qaaradaha adduunka;
- Natiijadii kasoo baxday latashiyadii dadweynaha iyo hay'adaha dawladda; iyo
- Heshiisyada siyaasadeed ee uu gaadhay Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ).

## Tallaabooyinka uu qaaday iyo tabta uu maray GMDHD

Si loo diyaariyo qoraal tayo leh, GMDHD wuxuu qaaday tallaabooyinka soo socda:

- Lafaguridda warbixinnadii iyo soojeedimihii horay looga diyaariyay dib-u-eegista Dastuurka ee 2016 iyo 2020.

- Lafagurid iyo falanqayn ku saabsan heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ), gaar ahaan Heshiiskii Astaynta Awoodaha oo u abbaaran cutubka 5aad iyo heshiiskii hannaanka federaalaynta garsoorka oo asna ku abbaaran cutubka 9aad ee

garsoorka. Guddigu wuxuu heshiisyadaas ku sameeyay falanqayn farsamo iyo mid sharci.

- ***Dulmar guud:*** Guddigu wuxuu billaabay dulmar guud oo ay xubnuhu uga doodayaan qodobbada cutuyada 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad. Dulmarkaas waxaa loo kala hormarinayey hadba sida ay cutubyadu iyo qodobbadu shaqo ugu baahan yihiin. Guddigu wuxuu dhagaystay talooyin iyo sixitaanno ay xubnaha soojeediyeen. Sidoo kale, haddii ay jirto arrin u baahan daraasad dheeri ah ama la soojeediyo in talo dheeraad ah la raadiyo taas oo ka maqan qabyoqoraalka.

- ***Diyaarinta barnaamijka latashiyada cutubyada:*** GMDHD wuxuu diyaariyay qorshe dhammaystiran oo ku aaddan latashiyada dadweynaha iyo hay'adaha dawladda. GMDHD wuxuu diyaariyay saddex iyo soddon (33) su'aalood oo u baahan in uu guddigu ka helo aragtida iyo talooyiinka hay'adaha dawladda iyo bulshada Soomaaliyeed.

- ***Falanqaynta natiijada latashiyada:*** GMDHD wuxuu ku sameeyay fallaanqeyn natiijada kasoo baxday latashiyada dadweynaha iyo dawladda iyadoo guddigu adeegsanaya hannaan casri ah oo danabaysan iyo khuburo ku sameeeya falaanqayn iyo warbixin.

- ***Diyaarinta soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada:*** GMDHD wuxuu diyaariyay soojeedinta cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka asagoo ku dhafay natiijada latashiyada iyo nuxurkii heshiisyadii Golaha Wadatashiga Qaran, ayadoo la tixgeliyay cilmibaarisyadii uu sameeyay guddigu ee la xiriira cutubyadan.

- ***Latashiyada wejiga 2aad:*** GMDHD wuxuu ku soo bandhigay diyaarinta soojeedinta wax-kabeddelka oo ay ka muuqato natiijadii latashiyada iyo sida loogu dhafay.

- ***Soo saarista nuqulka soojeedinta wax-kabeddelka iyo warbixinta la socota:*** Kaddib latashiyadii labaad GMDHD wuxuu soo saaray nuqulkii soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad.

- ***Gudbinta nuqulka soojeedinta wax-kabeddelka iyo warbixinta:*** GMDHD waxaa uu u gudiyay nuqulka soojeedinta wax-kabeddelka iyo warbixinta la socota Guddiga Lasocodka ee BFS si ay u qaado tallaabooyinka xiga, loona horgeeyo Baarlamaanka Fedeaalka Soomaaliya.

## Noocyada wax-kabeddelka ee uu sameeyay GMDHD

Sida ku xardhan jaantustuka hoose, wax-kabeddelka uu guddigu ku sameeyay qodobbada cutubyada 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad waxay ka koobanyihiin:

- Dib-u-eegis farsamo in lagu sameeyo sida toosin, siiqayn, hab-qaanuuni ah u qorid, sixidda luuqadda, qaladaadka qoraalka, IWM;
- Ku daris oo ah in wax cusub lagu soo kordhiyo oo noqon kara qodob, faqrad ama axkaam cusub oo ku dhex jiri karta;
- Tirtirid ama ka dhimid; iyo
- Dastuuraynta heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaran.




**Heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaran**

Dastuurku wuxuu tilmaamayaa in madaxda fulinta xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo madaxda fulinta Dawlad Goboleedyada ay yeelan karaan kulammo ay ku geli karaan heshiisyo iyo go'aanno lagu dhammaystirayo dib-u-eegista Dastuurka KMG ah, heshiisyadaas oo ay ka mid yihiin: ***(a)*** astaynta awoodaha ee heerarka kala duwan; ***(b)*** federaalaynta maaliyadda iyo dhammaystirka heshiiska wadaagga kheyraadka dabiiciga ah; ***(c)*** dhammaystirka nidaamka federaalka dalka; ***(d)*** nidaamka doorashooyinka, federaalaynta garsoorka dalka, iyo kuwo kale. Heshiisyada siyaaseed ee GWQ ma ahan xeerar leh awood sharci, mana ahan heshiisyo caalami ah, oo u dhaxeeya wadammo iyo hay'ado caalami ah ee waa go'aanno iyo heshiisyo loo madlay in lagu dhammaystiro Dastuurka KMG ah.

Golaha Wadatashiga Qaranku wuxuu gaaray heshiisyada siysaasadeed soo socda:

1) Heshiiska Hannaanka Fedaraaleynta Garsoorka, Diseembar, 2022, oo u abbaaran soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 9aad ee Garsoorka;
2) Heshiiska Astaynta Awoodaha Hay'adaha Dawladda, Diseembar, 2022, oo u abbaaran soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 5aad ee Nidaamka Federaalka iyo Baahsanaanta Awoodda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya;
3) Heshiiska Qaabdhismeedka Aminga Qaranka, Maarso, 2023, oo u abbaaran soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 14aad ee Nabadda iyo Amniga;
4) Heshiiska Federaaleynta Maaliyadda Dalka, Maarso, 2023, oo u abbaaran soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 13aad Maaliyadda Guud;
5) Heshiiska Hannaanka Doorashooyinka JFS, Maajo, 2023, oo lagu soo nidaamiyay cutubka 4aad oo uu Baarlamaanku ansixiyay; iyo
6) Heshiiskii Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka *(Shidaalka iyo Macdanta)*, Juun, 2018, oo lagu soo nidaamiyay cutubka 3aad ee uu horey u ansixiyay Baarlamaanka.




Habraaca loogu darayo heshiisyada siyaasadeed dib-u-eegista Dastuurka waxaa loo raacayaa sida ku xusan qodobbada 63aad iyo 71aad ee asalka Dastuurka oo faraya Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare in ay u raacaan wax-kabeddelidda Dastuurka habraaca ku xusan Cutubka 15aad ee Dastuurka KMG ah, gaar ahaan qodobbada 133aad, 134aad iyo 136aad ee Dastuurka KMG ah.

Golaha Wadatashiga Qaran marka uu gaaro go'aannada wadaxaajood ka siyaasadeed ee wax-kabeddelka qodobbada Dastuurka, GMDHD wuxuu heshiisyada GWQ u beddelayaa luqad dastuuri ah, kaddib marka uu ka guddoomo Guddiga Lasocodka iyo Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka. GMDHD wuxuu go'aannadaas ku dhafayaa dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan qodobbada 133aad, 134aad iyo Jadwalka 1(C&D). Kaddib waxaa loo gudbinayaa labada Aqal ee BJFS, si xildhibaannadu ay uga doodaan loona helo aragtidooda iyo faallooyinkooda ku aaddan soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ka hor ansixintooda sida ku xusan qodobka 136aad ee Dastuurka KMG ah.

## Latashiyada Soojeedinta Cutubyada 5aad – 9aad

GMDHD, Guddiga Lasocodka iyo Wasaaradda waxay sameeyeen qorshe dhammaystiran oo ku aaddan latashiyada dadweynaha iyo hay'adaha dawladda. Guddigu wuxuu diyaariyay saddex iyo soddon (33) su'aalood oo u baahan in uu guddigu ka helo aragtida iyo talooyinka hay'adaha dawladda iyo bulshada Soomaaliyeed.

Ujeeddooyinka latashiyada ee hay'adaha dawladda iyo bulshada qaybaheedka kala duwan ayaa ah in loo bandhigo soojeedinta dib-u-eegista wax-kabeddelka cutubyada 5aad-9aad ee Dastuurka si lo helo aragtidooda iyo talooyinkooda. Cutubyada ay latashiyadu khuseeyeen waxa ay taabanayaan arrimo muhiim u ah dawlad dhiska dalka sida cutubka 5aad oo ka hadlaya Baahsanaanta Awoodda Xukuumadaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; Cutubka 6aad oo ka hadlaya Baarlamaanka Federaalka; Cutubka 7aad oo ka hadlaya Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; Cutubka 8aad oo ka hadlaya

Laanta Fulinta; iyo Cutubka 9aad oo ka hadlaya Garsoorka. GMDHD wuxuu latashiyada u kala qaybiyay laba weji oo kala ah:

## Latashiyada Wejiga 1aad:

Kaddib, markuu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya 30kii Maarso 2024 ansixiyay cutubyada 1aad – 4aad ee Dastuurka, hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ee kala ah Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, Guddiga Lasocodka Dib-u-eegisa Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ayaa si wadajir u qorsheeyay in la qabto latashiyo ku aaddan cutubyada 5aad – 9aad ee Dastuurka, ayadoo latashiyadaasi laga billaabay Gobolka Banaadir, kaddibna loo sii gudbay Dawlad Goboleedyada iyo Maamulka SSC-Khatumo.

## Latashiyada Gobolka Banaadir

Intii u dhaxeysay 7dii ilaa 17kii Sebteembar 2024, hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ayaa magaalada Muqdisho ku qabtay latashiga wejiga 1aad ee dib-u-eegista soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka. Intii ay socdeen latashiyada waxaa qaybaha kala duwan ee bulshada iyo hay'adaha dawladda loo soo bandhigay 33 su'aalood oo laga soo diyaariyay cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka, su'aalahaas oo ahaa kuwo toos u abbaarayay meelaha u baahan in la helo talooyiinka iyo fikradaha muwaaddiniinta Soomaaliyeed.

Kulammada latashiyada lagu qabtay gobolka Banaadir intii ay socdeen waxaa lala kulmay oo ra'yigooda iyo talooyinkooda la dhegeystay: hay'adaha dawladda; aqoonyahannada iyo sharciyaqaannada; dhallinyarada; haweenka; bulshada rayidka; odeyaasha dhaqanka; culumaa'udiinka; golaha wasiirrada xukuumadda federaalka Soomaaliya; iyo dadka naafadda ah.




Intii lagu gudajiray latashiyada wejiga 1aad, Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu kulan walba oo la qabtay ka diyaariyay maxdarqoraal faahfaahsan, oo qof kasta aragtida uu dhiibtay kulankii uu ka qaybgalay loo diiwaangeliyay maqal, muuqaal iyo qoraal, sidoo kale guddigu wuxuu su'aalihii la qaybiyay kulammada asi ku kaydiyey sistemka GMDHD oo taxliilin ku sameyay dhammaan 33 su'aalood, natiijada

ka soo baxdayna lagu soo bandhigay latashiga wejiga 2aad oo hay'adaha lala kulmay dib loogu soo bandhigay aragtidii ay dhiibteen intii lagu gudajiray latashiga wejiga 1aad.






## Daahfurka Barnaamijka Danabeysan

GMDHD, ayaa intii lagu gudajiray latashiyada wejiga 1aad wuxuu taariikhdu markii ahayd Agoosto 29, 2024 magaalada Muqdisho ka daahfuray wejiga 2aad Barnaamijka Danabeysan ee Latashiga Dadweynaha Cutubyada 5aad – 9aad ee dib-u-eegista Dastuurka.

Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka Avv. Burhaan Aadan Cumar oo daafurka barnaamijka ka hadlay ayaa xusay in bulshada Soomaaliyeed ee ku sugan dal iyo dibedda oo fursad u helin in ay ka qaybqaataan latashiyada dib-u-eegista Dastuurka qaabka toos ah, ayaa fursad u siiyeen in ay kaga qaybqaataan nidaamka danabeysan oo ay aragtidooda ku soo gudbin karaan hadba jawaabahooda oo dhammaystiran. Waxaa Barnaamijka Danabaysan ee Latashiga Dadweynaha Cutubyada 5aad ilaa 9aad si rasmi ah u daahfureen Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane Sheekh Aadan Maxamed Nuur "Madoobe" iyo Guddoomiye Kuxigeenka 1aad ee Golaha Aqalka Sare Mudane Cali Shacbaan Ibraahin.





Nidaamka danabaysan oo hawada ku jiray muddo saddex isbuuc ah ayaa waxaa aragtidooda ku aaddan soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka ka dhiibtay dad gaaraya (12,000) oo ku sugan dalka gudihiisa iyo dibaddiisa.

## Dawlad Goboleedka Galmudug

Hay'ahada u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ayaa intii u dhaxeysay 21kii ilaa 25kii Sebteembar 2024, isla qorsheeyey in Dawlad Goboleedka Galmudug la booqdo degmooyin badan, maaddaama inta badan isu socodka degmooyinkaasi ay amni yihiin. Sidaas daraadeed, waxaa latashiyo lagu soo qabtay afar degmo oo ka tirsan maamulka Galmudug, kuwaas oo kala ah: Dhuusamareb, oo latashiga lala yeeshay: Hay'adaha Dawladda oo isugu jira fulinta, garsoorka iyo xeerdejinta; Guriceel, Caabudwaaq; iyo Gaalkacyo, oo dhammaantood lala kulmay bulshada kala duwan ee deeganadaas.








Latashiyadaasi oo ujeeddadoodu ahayd sida bulshada qaybaheeda kala duwan looga qayb gelin lahaa oo loo ururin lahaa ra'yigooda iyo aragtiyahooda, islamarkaana ay talo ku yeeshaan, dadaallada loogu jiro sidii Dastuurka loo dhammaystiri lahaa, loogana saari la haa kumeelgaarnimada.





GMDHD oo ka duulaya qorshaha ay dajiyeen hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ayaa agaasimay Shirka Latashiga Hay'adaha Dawlad Goboleedka Galmudug ee Dib-u-eegista Dastuurka cutubyadiisa 5aad ilaa 9aad. Shirkaas oo uu daahfuray Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Galmudug, Mudane Axmed Cabdi Kaariye, waxaa si wax-ku-ool ah uga qaybqaatay hay'adaha Dawlad Goboleedka Galmudug ee kala ah fulinta, xeerdejinta iyo garsoorka dhammaantood. Sidoo kale, waxaa ka qaybgalayaashu aragtiyahooda ka dhiibteen su'aalaha ku saabsan cutubyada 5aad ilaa 9aad iyo arrimaha kale ee la xiriira dib-u-eegista Dastuurka. Latashiyadaas waxaa loo arkay in ay lagama maarmaan yihiin, maaddaama ay muhiim tahay in muwaadiniinta ku nool dawlad goboleedyada dalka ay si mug leh uga qaybqaataan dib-u-eegista wax-kabeddelka Dastuurka, oo saamayn weyn ku yeelan doonta dhammaan bulshada ku nool gobollada dalka.





Madaxweynaha Dawlad Goboleedka Galmudug oo furay shirka ayaa u mahadceliyay hay'adaha loo xilsaaray dib-u-eegista Dastuurka iyo Wasaaradda Dastuurka Galmudug wadashaqaynta wanaagsan ee ka dhaxeysa heer federaal iyo heer dawlad goboleedba. Waxa sidoo kale uu sheegay Madaxweynaha Galmudug in Dastuurka uu muddo badan yahay mid ku-meelgaar ah loona baahanyahay in uu ka baxo kumeelgaarnimada, iyadoo la joogo waqtigii ugu macquulsanaa ee Dastuurka lagu dhammaystiri ahaa.






Guddoomiyaha GMDHD Avv. Burhaan Aadan Cumar ayaa Madaxweynaha iyo hay'adaha dawlad goboleedka Galmudug warbixinna ka siiyay shirarkii latashiyada lagu soo qabtay magaalada Muqdisho. Guddoomiyaha wuxuu sidoo kale xusay in latashiyada loo kala qaaday laba qayb: qayb ah in bulshada qaybaheeda kala duwan lagu gaaro goobahooda hadba intii suuragal ah; iyo qayb *digital*-ah oo muwaaddiniinta Soomaaliyeed uga qaybqaadanayaan ra'yigoodana uga dhiibanayaan hab danabaysan *"online"* ah ayagoo jooga dalka gudihiisa iyo dibeddiisaba.

Guddoomiye Burhaan ayaa xusay in loo baahanyahay hay'adaha dawaladda iyo bulshada rayidka qaybaheeda kala duwan ay taladooda ku darsadaan, maaddaama yoolka iyo himilada ummadda Soomaaliyeed ay tahay in uu Dastuurka la dhammaystiro iyada oo la rejaynayo in qof kasta oo Soomaali ah uu ka qaybqaato go'aaminta jihada loo socdo iyo nidaamka dawliga sida loo qaabaynayo.

Wasiirka Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Mudane Xasan Macallin Maxamuud ayaa u mahadceliyay Madaxweynaha iyo shacabka reer Galmudug soo dhoweynta ballaaran ee loo sameeyay wafdiga u yimid latashiyada, asagoo tilmaamay in Galmudug tahay dawlad goboleedkii u horreeyay oo lagu daahfuro latashiyada. Wuxuuuna hoosta ka xarriqay ahmiyadda ay latashiyadu leeyihiin.

## Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed

Intii u dhaxeysay 21kii – 24kii Octoobar 2024, GMDHD oo kaashanaya hay'adaha kale ee u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka wuxuu magaalada Baydhabo oo ah caasimadda KMG ah ee Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed ku qabtay shirarka latashiyada cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka oo lagu soo bandhigay soddon iyo saddex (33) su'aalood oo laga soo diyaariyay cutubyadaas kor ku xusan. Hay'adaha intii ay ku sugnaayeen magaalada Baydhabo waxay kulammada latashiyada la qaateen: hay'adaha dawladda Koofur Galbeed; dhallinyarada iyo haweenka; bulshada rayidka; culumada iyo odeyaasha dhaqanka.






Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka, markii ay soo gebagabeeyeen latashiyada lagu qabtay magaalada Baydhabo, waxay u sii gudbeen magaalada Baraawe oo ah caasimadda Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed oo ay ku sugnaayeen intii u dhaxeysay 29$^{\text{kii}}$ Octoobar – 5$^{\text{tii}}$ Nofeembar 2024, ayadoo halkaasi ay kula kulmeen: haweenka; culumada iyo odeyaasha dhaqanka; bulshada rayidka; iyo dhallinyarada.

Kulammadan oo si rasmi ah uu u furay Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Koofur Galbeed, Mudane Maxamed Nur, ayaa bogaadiyay dadaallada ay wadaan hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista dastuurka, iyo in dawlad goboleedka Koofur Galbeed diyaar u yihiin in ay ka qaybqaataan dib-u-eegista Dastuurka gaar ahaan cutubyada 5aad ilaa 9aad.






## Dawlad Goboleedka Hirshabeelle

GMDHD iyo hay'adaha kale ee u xilsaaran dib-u-eeigsta Dastuurka ayaa $22^{kii}$ Oktoobar 2024 magaalada Balcad ee Dawlad Goboleedka Hirshabeelle ku qabtay shirarka latashiga Bulshada Rayidka oo lagu soo bandhigay su'aalo laga soo diyaariyay cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka. Waxaa xusid mudan in bulshada lala kulmay aad ugu bogaadiyeen hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka, iyaga oo uga mahadceliyey in Dastuurka la soo gaarsiiyo Dawlad Goboleedyada, lana dhagaysto ra'yiga dadweynaha iyo maamulkaba. Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka, markii ay soo dhammeeyeen latashiga lagu qabtay magaalada Balcad, waxay intii u dhaxaysay $24^{kii}$ ilaa $27^{kii}$ Oktoobar 2024 ku sugnaayeen magaalada Jowhar oo ah caasimadda Dawlad Goboleedka Hirshabeelle, ayadoo halkaasi ay kula kulmeen: hay'adaha dawladda; bulshada rayidka; culumada iyo aqoonyahanka; iyo dhallinyarada iyo haweenka.




Kulammadaan waxaa si rasmi ah u furay Kusimaha Guddoomiyaha Golaha Wakiillada Hirshabeele ahna Guddoomiye Kuxigeenka 1aad, Mudane Siraaji Sh. Isak Abdullahi, ayaa hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ugu mahadceliyeay in ay Dastuurka soo gaarsiiyaan dawlad goboleedyada, gaar ahaan Dawlad Goboleedka Hirshabeelle.

## Maamulka SSC-Khaatumo

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka intii u dhaxeysay $9^{kii}$ ilaa $12^{kii}$ Nofeembar 2024, waxay latashiyo ballaaran ku qabteen magaalada Laascaanood oo ay kula kulmeen, hay'adaha maamulka SSC-Khaatumo; culimada iyo odeyaasha dhaqanka; iyo dhallinyarada iyo haweenka waxay kulammada asi ku soo bandhigeen $33^{da}$ su'aalood oo laga soo diyaariyay cutubyada 5aad ilaa 9aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka. Waxaa intaa sii dheer in ay deegaanka Adhicadeeye ay ku qabteen latashi ballaaran oo ay ka soo qaybgaleen bulshada rayidka ku sugan deegaannadaas.



## Latashiyada Wejiga 2aad ee Soojeedinta Cutubyada 5aad – 9aad

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ee kala ah Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka, Guddiga Lascodka Dastuurka BFS iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, kaddib markii ay soo gabagabeeyeen latashiyada waajigii 1aad ee soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka, waxay mar kale dib u bilaabeen latashiyada wajiga 2aad ayadoo muhiim loo arkay in dhammaan qaybihii lala soo tashtay wejiga 1aad loo bandhigo natiijooyiinkii ka soo baxay latashiyadaasi.

GMDHD oo ka mas'uul ah keydinta dhammaan dokumentiyadii, aragtidii & talooyinkii iyo su'aalihii loo qaybiyay dhammaan ka soo qaybgalayaashii latashiga wajiga 1aad, ayaa wuxuu ka diyaariyay soo bandhigid *"presentation"* laga soo minguuriyay natiijooyikaasi.
GMDHD oo kaashayana hawlwadeennadiisa, wuxuu latashiyadii wajiga 1aad kulan walba ka sameyay maxdarqoraal faahfaahsan *"Hansard"* oo qof waliba ka aragti dhiibtay kulammada asi laga diiwaangeliyay oraahdiisaa, aragtidiisa iyo talooyinkiisaa oo muuqaal, maqal iyo qoraalba ah.



GMDHD, kaddib markuu soo gabagabeeyey latashiyada wajiga 1aad, asagoo kaashanaya Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka wuxuu 1[dii] Diseembar 2024, magaalada Muqdisho ku daahfuray latashiyada wajiga 2aad ee soojeedimaha cutubyada 5aad – 9aad ee Dastuurka.

Latashiyadan wajiga 2aad waxaa lagu soo bandhigay natiijooyinkii ka soo baxay latashiga wajiga 1aad oo ay qabteen hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka, taasoo qof waliba aragtidii uu dhiibtay lagu keydiyey "system" kaddibna uu sameeyay taxliilin lagu soo bandhigayo natiijooyinka.

GMDHD wuxuu si gaar ah latashiyo ku saabsan cutubka 9aad ee garsoorka la yeeshay Bahda Garsoorka oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka, ayadoo ay kulankaasi ka soo qaybgaleen Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, heerarka kala duwan ee maxkamadaha dalka iyo Xeer-ilaaliyeyaasha heer federal iyo heer Dawlad Goboleed iyo garyaqaannada dalka. Kulankan oo ahaa mid muhiim ah ayaa intii uu socday dhammaan ka soo qaybgalaasha loo kala qeybiyey afar kooxood, oo koox waliba waxay talooyinkooda ka soo bixiyeen arrimihii loo xilsaaray.





Sidoo kale intii lagu gudajiray latashiyada wejiga 2aad ee soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ayaa la kulmay dhanlinyarada; haweenka; bulshada rayidka; aqoonyahanka; hay'adaha dawladda; iyo Golaha Wasiirrada oo uu shirguddoominayo Ra'iisalwasaare Kuxigeenka Xukuumadda Mudane Saalax Axmed Jaamac.





Kulanka Golaha Wasiirrada ayaa waxaa loogu soo bandhigay dhammaan natiijooyinka ka soo baxay latashiyada wejiga 1aad oo ay ku jiraa kulankii lala yeeshay Golaha Wasiirrada latashigii wajiga 1aad.

R/wasaare Kuxigeenka Mudane Saalax ayaa bogaadiyay howsha adag ay soo qabteen hay'adda u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka, gaar ahaan wuxuu GMDHD ku ammaanay si howlkarnimada leh ay u diiwaangaliyeen dhammaan cid walba oo ay la kulmeen ra'yigooda iyo tallooyinkooda.




## Latashiyada Qurbojoogta Soomaaliyeed

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ayaa lagama maarmaan u arkay in latashiyada dadweynaha la gaarsiiyo bulshada Soomaaliyeed ee ku nool dalka dibeddiisa. Xubno ka socday saddexda hay'adood ee u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ee kala ah Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka, Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka iyo Wasaaradda Caddaaladda ayaa magaalooyinka Nairobi *(Kenya),* London iyo Bristol *(UK)* ku qabtay shirka latashiga qurbajoogta Soomaaliyeed, ayadoo halkaasi lagu soo bandhigay dhammaan natiijooyinkii ka soo baxay latashiyada wejiga 1aad iyo 2aad ee soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka.

Kulammada ayaa intii ay socdeen waxay madaxdii hoggaaminaysay saddexda hay'adood qurbajoogta la wadaageen hormarka iyo guulaha laga gaaray dib-u-eegista Dastuurka iyo in markii ugu horeysay uu Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ansixiyay soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka.




## Shirka Latashiga Hay'adaha Dastuurka Heer Federaal, Heer Dawlad Goboleed iyo Maamulada Kale

Hay'adaha ayaa intii u dhaxeysay 10kii ilaa 12kii Febraayo 2025 magaalada Muqdisho ku qabtay shirka Latashiga Hay'adaha Dastuurka Heer Federaal, Heer Dawlad Goboleed iyo Maamulada kale. Shirkan oo ujeedkiisu ahaa dhammaystirka latashiyada soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka, ayaa waxaa ka soo qaybglay Wasiirrada iyo Guddoomiyeyaasha Goleyaasha Wakiillada Dawlad Goboleedyada iyo sidoo kale Maamulka Gobolka Banaadir oo uu hoggaaminayo Guddoomiyaha Gobolka ahna Duqa Magaalada Muqdisho. Intii uu socday shirka waxaa xoghayeyaasha goleyaasha wakiillada la guddoonsiiyay dhammaan dokumentiskii laga diyaariyay latashiga wejiga 1aad iyo 2aad iyo natiijooyinkii ka soo baxay latashiyadaasi.








Shirkan oo uu si rasmi ah u soo xiray Guddoomiye Kuxigeenka 2aad ee Golaha Shacabka ayaa u mahadceliyay guud ahaan hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka, gaar ahaan Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka oo qabtay shaqo aad iyo aad u baaxad weyn, wuxuu sidoo kale xusay in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya diyaar u yahay in ay gutaan waajibkooda ku aaddan dhammaystirka Dastuurka.



## Kulammada Wacyigelinta

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ee Guddiga Madaxa-bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee Baarlamaanka Fedeaalka iyyo Wasaaradda Caddaaladda ayagoo ka duulayo mabda'a daahfurnaanta iyo ka-qaybgalka shacabka ayaa bishii Agoosto ilaa Sebteembar 2025 qabtay kulamo isdaba jog ah, oo lagu dardargelinayo geeddisocodka dhammaystirka dastuurka. Hay'daha ayaa mudnaanta siiyay in muwaadiniintu si toos ah ugu lug yeeshaan doodaha iyo go'aamada la xiriira dib-u-eegista dastuurka, taas oo la higsanayo in lagu ururiyo aragtida bulshada, dhallinyarada, haweenka, iyo qaybaha kala duwan ee bulshada Soomaaliyeed.

Ujeeddada ugu weyn ee kulammadan ayaa ahaa in shacabka si toos ah ugu qaybqaataan doodaha dastuuriga ah, loona xaqiijiyo in dastuurka la dhisayo uu noqdo mid ka tarjumaya danaha, rajada, iyo himilooyinka guud ee bulshada. Kulammada wacyigelinta waxaa loo qabtay qaybaha kala duwan ee bulshada, kuwaas oo ay ka mid yihiin qaar ka mid ah degmooyinka Gobolka Banaadir, Jaamacadaha, iyo ururrada bulshada rayidka ah. Kulammadan waxaa la socday muuqaallo wacyigelineed *(Civic Education)* oo uu GMDHD soo diyaariyay, laguna saleeyay cutubyada 5aad ilaa 9aad, si bulshada aan akhriska aqoon ugu sahlanaato fahamka cutubyadaas, kaddibna ay fikirkooda uga dhiibtaan.

**Degmooyinka Gobolka Banaadir**

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista Dastuurka ayaa qaar kamid ah degmooyinka Gobolka Banaadir *(Waaberi; Xamar Jajab; Deynile; Warta Nabadda; iyo Kaxda)* ku qabtay kulamo wacyigelin oo ay kasoo qaybgaleen bulshooyinka ku dhaqan degmooyinkaas, kulammada asi oo loogu gol ahaa in bulshada lala wadaago geeddisocodka dib-u-eegista dastuurka isla markaasna la dhegaysto fikirdahooda iyo aragtiyahooda ku aaddan cutubyada 5aad ilaa 9aad ee wax-kabeddelka dastuurka.




**Kulammada Wacyigelinta Jaamacadaha**

Hay'adaha u xilsaaran dib-u-eegista dastuurka ayaa booqday qaar ka mid ah Jaamacadaha ku yaala Gobolka Banaadir, ujeedka hay'adaha ayaa ahaa in ardayda loo sameeyo wacyigalin ku aaddan hannaanka dib-u-eegista dastuurka, iyo in ardayda laga dhegaysto fikradahooda ka dhex guuxaya ee ku aaddan cutubyada harsan ee Dastuurka. Sidoo kale, waxaa ardayda loo soo bandhigay hanaankii loo maray ansixinta afartii cutub ee hore iyo diyaarinta cutubyada 5aad ilaa 9aad ee dastuurka oo ardayda badankood ay kasoo qaybgaleen latashiyadii barbilowga ahaa. Jaamacadaha wacyigelinta lagu qabtay waxaa ka mid ahaa: Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed; Jaamacadda Banaadir; Jaamacadda SIU; iyo Jaamacadda SIMAD.




**Kulammada Dadweynaha iyo Doodwadaag**

Hay'daha ayaa qabtay kulamo doodwadaag ah oo barbar socday kulamadii wacyigelinta. Kulammada as ujeeddadoodu waxay ahayd in lala kulmo qaybaha kala duwan ee bulshada,

isla markaasna lagala doodo arrimaha khuseeya ee ku jira cutubyada 5aad ilaa 9aad ee dib-u-eegista dastuurka. Kulammada la qabtay waxaa ka mid ahaa laba kulan oo kala duwan oo lala yeeshay dhallinyarada, kuwaas oo lagu falanqeeyay doorka dhallinyarada ee dib-u-eegista dastuurka. Sidoo kale, waxaa dood wadaag lala yeeshay dadka naafada ah oo lagala dooday xuquuqdooda ku aaddan hananka Dastuurka, waxay soo gudbiyeen farriimo wax-ku-ool ah.

Sidoo kale, waxaa la qabtay kulammado muhiim ah oo lagu casumay dad aqoon durugsan u leh hadba cinwaanka laga doodaya, oo ay ka mid yihiin Xildhibaanno ka tirsan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, sharciyqaanno, cilmibaareyaal hoggaamiyo hay'ado maxali ah, waxaana kulammada as ka soo qaybqaatay aqoonyahanno, haweenka, garyaqaannada iyo qaybaha kala duwan ee bulshada oo lagala dooday cinwaada kala ah: Xuquuqda dadka naafada ah iyo dib-u-eegista Dastuurka; Nidaamka federaalka iyo dib-u-eegista Dastuurka; Habraaca xeerdejinta labada aqal ee Baarlamaanka; Wadashaqaynta labada aqal ee Baarlamaanka; Doorka dhallinyarada iyo haweenka ee dib-u-eegista Dastuurka; Noocyada dawladda *(Nidaamka baarlaanka, Madaxtooyada iyo Nidaamka Isku-dhafka ah);* Kaalinta garsoor madaxbannaan iyo dib-u-eegista Dastuurka; Baahsanaanta awoodaha; iyo Ururada iyo hoggaamiyeyaasha haweenka.



Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa uu si joogto ah uga shaqaynayaa sidii Soomaaliya u yeelan lahayd dastuur dhammaystiran oo saldhig u noqda dowladnimo xasilloon, caddaalad iyo hufnaan ku dhisan. Kulammada dadweyne ee la qabtay waxay tusaale u yihiin go'aan-qaadashada bulshada iyo sida loo ilaalinayo in geeddisocodka dib u eegista dastuurka uu noqdo mid la wada leeyahay. Natiijooyinka kasoo baxayna ay noqdeen:

- ***Wacyigelin bulsho:*** shacabka ayaa si qoto dheer u bartay dastuurka iyo muhiimaddiisa.
- ***Ka-qaybgal ballaaran***: kooxo kala duwan oo bulshada ka tirsan ayaa helay fursad ay ku cabbiraan aragtidooda.
- ***Isfaham iyo wadatashi***; doodaha iyo talooyinka la isweydaarsaday waxay dhiseen jawi lagu mideeyo aragtiyo kala duwan.

Kulammada waxaa loo habeeyay qaab daahfuran oo bulashada qaybaheeda kala duwan ay si xor ah uga dhiibtaan aragtidooda. Guddiguna wuxuu si cad u sharraxay qodobbada dastuuriga ah ee doodaha ku jiray, isagoo isla mar ahaantaasna dhagaystay talooyinka iyo doodaha bulshada. Qaabkan ayaa horseeday in la abuuro jawi isfaham iyo kalsooni lagu dhisayo dastuur bulsho oo ay si wadajir ah u leeyihiin muwaadiniinta Soomaaliyeed.

Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka wuxuu kulammada ku saabsan wacyigelinta dib-u-eegista Dastuurka, kulan walba ka diyaariyay maxdarqoraal dhammaystiran oo faahfaahinaya qof waliba aragtidiisa iyo tallooyinkii uu ka dhiibtay intii ay socdeen kulammada wacyigelinta iyo doodwadaagyada soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka.



## U Bandhigidda Guddiga Lasocodka Dastuurka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 5aad – 9aad ee Dastuurka




Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu taariikhdu markay ahayd Nofeembar 3, 2025 Guddiga Lasocodka Dastuurka u soo bandhigay kuna wareejiyay soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad, 6aad, 7aad, 8aad iyo 9aad, iyo warbixin faahfaansan oo la socota soojeedimaha. Sidoo kale Guddiyada intii u dhaxaysay 15 – 22 Nofeembar 2025 yeeshay kulammo ujeedkoodu ahaa in cutub cutub loo dul istaago soojeedimaha, ayadoo ay jirtay in GMDHD uu sharaxaad ka bixinayay hadba meelaha su'aalaha ay ka soo gudbiyaan Guddiga Lasocodka.



Guddiga Lasocodka ayaa Diseembar 10, 2025 Guddiga Madaxabannaan u soo gudbiyay warqad ku saabsan in Guddigu soo sameeyo soojeedinayo wax-kabeddel, dib-u-habayn iyo siiqayn, iyo sidoo kale in qodobbada qaar laga soo sameeyo cilmibaaris dheeraad ah.

Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka oo ka jawaabaya warqadda Guddiga Lasocodka wuxuu Diseembar 15, 2025 u gudbiyay jawaabaha, ayadoo uu Guddigu u kala saaray saddex qaybood oo kala ah: Qaybo uu ku raacay Guddiga Lasocodka; Qaybo laga bixiyay faallo iyo faahfaahinno dheeraad ah; iyo Qaybo laga soo sameeyay daraasad iyo cilmibaaris dheeraad ah.

Ugu dambayntii Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka iyo Guddiga Lasocodka Dastuurka ayaa Jannaayo 2026 kulan wadajir ah ku dhammaystiray nuqulka soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 5aad ilaa 9aad ee Dastuurka iyo warbixinta faahfaahsan ee la socoto, si loogu gudbiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyan ayna waajibaadkooda dastuuriga ah uga gutaan.

# FAALLADA IYO SHARRAXAADDA

## SOOJEEDINTA WAX-KABEDDELKA CUTUBKA SHANAAD: NIDAAMKA FEDERAALKA IYO BAAHSANAANTA AWOODDA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA

## Cutubka Shanaad: Nidaamka Federaalka iyo Baahsanaanta Awoodda Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

Qoraalkan soo socda wuxuu faahfaahin ka bixinayaa wax-kabeddelka ku yimid cutubka shannaad, iyadoo la sheegayo nooca wax-kabeddelka lagu sameeyay, sababaha keenay wax-kabeddelka iyo cilmibaarista la sameeyay oo arrintaas la xiriirta (haddii ay jirto) iyo sidoo kale, tusaalooyin laga soo qaatay dalal ka mid ah caalamka oo qaatay nidaamka federaalka.

Nidaamka federaalka ee Soomaaliya waa mid dib-u-habayn iyo horumarin lagu samaynayo si loo helo qaab maamul oo waafaqsan baahiyaha bulshada iyo xasilloonida dalka. Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) ee Diseembar 2022 wuxuu aas-aas u yahay dib-u-eegista Cutubka 5aad ee la xiriira qaybsiga awoodaha. Heshiiskan wuxuu qeexayaa astaynta awoodaha heerarka kala duwan ee dawladda sida Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose, awoodaha la wadaago, kuwa haraadiga ah iyo guud ahaan xiriirka iskaashi ee u dhexeeya heerarka kala duwan ee dawladda.

Soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu dhisay saddex heer oo dawladeed: Dawlad Federaalka, Dawlad Goboleedyada iyo Dawlad Hoose. Qaybahaasi waxay u baahan yihiin nidaam cad oo qeexaya awoodahooda, waajibaadkooda iyo xiriirkooda si loo xaqiijiyo dawladwanaagga iyo isla xisaabtanka. Habraaca federaalka ee Soomaaliya waxaa lagu sameeyay cilmibaaris iyo isbarbardhig caalami ah, iyadoo tusaalooyin laga soo qaatay dalal kale sida Jarmalka, Maraykanka, Kanada, iyo Itoobiya, Nigeria, Koofur Afrika, Brazil, Tanzania, Kenya, Pakistan, Uganda iyo waddammo kale si loo fahmo qaab-dhismeedyada iyo xalka caqabado ka jira nidaamka federaalka.

Heshiiska Golaha Wadatashiga Qaranka wuxuu qeexayaa awoodaha Dawladda Federaalka, Dawlad Goboleedyada iyo Dawladaha Hoose si ay u noqdaan kuwo waafaqsan Dastuurka. Qaybaha cusub ee heshiiska waxaa ka mid ah awoodaha gaarka ah ee federaalka, awoodaha la wadaago iyo habraacyada la xiriira faragelinta federaalka ee xaaladaha deg-degga ah.

Dib-u-eegistan Dastuurka waxay muhiim u tahay dejinta xeerarka sugan ee haga nidaamka federaalka Soomaaliya. Iyadoo la xoojinayo xiriirka iskaashi ee heerarka dawladeed, lana dejinayo xeerar hufan oo qeexaya xadka awoodaha. Waxaa la rajeynayaa in nidaam federaal oo caddaalad iyo wadashaqayn ku dhisan uu horseedi doono xasillooni iyo horumar waara.

GMDHD wuxuu ku sameeyay falanqayn dhammaystiran heshiiska astaynta awoodaha ee uu Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) gaaray Diseembar 2022. Heshiiskan ayaa ka koobnaa awoodaha kala ah: Awoodaha u gaarka ah Dawladda Federaalka; Awoodaha u gaarka Dawlad Goboleedka; Awoodaha Dawlaha Hoose; iyo Awoodaha wadaagga ah.




GMDHD wuxuu diyaariyay Cutubka 5aad oo ka kooban afar (4) madax iyo sagaal iyo toban (19) qodob oo inta badan cusub marka laga reebo shan (5) qodob oo asalka Dastuurka ahaa.

Cutubkan shanaad ayaa loo kala qaybiyay afar madax oo kala ah: Madaxa Koowaaad: Qaabdhismeedka Dawladda; Madaxa Labaad: Iskaashiga Heerarka Dawladda; Madaxa Saddexaad: Dawlad Goboleedyada; iyo Madaxa Afaraad: Astaytnta awoodaha. Waxaa lagu soo kordhiyay arrimo ay ka mid yihiin:

- ⇒ Maqaamka Caasimadda;
- ⇒ Dastuurrada Dawlad Goboleedyada;
- ⇒ Goleyaasha Dawlad Goboleedyada;
- ⇒ Fulinta Dawlad Goboleedyada;
- ⇒ Awoodaha heerarka kala duwan ee dawladda;
    - o Awoodaha u gaarka ah Dawladda Federaalka;
    - o Awoodaha u gaarka ah Dawlad Goboleedyada;
    - o Awoodaha u gaarka ah Dawladaha Hoose;
    - o Awoodaha Wadaagga ah;
    - o Awoodaha Haraagga ah;
- ⇒ Erginta awoodaha; iyo
- ⇒ Dhexgalka Dawladda Federaalka.

GMDHD wuxuu diyaariyay laba xulasho oo ku saabsan caasimadda dalka, ayadoo xildhibaannada labada Aqal ee BFS laga doonayo in ay ka doortaan hal xulasho. Si loo helo fahan dheeraad ah oo ku saabsan maqaamka caasimadda, ayuu GMDHD ka diyaariyay daraasad dheer oo lagu soo bandhigay tusaalooyinka qaar mid ah caasimadaha dalalka ku dhaqma nidaamka federaalka.

## Madaxa 1aad: Qaabdhismeedka Dawladda

### Qodobka 61aad: Heerarka Dawladda

Qodobkan wuxuu ka koobanyahay laba (2) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka. Madaxa koowaad oo asalka Dastuurka ahaa *"Qaab-dhismeed iyo Mabaadii'da Wadashaqeynta Heerarka Xukuumadda"*, waxaa lagu soo koobay *"Qaabdhismeedka Dawladda"*. Cinwaanka qodobka 61aad ereyga *"Qaab-dhismeedka"* waxaa lagu beddelay *"Heerarka"*, maaddaama faqradaha qodobka ay yihiin heerarka kala duwan ee dawladda.

- **Faqradda 1aad** ee asalka Dastuurka, qaabdhismeedka dawladda ayaa ka koobnaa laba heer oo dawladeed, haddase, faqradda 1aad heerarka dawladda waxaa laga dhigay saddex heer dawladeed oo kala ah: Dawladda Federaalka; Dawlad Goboleedyada; iyo Dawladaha Hoose.

  Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaa loo raray oo lagu nidaamiyay Qodobka 62aad faqradda 6aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

**Natiijada Latashiyada.**




- **Faqradda 2aad** ee soojeedinta wax-kabeddelka oo ah mid cusub waxay xeerinaysa in Dawladda Federaalka ay waajibaadkeeda u gudanayso si waafaqsan Dastuurka Federaalka, halka Dawlad Goboleedyada ay u gudanayaan si waafaqsan Dastuurka Federaalka iyo kan Dawlad Goboleedka.

**Cilmibaaris: Qaabdhismeedka Dawladda**

⇒ ***Jarmalka,*** Nidaamka federaalka waxaa lagu qeexay Dastuurka Federaalka. Kaas oo caddaynaya in Jamhuuriyadda Federaalka Jarmalka ay tahay dawlad federaal ah.[1] Dastuurku wuxuu qeexayaa saddexda heer ee dawladda: federaalka *(Bund);* dawlad goboleedyada *(Länder)*[2] iyo degmooyinka *(municipalities)*[3].

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka waxa uu aqoonsanayaa dawlad goboleedyo xornimo buuxda leh, gaar ahaan kuwa lagu saleeyay qowmiyadaha.[4]

## Qodobka 62aad: Dhismaha Dawlad Goboleedyada iyo Soohdimahooda

Qodobkan wuxuu ka koobanyahay lix (6) faqradood, si la mid ah asalka Dastuurka. Cinwaanka Qodobka 62aad waxaa loo beddelay *"Dhismaha Dawlad Goboleedyada iyo Soohdimahooda"* halka asalka Dastuurka uu ahaa *"Tirada iyo Xudduudaha Dawladaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka iyo Degmooyinka"*. Qodobkan wuxuu xusayaa Dawlad Goboleedyada hadda jira iyo kuwa mustaqbalka la dhisi karo, iyadoo xadaynta xudduudaha loo baahanyahay oggolaanshaha Golaha Aqalka Sare.

- **Faqradda 1aad:** Waa mid cusub oo qeexaysa Dawlad Goboleedyada ku dhisma si waafaqsan Dastuurka.

  Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waa la tiray waxaana nuxurkeeda lagu daray isla qodobkan faqradihiisa.

  Faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waa la tiray nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobka 55aad ee cutubka 4aad.

- **Faqradda 2aad:** Waxaa laga soo raray Qodobka 49aad faqradda 4aad ee asalka Dastuurka, waxaana lagu sameeyay dib-u-siiqayn. Golaha Aqalka Sare ayaa go'aan ka gaaraya dhismaha Dawlad Goboleedka, maaddaama uu matalo Dawlad Goboleedyada.

  Faqradda 3aad ee asalka Dastuurka waa la tiray, nuxurkeedana waxaa lagu daray qodobka 55aad ee Cutubka 4aad.

  Faqradda 4aad ee asalka Dastuurka nuxurkeeda waxaa lagu daray soojeedinta faqradda 2aad ee isla qodobkan.

- **Faqradda 3aad:** Waa mid cusub oo nidaaminaysa habraaca la marayo haddii uu ku yimaaddo wax-kabeddel dhismaha Dawlad Goboleedka iyo habka loo xallinayo khilaafka yimaadda.

---

[1] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 20(1).
[2] Dastuurka Jarmalka Qodobka 29aad.
[3] Dastuurka Jarmalka Qodobka 28aad.
[4] Dastuurka Itoobiya Qodobka 47aad.

- **Faqradda 4aad**: oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 5aad, nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya siiqdeeda ayaa la hagaajiyay. Ereyga *"xudduudaha"* waxaa lagu beddelay *"soohdimaha"*.

- **Faqradda 5aad**: oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 6aad waxaa loo dhigay in dawlad goboleed ay ku midoobi karaan laba, saddex ama afar gobo loo deris ah ayagoo xor u ah go'aankooda..

- **Faqradda 6aad:** waxaa laga soo raray Qodobka 48(2) ee asalka Dastuurka, ayadoo lagu sameeyey dib-usiiqayn, waxayna xeerinaysaa in aan la oggoleyn in gobol gooni isu taago aysan jirin karin, ayadoo XFS ay maamulayso inta uu ku biirayo gobol ama dawlad goboleeed kale, waxaa la tiray ereyga "muddo labo sano ah".

**Natiijada Latashiyada.**




**Cilmibaaris: Dhismaha Dawlad Goboleedka**

⇒ ***Maraykanka***[5]**,** Qodobka afaraad wuxuu farayaa in gobollo cusub lagu dhisi karo go'aanka *Congress*-ka, iyadoo gobollada la kala saarayo ama la mideynayo laga rabo oggolaanshaha labada dhinac. Khilaafaadka gobollada waxaa lagu xalliyaa maxkamadaha federaalka.

⇒ ***Hindiya***, waxay leedahay nidaam dib-u-habeyn goboleed oo firfircoon oo ku salaysan luqado iyo baahiyo maamul. Dastuurka Hindiya[6] wuxuu u oggolaanayaa Baarlamaanka Qaranka inuu sameeyo gobollo cusub, beddelo soohdimaha gobollada, ama mideeyo gobollada jira. Wuxuu u baahanyahay wadahadal siyaasadeed, laakiin kama maarmaan ma aha ansixinta gobollada.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[7] wuxuu farayaa in gobollo cusub lagu dhiso codsiga shacabka deegaankaas oo loo qaado afti dadweyne, iyadoo Baarlamaanka federaalka uu go'aanka ugu dambeeya leeyahay.

[5] Dastuurka Maraykanka Qaybtiisa 3aad.
[6] Dastuurka Hindiya, Qodobka 3aad.
[7] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 29aad.

⇒ ***Kanada***, waxay leedahay nidaam adag oo aan si fudud loogu samayn karin gobollo cusub, iyadoo xuduuduhu yihiin kuwo taariikhi ah. Dastuurka[8] wuxuu tilmaamayaa in wax-kabeddelka xuduudaha gobollada u baahanyahay oggolaanshaha gobollada iyo federaalka, si looga fogaado muran sharciyeed.

⇒ ***Australia***, Dastuurka[9] wuxuu qeexayaa in xuduudaha gobollada la beddeli karo oo keliya haddii dadka deegaankaas oggolaadaan, waxaana go'aanka ugu dambeeya leh Baarlamaanka Qaranka.

## Qodobka 63aad: Maqaamka Caasimadda

GMDHD wuxuu maqaamka caasimadda ka diyaariyay laba xulusho oo ah kuwan hoos ku xusan, oo la doonayo in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu ka xusho hal xulasho, si looga dhigo faqrad ka mid ah Qodobka 63aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

**Xulashada 1aad: Gobol Caasimad ah oo Hoosyimaadda Dawladda Federaalka**

1) Magaalamadaxda waxay noqonaysaa gobol magaalamadax u ah Dawladda Federaalka.

2) Gobolka magaalamadaxda federaalku kama mid noqon karto qayb ka mid ah dawlad goboleed.

3) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya waa in uu soo saaro xeer gaar ah oo nidaamiya is xukun dimuqaraaddi ah, oo lagu maamulo degmada Magaalamadaxda Federaalka.

4) Xeerka doorashooyinka federaalku waa in uu siiyaa muwaaddiniinta deggan Magaalamadaxda, xaq ay ku dooran karaan wakiillo u matala Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waana in aysan matalaaddaas ku waayin degganaanshada ay deggan yihiin magaalamadaxda Dawlada Federaalka awgeed.

**Xulashada 2aad: Caasimad Dawlad Goboleed ah**

1) Magaalamadaxda Federaalku waxay noqonaysaa dawlad goboleed leh maqaam iyo xuquuq la mid ah kuwa Dawlad Goboleedyada.

2) Magaalamadaxda Federaalku kuma biiri karto gobol kale ma noqon karto qayb dawlad goboleed kale ku dhul ballaarsato.

3) Xukuumadda Dawlad Goboleedka ee Magaalamadaxda Federaalka iyo Xukuumadda Federaalku waa in ay dhowraan mabaadii'da xiriirka iskaashiga ee ku xusan Dastuurkan. Waa in ay si gaar ah ugu heshiiyaan arrimaha canshuuraha iyo xeerarka kale ee nidaaminaya dhulalka iyo dhismooyinka ay leedahay ama ay deggan tahay Xukuumadda Federaalku ee ku dhexyaal magaalamadaxda.

[8] Dastuurka Kanada, Qodobadiisa 42aad-43aad.
[9] Dastuurka Australia, Qaybtiisa 123aad.

Si Muqdisho u hesho maqaam iyo matalaad, waxaa muhiim ah in jawaab loo helo su'aalaha hoose:

(1) Maamulka caasimadda uu noqonayo?
(2) Goleyaasha ay yeelanayso caasimadda?
(3) Muxuu noqonayaa xiriirka caasimadda iyo xukuumadda Dawladda Federaalka?
(4) Matalaadda caasimadda ee goleyaasha dawladda?

## Natiijada Latashiyada




### Tusaalooyinka Caasimadaha Dalalka Federaalka Ah

Magaalamadaxda federaalka way ka duwan tahay casimadaha dawladaha leh nidaamka midaysan, sidaas daraadeed, inta badan dalalka federaalka waxay qaataan mid ka mid ah saddexda nidaam ee lagu maamulayo maqaamka caasimadda ee kor ku xusan, waxaana xusid mudan in dalalku hal nidaam maqaam ay ku sii kala duwanyihiin faahfaahinta la xiriirta qaabdhismeedka maamul, xeeridejinta, maaliyadda iyo garsoorkaba. GMDHD wuxuu halkan kusoo bandhigayaa qaar ka mid ah caasimadaha dalalka haysta nidaamka federaalka caalamka:

**Cilmibaaris: Magaalamadaxda**

⇒ ***Abuja:*** Magaalamadaxda dalka Nigeria ee Abuja waa tusaale caasimad ah oo hoostimaadda xukuumadda federaalka. Muwaaddiniinta deggan Abuja waxay matalaad ku leeyihiin heer federaal: Hal xubin ee Aqalka Sare (Aqalka labaad) iyo laba xubnood ee Aqalka Wakiillada. Sidoo kale, Madaxweynaha Federaalka ayaa u soo magacaabaya Wasiir ka tirsan xukuumadda federaalka mana laha guddoomiye gobol sidoo kale ma laha baarlamaan la soo doortay ee waxaa kaalintaa qaadanaya Baarlamaanka Federaalka. Xukuumadda Federaalka ayaa leh dhammaan dhulalka iyadaana bixinaysa shahaada lahaanshaha dhulka.

⇒ ***Washington DC:*** Aasaasayaashii Washington DC ayaa go'aansaday in caasimaddu ay ka madaxbannaanaato xubnaha ka tirsan federaalka[10]. Dastuurka ayaa siinaya kongareeska awood buuxda oo uu ku maamulo caasimadda. Washington waxaa si tartiib tartiib ah loo siiyay madaxbannaani xaddidan[11] hase ahaatee, kongreeska ayaa weli ansixiya xeerarka iyo misaaniyaddaba ayagoo u soo gudbiya Madaxweynaha Federaalka si uu u ansixiyo. Washington DC kuma lahan wakiil Aqalka Sare, hase ahatee waxay leeyihiin hal xubin oo aan cod lahayn ee Aqalka Wakiillada.

⇒ ***Berlin*:** Berlin waa caasimad dawlad goboleed ah oo si buuxda u leh awoodaha dawlad goboleedyada; waxayna wakiillo ku leedahay aqalka labaad ee Baarlamaanka *(Bundesrat)* taasoo ku xiran saamiga baaxaddeed sida gobollada. Xukuumadda Federaalka ee Jarmalka kuma lahan saamayn toos ah arrimaha u gaarka ah ee caasimadda.

⇒ ***Islamabad*:** Magaalamadaxda dalka Pakistan ee Islamabad[12] waxay matalaad buuxda ku leedahay labada aqal ee Baarlamaanka *(Majlis-e-Shoora)*. Golaha Shacabka waxay ku leedahay laba kursi ee tirada guud oo ah 342 kursi, halka Aqalka Sare ay ku leedahay afar[13] kursi oo ka mid ah tirada guud oo ah 100 kursi.

⇒ ***Ottawa*:** Ottawa waxay ku taallaa gobol lagu magaacabo *Ontario* oo xuduud la leh gobolka *Quebec*; Inkastoo *Ottawa* loo qorsheeyay in ay tahay xarunta xukuumadda si la isugu dheelitiro luqadaha, hadana hay'ado federaal oo badan oo muhiim ah ayaa ku yaal Quebec. Waxaa la sameeyay Guddiga Caasimadda Qaranka sanadki 1959 waxaana awood loo siiyay in ay horumariyaan, dhowraan isla markaana wanaajiyaan Caasimad Goboleedka Qaranka si waafaqsan arrimaha muhiimka u ah qaranka.

10 Qodobka 1aad, faqradda 8(17), Dastuurka Maraykanka.
11 [See, for further details of the contents of the Home Rule, the District of Colombia Home Rule Act of 1973, Public Law 93-198; Stat.774 D.C. Official Code 1-201.01 et seq. Approved December 24, 1973.
12 Qodobka 1aad, faqradda 2aad, Dastuurka Dawladda Islaamiga ah ee Pakistan.
13 Hal kursi oo ka imaanaya culumada, hal kursi oo ka imaanaya haweenka, iyo laba kursi oo guud.

## Madaxa 2aad: Iskaashiga Heerarka Dawladda

Madaxan waa mid cusub oo laga soo jaray madaxa 1aad ee cutubkan, wuxuuna ka koobanyahay 3 qodob.

## Qodobka 64aad: Mabaadii'da Federaalka

Cinwaanka Qodobka waxba lagama beddelin keliya waa la soo koobay. Qodobkan oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 50aad, waxaa soojeedinta laga dhigay Qodobka 64aad wuxuu ka koobanyahay hal (1) faqrad si la mid ah asalka dastuurku, sidoo kale nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo hagaajin. Waxaa kale oo lagu soo kordhiyay mabaa'dii cusub.

- ***Xarafka (a)*** ee faqraddan waa mid cusub oo tilmaamaysa mabda'a in awoodda dawladdu u baahsantahay una qaybsan tahay heerarka dawladda.
- ***Xarafka (b)*** ee faqraddan oo xarafka (d) asalka Dastuurka ahaa nuxurkeeda waxba lagama beddelin laakiin waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. Ereyga *"xukuumadeed"* waxaa lagu beddelay *"dawladeed"*.
- ***Xarafka (c)*** oo asalka Dastuurka ahaa xarafka (a) nuxurkiisa waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqatoosin.
- ***Xarafka (d)*** oo ahaa xarafka (c) oo tilmaamaya iskaashiga ka dhexaynaya Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedka iyo kan Dawlad Goboleedyada dhexdooda, nuxurka waxaba lagama beddelin, ee waxaa lagu sameeyay dibuqorid.
- ***Xarafka (e)*** oo ahaa xarafka (b) ee asalka Dastuurka nuxurka waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-usiiqayn.
- ***Xarafka (f)*** ee asalka Dastuurka waa la tiray, waxaana lagu xeerinayaa qaybaha Dastuurka oo ka hadlaya dhaqaalaha.
- ***Xarafka (g)*** nuxurkiisa waxaa lagu sameeyay siiqayn, waxaana lagu daray nuxurkiisa in Aqalka Sare uu leeyahay awoodda xallinta haddii khilaafka lagu xallin waayo wadaxoojood.

**Cilmibaaris: Mabaadii'da Federaalka**

⇒ ***Maraykanka,*** Wax-kabeddelka 10aad wuxuu xaddidayaa awoodaha federaalka, isaga oo tilmaamaya in awoodaha aan si cad loogu xusin federaalka ay iska leeyihiin gobollada. Nidaamka Maraykanka wuxuu xoogga saarayaa kala soocidda awoodaha heerarka kala duwan ee dawladda.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[14] wuxuu qeexayaa in awoodaha dawladda ay u kala qaybsan yihiin saddex qaybood: liiska federaalka, liiska gobollada, iyo liiska awoodaha wadaagga ah.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[15] wuxuu qeexayaa in awoodaha dawladda si siman loo qaybsado, iyadoo heer kasta uu leeyahay mas'uuliyado gaar ah, Sidoo kale, Qodobka 35 wuxuu xoojinayaa iskaashiga federaalka iyo gobollada.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka[16] wuxuu farayaa in muwaaddiniinta dalka oo dhan ay helaan adeegyo dawladeed oo isku mid ah. Sidoo kale, nidaamka federaalka Kanada wuxuu qeexayaa in khilaafaadka federaalka iyo gobollada lagu xalliyo wadaxaajood , iyadoo maxkamadaha federaalka ay door ka ciyaaraan go'aaminta khilaafaadka.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka[17] wuxuu qeexayaa in federaalku si siman ugu qaybin karo kheyraadka gobollada. Sidoo kale, nidaamka federaalka Australia wuxuu xoojinayaa xiriirka iskaashiga federaalka iyo gobollada.

**Xog dheeraad ah:**

- ***Qaybsanaanta Awoodaha*** (Faqradda (a)) waxaa la caddeeyay in awoodaha dawladdu ay u qaybsan yihiin heerarka kala duwan ee dawladda. Nidaamyada Maraykanka, Jarmalka, iyo Hindiya waxay si gaar ah u qeexayaan nidaamka qaybsanaanta awoodaha.

- ***Sinnaan iyo Xaqsoor (***Faqradda (b)) waxaa la xaqiijiyay in muwaaddin kasta uu helo adeegyo dawladeed oo isku mid ah, taasoo waafaqsan nidaamka Kanada iyo Australia.

- ***Kalsoonida Shacabka*** (Faqradda (c)) heer kasta oo dawladeed waa in uu haysto kalsoonida shacabka, taasoo la mid ah mabda'a dimuqraadiyada matalaada ee Jarmalka iyo Maraykanka.

- ***Wada-Shaqeynta Heerarka Dawladaha (***Faqradda (d)) waxaa xoogga la saaray iskaashiga Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada, taasoo la mid ah habka wada shaqeynta federaalka ee Jarmalka iyo Kanada.

- ***Fulinta Adeegyada*** (Faqradda (e)) waxaa lagu caddeeyay in fulinta adeegyada loo dhiibo dawladda awoodda u leh, taasoo la mid ah nidaamka federaalka Hindiya iyo Australia.

[14] Dastuurka Hindiya, Qodobka 246aad.
[15] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 20aad.
[16] Dastuurka Kanada, Qaybta 36aad.
[17] Dastuurka Australia, Qaybtiisa 96aad.

- ***Qaybsiga Kheyraadka*** (Faqradda (f)) waxaa la xaqiijiyay in heerarka kala duwan ee dawladda ay si cadaalad ah u qaybsadaan kheyraadka qaranka, taasoo la mid ah nidaamka Maraykanka iyo Australia.

- ***Xallinta Khilaafaadka*** (Faqradda (g)) waxaa la qeexay in khilaafaadka u dhexeeya heerarka dawladda lagu xalliyo wadaxaajood, haddii aysan suurtagal noqon, Golaha Aqalka Sare ayaa go'aan ka gaaraya, taasoo la mid ah nidaamka xallinta khilaafaadka ee dalalka Kanada iyo Jarmalka.

## Qodobka 65aad: Xiriirka Iskaashi ee u Dhexeeya Heerarka Kala duwan ee Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 65aad oo asalka Dastuurka oo ahaa Qodobka 51aad: *"Xiriirka Iskaashiga Heerarka Dawladaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya"* waxaa laga dhigay *"Xiriirka Iskaashi ee u Dhexeeya Heerarka Kala duwan ee Dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya"*. Qodobkan wuxuu ka koobanyahay shan (5) faqradood si la mid ah asalka Dastuurka.

- **Faqradda 1aad**: waxaa laga soo raray faqradda 4aad ee Qodobka 51aad asalka Dastuurka, waxayna ku waajibinaysaa heerar kasta oo dawladeed in ay dhawraan una hoggaansamaan Dastuurka iyo in aan la isasiin karin awood ka baxsan awoodaha Dastuurku asteeyay.

- **Faqradda 2aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. Ereyga "xukuumadeed" waxaa lagu beddelay "dawladeed".

- **Faqradda 3aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqardda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. Ereyga *"xukuumad"* waxaa lagu beddelay *"dawlad"*. Sidoo kale "midnimada muwaadiniinta" waxaa laga dhigay "wadajirka shacabka".

- **Faqradda 4aad**: oo asalka Dasturuka ahayd faqradda 3aad waxaa lagu sameeyay dib-usiiqayn si loo waafajiyo heshiisyada siyaasadeed ee ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka iyo qaybaha kale ee Dastuurka.

  Faqradda 4aad ee asalka Dastuurka waxa loo raray oo lagu nidaamiyey faqradda 1aad ee isla qodobkan.

- **Faqradda 5aad**: Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya waxa lagu sameeyay dib-u-habyn iyo siiqatoosin.

**Cilmibaaris: Xiriirka Iskaashiga Heerarka Dawladda**

⇒ ***Maraykanka,*** nidaamka iskaashiga heerarka dawladdu wuxuu ku saleysan yahay mabda'a kalasoocidda awoodaha, laakiin Dastuurku[18] wuxuu farayaa in federaalku dammaanad qaado nidaamka dimoqraadiga ah ee gobollada, taasoo qeexeysa xaddidaadda iyo iskaashiga xukuumadaha goboleed iyo federaalka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[19] wuxuu qeexayaa in Golaha Iskaashiga Federaalka uu kor kala socdo xiriirka u dhexeeya federaalka iyo gobollada, wuxuuna nidaaminayaa khilaafaadka suurtagalka ah.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[20] waxay qeexayaan iskaashiga federaalka iyo gobollada ee arrimaha dhaqaale iyo waxbarasho, wuxuuna xaddidayaa in federaalku faragelin karo oo keliya marka gobolladu ka codsadaan taageero dhaqaale.

⇒ ***Kanada,*** nidaamka federaalku wuxuu bixiyaa sharciyo qeexaya iskaashiga federaalka iyo gobollada ee arrimaha sida daryeelka caafimaadka, waxbarashada, iyo dhaqaalaha. Dastuurka[21] wuxuu oggolaanayaa wadashaqeyn buuxda oo u dhexaysa labada heer dawlad.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka[22] wuxuu federaalka u oggolaanayaa inuu siiyo gobollada deeqo dhaqaale oo ay u isticmaalaan mashaariicda iskaashiga heerarka kala duwan ee dawladaha.

## Qodobka 66aad: Heshiisyada Iskaashiga ee Heerarka Dawladda

Cinwaanka Qodobka 66aad ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 52aad ahaa *"Iskaashiga Xukuumadaha xubinta ka ah Dawladda Federaalka"* waxaa laga dhigay *"Heshiisyada Iskaashiga ee Heerarka Dawladda"*. Qodobkan wuxuu ka koobanyahay laba (2) faqraddood si la mid ah asalka Dastuurka.

- Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradda hoose, sidoo kale waxaa nuxurkeeda lagu daray madaxa Astaynta Awoodaha oo Heshiiska Astaynta Awoodaha oo Golaha Wadatashiga Qaranku gaareen 2022.

- **Faqradda 1aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad, waxay xeerinaysaa in dawlad goboleedyada dhexdooda iyo dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada ay geli karaan heshiis, kuwaas oo aan ka hor imaanayn Dastuurka Federaalka.

[18] Dastuurka Maraykanka, (Article IV, Section 4).
[19] Dastuurka Hindiya, Qodobka 263aad.
[20] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 91a-91b.
[21] Dastuurka Kanada, Qaybta 106aad.
[22] Dastuurka Australia, Qaybta 96aad.

- **Faqradiisa 2aad:** Waa mid cusub oo tilmaamaysa in heshiisyada u dhexeeya dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada ay u baahanyihiin ansixinta Baarlamaanka federaalka.

**Cilmibaaris: Heshiisyada Iskaashiga Heerarka Dawladda**

⇒ ***Maraykanka,*** Heshiisyada iskaashiga federaalka iyo gobolladu waxay u baahanyihiin ansixinta Congress-ka[23], taasoo xaddidaysa heshiisyada gobollada oo aan la oggolaan karin haddii aysan u marayn federaalka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[24] wuxuu qeexayaa in gobolladu samayn karaan heshiisyo iskaashi, balse waa in federaalku ansixiyaa heshiisyadaas haddii ay saameynayaan xeerarka qaranka.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[25] wuxuu qeexayaa in federaalka iyo gobolladu samayn karaan heshiisyo dhaqaale oo iskaashi ah, kuwaas oo u baahan in la helo oggolaanshaha hay'adaha federaalka.

⇒ ***Kanada***, Dastuurka[26] wuxuu si gaar ah u oggolaanayaa in gobolladu samaystaan heshiisyo la xiriira arrimaha tamarta iyo dhaqaalaha, balse heshiisyada kale waxay u baahan yihiin wadaxaajood federaal.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka[27] wuxuu federaalka siinayaa awood inuu la galo heshiisyo heer goboleed oo lagu maamulo arrimaha dhaqaalaha, waxbarashada, iyo caafimaadka.

Qodobka 53aad: Wadaxaajoodyada Caalamiga ee asalka Dastuurka waa la tiray, waxaana nuxurkiisa lagu daray madaxa afaraad oo lagu xeeriyay Astaynta Awoodaha ee Heerarka Dawladda.

Qodobka 54aad: Kala Qaybinta Awoodaha ee asalka Dastuurka waa la tiray, Nuxurkiisa waxaa lagu daray qodobbada soo socda ee madaxa 4aad ee isla cutubka 5aad.

## Madaxa Saddexaad: Dawlad Goboleedyada

Madaxan waa mid cusub oo laga soo raray cutubka 12aad ee asalka Dastuurka, oo ka koobnaa laba qodob, wuxuuna xeerinayaa Dastuurrada Dawlad Goboleedyada, Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedyada iyo Fulinta Dawlad Goboleedyada.

---

23 Dastuurka Maraykanka, (Article I, Section 10).
24 Dastuurka Hindiya Qodobka 252aad.
25 Dastuurka Jarmalka Qodobka 91b
26 Dastuurka Kanada, Qodobka 92A
27 Dastuurka Australia, Qodobka 51(xxix).

## Qodobka 67aad: Dastuurka Dawlad Goboleedyada

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub waxay xeerinaysaa in dastuurrada Dawlad Goboleedyadu waafaqsanyiiin Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

- **Faqradda 2aad**: Waa mid cusub waxay tilmaamaysaa in qodob kasta oo ka mid ah Dastuurka Dawlad Goboleedka ee ka soo horjeeda Dastuurka Federaalka uu noqonayo waxba kama jiraan.

**Cilmibaaris: Dastuurrada Dawlad Goboleeyada**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[28] wuxuu tilmaamayaa in Dastuurka Federaalka uu yahay sharciga ugu sarreeya dalka, taasoo ka dhigaysa in sharci kasta oo goboleed oo ka hor yimaadda Dastuurka federaalka uu yahay mid aan ansax ahayn.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[29] waxay qeexayaan in sharciyada gobolladu ay waafaqsanaadaan Dastuurka Qaranka, haddii ay is khilaafaanna, Dastuurka Qaranka ayaa mudnaan leh.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka Jarmalka[30] wuxuu si cad u sheegaya in sharciyada federaalku ay ka sareeyaan kuwa gobollada (Länder), haddii uu jiro is khilaaf sharciyeed.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka[31] wuxuu tilmaamayaa in sharci kasta oo aan waafaqsanayn Dastuurka Qaranka uu yahay mid aan ansax ahayn.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka[32] wuxuu farayaa in haddii sharci goboleed uu ka hor yimaaddo sharci federaal ah, sharci federaalku uu mudnaan leeyahay.

## Qodobka 68aad: Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedyada

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub oo xeerinayaa si guud in dawlad goboleedku yeeelanayo gole wakiil oo matalaya shacabka dawlad goboleedka.
-

[28] Dastuurka Maraykanka, (Article VI, Supremacy Clause).
[29] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 245aad-246aad.
[30] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 31aad.
[31] Dastuurka Kanada, Qaybta 52aad.
[32] Dastuurka Australia, Qaybta 109aad

## Natiijada Latashiyada




- **Faqradda 2aad:** Waa mid cusub waxayna xeerinaysa tirada xubnaha golaha wakiillada aysan ka badnaan 99 wakiil.

## Natiijada Latashiyada




- **Faqradda 3aad:** Waa mid cusub waxay tilmaamaysaa in xeerarka ay soo saaraan Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedyada ay noqdaan kuwo waafaqsan xeerarka Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

**Cilmibaaris: Golaha Wakiillada Dawlad Goboleeyada**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[33], waxa ku xusan "Awoodaha aan si cad loogu wareejin dawladda dhexe, ama aan laga mamnuucin gobollada, waxay u harayaan gobollada."

Qodobkani wuxuu xaqiijinayaa madaxbannaanida gobollada Maraykanka marka la eego sharcidejinta. Sidaa darteed, gobolladu waxay si madaxbannaan u dejisan karaan goleyaashooda sharcidejin. Inta badan gobollada waxay leeyihiin baarlamaan labo aqal leh (*bicameral legislature*), inkasta oo ay jiraan gobollo yar sida Nebraska oo leh hal aqal.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[34], wuxuu Gobol kasta yeelanayaa gole sharcidejin, waxayna noqon kartaa labo aqal *(Legislative Assembly iyo Legislative Council)* ama hal aqal.", iyo "Gobolku wuxuu baabi'in karaa Aqalka Sare haddii golihiisu ansixiyo soojeedin, Baarlamaanka Qarankuna oggolaado."

Qaabdhismeedka sharcidejinta gobollada Hindiya waa kuwo isku dhafan. Qaar ka mid ah gobollada sida Karnataka, Maharashtra iyo Uttar Pradesh waxay leeyihiin baarlamaan labo aqal leh, halka kuwa kale ay leeyihiin hal aqal. Dastuurka Hindiya si cad ayuu u oggol yahay labada qaab.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[35] (*Grundgesetz*), wuxuu dhigayaa "Nidaamka dastuuri ee gobollada waa inuu waafaqsanaadaa mabaadi'da jamhuuriyadda, dimuqraadiyadda iyo sarraynta sharciga." Gobollada waxay leeyihiin awood sharcidejin marka aysan jirin awood si gaar ah loogu wareejiyay dawladda dhexe.

Dastuurka Federaalka Jarmalka si toos ah uma xuso tirada aqallada ee golaha sharcidejinta gobollada, balse dhammaan 16-ka gobol waxay leeyihiin hal aqal sharcidejin *(unicameral legislature)* oo loo yaqaan Landtag. Waxayna ku caddahay dastuurrada gobollada.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka[36] *(Constitution Act 1867),* wuxuu "Gobol kasta wuxuu yeelanayaa gole sharcidejin oo ka kooban Guddoomiyaha Gobolka iyo Golaha Wakiillada.", iyo "Gobolladu waxay leeyihiin awood sharcidejin ku saabsan arrimo sida waxbarashada iyo xuquuqda madaniga."

Dhammaan gobollada Kanada waxay leeyihiin hal aqal xeerdejin, waxaana ay u madaxbannaan yihiin dejinta sharciyo gudaha ah oo la jaanqaadaya Dastuurka Federaalka. Dastuurku si cad ayuu u xusay qaabkaas hal aqal.

---

[33] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 10aad (Tenth Amendment).
[34] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 168aad iyo 169aad.
[35] Dastuurka Jarmalka (Grundgesetz), Qodobka 28(1) iyo 70aad.
[36] Dastuurka Canada (Constitution Act 1867) – Qodobbada 69aad iyo 92aad.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka[37],

- Gobolladu waxay sii haysanayaan dastuurradooda ilaa laga beddelo.
- Awoodaha gobolladu way sii jiri doonaan ilaa laga mamnuuco.
- Sharciyada gobollada waxay sii shaqeyn doonaan ilaa laga baabi'iyo.

Dastuurka ma waajibinayo qaab gaar ah oo aqallo ah, laakiin gobollada intooda badan – sida *(New South Wales, Victoria, iyo Western Australia)* waxay leeyihiin baarlamaan labo aqal leh. Qaabkaasi wuxuu ku cad yahay dastuurradooda goboleed.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka[38], wuxuu xeerinayaa in gobol kasta uu yeelanayo gole sharcidejin oo ka kooban guddoomiyaha golaha iyo xubnaha golaha wakiillada. Sidoo kale wuxuu si cad u qeexayaa in gobolladu leeyihiin gole xeerdejin hal aqal leh *(unicameral legislature)*. Dalka Nigeria waxaa ka jira 36 gobol, mid walbana wuxuu leeyahay golaha xeerdejinta gobolka, oo sharci ka sameeya arrimaha gudaha gobolkaas.

⇒ ***Brazil,*** Dastuurka[39], wuxuu tilmaamayaa in gobolladu leeyihiin awood xeerdejin madaxbannaan, iyo sidoo kale goleyaasha xeerdejinta gobollada in ay noqdaan hal aqal, una hoggaansamaan mabaadi'da Dastuurka Qaranka.

Dastuurka Brazil si cad ayuu u tilmaamayaa in golaha sharcidejinta ee gobolladu yahay hal aqal. Gobol kastaa wuxuu leeyahay Assembleia Legislativa, oo ah gole sharcidejin u gaar ah gobolka, waxaana loo baahan yahay in sharciyadoodu ay waafaqaan Dastuurka Qaranka.

⇒ ***Koonfur Afrika,*** Dastuurka[40], wuxuu xeerinayaa in Gobol kasta yeelanayo awood Xeer dejin oo uu ku salaynayo Dastuurka Qaranka, wuxuuna leeyahay gole Xeer dejin hal aqal ah.

Dastuurka Koonfur Afrika si cad ayuu u qeexayaa in gobollada ay leeyihiin hal aqal sharcidejin. Waxaa jira sagaal gobol, mid walbana wuxuu leeyahay *"Provincial Legislature"* oo sharci ka sameeya arrimaha gobolka. Awoodahooda waa kuwo xaddidan oo ay tahay in aysan khilaafin Dastuurka Qaranka.

## Qodobka 69aad: Golaha Fulinta Dawlad Goboleedyada

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

[37] Dastuurka Australia, Qodobbada 106aad ilaa 108aad.
[38] Dastuurka Nigeria, Qodobka 90aad.
[39] Dastuurka Brazil (1988) Qodobbada 25aad iyo 27aad.
[40] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 104aad.

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub dawlad goboleedku yeelanayo gole fulin oo ka kooban Hoggaamiye, oo ah madaxa u sareeya Dawlad Goboleedka, hoggaamiye kuxigeen iyo xoghayeyaal.

**Natiijada Latashiyada:**




- **Faqradda 2aad**: waa mid cusub waxay xeerinaysaa in hoggaamiyaha iyo hoggaamiye kuxigeenka Dawlad Goboleedka aan xilka loo dooran karin wax ka badan laba muddo xileed oo isku xiga.

**Cilmibaaris: Golaha Fulinta Dawlad Goboleeyada**

⇒ ***Maraykanka,*** gobolladu waxay leeyihiin guddoomiye gobol *(Governor)* oo ah madaxa fulinta, wuxuuna leeyahay xukuumad goboleed oo u gaar ah. Dastuurka Maraykanka[41] wuxuu dammaanad qaadayaa in gobolladu yeelan karaan nidaam madaxbannaan oo maamulka goboleedka ah. Inta badan gobollada Maraykanka waxay xaddidaan muddada xilka guddoomiyeyaasha gobollada ilaa laba xilli doorasho.

⇒ ***Hindiya,*** gobolladu waxay leeyihiin *(Chief Minister)* oo ah hoggaamiyaha xukuumad goboleedka, wuxuuna maamulaa xukuumad ka kooban wasiirro goboleed. Dastuurka[42] wuxuu xeerinayaa qaabka hoggaanka dawlad goboleedyada, laakiin ma xaddidayo muddada xilka hoggaanka goboleedka.

⇒ ***Jarmalka,*** gobollada (*Länder*) waxay leeyihiin madaxweyne goboleed (*Minister-President*), wuxuuna maamulaa xukuumad goboleed. Dastuurka Jarmalka[43] wuxuu dammaanad qaadayaa in gobolladu leeyihiin nidaam dawlad goboleed oo waafaqsan Dastuurka qaranka. Inta badan gobollada Jarmalka waxay leeyihiin xadidnaan la'aan oo ku saabsan muddada xilka hoggaan goboleedyada.

[41] Dastuurka Maraykanka, Qodobka IV, Qaybta 4aad.
[42] Dastuurka Hindiya, Qodobka 164aad.
[43] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 28aad.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka[44], wuxuu xeerinayaa in ay jiri doonaan guddoomiyaha gobolka oo noqonaya madaxa fulinta ee gobol kasta iyo in guddoomiyaha xilka loo dooran karo muddo afar sano ah, isla markaana uu mar labaad u tartami karo hal xilli oo dheeraad ah.

Nigeria waxay leedahay 36 gobol, mid kasta oo leh "*Governor*" oo ah hoggaamiyaha fulinta. Guddoomiyaha waxaa doorta shacabka gobolka si toos ah, wuxuuna maamulaa xukuumad goboleed oo madaxbannaan. Muddada xilku waa afar sano, waxaana uu guddoomiyuhu u tartami karaa hal mar oo kale (2 muddo xileed isu geyn).

⇒ **Koonfur Afrika,** Dastuurka[45], wuxuu tilmaamayaa in awoodda fulinta gobolka leedahay dawlad goboleedka, oo uu hoggaamiyo "*Premier*" iyo in "*Premier*-ka" ay dooranayaan golaha xeerdejinta gobolka."

Gobollada Koonfur Afrika (9 gobol) waxay leeyihiin "*Premier*", oo ah hoggaamiyaha xukuumad goboleedka. Waxaa doorta golaha sharcidejinta gobolka. *Premier*-ku wuxuu xilka hayaa muddo shan sano ah (5 sano), waana la dooran karaa marar badan ilaa uu heysto aqlabiyadda golaha. Dastuurku ma xaddido tirada jeer ee uu xilka qaban karo.

⇒ ***Brazil,*** Dastuurka[46], wuxuu xeerinayaa in gobolladu dejin karaan xeerar u gaar ah oo nidaaminaya maamulka goboleedka. Sidoo kale guddoomiyaha gobolka xilka loo dooran karo muddo afar sano ah, oo hal mar oo keliya dib isu sharxi karo.

Gobollada Brazil (26 gobol iyo hal caasimad federaal ah) waxay leeyihiin guddoomiye gobol *(Governador)* oo ah madaxda fulinta. Waxaa si toos ah u doorta shacabka gobolka. Dastuurka wuxuu si cad u xaddidayaa in guddoomiyuhu xilka hayn karo afar sano (4) sano oo uu hal mar oo keliya dib isu sharixi karo.

## Madaxa Afaraad: Astaynta Awoodaha ee Heerarka kala duwan ee Dawladda

Madaxan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 5aad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka kooban yahay toban (10) qodob oo aan ku jirin asalka Dastuurka

## Qodobka 70aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawladda Federaalka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood. Qodobkan wuxuu si cad u xeerinayaa awoodaha gaarka ah ee Dawladda Federaalka, kuwaas oo lagu qeexay Jadwalka 2(A). Waxa uu xaddidayaa in Dawladda Federaalka ay leedahay awoodaha masiiriga ah ee saameeya qaranka oo dhan.

[44] Dastuurka Nigeria, Qodobka 176(1) iyo 180(2).
[45] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobbada 125aad iyo 130aad.
[46] Dastuurka Brazil Qodobbada 28aad iyo 77aad,

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub oo xeerinaysaa in Dawladda Federaalka ay yeelanayso awoodo u gaar ah oo ku xusan Jadwalka 2(A).

- **Faqradda 2aad**: Waa mid cusub oo xeerinaya hirgelinta awoodaha u gaarka ah Dawladda Federaalka.

**Cilmibaaris: Awoodaha u gaarha Dawladda Federaalka**

⇒ ***Maraykanka***, Dastuurka[47] wuxuu tilmaamayaa awoodaha gaarka ah ee Dawladda Federaalka, oo ay ka mid yihiin arrimaha difaaca, xiriirka caalamiga ah iyo maaliyadda qaranka.

⇒ ***Hindiya***, Dastuurka[48] wuxuu qeexayaa awoodaha federaalka ee go'an, sida amniga qaranka iyo maaliyadda federaalka.

⇒ ***Jarmalka***, Dastuurka[49] wuxuu qeexayaa awoodaha gaarka ah ee federaalka, oo ay ka mid yihiin arrimaha dibadda, difaaca, iyo dhaqaalaha qaran.

⇒ ***Kanada***, Dastuurka[50] wuxuu qeexayaa awoodaha federaalka, sida xiriirka dibadda iyo amniga qaranka.

⇒ ***Australia***, Dastuurka[51] wuxuu caddeynayaa awoodaha federaalka sida difaaca, lacagaha qaranka, iyo ganacsiga dibadda.

## Qodobka 71aad: Awoodaha Wadaagga ah

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub oo xeerinaysaa awoodaha wadaagga ee ka dhexeeya Dawladda Federaalka ah iyo Dawlad Goboleedyada.

- **Faqradda 2aad**: Waa mid cusub oo tilmaamaya in Dawladda Federaalka ay mas'uul ka tahay dejinta xeerarka, siyaasadaha, xeernidaamiyayaasha khuseeya awoodaha wadaagga ah ee Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada.

- **Faqradda 3aad**: Waa mid cusub oo xeerinaysa in fulinta iyo dhaqangelinta awoodaha la wadaago ay Dawlad Goboleedyadu u xilsaaran yihiin.

---

[47] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybtiisa 8aad.
[48] Dastuurka Hindiya, Liiska 1aaad ee wax-kabeddelka 7aad.
[49] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 73aad.
[50] Dastuurka Kanada, Qaybta 91aad.
[51] Dastuurka Australia, Qaybta 51aad.

**Cilmibaaris: Awoodaha Wadaagga ah**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka wuxuu adeegsadaa *"Concurrent Powers Doctrine"*[52] Qodobkani wuxuu oggolaanayaa in haddii awood aan si gaar ah loogu xusin dawladda dhexe ama aan laga mamnuucin gobollada, ay u furan tahay in labaduba wada yeeshaan – taasina waa salka lagu dhisay *"Concurrent Powers Doctrine"*. Waxayna u oggolaaneysa dawladda dhexe iyo gobollada in ay si wadajir ah u maamulaan awoodo gaar ah, haddii aysan si gaar ah ugu xusin Dastuurka dawladda dhexe. Awoodahaas waxaa ka mid ah: waxbarashada, caafimaadka, adeegyada bulshada iyo cashuur ururinta. Marka ay khilaafaan, maxkamaduhu waxay xalliyaan iyadoo la eegayo mabaadi'da dastuuriga ah iyo horumarka danta guud.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurku[53] wuxuu si rasmi ah u qeexayaa awoodaha wadaagga ah ee u dhexeeya dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada, kuwaas oo lagu taxay liiska 3aad (*Concurrent List)* ee ku jira jadwalka 7aad. Labada heer ee dawladda waxay ka sharcidejin karaan mowduucyada ku jira liiskan, sida waxbarashada, caafimaadka, deegaanka, qoyska iyo caddaaladda bulshada. Haddii uu khilaaf sharci yimaaddo, sharciga dawladda dhexe ayaa mudnaan leh.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[54] wuxuu si cad u kala soocayaa awoodaha federaalka, kuwa gobollada, iyo kuwa wadaagga ah. Awoodaha wadaagga ah waxaa lagu xusay Qodobka 74aad, waxaana ka mid ah: deegaanka, isgaarsiinta, waxbarashada dadweynaha, caafimaadka iyo horumarinta magaalooyinka. Dawladda Federaalka waxay mudnaan u yeelan kartaa haddii ay jirto baahi midaysan oo qaran.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka[55] wuxuu tilmaamayaa in gobolladu ay leeyihiin awood xadidan oo wadaag ah, wuxuuna oggolaanayaa in dawladda dhexe iyo gobolladu ay ka dejin karaan xeerarka khuseeya mowduucyada sida waxbarashada, tamarta, iyo horumarinta beeraleyda. Marka ay jiraan sharciyo is khilaafsan, kan dawladda dhexe ayaa ka awood badan.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka[56] wuxuu qeexayaa awoodaha wadaagga ah ee federaalka iyo gobollada. Australia waxay leedahay nidaam awood wadaag ah, gaar ahaan arrimaha waxbarashada, caafimaadka, cashuuraha iyo horumarinta dhaqaalaha. Gobollada waxay ka dejin karaan xeerar ay dawladda dhexe sidoo kale ka shaqeyso, laakiin haddii khilaaf yimaaddo, sharciyada federaalka ayaa mudnaan leh. sida caafimaadka iyo waxbarashada.

---

[52] Dastuurka Maraykanka Waxkabdelka 10aad.
[53] Dastuurka Hindiya, Liiska 3aad ee wax-kabeddelka 7aad.
[54] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 74aad.
[55] Dastuurka Kanada, Qaybta 92A.
[56] Dastuurka Australia, Section 51(xx).

⇒ ***Brazil,*** Dastuurka[57] wuxuu sheegayaa awoodaha wadajirka ah, iyo in dawladda fedaraalka iyo gobollada ay labaduba xeerdejin karaan mowduucyada wadaagga ah.

Brazil waxay leedahay nidaam awood wadaag ah oo fiican. Dastuurku wuxuu oggolaanayaa in dawladda dhexe iyo gobolladu ay ka wada shaqeeyaan arrimaha ay ka mid yihiin: deegaanka, caafimaadka, waxbarashada, gaadiidka iyo caddaaladda bulshada. Haddii ay is khilaafaan, xeerarka federaalka ayaa mudnaan leh.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurku[58], wuxuu Taxaya mowduucyada awood wadaagga ah. Wuxuu sidoo kale xusayaa in Dawladda Federaalka iyo gobolladu ay awood u leeyihiin Xeer dejin wadajir ah.

Nigeria waxay leedahay *"Concurrent Legislative List"*, kaasoo oggolaanaya in dawladda dhexe iyo gobollada ay ka sharcidejin karaan mowduucyada la midka ah waxbarashada, caafimaadka, adeegyada bulshada iyo shaqada rayidka. Marka sharciyada labada heer is khilaafaan, kan dawladda dhexe ayaa mudnaan leh.

⇒ ***Koonfur Afrika,*** Dastuurku[59] wuxuu taxayaa liiska rasmi ah ee awoodaha la wadaago. Sidoo kale wuxuu tilmaayan in Xeerar Federaalka ayaa mudnaan leeyihiin haddii uu jiro khilaaf dan guud oo qaran.

Koonfur Afrika waxay si cad u kala saartay awoodaha dawladda dhexe iyo gobollada. Awoodaha la wadaago waxaa ku jira: caafimaadka, waxbarashada, gaadiidka dadweynaha, deegaanka, iyo gargaarka bulshada. Haddii sharciyo is khilaafaan, kan dawladda dhexe ayaa laga doorbidaa marka ay dan qaran jirto.

## Qodobka 72aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawlad Goboleedyada

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood. Qodobkan wuxuu qeexayaa awoodaha u gaarka ah Dawlad Goboleedyada, kuwaas oo lagu xusay Jadwalka 2(C) ee Dastuurka. Waxa uu xaqiijinayaa in Dawlad Goboleedyadu ay leeyihiin mas'uuliyadda dejinta xeerarka iyo siyaasadaha ay iyagu maamulaan.

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub oo tilmaamaysa in Dawlad Goboleedyada ay yeelanayaan awoodo u gaar ah oo ku xusan Jadwalka 2 (C) ee Dastuurka.

- **Faqradda 2aad**: Waa mid cusub oo tilmaamaysa in ay dawlad goboleedyadu leeyihiin mas'uuliyadda dejinta xeerarka, siyaasadaha iyo xeer nidaamiyayaasha ee awoodaha ku xusan Jadwalka 2B.

---

[57] Dastuurka Brazil (1988), Qodobbada 23aad iyo 24aad.
[58] Dastuurka Nigeria (1999), Second Schedule, Part II iyo Qodobka 4(4).
[59] Dastuurka Koofur Afrika, Schedule 4 iyo Qodobka 146aad.

**Cilmibaaris: Awoodaha u gaar ah Dawlad Goboleedyada**

⇒ ***Hindiya,*** dastuurku[60] wuxuu qeexayaa awoodaha u gaarka ah gobollada, sida waxbarashada iyo caafimaadka.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurku[61] wuxuu qeexayaa in gobollada ay leeyihiin awood sharcidejin oo gaar ah marka ay la xiriirto arrimaha gudaha iyo maamulka maxalliga ah.

⇒ ***Kanada,*** dastuurku[62] wuxuu qeexayaa awoodaha gobollada, sida waxbarashada, caafimaadka iyo adeegyada bulshada.

⇒ ***Australia,*** dastuurku[63] wuxuu dammaanad qaadayaa madaxbannaanida sharcidejinta gobollada.

## Qodobka 73aad: Awoodaha u Gaarka ah Dawladaha Hoose

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad** waa mid cusub dawladaha hoose ay yeelanayaan awoodo u gaar ah oo ku xusan Jadwalka 2 (D).

- **Faqradda 2aad** waxay xeerinaysaa in awoodaha gaarka u ah dawladaha hoose mas'uuliyadda dejinta siyaasadaha, xeernidaamiyayaasha iyo halbeegyada ay saaran tahay dawladaha hoose.

**Cilmibaaris: Awoodaha u gaar ah Dawlad Goboleedyada**

⇒ ***Maraykanka,*** Dawladaha hoose waxay leeyihiin awood si gaar ah loogu qeexay Dastuurka gobollada, iyadoo gobollada ay si gaar ah u maamulaan nidaamyada dowladaha hoose, balse Dastuurka Maraykanka[64] wuxuu farayaa in awoodaha aan si cad loogu xusin federaalka ay gobolladu leeyihiin, taasoo si dadban u saamaynaysa awoodaha dawladaha hoose.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka Jarmalka[65], wuxuu dammaanad qaadaa madaxbannaanida dowladaha hoose, wuxuuna qeexayaa in gobolladu ay masuul ka yihiin ilaalinta nidaamyada maxalliga ah.

[60] Dastuurka Hindiya, (Liiska 2aad ee wax-kabeddelka 7aad).
[61] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 70aad.
[62] Dastuurka Kanada, Qaybta 92aad.
[63] Dastuurka Australia, Qaybta 106aad-108aad.
[64] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 10aad.
[65] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 28aad.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurku[66] wuxuu oggolaanayaa in gobollada ay xukumaan dawladaha hoose, balse federaalku wax faragelin ah kuma yeelan karo maamulka dawladaha hoose.

## Qodobka 74aad: Awoodaha Haraagga ah

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay hal (1) faqrad oo kaliye. Faqradda 1aad oo tilamamaysaa in awoodaha ka baxsan kuwa gaarka loo asteeyay iyo kuwa wadaagga ah ay ka gaarayaan heshiis Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawlad Goboleedyada.

**Cilmibaaris: Awoodaha Haraagga ah**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka Maraykanka[67], wuxuu qeexayaa in awoodaha aan si cad loogu xusin federaalka ay iska leeyihiin gobollada.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka Hindiya[68] wuxuu oggolaanayaa in awoodaha aan lagu qeexin Dastuurka ay dawladda dhexe leedahay.

⇒ ***Jarmalka,*** awoodaha hadhaagga ah waxay hoos yimaaddaan dawladda federaalka, sida lagu qeexay Dastuurka Jarmalka[69].

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka Kanada[70] wuxuu federaalka siinayaa awoodaha hadhaagga ah, taasoo macnaheedu yahay in federaalku leeyahay go'aanka kama dambaysta ah ee arrimaha aan si cad loogu xusin Dastuurka.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka Australia[71] wuxuu xusayaa awoodaha federaalka, halka gobollada ay leeyihiin awoodahooda gaarka ah, laakiin awoodaha hadhaagga ah waxay si gaar ah u hoos yimaaddaan federaalka.

## Qodobka 75aad: Erginta Awoodaha

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

---

66 Dastuurka Kanada, Qodobka 92(8).
67 Dastuurka Maraykanka Qodobka 10aad.
68 Dastuurka Hindiya, Qodobka 248aad.
69 Dastuurka Jarmalka, Qodobka 71aad.
70 Dastuurka Kanada, Qaybta 91aad.
71 Dastuurka Australia, Qaybta 51aad.

- **Faqradda 1aad**: Waa mid cusub oo tilmaamaysa in dawladda federaalka ay awoodaheeda gaarka u leedahay u wakiilan karto dawlad goboleedyada iyo golayaashooda wakiillada.

- **Faqradda 2aad**: Waa mid cusub oo xeerinaysa in dawlad goboleedku u wakiilan karo awoodahooda u gaarka ah dawladda federaalka, loona baahanyahay ansixinta golaha wakiillada dawlad goboleedka ay khusayso.

- **Faqradda 3aad**: Waa mid cusub oo xeerinaysa in dawladaha hoose awoodaha gaarka ah u wakiillan karaan dawlad goboleedka.

**Cilmibaaris: Erginta Awoodaha**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka Maraykanka[72], wuxuu nidaamka awoodda erginta *(Delegated Powers)* u oggolaanayaa in federaalku siiyo gobollada awoodaha qaarkood. Awoodaha la ergiyo waxaa ka mid ah canshuuraha qaarkood, waxbarashada iyo maaraynta kaabayaasha dhaqaalaha. Gobollada Maraykanka waxay si wadajir ah federaalka ula shaqeeyaan si ay u hirgeliyaan siyaasadaha la ergiyay, iyadoo mararka qaar la isku khilaafay, sida xeerarka deegaanka oo federaalka iyo gobollada ay kala leeyihiin mas'uuliyado kala duwan.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[73] wuxuu qeexayaa in dawladda dhexe ay u wareejin karto gobollada awoodaha qaarkood, gaar ahaan kuwa la xiriira amniga iyo dhaqaalaha. Dawladda Federaalka Hindiya waxay inta badan adeegsataa awoodaha erginta si ay u fududayso fulinta sharciyada federaalka ee gobollada. Tusaale ahaan, xeerarka ilaalinta deegaanka iyo horumarinta dhaqaalaha ayaa lagu wareejiyay gobollada si ay u maamulaan, halka federaalku leeyahay kormeer guud.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[74] wuxuu tilmaamayaa in federaalku leeyahay awooda ergin ee la xiriirta maamulka guud, halka gobollada ay fuliyaan sharciyadaas. Tusaale ahaan, sharciyada la xiriira canshuuraha iyo waxbarashada ayaa lagu ergiyay gobollada (Länder), kuwaas oo lagu maamulo heer goboleed, laakiin leh waajibaad federaal ah.

⇒ ***Kanada,*** nidaamka erginta awoodaha wuxuu oggolaanayaa in federaalka iyo gobollada ay awoodaha iskugu wareejin karaan iyada oo la ansixinayo sharciyo baarlamaani ah. Tani waxay ka dhacdaa gaar ahaan marka federaalku u baahdo inuu gobollada siiyo mas'uuliyad dheeraad ah oo la xiriirta adeegyada bulshada ama waxbarashada. Waxaa la arkay in awoodaha sida caafimaadka iyo kaabayaasha dhaqaalaha ay mararka qaar isku dhacaan maaddaama federaalka uu leeyahay awood sharciyeed, halka gobolladu ay haystaan maamulka fulinta.

---

[72] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 8aad.
[73] Dastuurka Hindiya, Qodobka 258aad.
[74] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 85aad.

⇒ ***Australia***, Dastuurka[75] wuxuu federaalka u oggolaanayaa inuu si ku-meelgaar ah ugu wareejiyo gobollada awoodaha qaarkood. Gobollada Australia waxay codsan karaan in federaalku la wareego mas'uuliyadda sharciyadooda, sida ganacsiga ama adeegyada bulshada, haddii ay dareemaan in federaalku leeyahay awood fulineed ka wanaagsan. Sidaas darteed, nidaamka Australia wuxuu u dhowyahay mid dabacsan oo iskaashi ku salaysan.

## Qodobka 76aad: Dhexgalka Dawladda Federaalka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad**: oo ah mid cusub waxay xeerinaysaa in dawladda federaalka awood u leedahay inay dhexgasho dawlad goboleedyada marka midnimada dhuleed, amniga qaranka, ama madaxbannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay khatar ku jirto iyo duruufo adag oo ku yimaadda Dawlad Goboleedka ee uu maareyn waayo.

- **Faqradda 2aad**: Waa mid cusub oo xeerinaysa in baarlamaanku soo saarayo xeer ku saabsan habraaca faragelinta.

## Qodobka 77aad: Habraaca Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood oo ku cusub Dastuurka.

- **Faqradda 1aad:** Waa faqrad cusub tilmaamaysaa in dawladda federaalka ay soo saarto wargelin rasmi ah oo ay u dirayso dawlad goboleedka taas oo lagu faahfaahinayso sababaha saxda ah ee faragelinta.

- **Faqradda 2aad:** Waa faqrad cusub waxay muujinaysaa in dawladda federaalka ay la tashato dawlad goboleedka oo ay xal raadiso faragelinta ka hor.

- **Faqradda 3aad:** Waa faqrad cusub waxay xeerinaysaa in marka ay jirto xaalad deg deg ah dawladda federaalku ay qaadi karto tallaabooyin faragelin ah, laakiin Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanku leeyahay dib-u-eegis faragalintaas.

Nidaamka faragelinta federaalka waa arrin aad u xasaasi ah oo si taxaddar leh loo maamulo, si looga hortago ku xadgudubka madaxbannaanida dawlad goboleedyada. Dalal badan oo federaal ah waxay leeyihiin hannaan qeexaya xilliyada federaalku faragelin karo gobollada, iyadoo la raacayo shuruudo gaar ah iyo xeerar dastuuri ah oo lagu maamulo. Habka ay dalalka federaalka ahi u maareeyaan faragelinta federaalka ee gobollada si weyn ayuu u kala duwanyahay, taasoo ka tarjumaysa baahida siyaasadeed, taariikhda iyo qaabdhismeedka maamulka ee waddan walba. Hoos waxaa lagu eegayaa habraacyada kala duwan ee ay dalalkani u adeegsadaan faragelinta federaalka.

[75] Dastuurka Australia, (Section 51(xxxvii)).

**Cilmibaaris: Nidaamka Dhexgalka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka Maraykanka[76] wuxuu federaalka awood u siinayaa inuu faragelin ku sameeyo gobollada haddii ay ku guuldareystaan in ay bixiyaan nidaam dimuqraadi ah ama ay khatar geliyaan xasilloonida qaranka. Faragelintan waxay noqon kartaa mid militari ama sharci, iyadoo inta badan la adeegsaday xilliyadii dagaallada xuquuqda madaniga ah.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka Hindiya[77] wuxuu u oggolaanayaa dawladda dhexe inay si ku meel gaar ah u maamusho gobol haddii ay ka dhalato xaalad degdeg ah, taasoo horseedaysa kala dirista xukuumadda gobolka. Waxaa si ballaaran loogu adeegsaday xaalado siyaasadeed oo ay dawladda dhexe ku xakameynaysay gobollada qaar.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka Jarmalka[78]wuxuu federaalka awood u siinayaa inuu faragelin ku sameeyo gobollada haddii ay jabshaan waajibaadyadooda dastuuriga ah, si loo hubiyo in nidaamka federaalka uu si habsami leh u shaqeeyo. Si kastaba ha ahaatee, nidaamka Jarmalka wuxuu doorbidaa wadahadal iyo is-afgarad halkii laga isticmaali lahaa awood xoog leh.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka Kanada[79] wuxuu federaalka siinayaa awood uu gobol ula wareegi karo haddii loo baahdo, inkastoo si xadidan loo adeegsaday. Kanada waxay doorbidaa wadahadal iyo xal siyaasadeed halkii ay ka isticmaali lahayd awood federaal oo xooggan. Xukuumadda dhexe ayaa marar kooban isticmaashay faragelinta si ay u xalliso murannada gobollada, iyadoo inta badan laga doorbido xeerar dhex-dhexaad ah iyo heshiisyo is-afgarad ah.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka Australia[80] wuxuu federaalka si cad ugu oggolaanayaa inuu faragelin ku sameeyo gobollada haddii xasilloonida qaranka la khatar geliyo. Faragelinta federaalka ee gobollada waxaa lagu xakameeyay xeerar sharciyeed, waxaana la adeegsadaa marka ay jirto halis qaran oo dhaqaale, nabadgelyo, ama khatar kale oo halis ah. Waxaa xusid mudan in la adeegsaday awooddan si federaalku u xakameeyo maaraynta xaaladaha degdegga ah sida masiibooyinka dabiiciga ah.

## Qodobka 78aad: Xaddidaadda Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood oo ku cusub Dastuurka.

[76] Dastuurka Maraykanka, Qodobka IV, Qaybta 4.
[77] Dastuurka Hindiya, Qodobka 356aad.
[78] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 37aad.
[79] Dastuurka Kanada, Qodobka 90aad
[80] Dastuurka Australia, Qodobka 61aad.

- **Faqradda 1aad**: Waa faqrad cusub waxay tilmaamaysaa in soo dhexgalka federaalku noqoto mid ku meel gaar ah oo ku jaango'an baahida soo celinta nabadda, amniga iyo nidaamka dastuuriga ah.

- **Faqradda 2aad**: Waa faqrad cusub waxay xeerinaysaa waajibka Dawladda Federaalka ee ilaalinta madaxbannaanida Dastuuriga ah ee dawlad goboleedka iyo in aan isbeddel lagu samayn qaabdhismeedka dawlad gololeedka inta dhexgalku socdo, haddii aanay laga maarmaan u ahayn soo celinta maamulka dastuuriga ah.

- **Faqradda 3aad**: Waa faqrad cusub waxa ay xeerinaysaa in ay khasab tahay in ay dhammaato faragelintu marka la xalliyo sababihii keenay faragelinta.

**Cilmibaaris: Xaddidaada Dhexgalka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[81] wuxuu xaddidayaa awoodaha federaalka, wuxuuna tilmaamayaa in dhammaan awoodaha aan si cad loogu xusin Dastuurka ay iska leeyihiin gobollada. Sidaas darteed, faragelinta federaalku waa in ay noqoto mid aan wax u dhimayn madaxbannaanida gobollada.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[82] wuxuu oggolaanayaa faragelinta federaalka, laakiin waxa uu xaddidayaa in aan la beddeli karin qaabdhismeedka gobollada inta lagu jiro faragelinta.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka Jarmalka[83] wuxuu qeexayaa in sharciyada federaalka ay yihiin kuwa ugu sarreeya, laakiin ma oggolaanayo in gobollada lagu xadgudbo iyada oo aan la raacin nidaamka sharciyeed.

⇒ ***Kanada,*** Dastuurka Kanada[84] wuxuu federaalka farayaa in faragelintu ay noqoto mid ku meel gaar ah oo aan burburin nidaamka dowladeed ee gobollada.

⇒ ***Australia,*** Dastuurka Australia[85] wuxuu farayaa in faragelinta federaalka ay tahay in si sharci ah loo sameeyo, isla markaana aan la beddelin qaabdhismeedka dawlad goboleedyada inta ay faragelintu socoto.

## Qodobka 79aad: Korjoogtaynta Aqalka Sare ee Soo Dhexgalka Dawladda Federaalka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka shanaad ee wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay hal (1) faqrad oo kaliye. Faqradda 1aad waxay

[81] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 10aad.
[82] Dastuurka Hindiya, Qodobka 356aad.
[83] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 31aad
[84] Dastuurka Kanada, Qaybta 36aad.
[85] Dastuurka Australia, Qaybta 96aad

xeerinaysaa korjoogtayna Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka iyo faragelinta Dawladda Federaalka.

Golaha Aqalka Sare ee baarlamaannada dalalka federaalka ah wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa korjoogtaynta faragelinta federaalka ee dawlad goboleedyada. Aqalka Sare wuxuu inta badan matalaa gobollada, wuxuuna hubiyaa in xukuumadda federaalka aysan si aan sharciga waafaqsanayn u faragelin awoodaha gobollada. Habka dalalka federaalka ahi u maamulaan kor-joogtaynta Aqalka Sare waa mid kala duwan, iyadoo loo eegayo taariikhda, qaabdhismeedka siyaasadeed, iyo baahiyaha sharci ee waddan walba.

**Cilmibaaris: Korjoogtaynta Aqalka Sare ee Dhexgalka**

⇒ ***Maraykanka,*** *Senate*-ka Maraykanka wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa ilaalinta xuquuqda gobollada, isagoo awood u leh inuu wax-kabeddelo sharciyada federaalka ee saamaynaya gobollada. Dastuurka Maraykanka[86] wuxuu qeexayaa in *Senate*-ka uu si siman u matalo gobollada, halka Qodobka X uu xaddidayo awoodaha federaalka, isagoo ilaalinaya madaxbannaanida gobollada. Marka federaalku isku dayo inuu faragelin ku sameeyo gobollada, gobolladu waxay adeegsan karaan Aqalka Sare si ay u diidaan ama wax uga beddelaan sharciyada la xiriira faragelinta federaalka.

⇒ ***Hindiya,*** Aqalka Sare *(Rajya Sabha)* wuxuu matalaa gobollada, waxaana lagu doortaa xubnihiisa iyadoo la adeegsanayo baarlamaanada gobollada. Dastuurka Hindiya[87] wuxuu oggolaanayaa in federaalku uu si ku meel gaar ah ugu xukumo gobollada haddii Aqalka Sare uu ansixiyo sharci gaar ah oo arrintaas oggolaanaya. Tani waxay la micno tahay in Rajya Sabha uu door muhiim ah ka ciyaaro xakamaynta awoodaha federaalka si uusan si khaldan u faragelin gobollada.

⇒ ***Jarmalka,*** Aqalka Sare *(Bundesrat)* wuxuu matalaa gobollada *(Länder),* wuxuuna leeyahay awood sharciyeed oo ka weyn kuwa aqallada sare ee dalalka kale ee federaalka. Dastuurka Jarmalka[88] wuxuu qeexayaa in *Bundesrat* uu saamayn ballaaran ku leeyahay sharciyada federaalka ee saamaynaya gobollada, taasoo u oggolaanaysa inuu hor istaago faragelinta federaalka ee gobollada haddii ay xadgudub tahay.

⇒ ***Kanada***, *Senate*-ka Kanada wuxuu matalaa gobollada, laakiin awooddiisa waa mid xaddidan marka loo eego *Senate*-ka Maraykanka ama *Bundesrat*-ka Jarmalka. Dastuurka Kanada[89] wuxuu qeexayaa kala qaybsanaanta awoodaha, wuxuuna *Senate*-ka u oggolaanayaa inuu ka baaraandego sharciyada federaalka ee saamaynaya gobollada, inkastoo go'aanka ugu dambeeya uu leeyahay golaha wakiillada. Tani waxay ka dhigan tahay in Aqalka Sare uu leeyahay door xaddidan marka la eego ilaalinta madaxbannaanida gobollada.

[86] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 3aad.
[87] Dastuurka Hindiya, Qodobka 249aad.
[88] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 50aad-52aad.
[89] Dastuurka Kanada, Qodobbada 91aad iyo 92aad.

⇒ ***Australia,*** *Senate*-ka Australia wuxuu door muhiim ah ka ciyaaraa ilaalinta gobollada, maaddaama uu si siman u matalo gobollada, halka golaha wakiillada uu ku salaysan yahay tirada dadka. Dastuurka Australia[90] wuxuu *Senate*-ka si cad uga dhigayaa mid awood u leh inuu saamayn ku yeesho sharciyada federaalka ee saameynaya gobollada, si looga hortago in federaalku si xaddhaaf ah u farageliyo gobollada.

## Jaantuska 1aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 5aad

Qodobbada cutubka shannaad waxaa lagu sameeyay siiqayn, qaabayn, toosin, ku daris, dhimis iyo wax-kabeddel xagga nuxur axkaamta ah. Waxaa la soo kordhiyay toban iyo afar (14) Qodob iyo soddon iyo afar (34) faqradood; halka la tiray laba (2) Qodob iyo afar (4) faqrafood oo asalka Dastuurka ku jiray.




[90] Dastuurka Australia, Qodobka 53aad.

# FAALLADA IYO SHARRAXAADDA

## SOOJEEDINTA WAX-KABEDDELKA CUTUBKA LIXAAD: BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## Cutubka Lixaad: Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Cutubkan lixaad wuxuu nidaaminayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, wuxuuna ka koobanyahay afar madax oo kala ah: Madaxa 1aad: Qodobbo Guud; Madaxa 2aad: Kalfadhiyada iyo Maamulka Baarlamaanka; Madaxa 3aad: Awoodaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka; iyo Madaxa 4aad: Xeerdejinta Baarlamaanka.

Cutubka lixaad wuxuu ka koobanyahay labaatan iyo (29) qodob oo ka bilaabanaya Qodobka 80aad ilaa Qodobka 108aad, halka asalka Dastuurka oo ka koobnaa labaatan iyo afar (24) qodob. Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay shan (5) qodob iyo afartan iyo shan (45) faqradood oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray shan (5) qodob iyo sagaal (9) faqradood oo ku jiray asalkii Dastuurka. Waxaa lagu soo kordhiyay arrimo ay ka mid yihiin:

- Dhaarta xubnaha labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka;
- Shuruudaha Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka;
- Guddiga Adeegga Baarlamaanka oo laga soo raray Qodobka 111D ee asalka Dastuurka;
- Awoodda Korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka Federaalka; iyo
- Heshiisyada Caalamiga.

## Madaxa Koowaad: Qodobbo Guud

Cinwaanka Madaxa Koowaad ee Cutubka 6aad, oo asalka Dastuurka ahaa "Qodobbo Guud ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya" waxaa laga dhigay "Qodobbo Guud".

### Qodobka 80aad: Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 80aad ee soojeedinta wax- kabeddelka oo ahaa Qodobka 55aad ee Asalka Dastuurka waxba lagama beddelin. Qodobkan wuxuu ka koobanyahay laba faqradood si la mid ah asalkii Dastuurka.

- **Faqradda 1aad:** waa faqrad cusub waxay caddaynaysaa in BFS yahay hay'adda u xilsaaran awoodda xeerdejinta qaranka. Qodobkan oo Asalka Dastuurka ahaa laba faqradood hadda soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa uu noqday saddex faqradood.

- **Faqradda 2aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, keliya waxaa la tiray xarfaha (a) iyo (b), waxaa sidoo kale lagu soo kordhiyay "wuxuuna gole walba xilalka uu gaarka ah u gudanayaa goonidiisa, xilalka wadaagga ahna wadajir.".

  Farqadda 2aad ee asalka Dastuurka waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu xeeriyay Qodobka 81aad ee Xilaka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka.

**Cilmibaaris: Goleyaasha Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[91] wuxuu awood sharcidejin siiyay Kongareeska, oo ka kooban: Aqalka Sare *(Senate):* Xubnaha waxaa si siman u metela gobollada *(State)* iyo aqalka wakiillada *(House of Representatives):* Waxaa xubnaha laga soo xulaa iyadoo la eegayo tirada dadka gobol kasta.

Labada gole waxay leeyihiin awoodo kala duwan, sida ansixinta xeerarka maaliyadda oo gaar u ah aqalka wakiillada, halka *Senate*-ku uu leeyahay awood uu ku ansixiyo heshiisyada caalamiga ah iyo magacaabista saraakiisha sare.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[92] wuxuu awoodaha sharcidejinta u kala saaray: Aqalka hoose *(Bundestag):* Hay'adda ugu awoodda badan ee sharcidejinta, iyo Aqalka Sare *(Bundesrat):* Wuxuu matalaa gobollada *(Länder),* wuxuuna saamayn ku leeyahay sharciyada quseeya federaalka iyo gobollada.

Nidaamka Jarmalka wuxuu xoogga saarayaa iskaashiga dawladda federaalka iyo gobollada, iyada oo Bundesrat uu xeerinayo sharciyada saameeya gobollada.

⇒ ***Hindiya***, Dastuurka[93] wuxuu qeexayaa Baarlamaanka oo ka kooban: Aqalka hoose *(Lok Sabha):* Awoodda ugu badan ee sharcidejinta, iyo Aqalka Sare *(Rajya Sabha):* Xubnaha waxaa laga soo doortaa gobollada si ay u matalaan.

Dastuurka wuxuu awood sharcidejinta si gooni ah u siiyay dawladda federaalka iyo gobollada, iyada oo qodobbada 245-246 ay qeexayaan xeerarka federaalka iyo kuwa goboleedka.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[94] wuxuu xusayaa in Baarlamaanka Federaalka uu ka kooban yahay: Aqalka wakiillada *(National Council):* Waxaa xubnaha laga soo xulaa iyadoo lagu salaynayo tirada dadka, iyo Aqalka Sare *(Council of States):* Xubnaha waxaa si siman u metela kantoonnada.

Labada gole waxay awood sharcidejin u leeyihiin si isku mid ah, taasoo ka dhigan in sharci kasta uu u baahan yahay ansixinta labada gole.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[95] wuxuu Baarlamaanka u kala saaray: House of *Peoples' Representatives (HPR):* Awood sharcidejineed oo buuxda iyo *House of Federation (HoF):* Wuxuu xeerinayaa arrimaha federaalka iyo xiriirka qowmiyadaha.

---

91 Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad
92 Dastuurka Jarmalka, Qodobka 70aad
93 Dastuurka Hindiya, Qodobka 79aad & 245aad
94 Dastuurka Switzerland, Qodobka 148aad
95 Dastuurka Itoobiya, Qodobka 55aad.

Itoobiya waxay leedahay nidaam federaal xooggan, iyadoo gobolladu ay leeyihiin awood sharcidejin gooni ah, taasoo ku xusan qodobka 50-52 ee Dastuurka.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka Nigeria[96], wuxuu awood sharcidejin siiyay Baarlamaanka Federaalka *(National Assembly),* oo ka kooban: Aqalka Sare *(Senate):* 109 xubnood, 3 xubnood gobol kasta + 1 xubnood gobolka caasimadda federaalka; iyo Aqalka Hoose *(House of Representatives):* 360 xubnood, lagu salaynayo tirada dadka iyo deegaan doorashooyinka.

Labada aqal waa in ay si wadajir ah u ansixiyaan xeer kasta. Xeerarka wuxuu marka hore mari karaa midkood, kaddibna midka kale, iyadoo ugu dambeyna la horgeynayo Madaxweynaha si uu u saxiixo. Haddii uu diido, baarlamaanku wuxuu haystaa awood uu dib ugu ansixiyo xeerkaas haddii cod aqlabiyad ah la helo.

***Qodobka 56aad ee asalka Dastuurka*** waa la tiray nuxurkiisa waxaa lagu daray Qodobka 80(2) ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

## Qodobka 81aad: Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 81aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 61aad waxba lagama beddelin.

- **Faqradda 1aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa la hagaajiyay siiqada. “Labada Aqal” waxaa lagu beddelay “Golayaasha”. Waxaa kale oo lagu kordhiyay “ummadda iyo qaranka Soomaaliyeed”.

- **Faqradda 2aad:** waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. “Deegaan-codbixiyayaasha laga soo doortay” waxaa lagu beddelay “codbixiyayaasha deegaanka laga soo doortay”.

- **Faqradda 3aad:** Nuxurka faqradda 3aad waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo dibuqorid. Sidoo kale, “Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda federaalka ah” waxaa lagu beddelay “Dawlad Goboleedka”. Waxaa kale oo lagu kordhiyay “Dawlad Goboleedyada dhexdooda iyo Dawlad Goboleedyada iyo Dawladda Federaalka”.

[96] Dastuurka Nigeria, Qodobka 58aad.

**Cilmibaaris: Xilka Xubnaha Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Xilka Xubnaha Kongareeska: Dastuurka[97] wuxuu si faahfaahsan u qeexayaa mas'uuliyadda iyo xadeynta xubnaha Kongareeska:

- Xubnaha Kongareeska ma qaban karaan shaqo kale oo ka tirsan dawladda inta ay xilka hayaan, gaar ahaan xafiisyada ay maamusho xukuumadda dhexe.
- Xildhibaan kasta wuxuu haystaa xasaanad sharci ah oo ka difaacaysa in si fudud looga qaado xasaanadda xubinnimada, taasoo la mid ah xasaanadda madaxweynuhu haysto.
- Mushaharka xubnaha Kongareeska lama kordhin karo inta uu xilka hayo, haddii loo kordhiyo waxa uu dhaqan galayaa xilliga xiga ee Baarlamaanka.

Dastuurka Maraykanka wuxuu si adag u kala saaray sharcidejinta iyo fulinta, taasoo ka hortagaysa isku milanka awoodaha xildhibannada iyo hay'adaha fulinta. Xubnaha barlamaanku waxay leeyihiin xorriyad ay ku gutaan waajibaadkooda, laakiin waa in aysan qabin xil kale oo xukuumadeed.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[98] wuxuu qeexayaa:

- Xubnaha Bundestag waa wakiillo si xor ah u matalaya dadweynaha, loomana oggola in ay hoos yimaaddaan amarro ka yimaadda xisbi siyaasadeed, gole, ama cid kale.
- Ma jiraan sharciyo xaddidaya sida ay u coddaynayaan, taasoo ka dhigan in go'aankooda ay ka madaxbannaan yihiin cadaadis ka yimaadda xukuumadda ama xisbiyada.
- Xildhibaan kasta wuxuu leeyahay xorriyad buuxda iyo xasaanad sharci ah, wuxuuna si toos ah u metalaa danaha dadka reer Jarmal.

Nidaamka Jarmalku wuxuu xoogga saarayaa madaxbannaanida xildhibannada iyo in aysan jirin awood sare oo xukumi karta go'aankooda. Waxa kale oo uu ka hortagayaa in xukuumadda ay cadaadis saarto xubnaha Baarlamaanka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[99] wuxuu qeexayaa masuuliyadda iyo xaddidaadaha xubnaha Baarlamaanka:

- Xubnaha Baarlamaanka lama hayn karo laba xil hal mar; haddii xildhibaan loo magacaabo xil kale oo dawladda ka tirsan, waa inuu si degdeg ah u doortaa mid ka mid ah labada xil.
- Haddii xildhibaan uu go'aansado in uu iska casilo xafiiska, waa inuu u gudbiyaa iscasilaadiisa guddoomiyaha aqalka, kaasoo xaq u leh inuu aqbalo ama diido.
- Haddii xubin baarlamaan ay jabiso shuruudaha xubinnimada ama ay ka baxdo xisbigii lagu doortay iyada oo aan sharciyad loo haynin, waxay waayi kartaa xubinnimada.

[97] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 6aad.
[98] Dastuurka Jarmalka, **Qodobka 38aad.**
[99] Dastuurka Hindiya, Qodobka 101aad.

Dastuurka Hindiya wuxuu aad u xoojiyay anshaxa iyo masuuliyadda xubnaha Baarlamaanka, wuxuuna si gaar ah u qeexayaa sida ay ku waayi karaan xilka haddii ay la yimaaddaan ficillo khilaafsan xeerarka Baarlamaanka ama ay lumiyaan kalsoonida xisbiyada ay ka tirsan yihiin.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[100] wuxuu qeexayaa:

- Xubnaha Baarlamaanka waa inay codeeyaan iyaga oo xor ah, mana jirto cid ku qasbi karta inay qaataan mowqif gaar ah.
- Waa mamnuuc in la cadaadiyo ama la saameeyo go'aanka xildhibannada, si ay si xor ah u matalaan codbixiyayaashooda.
- Xubnaha Baarlamaanka waxay ka madaxbannaan yihiin xukuumadda, mana jiro hab sharci ah oo cadaadis lagu saarayo mowqifyadooda siyaasadeed.

Dastuurka Switzerland wuxuu si gaar ah diiradda u saarayaa in Baarlamaanka uu ka madaxbannaan yahay xukuumadda iyo xisbiyada siyaasadeed, taasoo xoojinaysa dimoqraadiyadda dalka. Waxaa la xaqiijiyay in xildhibaan kasta uu xor u yahay inuu si madaxbannaan u codeeyo, iyada oo aan la saari karin cadaadis siyaasadeed.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[101] wuxuu xusayaa:

- Xubnaha Baarlamaanka waa in si toos ah loo doortaa, si ay u metelaan dadka deegaannadooda.
- Haddii xildhibaan la ogaado inuu jabiyay shuruudaha xubinnimada, wuxuu waayi karaa xilkiisa.
- Xildhibannada waxay haystaan xasaanad siyaasadeed iyo sharci ah, si ay ugu gutaan waajibaadkooda iyaga oo aan la cabburin.

Dastuurka Itoobiya wuxuu muhiimad gaar ah siiyay in xubnaha Baarlamaanka si cad loo xadeeyo masuuliyadooda, loona oggolaado inay si xor ah u gutaan xilalkooda. Waxaa kale oo si gaar ah loo xusay in xildhibaanadu ay yeelan karaan xasaanad siyaasadeed, taasoo ka difaacaysa faragelin toos ah oo ka timaada xukuumadda.

## Qodobka 82aad: Tirada Xubnaha Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 82aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa qodobka 64aad, "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka Federaalka" sidoo kale qodobkan waxaa lagu soo daray Qodobka 72aad ee asalka Dastuurka.

- **Faqradda 1aad:** waxaa lagu mideeyay qodobka 64(2) iyo qodobka 72aad oo labaduba sheegaya tirada xubnaha Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare. waxayna caddeynaysa in xubnaha Golaha Aqalka Sare ay ka imaanayaan Dawlad Goboleedyada.

[100] Dastuurka Switzerland, Qodobka 161aad.
[101] Dastuurka Itoobiya Qodobka 54aad.

- **Faqradda 2aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxay tilmaamaysaa in labada Gole ee Baarlamaanka ay dhammaan qaybaha bulshadu metelaad ku yeeshaan.

- **Faqradda 3aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 4aad waxay xeerinaysaa in Madaxweynaha JFS oo xilka ka dega uu xubin sharafeed ka noqonayo Golaha Aqalka Sare haddii aan xilkaxayuubin lagu samayn iyada oo aan muddadii xilhayntiisu dhammaan. Waxa kale oo faqraddan tilmaamaysaa in xeer gaar ah nidaamin doono xuquuqda, waajibaadka iyo xaddidaadda xubinnimadan sharafeed.

Qodobkan wuxuu qeexayaa tirada iyo habka xubinnimada Baarlamaanka federaalka. Wax-kabeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu diiradda saaray:

- Mideynta qodobbadii hore ee lagu qeexay tirada xubnaha labada aqal.
- Caddaynta in Aqalka Sare ay xubnuhu ka imanayaan dawlad goboleedyada.
- Siyaasadda metelaadda dhammaan qaybaha bulshada ee Baarlamaanka.
- Xaqiijinta in madaxweynihii xilka ka dega uu noqonayo xubin sharafeed aqalka aare, haddii uusan xilka laga xayuubin.

**Cilmibaaris: Tirada Xubnaha Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[102] wuxuu si faahfaahsan u xusay tirada iyo habka xubinnimada labada aqal ee Kongareeska:

- ***Aqalka wakiillada*** *(House of Representatives):* Dastuurka Maraykanka wuxuu dhigaya in xubnaha Aqalka Wakiillada lagu doorto muddo laba sano ah (2 years), waxaana tiradooda lagu saleeyaa tirada dadka ku nool gobollada (apportionment). Tani waxay ka dhigan tahay in marka la helo xogta tirakoobka dadweynaha (census), kuraasta wakiillada dib loo qaybiyo si ay u matalaan dadka si caddaalad ah. Tirada guud ee xubnaha eakiilada waa 435 xubnood oo la dejiyay sanadkii 1929, ayadoo wakiil kasta uu matalo in ka badan 700,000 qof (2020 census).

- ***Aqalka Sare*** *(Senate):* Gobol kasta wuxuu leeyahay laba senator, iyadoon loo eegin tirada dadka ku nool. Xubnaha *senate*-ka waxaa lagu doortaa muddo lix sano ah (6 years). Si loo ilaaliyo joogtaynta, saddex meelood meel (1/3) ayaa la doortaa saddexdii sano mar, taasoo ka dhigaysa in *senate*-ku uusan gabi ahaanba is beddelin mar keliya. Tirada guud ee xubnaha Senate-ka waa 100 senator oo gobol walba ay ka imanayaa laba wakiil (2 x 50 gobol) iyo sidoo kale in qaybsiga kuraasta *senate*-ka ay siman, waxaana matalaadda gobolladu tahay mid laga ilaaliyo saamayn dad badan ama dad yar.

Dastuurka Maraykanka wuxuu xaddidayaa tirada xubnaha *senate*-ka si gobol kasta uu u yeesho matalaad siman, halka aqalka wakiillada uu ku xiran yahay tirada dadka, taasoo ka dhigaysa nidaamka metelaadda mid la jaanqaadi kara isbeddelka dadweynaha.

[102] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 2aad iyo 3aad.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[103] wuxuu xusayaa tirada iyo metelaadda Baarlamaanka:

- Aqalka Hoose *(Bundestag):* Waxaa xubno ka ah in ka badan 700 xildhibaan, kuwaasoo si toos ah loogu doorto nidaam isku dhafan (direct & proportional representation). Tirada xildhibannada Bundestag waa mid isbeddelaysa iyadoo la eegayo tirada codbixiyayaasha iyo nidaamka doorashada.
- Aqalka Sare *(Bundesrat)*: Waxaa xubno ka ah 69 xubnood, oo laga keenay *gobollada (Länder)*. Gobolladu waxay helaan kuraas kala duwan iyadoo lagu saleeyo tiradooda dadweynaha.

Jarmalka, Aqalka Hoose wuxuu ka tarjumayaa matalaadda dadweynaha, halka Aqalka Sare uu matalo gobollada, iyada oo ay jiraan kala duwanaansho ku salaysan tirada dadka ee gobol kasta.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[104] wuxuu xusayaa nidaamka xubinnimada Baarlamaanka:

- **Aqalka Hoose *(Lok Sabha):*** Xubnaha waa 545, waxaana tirada laga beddeli karaa iyadoo la eegayo tirada dadka. 543 xubnood waxaa si toos ah loo doortaa, halka 2 xubnood uu magacaabo madaxweynaha.
- **Aqalka Sare *(Rajya Sabha):*** Xubnaha waa 250, waxaana laga keenayaa gobollada iyadoo lagu salaynayo dadkooda. Madaxweynaha wuxuu magacaabi karaa 12 xubnood oo khibrad gaar ah leh.

Hindiya waxay si cad u kala saartay tirada iyo metelaadda Baarlamaanka, iyadoo Aqalka Sare uu ka kooban yahay xubno si dadban loo doortay iyo kuwo uu magacaabay madaxweynaha, halka aqalka hoose uu yahay mid si toos ah loo doortay.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[105] wuxuu qeexayaa nidaamka Baarlamaanka federaalka:

- **Aqalka Wakiillada** *(National Council):* Xubnaha waa 200, waxaana si toos ah loo doortaa iyadoo lagu salaynayo tirada dadweynaha kantoon walba.
- **Aqalka Sare** *(Council of State):* Waxaa xubno ka ah 46, iyada oo *Kanton* kasta uu leeyahay laba xubnood (labada *Kantoon* ee yaryar waxay haystaan hal xubin).

Switzerland waxay isticmaashaa nidaam ay *Kantoonka* si siman u metelaan Aqalka Sare, halka aqalka hoose uu ka tarjumayo tirada guud ee dadka.

---

[103] Dastuurka Jarmalka, Qodobada 38aad iyo 51aad.
[104] Dastuurka Hindiya, Qodobada 81aad iyo 80aad.
[105] Dastuurka Switzerland, Qodobada 149aad iyo 150aad.

⇒ **Itoobiya,** Dastuurka[106] wuxuu qeexayaa tirada iyo metelaadda Baarlamaanka:

- **Aqalka Hoose** *(House of Peoples' Representatives):* Xubnaha waa in ka badan 500, waxaana si toos ah loogu doortaa nidaam deegaan doorasho ah.

- **Aqalka Sare** *(House of Federation):* Gobol kasta wuxuu helayaa xubno ku saleysan tirada qowmiyadaha ku nool gobolkaas. Xubnaha waxaa lagu magacaabaa ama si toos ah loo doortaa, iyada oo gobol kastaa dooranayo qaabka uu u xulayo xubnahiisa.

Itoobiya waxay ku saleysay metelaadda Baarlamaanka hab qowmiyadeed, iyadoo gobollada loo oggolaaday inay nidaamka doorashada Aqalka Sare u maamulaan si waafaqsan sharcigooda gudaha.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka Nigeria (1999)[107] wuxuu si cad u qeexayaa qaabka, tirada, iyo habka metelaadda Baarlamaanka federaalka, oo ka kooban laba aqal:

- ***Aqalka Sare*** *(Senate):* Xubnaha Aqalka Sare waa tiradooda waa 109 senator, oo gobolka walba waxaa laga soo doortaa saddex senator ayadoo gobolladu yihiin 36 gobol (3x36=108), iyo 1 senator gobolka caasimadda federaalka *(Federal Capital Territory – Abuja).*

  Senatorrada waxaa si toos ah u doorta shacabka gobolka ama FCT, iyadoo degmo doorasho kasta *(senatorial district)* ay soo saarto hal xubnood.

- ***Aqalka Hoose*** *(House of Representatives),* wuxuu ka kooban yahay 360 xildhibaan, waxaana xubnaha laga soo xulaa deegaan doorashooyin gaar ah (federal constituencies) oo lagu saleeyay tirada dadka iyo baahiyaha juqraafiyeed.

  Xildhibaan kasta waxaa si toos ah u doorta shacabka deegaanka uu metelo, isagoo matalaya danaha dadweynaha ee aaggaas.

Nigeria waxay ku dhisantahay hab metelaad juqraafiyeed iyo dadweyne, iyadoo Aqalka Sare si siman u metelo gobollada, halka aqalka hoose uu si dheellitiran u metelo tirada dadka. Metelaadda Baarlamaanka waa mid si dastuuri ah u qeexan oo aan u bannaaneyn gobolladu inay beddelaan habka doorashada ama tirada xubnaha, maaddaama ay tahay nidaam dhexe oo federaal ah.

***Qodobka 57aad ee asalka Dastuurka*** waa la tiray nuxurka qodobkan waxaa lagu daray Qodobka 94aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

[106] Dastuurka Itoobiya[106], Qodobada 54aad iyo 61aad.
[107] Dastuurka Federaalka Nigeria (1999), Qodobbadiisa 48aad iyo 49aad.

## Qodobka 83aad: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 83aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 58aad waxba lagama beddelin.

- **Faqradda 1aad:** waxaa lagu sameeyay siiqatoosin iyo dib u qorid, waxaana la ballaariyay:
    - ***Xarafka (a)*** oo kulminayay dhowr arrimood waa la kala qaaday oo waxaa lagu soo koobay shuruudda muwaaddinnimada oo keli ah.
    - ***Xarafka (b)*** oo tilmaamayay shuruudda ah in qofka loo dooranayo xubin Baarlamaanka Federaalka aan xuquuqdiisa muwaaddinnimo maxkamadi hakin waxba lagama beddelin. Waxaa lagu soo biiriyay shuruud kale oo tilmaamaysa in aan maxkamad si kamadambays ah ugu xukumin dembi ciqaabtiisu gaarayso shan sano.
    - ***Xarafka (c)*** waxaa laga soo jaray xarafka (a) ee asalka Dastuurka waxa uuna xeerinayaa shuruudda ah qofka u sharraxan xubin golayaasha Baarlamaanka dhimirkiisu dhan yahay.
    - ***Xarafka (d)*** waxaa lagu xeeriyay shuruudda da'da ee qofka loo dooranayo Golaha Shacabka waa in da'diisu noqoyaa ugu yaraan 30jir, halka musharraxa Golaha Aqalka Sare laga rabo in uu noqdo ugu yaraan 35jir. Waxaa kale oo muhiim ah in musharraxu codbixiye ahaan u diiwaangashan yahay.
    - ***Xarafka (e)*** wuxuu shuruud ka dhigayaa lahaanshaha aqoon heer jaamacadeed.
    - ***Xarafka (f)*** wuxuu xeerinayaa waaya-aragnimada looga baahan yahay musharraxiinta xubnaha golayaasha Baarlamaanka.
    - ***Xarafka (i)*** wuxuu dejinayaa shuruudda xubin ka ahaashaha xisbi siyaasadeed oo ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.
- **Faqradda 2aad** ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin, keliya waxa lagu daray "Soohdimaha" madaama guddiga magaciisu uu isbeddelay.

Qodobkan wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Baarlamaanka federaalka, iyadoo la hagaajiyay siiqada iyo dibuqoridda qodobka, laguna ballaariyay shuruudo dheeraad ah. Isbeddelkan wuxuu si gaar ah u qeexayaa: Shuruudda muwaaddinnimada; Xayiraadaha la xiriira dambiyada culus; Shuruudaha caafimaadka maskaxda; Xaddidaadda da'da musharraxiinta; Shuruudda aqoonta iyo waaya-aragnimada; iyo Xubinnimada xisbiyada siyaasadeed.

**Cilmibaaris: Shuruudaha Xubinnimada Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[108] wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Kongareeska:

***Aqalka Wakiillada*** *(House of Representatives):* Xubinta la dooranayo waa inuu ahaado muwaaddin Maraykan ah muddo ugu yaraan 7 sano. Waa inuu jiraa ugu yaraan 25 sano. Waa inuu ku nool yahay gobolka uu matalayo.

***Aqalka Sare*** *(Senate):* Waa inuu yahay muwaaddin Maraykan ah muddo 9 sano ah. Waa inuu jiraa ugu yaraan 30 sano. Waa inuu deggan yahay gobolka uu matalayo.

Maraykanka kama dhigo waajib in musharraxu haysto shahaado jaamacadeed, xubin ka noqdo xisbi siyaasadeed, ama leeyahay waaya-aragnimo gaar ah.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[109] wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Baarlamaanka:

- Waa inuu yahay muwaaddin Jarmal ah. Waa inuu jiraa ugu yaraan 18 sano si uu u noqdo xildhibaan Bundestag.
- Lama xaddidin heerka aqoonta ama waaya-aragnimada siyaasadeed.
- Lama xaddidin in qofka uu xisbi siyaasadeed ka tirsan yahay, balse badanaa musharraxiintu waxay ka yimaaddaan xisbiyada siyaasadeed.

Jarmalka ma adkayn shuruudaha xubinnimada, maaddaama uusan shardi ka dhigin aqoon gaar ah, xubin ka noqoshada xisbi, ama da' sare oo u gaar ah xubnaha Aqalka Sare.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[110] wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Baarlamaanka:

- Waa inuu yahay muwaaddin Hindi ah.
- Waa inuu jiraa ugu yaraan 25 sano si uu u galo Aqalka Hoose *(Lok Sabha)*.
- Waa inuu jiraa 30 sano si uu u galo Aqalka Sare *(Rajya Sabha)*.
- Waa inuu buuxiyo shuruudaha sharciga doorashooyinka ee Baarlamaanka Hindiya.
- Lama xaddidin in musharraxu haysto aqoon gaar ah ama waaya-aragnimo siyaasadeed.

Shuruudaha Hindiya waxay la mid yihiin kuwa Maraykanka iyo Jarmalka, iyada oo la dhigay xad da' iyo muwaaddinnimo, balse aysan jirin shuruudo la xiriira aqoon, waaya-aragnimo ama xisbi siyaasadeed.

---

[108] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 2aad iyo 3aad.
[109] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 38aad.
[110] Dastuurka Hindiya, Qodobka 84aad.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[111] wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Baarlamaanka Federaalka:

- Waa inuu yahay muwaaddin *Swiss* ah.
- Waa inuu jiraa ugu yaraan 18 sano.
- Lama xaddidin wax shuruud ah oo la xiriira aqoon, waaya-aragnimo, ama xisbi siyaasadeed.

Nidaamka Switzerland waa mid shuruudaha aan la adkeyn, maaddaama uu qof kasta oo muwaaddin ah oo gaara 18 sano uu u tartami karo Baarlamaanka.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[112] wuxuu xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Baarlamaanka:

- Waa inuu yahay muwaaddin Itoobiyaan ah.
- Waa inuu jiraa ugu yaraan 21 sano.
- Waa inuu buuxiyo shuruudaha sharci ee la xiriira doorashada iyo metelaadda dadweynaha.
- Lama xaddidin shuruudo la xiriira aqoon, waaya-aragnimo, ama xisbi siyaasadeed.

Dastuurka Itoobiya wuxuu ka xoreeyay musharraxiinta in ay leeyihiin heer aqooneed gaar ah ama waaya-aragnimo, taasoo ah farqiga ugu weyn ee u dhaxeeya nidaamka Soomaaliya iyo Itoobiya.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka (1999)[113], wuxuu si cad u xeerinayaa shuruudaha xubinnimada Baarlamaanka federaalka *(National Assembly)*, oo ka kooban *(Senate and House of Representatives)*. Shuruudaha guud ee xubinnimada Baarlamaanka:

- Waa inuu yahay muwaaddin u dhashay Nigeria.
- Waa inuu jiro ugu yaraan 35 sano si uu ugu tartamo *Senate*-ka
- Waa inuu jiro ugu yaraan 30 sano si uu ugu tartamo *(House of Representatives)*.
- Waa inuu yahay xubin ka diiwaangashan xisbi siyaasadeed oo laga oggol yahay dalka.
- Waa inuusan horay ugu xukumnayn dembi musuqmaasuq, khiyaano, ama dambiyo lid ku ah dimoqraadiyadda.
- Waa inuu buuxiyaa dhammaan shuruudaha xeerarka doorashada ee ay dejiso guddiga doorashooyinka qaranka *(INEC)*

Dastuurka Nigeria wuxuu si gaar ah u xaddidaya da'da musharraxiinta, wuxuuna sidoo kale wajibinayaa in musharrax kasta ku xiran yahay xisbi siyaasadeed (lama oggola musharrax madaxbannaan).

---

[111] Dastuurka Switzerland, Qodobka 143aad
[112] Dastuurka Itoobiya, Qodobada 38aad iyo 54aad
[113] Dastuurka Nigeria Qodobbada 65aad iyo 66aad

## Qodobka 84aad: Sababaha Lagu Lumiyo Xubinnimada Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 84aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dasuurka ahaa Qodobka 59aad waxba lagam beddelin.

- **Faqradda 1aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-usiiqayn iyo dib-u-habayn. Waxaa lagu soo kordhiyay sababha luminta xubinnimada Baarlamaanka Federaalka muddo xileedka oo dhammaada.
    - ***Xarafka (a)*** waxa la tiray "xubinta oo".
    - ***Xarafka (b)*** waxay xeerinaysaa iscasilaad rasmi ah oo xildhibaanku u gudbiyo guddoonka golaha uu ka tirsanyahay, lagana aqbalo.
    - ***Xarafka (c)*** waxa uu xeerinayaa in sababaha lagu weyn karo xubinnimada ay ka mid tahay xilgudasho la'aan joogto ah sababa la xiriira mid jireed iyo mid maskaxeed. Asalka Dastuurka xarafka (b) ayaa arrinkan xeeriyey, waxaana lagu daray "sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyay dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay".
    - ***Xarafka (d)*** waxaa uu tilmaamayaa in xubinta ka maqnaata labo kalfadhi oo caadi ah, iskuna xiga ayada oo aanay jirin cudurdaar maangal ah.

## Natiijada Latashiyada




- ***Xarafka (f)*** oo asalka Dastuurka ahaa xarafka (e) waxaa lagu soo kordhiyay "heerarka kala duwan".




- *Xarafka (e)* waxay xeernaysaa in xubintii maxkamad si kamadambays ah ugu xukunto xabsi gaaraya shan (5) sano ay luminayso xubinnimada.

- *Xarafka (g)* waxa uu tilmaamayaa in dhammaanshaha xilhaynta ay keenayso lumin xubinnimada.

- **Faqradda 2aad,** waa mid cusub waxayna lagu xeeriyay in loo baahanyahay oggoolaanshaha golaha uu ka tirsanyahay xildhibaanka ama senatorka haddii uu ka maqnaado sababo maangal ah la'aantood muddada ku xusan Dastuurka iyo haddii qofka lagu sheego in uu xilka gudan karin sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyay dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay.

- **Faqradda 3aad:** waxay xeerinaysaa in haddii xubin ka tirsan golayaasha Baarlamaanka booskeeda bannaanaado sababaka faqradda hore lagu tilmaamay midkood, buuxinta xubinnimadaas loo raacayo si waafaqsan habraaca ku xusan xeerka doorashooyinka.

  Faqradda 3aad: ee asalka Dastuurka waa tiray nuxurkeediina waxaa lagu daray faqradda 3aad ee isla qodobkan, iyada oo habraaca loo marayo doorashada loo raacayo xeerka doorashooyinka.

**Cilmibaaris: Sababaha lagu lumiyo xubinnimada Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[114] wuxuu si gaar ah u xusayaa in awoodda lagala noqoshada xubinnimada xildhibaan ay tahay mid Baarlamaanka laftiisa u gaar ah:

- Aqalka wakiillada iyo *Senate*-ka waxay leeyihiin awood sharci ah oo ay ku qiimeeyaan sax ahaanshaha xubinnimada xildhibaanadooda.
- Haddii ⅔ ka mid ah xubnaha golaha ay u codeeyaan, xildhibaan waa laga saari karaa Baarlamaanka.
- Xubinnimada waa la lumin karaa haddii xildhibaan si rasmi ah isaga casilo kursigiisa.
- Haddii maxkamad ay xukunto xildhibaan, luminta xubinnimada laguma fulinayo si toos ah; waxaa go'aanka iska leh Baarlamaanka.

Dastuurka Maraykanka wuxuu xaddidaya awoodda xukuumadda fulinta ee ku aaddan Baarlamaanka, isagoo siinaya awood buuxda aqalka wakiillada iyo *senate*-ka si ay uga go'aan gaaraan sax ahaanshaha xubinnimadooda.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[115] wuxuu nidaaminayaa luminta xubinnimada Baarlamaanka iyadoo xoogga la saarayo xuquuqda xildhibannada iyo madaxbannaanida Baarlamaanka:

- Xubinnimada *"Bundestag"* waa laga saari karaa haddii maxkamad ay go'aamiso in xildhibaanku waayay shuruudihii xubinnimada.
- Xildhibannada lama ceyrin karo haddii ay si joogto ah uga maqnaadaan fadhiyada Baarlamaanka.
- Xasaanadda siyaasadeed ee xildhibannada waa laga qaadi karaa haddii maxkamad ay xukunto, balse Baarlamaanka ayaa go'aaminaya in xubinnimadooda ay sii jiri karto iyo in kale.

Nidaamka Jarmalka wuxuu xoojinayaa ilaalinta xasaanadda xubnaha Baarlamaanka, wuxuuna diidayaa in maqnaansho keliya ay keento luminta xubinnimada, taasoo u oggolaanaysa xildhibannada in ay si madaxbannaan u gutaan waajibaadkooda.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[116] wuxuu faahfaahin dheeraad ah ka bixinayaa luminta xubinnimada Baarlamaanka, isagoo qeexaya:

- Xildhibaan waa inuu si rasmi ah isaga casilaa haddii uu guddoomiyaha golaha u gudbiyo iscasilaaddiisa, balse guddoomiyaha Baarlamaanka ayaa leh go'aanka ugu dambeeya ee aqbalaadda ama diidmada iscasilaadda.
- Haddii xildhibaan 60 maalmood oo xiriir ah uu maqnaado iyada oo aan cudurdaar la aqbalay, Baarlamaanka wuxuu go'aaminayaa inuu lumiyo kursiga.
- Haddii maxkamad ay xukunto xildhibaan, waxa uu waayi karaa xubinnimada, iyadoo la raacayo xeerarka doorashooyinka.

[114] Datuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 5aad.
[115] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 41aad iyo 46aad.
[116] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 101aad iyo 102aad.

- Xildhibannada xisbi siyaasadeed loo doortay kama bixi karaan xisbiyada ay ka tirsanyihiin iyaga oo aan lumin xubinnimadooda.

Nidaamka Hindiya wuxuu si gaar ah u xaddidayaa maqnaanshaha xildhibannada Baarlamaanka (60 maalmood), taasoo ah waqti dheer marka la barbar dhigo nidaamyada kale ee federaalka.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[117] wuxuu si xaddidan u xeerinayaa sababaha luminta xubinnimada Baarlamaanka:

- Haddii xildhibaan uu qaban karo xil kale oo isburinaya danaha Baarlamaanka, waa inuu iska casilo xubinnimada.
- Baarlamaanku wuxuu go'aamin karaa in xubin laga saaro haddii la ogaado in ay jirto sabab sharci ah oo caqabad ku ah xildhibaanimada.
- Xasaanadda siyaasadeed waa laga xayuubin karaa xildhibannada haddii ay la kulmaan dacwad maxkamadeed, balse tani looma arko in ay si toos ah u keeneyso luminta xubinnimada.

Nidaamka Switzerland wuxuu aad ugu dhow yahay habka Jarmalka, maaddaama Baarlamaanka uu leeyahay awood sare oo ku saabsan xildhibannadiisa.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[118] wuxuu si gaar ah u xusay sababaha luminta xubinnimada Baarlamaanka:

- Haddii xildhibaan uu iscasilayo, waa inuu Baarlamaanka u gudbiyaa iscasilaaddiisa, waxaana laga rabaa in Baarlamaanka ansixiyo.
- Xildhibannada waxaa xasaanadda laga qaadi karaa haddii maxkamad ay ku xukunto dembiyo la xiriira musuqmaasuq ama khiyaano qaran.
- Ma jiro sharci qeexaya in xildhibaan lagu waayi karo xubinnimada haddii uu ka maqnaado kalfadhiyada Baarlamaanka.

Nidaamka Itoobiya wuxuu xoogga saaraya ilaalinta xubinnimada xildhibannada, isagoo aad u xaddiday sababaha luminta xubinnimada, gaar ahaan marka la eego maqnaanshaha Baarlamaanka.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka[119] wuxuu si toos ah u qeexayaa in xildhibaanka ama senatarka labada aqalka uu xilka waayayo haddii loo magacaabo wasiir, lataliye sare, guddi ama u qabto jago dawladeed heer federaal ama heer dawladeed.

⇒ ***Tanzania,*** Dastuurka wuxuu tilmaamay in ay khasab tahay in xildhibaanka iska casilo xildhibaannada marka loo magacaabo jago wasiir.

[117] Dastuurka Switzerland, Qodobka 144aad.
[118] Dastuurka Itoobiya, Qodobbadiisa 54aad iyo 63aad.
[119] Qodobka 68aad ee Dastuurka Nigeria.

⇒ ***Brazil,*** Dastuurka[120] wuxuu tilmaamayaa in xildhibannada baarlamaanku aysan qaban karin xil kasta oo lacag kale kasoo galayso mana qaban karo jago kale.

⇒ **Maraykanka** Dastuurka[121] wuxuu si toos ah u qeexay in xubin kamid ah labada aqal ay khasab tahay in uu iska casilo haddii loo magacaabo uuna aqablo jago.

Qodobka 60aad ee asalka Dastuurka waa la tiray, waxaa nuxurkiisa lagu xeeriyay Qodobka 50aad ee cutubka 4aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo uu baarlamaanku ansixiyay.

Qodobka 61aad: Xilka Xubnaha Baarlamaanka Federaalka, Qodobkan waxaa loo raray Qodobka 81aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

## Qodobka 85aad: Dhaarta Xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka

Qodobka 85aad. Qodobkan waa mid cusub oo la soo kordhiyay, wuxuuna xeerinayaa dhaarinta xubnaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Xubnaha cuusb waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

## Qodobka 86aad: Xasaanadda iyo Xuquuqda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 86aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo ahaa Qodobka 70aad ee asalka Dastuurka waxaa laga dhigay "Xasaanadda iyo Xuquuqda Xubnaha Baarlamaanka Federaalka" halka uu asalka Dastuurka ahaa "Xasaanadda Xildhibaannada Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka".

- **Faqradda 1aad:** ee asalka Dastuurka nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay Baarlamaanka Federaalka".

- **Faqradda 2aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxayna xeerinaysaa in aan xildhibaanka lagu oogi karin dacwad ciqaabeed, la xiri karin, lana baari karin hoygiisa iyo meeshii u gaar ah haddii aan oggolaasho laga haysan Golaha Shacabka ama Aqalka Sare haddii aan lagu qaban dembi uu faraha kula jiro oo ay sharci ahaan khasab tahay in la qabto.

- **Faqradda 3aad:** Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin ee waxaa lagu sameeyay dib u habayn iyo siiqatoosin, waxayna xeerinaysaa in dacwadaha aan ciqaabta ahayn oo ka dhanka ah xubnaha Baarlamaanka la furi karo iyada oo aan loo baahnayn oggolaasho golayaasha Baarlamaanka.

[120] Qodobka 54aad ee Dastuurka Brazil
[121] Qodobka 1aad, faqradda 6aad ee Dastuurka Maraykanka

- **Faqradda 4aad:** Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu daray ereyga "toos" oo muujinayo in kharashka toos looga bixinayo khasnadda dhexe ee dawadda iyada oo aan meel kale la soo marsiin.

Qodobkan wuxuu xeerinayaa xasaanadda iyo xuquuqda xubnaha Baarlamaanka, wuxuuna asal ahaan ka tirsanaa Qodobka 70aad ee Dastuurka. Wax-ka-bedelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu xooga saaray ballaarinta iyo faahfaahinta xasaanadda xildhibannada, si loo caddeeyo xuduudaha xasaanadda iyo xuquuqaha xildhibannada.

**Cilmibaaris: Xasaanadda Xildhibaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[122] wuxuu si cad u qeexayaa xasaanadda xubnaha *Kongareeska*:

- Xildhibannada Kongareeska lama xukumi karo, lagumana xiri karo hadallada ay ka jeediyaan gudaha fadhiyada Baarlamaanka. Tani waa tallaabo lagu difaacayo xorriyadda hadalka xildhibannada, si ay si furan u matalaan codbixiyayaashooda iyaga oo aan cabsiyayn.
- Xildhibannada lama xiri karo inta ay ku guda jiraan shaqada Baarlamaanka, marka laga reebo dembiyo culus sida khiyaano qaran, musuqmaasuq, ama dambiyo waawayn oo sharciyaysan.
- Xildhibannada waxaa loo dammaanad qaaday gunno iyo xuquuq dhaqaale oo aan la xannibi karin inta ay xafiiska hayaan.
- Xasaanadda xildhibaanadu ma ilaalinayso anshax-xumo iyo ku xadgudub xeer hoosaadka Baarlamaanka, taasoo la macno ah in haddii xildhibaan uu ku dhaqmo anshax-xumo, ay baarlamaanku xaddidi karaan xasaanaddiisa.

Dastuurka Maraykanka wuxuu si gaar ah u ilaaliyaa xorriyadda xildhibannada, si aysan uga baqin cawaaqib sharci ah marka ay gudanayaan waajibaadkooda, balse waxa uu caddaynayaa in xasaanaddu aysan ku fidin danbiyada culus ee qaran.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[123] wuxuu si cad u qeexayaa xasaanadda xubnaha Baarlamaanka:

- Xildhibannada *Bundestag* lama xiri karo, lama baari karo, lagumana soo oogayo dacwad la xiriirta hadalladooda, mowqifyadooda siyaasadeed, ama codbixintooda Baarlamaanka.
- Xasaanadda xildhibannada waxaa laga qaadi karaa oo keliya haddii *Bundestag* uu go'aansado in ay tahay mid sharciyan loo baahan yahay.
- Haddii xildhibaan uu galo dembiyo culus, sida musuqmaasuq ama qiyaano qaran, xasaanadda waxaa laga qaadi karaa iyadoo loo marayo hanaan sharciyeed oo adag.
- Xildhibaannadu waxay xaq u leeyihiin mushaar iyo xuquuqaha dhaqaale ee laga bixiyo khasnadda dawladda.

[122] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 6aad.
[123] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 46aad.

Nidaamka Jarmalka wuxuu xoogga saarayaa ilaalinta xasaanadda Baarlamaanka si xildhibaanadu u gutaan shaqadooda iyaga oo ka madaxbannaan cadaadis sharciyeed, balse waxa uu leeyahay hanaan sharciyeed oo looga qaadi karo xasaanadda haddii loo baahdo.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[124] wuxuu xeerinayaa xasaanadda xildhibannada Baarlamaanka:

- Xildhibaanadu laguma dacweyn karo mowqifyadooda siyaasadeed iyo hadallada ay ka jeediyaan fadhiyada Baarlamaanka, taasoo la mid ah nidaamyada Maraykanka iyo Jarmalka.
- Xubnaha Baarlamaanka lama xiri karo marka ay ku jiraan shaqada Baarlamaanka, marka laga reebo xaaladaha dembiyada waawayn sida musuqmaasuq ama khiyaano qaran.
- Xasaanadda xildhibannada lama adeegsan karo si loo difaaco hadallo ama ficillo si cad u kicinaya rabshado ama amniga qaranka wax u dhimaya, taasoo la macno ah in xasaanaddu aysan ahayn mid aan xad lahayn.
- Xuquuqda dhaqaale ee xildhibannada Baarlamaanka waxaa si toos ah looga bixiyaa khasnadda dawladda.

Nidaamka Hindiya wuxuu si gaar ah u xadidayaa xasaanadda Baarlamaanka, wuxuuna mamnuucayaa in xasaanaddu ay daboosho hadallada xildhibannada ee wax u dhimi kara amniga qaranka.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[125], wuxuu qeexayaa in xildhibannada Baarlamaanka ay:

- Xasaanad buuxda ka haystaan dacwadaha la xiriira hadalladooda iyo mowqifyadooda siyaasadeed.
- Xildhibannada Baarlamaanka lama xiri karo, mana laga qaadi karo xasaanadda, haddii aanay jirin xukun maxkamadeed oo Baarlamaanka laftiisu ansixiyay.
- Xuquuqaha dhaqaale ee xildhibannada waxaa si toos ah looga bixiyaa khasnadda dawladda.

Dastuurka Switzerland wuxuu si adag u ilaaliyaa xasaanadda Baarlamaanka, wuxuuna xaddidaya in xildhibannada aan si sahlan looga qaadi karin xasaanadda sharciyeed.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[126] wuxuu xeerinayaa xasaanadda xildhibannada:

- Xubnaha Baarlamaanka lama xiri karo, laguma dacweyn karo, mana laga qaadi karo xasaanadda haddii aysan si cad ugu lug lahayn dembiyo culus.
- Xildhibannada Baarlamaanka waxa ay xaq u leeyihiin xuquuq dhaqaale oo si toos ah looga bixinayo khasnadda dawladda.

Nidaamka Itoobiya wuxuu xoogga saaraya ilaalinta xubnaha Baarlamaanka, wuxuuna u ogolaanayaa in xasaanadda laga qaado haddii xildhibaan la xukumo.

---

[124] Dastuurka Hindiya, Qodobka 105aad.
[125] Dastuurka Switzerland, Qodobka 162aad.
[126] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 54aad.

# Qodobka 87aad: Doorasho Xilligeedda Laga Soo Hormariyey

Cinwaannka Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo ahaa Qodobka 67aad ee asalka Dastuurka.

- **Faqradda 1aad:** waxay xeerinaysaa in aan labada Gole ee Baarlamaanka loo diri karin doorasho xilligeeda laga soo hormariyey abada (2) sano ee ugu horreysa muddo xileedkooda

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub tilmaalaysaa in doorasho xilligeedda laga soo hormariyey la qaban karo oo keliya saddexda (3) sano ee u dambeysa muddo xilleedka Baarlamaanka haddii ay jiraan xaalado ay ku gudan waayaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

**Natiijada Latashiyada:**




- **Faqradda 3aad:** Waa mid cusub waxayna xeerinaysaa in Madaxweynaha soo saarayo Xeer Madaxweyne lagu qabanayo doorasho xilligeeda laga soo hormariyey, kaddib markuu dhageysto talada xisbiyada siyaasadeed ee dalka.

- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo xeerinaysa habraaca ku dhawaaqidda doorashada xilligeeda laga soo hormariyay.

- **Faqradda 5aad:** waa mid cusub waxay tilmaamaysaa Baarlamaanka xilka ka degaya uu sii haynayo awoodda Baarlamaanka ilaa inta laga dooranayo xubno cusub.

**Cilmibaaris: Kala Dirista Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[127] si adag ayuu u mamnuucayaa kala dirista Baarlamaanka kahor dhammaadka muddo xileedkiisa. Waxaa la dejiyey nidaam sugan oo xaqiijinaya in labada aqal ee Kongareeska ay dhammaystaan xilligooda doorashada kahor inta aysan xilka wareejin.

- Madaxweynaha Maraykanka ma kala diri karo Kongareeska ama mid ka mid ah labada gole.
- Baarlamaanka wuxuu sii shaqaynayaa ilaa doorasho kale la qabto, waxaana la sugayaa in doorashooyinka lagu qabto waqtiyadii horey loo cayimay.
- Madaxweynaha waxa uu yeelan karaa awood uu ku baaqi karo shir aan caadi ahayn *(Extraordinary Session)* haddii Baarlamaanka uusan shaqayn, balse ma kala diri karo Baarlamaanka.

Dastuurka Maraykanka wuxuu si adag u mamnuucay in Baarlamaanka la kala diro, taasoo ka dhigan in marka la doorto xildhibannada, aysan jirin wax sharciyad ah oo oggolaanaya in Baarlamaanka la kala diro, xitaa haddii ay jirto xaalad siyaasadeed oo kacsan.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[128] wuxuu oggolaanayaa in Baarlamaanka la kala diro xilligiisa ka hor, balse waxaa lagu xaddidayaa xaalado gaar ah:

- ***Aqalka Hoose*** *(Bundestag)* waxaa la kala diri karaa haddii la waayo ra'iisulwasaare *(Chancellor)* cusub kaddib cod kalsooni ah oo fashilmay.
- Haddii Baarlamaanka uu cod kalsooni ah ku waayo *Chancellor*-ka, madaxweynaha Jarmalka wuxuu go'aan ka gaari karaa kala dirista *Bundestag*.
- Doorashooyin cusub waa in lagu dhawaaqaa muddo 60 maalmood gudahood marka Baarlamaanka la kala diro.
- *Bundestag*-ka xilka ka degaya wuxuu sii haynayaa awoodiisa illaa inta uu xilka la wareegayo Baarlamaanka cusub.

Nidaamka Jarmalka wuxuu oggolaanayaa kala dirista Baarlamaanka, balse waxaa la dejiyey hannaan sharciyeed oo adag si loo sugo in aan la burburin Baarlamaanka sababo siyaasadeed.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[129] wuxuu oggolaanayaa in Baarlamaanka la kala diro xilligiisa ka hor, balse si xaddidan:

- Madaxweynaha Hindiya wuxuu kala diri karaa Aqalka *Hoose (Lok Sabha),* balse keliya marka uu talo ka helo ra'iisulwasaaraha.
- Baarlamaanka xilka ka degaya wuxuu sii shaqeynayaa inta laga dooranayo baarlamaan cusub, si loo hubiyo jiritaanka sharciyadda dawladda.
- Kala dirista Baarlamaanka waxay dhacdaa haddii xukuumadda ay lumiso codka kalsoonida, taasoo ah mid la mid ah nidaamka Jarmalka.

[127] Dastuurka Maraykanka, Qodobbada 1aad iyo 2aad.
[128] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 63aad iyo 68aad.
[129] Dastuurka Hindiya, Qodobka 85aad.

Nidaamka Hindiya wuxuu u oggolaanayaa madaxweynaha in uu Baarlamaanka kala diro, balse waxaa la xadidayaa awooddiisa si loo sugo xasilloonida dawladeed.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[130] wuxuu mamnuucayaa in Baarlamaanka la kala diro:

- Baarlamaanka federaalka wuxuu sii shaqaynayaa ilaa dhamaadka xilligii loogu talogalay, iyadoo madaxweynaha aan la siin awood uu ku kala diro Baarlamaanka.
- Doorashooyinku waa inay dhacaan xilliga lagu heshiiyey, waana inaan Baarlamaanka la burburin inta ka horreysa.

Switzerland waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xasiloon, iyadoo laga hortagayo xaaladaha ay xukuumadda fulinta isku dayi karto in ay Baarlamaanka kala dirto.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[131] wuxuu oggolaanayaa kala dirista Baarlamaanka balse wuxuu xaddidayaa xaaladaha:

- Haddii baarlamaanku uu lumiyo codka kalsoonida, madaxweynaha wuxuu u yeeri karaa doorashooyin cusub.
- Haddii uu dhaco xaalad degdeg ah, Baarlamaanka wuxuu sii shaqeynayaa illaa laga gaadhayo xal sharci ah.
- Baarlamaanka xilka ka degaya wuxuu sii shaqeynayaa ilaa la helo baarlamaan cusub, taasoo la mid ah nidaamka Jarmalka iyo Hindiya.

⇒ ***Nigeria*** Dastuurka, ma oggola in la kala diro Baarlamaanka *(National Assembly)* ka hor dhammaadka xilka oo ah afar sano, iyadoo aan jirin xaalad siyaasadeed oo xeerinaysa kala diris sababo la xiriira:

- Kalsooni lumis.
- Xaalad degdeg ah, am
- Is-casilaad madaxweyne

Baarlamaanka wuxuu si buuxda u shaqeynayaa muddo afar sano ah, lamina kala diri karo ka hor dhammaadka xilligaa, oo ma laha nidaam kalsooni lumis oo sababi kara kala dirid baarlamaan, waxaana baarlamaanku dhamaystiraa muddadiisa.[132]

⇒ ***Koofur Afrika,*** Dastuurka wuxuu oggolaanayaa kala dirista Baarlamaanka *(National Assembly)* haddii shuruudahaan la fuliyo:

- Cod aqlabiyad ah oo baarlamaanku isku kala diro *(self-dissolution)*
- In ay ka soo wareegtay ugu yaraan 3 sano tan iyo markii la doortay[133]
- Haddii madaxweynuhu uu lumiyo codka kalsoonida *(vote of no confidence)* iyo Baarlamaanku uusan dooneyn in uu doorto hoggaamiye kale, waxaa lagu khasbanaan karaa in la kala diro Baarlamaanka si loo qabto doorasho cusub.[134]

---

130 Dastuurka Switzerland, Qodobbada 193aad iyo 195aad.
131 Dastuurka Itoobiya, Qodobka 60aad.
132 Dastuurka Nigeria (1999), Qodobka 61aad.
133 Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 50aad
134 Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobbada 86aad iyo 102aad.

## Qodobka 88aad: Xeer Hoosaadyada Baarlamaanka

Cinwaanka Qodobka 88aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 68aad "Xeer hoosaadka Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah" waxaa laga dhigay "Xeer Hoosaadka Baarlamaanka". Qodobka oo asalka Dastuurka ka koobnaa 5 faqradood waxa uu hadda noday 3 faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waxaa lagu xeeriyay in golayaasha Baarlamaanka mid walba yeelanayo xeerhoosaad u gaar ah oo waafaqsan xeer hoosaadka wadajirka ah ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Faqraddan asalka Dastuurka waxay khusaysay Golaha Shacabka oo keli ah.

  Faqradaha 2aad iyo 4aad ee asalka Dastuurka waa la tiray maaddaama nuxurkooda lagu daray qodobbada xeerinaya xeerdejinta.

- **Faqradda 3aad:** Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd farqadda 5aad, nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay dib u habayn. "fadhiyada" waxaa lagu beddelay "kulammada" waxaa kale oo lagu daray "Golaha Aqalka Sare".

## Madaxa Labaad: Kalfadhiyada iyo Maamulka Baarlamaanka Federaalka

Waa madax cusub oo lagu soo kordhiiyey cutubka 6aad, wuxuuna soo koobayaa dhammaan arrimaha la xiriirta kalfadhiyada iyo maamulka Baarlamaanka Federaalka.

## Qodobka 89aad: Kalfadhiyada Baarlamaanka

Cinwaanka Qodobka 89aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 66aad "Kal-fadhiga Golaha Shacabka Federaalka" iyo Qodobka 74aad "Kal-fadhiga Golaha Aqalka Saree e Baarlamaanka Federaalka" waxaa laga dhigay "Kalfadhiga Baarlamaanka".

- **Farqadda 1aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Magaca Guddiga waxaa lagu daray "Qaranka iyo Soohdimaha" si waafaqsan wax-kabeddelka Dastuurka.

- **Faqradda 2aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. Sidoo kale, "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka Federaalka".

- **Faqradda 3aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "Baarlamaanka Federaalka". Ereyga "Naashada" waxaa lagu beddelay "fasaxa".

- **Faqradda 4aad:** waxay xeerinaysaa marxaladaha ay golayaasha Baarlamaanka Federaalka yeelan karaan fadhiyo aan caadi ahayn. Xarafka (a) waxaa laga tiray "kaddib marka uu helo codsi ka yimaadda Golaha Wasiirrada". "Golaha Shacabka" waxaa lagu beddelay "xubnaha golaha". Sidoo kale, Xarafka (c) waxaa lagu daray "ama xubnaha hal Dawlad Goboleed".

- **Faqradda 5aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysaa shir guddoonka golaha waxayna tilmaaysaa in golaha uu shir-guddoominayo oo keliya Guddoomiyaha, haddii u maqanyahay Guddoomiye ku xigeenka 1aad, ama 2aad ama xubinta ku xusan Xeer Hoosaadka golaha.

Qodobkan wuxuu xeerinayaa kalfadhiyada Baarlamaanka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 66aad oo ka hadlayay kalfadhiga Golaha Shacabka iyo Qodobka 74aad oo xusayay kalfadhiga Aqalka Sare. Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan waxa uu mideeyay labada qodob oo ka hortagayay kala qaybsanaanta nidaamka kalfadhiyada labada aqal ee Baarlamaanka. Qodobkan waxa uu dejinayaa nidaam qeexaya:

- ***Waqtiga iyo habraaca fadhiyada caadiga ah ee Baarlamaanka:*** Xilliga uu Baarlamaanka furmayo, muddada uu shaqeynayo, iyo fasaxa rasmiga ah ee xubnaha.
- ***Fadhiyada aan caadiga ahayn*** *(Extraordinary Sessions):* Xaaladaha ay baarlamaanku yeelan karaan shirar degdeg ah oo aan ku jirin jadwalkii horay loo dejiyey.
- ***Xubnaha codsan kara shirarka aan caadiga ahayn:*** Xukuumadda, xubnaha Baarlamaanka iyo dawlad goboleedyada oo xaq u yeeshay inay codsadaan shirar gaar ah.
- ***Sii wadista shaqada Baarlamaanka inta laga gaarayo doorashada Baarlamaanka cusub:*** Xaqiijinta in Baarlamaanka xilka ka degaya uu sii shaqeynayo si loo sugo xasilloonida dawladeed.

### Cilmibaaris: Kalfadhiyada Baarlamaanka

Dalalka federaalka ah waxay si kala duwan u nidaamiyaan kalfadhiyada Baarlamaanka, iyadoo ay jiraan nidaamyo si joogto ah u shaqeeya iyo kuwo xaddidaya tirada fadhiyada.

⇒ ***Maraykanka*** iyo ***Switzerland*:** Baarlamaanku wuxuu leeyahay fadhiyo joogto ah oo sanadle ah, waxaana la hubiyaa in aanay firaaq siyaasadeed dhicin.

⇒ ***Jarmalka*** iyo ***Hindiya***: Waxaa la dajiyey nidaam fadhiyo caadi ah iyo kuwo gaar ah oo la codsan karo marka loo baahdo.

⇒ ***Itoobiya***: Baarlamaanka wuxuu yeelanayaa kalfadhi sanadle ah, balse waxaa jira sharciyo ogolaanaya shirar gaar ah haddii loo baahdo.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[135] wuxuu xeerinayaa nidaamka kalfadhiyada Baarlamaanka:

- Baarlamaanka wuxuu leeyahay saddex kalfadhi oo waajib ah sanadkii, taasoo ah hab gaar ah oo aan laga helin nidaamyada kale ee federaalka.
- Shirarka aan caadiga ahayn waxaa codsan kara xukuumadda, Baarlamaanka, ama codbixiyayaal gaaraya tiro cayiman.
- Baarlamaanka lama hakrin karo muddo dheer, waxaana la xaqiijinayaa in uu si joogto ah u shaqeeyo.

Nidaamka Switzerland wuxuu xoojinayaa joogtaynta fadhiyada Baarlamaanka, iyadoo la sugo in aan Baarlamaanka muddo dheer la xirin.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[136] wuxuu qeexayaa nidaamka kalfadhiyada Baarlamaanka:

- Madaxweynaha Hindiya wuxuu leeyahay awood uu Baarlamaanka ugu yeeri karo fadhiyo caadi ah iyo kuwo aan caadi ahayn.
- Fadhiyada Baarlamaanka waa in aanay ka dheeraan 6 bilood iyadoon la furin kalfadhi kale, taasoo la micno ah in Baarlamaanka uu yeelan karo ugu yaraan laba kalfadhi sanadkii.
- Ra'iisulwasaaraha iyo xildhibaanadu waxay codsan karaan fadhiyo gaar ah, haddii loo baahdo shir aan caadi ahayn.
- Baarlamaanka xilka ka degaya wuxuu sii shaqeynayaa illaa Baarlamaanka cusub la doorto.

Hindiya waxay leedahay nidaam oggolaanaya fadhiyo joogto ah oo lagu go'aaminayo xaaladaha muhiimka ah, waxaana si gaar ah loo xusay in aan Baarlamaanka la xirin in ka badan 6 bilood.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[137] wuxuu xeerinayaa:

- Baarlamaanka wuxuu yeelanayaa kalfadhi sanadkiiba hal mar, marka laga reebo xaaladaha degdegga ah.
- Madaxweynaha Itoobiya wuxuu furi karaa fadhiyo aan caadi ahayn, haddii loo baahdo.
- Baarlamaanka xilka ka degaya wuxuu sii shaqeynayaa illaa Baarlamaanka cusub la doorto.

Nidaamka Itoobiya wuxuu xaddiday tirada fadhiyada Baarlamaanka, balse wuxuu oggol yahay in la furo shirar aan caadi ahayn haddii ay timaado xaalad degdeg ah.

[135] Dastuurka Switzerland, Qodobka 151aad.
[136] Dastuurka Hindiya, Qodobka 85aad.
[137] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 58aad.

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[138] wuxuu xeerinayaa:

- Baarlamaanka wuxuu furanayaa kalfadhigiisa sanad walba bisha Janaayo, isagoo la jaanqaadaya nidaamka doorashooyinka la cayimay.
- Aqalka wakiillada iyo senate-ka midkoodna ma hakrin karo kalfadhigiisa muddo ka badan 3 maalmood, haddii uusan midka kale oggolaan.
- Madaxweynaha waxa uu yeelan karaa awood uu ku baaqi karo shir aan caadi ahayn *(Extraordinary Session)* haddii Baarlamaanka uusan shaqeyn.
  - Baarlamaanka wuxuu sii shaqeynayaa illaa mid cusub la doorto, waxaana la sugayaa in xilliga doorashada lagu qabto waqti horey loo qorsheeyey.

Nidaamka Maraykanka waxa uu xoojinayaa in Baarlamaanka sii shaqeeyo xilligiisa, wuxuuna ogolaanayaa in Madaxweyne uu ku baaqi karo fadhiyo aan caadi ahayn haddii loo baahdo.

⇒ **Jarmalka,** Dastuurka[139] wuxuu xeerinayaa:

- *Bundestag*-ku wuxuu furanayaa kalfadhigiisa ugu horreeya 30 maalmood gudahood kaddib doorashada Baarlamaanka cusub.
- Madaxweynaha Jarmalka wuxuu leeyahay awood uu ku baaqi karo shir aan caadi ahayn haddii xaalad degdeg ah timaado.
- Xildhibaannadu waxay xaq u leeyihiin inay codsadaan fadhiyo gaar ah, haddii aqlabiyadda Baarlamaanka ay codsato.
- Xukuumadda lama hor istaagi karo fadhiyada Baarlamaanka, waxaana la xaqiijinayaa in golaha uu leeyahay madaxbannaani ku filan.

Jarmalka, nidaamka kalfadhiyada Baarlamaanka wuxuu si toos ah ula jaanqaadayaa doorashada Baarlamaanka cusub, waxaana la sugaa in aan Baarlamaanka la hakin muddo dheer.

## Qodobka 90aad: Shuruudaha Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka.

Qodobka 90aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo la soo kordhiyay, wuxuuna xeerinaysaa shuruudaha doorshada guddoonka labada gole.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa shuruudaha looga baahanyahay in uu buuxiyo qofkii raba in loo doorto guddoonka labada gole ee Baarlamaanka federaalka midkood.

[138] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 4aad iyo 5aad.
[139] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 39aad iyo 43aad.

# Natiijada Latashiyada









- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub laga soo raray Qodobka 65(3) ee asalka Dastuurka waxayna xeerinaysaa in guddommiyaha loo loo doorto mid kamid ah labada gole ee barlamaanka Federaalka inta uusan qaban xilka looga baahanyahay in uu si rasmi ah uga tanaasulo xilkasta oo uu ka hayay xisbi siyaasadeed, waajibaadkiisana u gubo dhexdhexaadnimo.

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna si cad u qeexayaa shuruudaha laga rabo qofka loo dooranayo guddoomiyaha Golaha Shacabka ama guddoomiyaha Aqalka Sare. Qodobkani waxa uu dejinayaa laba arrimood oo waawayn:

a) Shuruudaha qofka doonaya in loo doorto guddoomiyaha Golaha Shacabka ama Aqalka Sare: Waxaa la dhigay shuruudo cad oo qofka musharraxa ah looga baahan yahay in uu buuxiyo.

b) Xil-ka-tanaasulka guddoomiyaha kahor inta uusan xilka la wareegin: Qofka la doortay waa inuu si rasmi ah uga tanaasulo jago kasta oo uu ka hayay xisbi siyaasadeed, si uu si dhexdhexaad ah u guto waajibaadkiisa.

Shuruudahaas ayaa ah kuwo ujeeddadoodu tahay in hoggaanka baarlamaanku noqdo mid si caddaalad ah u metela dhammaan xildhibannada, halkii ay noqon lahayd mid xag-xagasho siyaasadeed ku dhisan. Waxay xaddideysaa in guddoomiyaha Baarlamaanka uu sii ahaado xubin firfircoon oo xisbi ah, taasoo meesha ka saaraysa suurtagalnimada in uu u janjeero hal dhinac siyaasadeed.

**Cilmibaaris: Shuruudaha Doorashada Guddoonka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[140] wuxuu si cad u xusayaa habraaca doorashada guddoomiyaha aqalka wakiillada iyo Aqalka Sare, balse ma dejinayo shuruudo adag oo la xiriira musharraxiinta Guddoomiyaha Baarlamaanka.

- Guddoomiyaha Aqalka Wakiillada *(Speaker of the House)* waxaa dooranaya xubnaha aqalka wakiillada. Dastuurku ma xaddidayo in guddoomiyuhu uu xildhibaan ahaan jiro, taasoo la micno ah in qof aan xildhibaan ahayn loo dooran karo xilkan, inkastoo taasi aysan dhicin inta badan taariikhda.
- Madaxweyne kuxigeenka maraykanka waa guddoomiyaha Aqalka Sare *(President of the Senate),* waxaana doortaan codbixiyeyaasha qaranka, isagoo aan si gaar ah loogu tartamin jagada guddoomiyaha Aqalka Sare.

Shuruudaha halkan ku jira waa kuwo dabacsan, mana jirto qodob dastuuri ah oo waajibinaya in guddoomiyaha aqalka wakiillada ama Aqalka Sare uu ka tanaasulo xisbi siyaasadeed kahor inta uusan xilka la wareegin.

[140] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 2aad iyo 3aad.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[141] wuxuu xeerinayaa doorashada Guddoomiyaha Baarlamaanka Jarmalka:

- Guddoomiyaha Aqalka Hoose *(Bundestag)* waxaa si toos ah u doorta xildhibannada Baarlamaanka, waxaana musharrax noqon kara keliya xildhibannada la doortay.
- Guddoomiyaha Aqalka Sare *(Bundesrat)* waa ra'iisulwasaaraha mid ka mid ah gobollada Jarmalka (*Länder*), waxaana xilka haya gobol kasta muddo hal sano ah, iyada oo gobollada isku beddelayaan sanad walba.
- Ma jiro xeer waajibinaya in guddoomiyaha *Bundestag* uu ka tanaasulo xisbigiisa, inkastoo la filayo inuu si dhexdhexaad ah u guto waajibaadkiisa.

Jarmalka, guddoomiyaha Baarlamaanka ma waayi karo xubinimadiisa xisbi siyaasadeed, laakiin waxa uu leeyahay mas'uuliyad dheeraad ah oo ah in uu cadaalad u dhexdhexaadiyo doodaha Baarlamaanka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[142] wuxuu xeerinayaa habka doorashada guddoomiyaha Baarlamaanka iyo shuruudaha la xiriira:

- Guddoomiyaha Aqalka Hoose *(Lok Sabha)* waa in uu noqdo xildhibaan Baarlamaanka ah. Doorashadu waxay dhacdaa hal wareeg, musharraxa hela codadka ugu badan ayaa guuleysta.
- Guddoomiyaha Aqalka Sare *(Rajya Sabha)* waa madaxweyne kuxigeenka Hindiya, waxaana si toos ah loogu doortaa doorasho madaxbannaan.
- Ma jiro sharci waajibinaya in guddoomiyaha Baarlamaanka uu ka tanaasulo xisbigiisa siyaasadeed, balse waxaa laga filayaa in uu si dhexdhexaad ah u guto xilkiisa.

Hindida, guddoomiyeyaasha Baarlamaanka waxay haystaan xasaanad siyaasadeed, waxayna ka tirsan yihiin xisbiyadooda marka la doorto.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[143] wuxuu xeerinayaa doorashada Guddoomiyaha Baarlamaanka:

- Guddoomiyaha waxaa dooranaya xildhibannada Baarlamaanka laftiisa.
- Guddoomiyaha wuxuu xilka hayaa muddo hal sano ah, kaddibna waxaa la doortaa guddoomiye cusub.
- Guddoomiyuhu waa inuu si rasmi ah uga baxo xisbigiisa siyaasadeed, si uu u noqdo mid aan wax dan ah ka lahayn is-muquuninta xisbiyada Baarlamaanka dhexdiisa.

Switzerland waxay leedahay nidaam adag oo xaqiijinaya in guddoomiyaha Baarlamaanka uu noqdo mid madaxbannaan, si looga hortago eex siyaasadeed.

---

[141] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 40aad.
[142] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 93aad iyo 89aad.
[143] Dastuurka Switzerland, Qodobka 152aad.

> ⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[144] wuxuu xeerinayaa:
> - Guddoomiyaha aqalka wakiillad waxaa dooranaya xildhibannada Baarlamaanka.
> - Musharraxa waa inuu ka tirsan yahay Baarlamaanka.
> - Ma jiro sharci waajibinaya in guddoomiyaha uu si rasmi ah uga baxo xisbigiisa, laakiin waxaa looga baahan yahay in uu dhexdhexaadnimo muujiya.
>
> Itoobiya waxay oggolaatay in guddoomiyaha baarlamaanku uu sii ahaado xubin xisbi, balse waxaa jirta rajo laga qabo in uu noqdo dhexdhexaad.

## Qodobka 91aad: Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka

Qodobka 91aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ku kala jiray Qodobbada 65aad iyo 73aad waxaa lagu mideeyay qodobkan. Cinwaankana waxaa laga dhigay "Doorashada Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka

- **Faqradda 1aad:** waxay xeerinaysaa in in kulanka koowaad ee gole kasta uu shirguddoominayo xubinta ugu da'da weyn. Sidoo kale in labada gole ee Baarlamaanka mid kasta kulankiisa koowad ku dooranayo guddoomiye iyo laba (2) kuxigeen.

- **Faqradda 2aad:** waa faqrad cusub oo habraaca lagu dooranayo guddoonka labada gole ee Baarlamaanka Federaalka:

  - ***Xarafka (a)*** wuxuu tilmaamayaa in musharraxa hela saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay uu guulaysanayo. Haddii la waayo qof ku guulaysata wareegga koowaad ee codaynta in afarta musharrax ee ugu codka badan u gudbi doonaan wareegga labaad.

  - ***Xarafka (b)*** wuxuu xeerinayaa habraaca doorashada wareegga labaad ee codbixinta iyo in lagu kala guulaysanayo boqolkiiba konton iyo hal dheeri (50%+1). Haddii aan musharraxna ku guulaysan wareeggan waxaa loo gudbayaa wareeg saddexaad oo codeyn ah.

  - ***Xarafka (c)*** waxay tilmaamaysaa habraaca doorashada wareegga saddexaad ee ugu dambeeya doorashada guddoonka labada gole, waxayna caddeynaysaa in labada musharrax ee ugu codka badan u gudbayaan wareegga saddexaad, uuna guulaysanayo musharraxa hela cod hal dheeri ah ee tirada guud ee golaha

Qodobkan wuxuu xeerinayaa habka doorashada guddoomiyaha iyo kuxigeennada labada gole ee Baarlamaanka. Qodobkani waxa uu mideeyay Qodobka 65aad: Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka iyo Qodobka 73aad: Doorashada Guddoomiyaha Aqalka Sare). Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu caddaynayaa nidaamka doorashada,

[144] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 56aad iyo 59aad

heerarka codaynta, iyo habka lagu buuxinayo booska shir-guddoonka haddii ay maqnaadaan guddoomiyaha iyo kuxigeennadiisu.

**Cilmibaaris: Doorashada Guddoonka**

- ⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[145] wuxuu xeerinayaa habka doorashada guddoomiyaha aqalka wakiillada *(Speaker of the House)* iyo guddoomiyaha Aqalka Sare *(President of the Senate):*
    - Guddoomiyaha aqalka wakiillada (*Speaker of the House)* waxaa si toos ah u dooranaya xubnaha aqalka wakiillada.
    - Doorashada guddoomiyaha waxay dhacdaa wareegyo isku xiran, waxaana loo baahan yahay in musharrax helo aqlabiyadda codadka (50%+1).
    - Haddii wareegga hore la waayo musharrax hela aqlabiyadda, waxaa lagu celinayaa wareeg kale ilaa mid guulaysto.
    - Guddoomiyaha Aqalka Sare *(President of the Senate)* oo ah madaxweyne kuxigeenka maraykanka, waxaana doorta codbixiyeyaasha qaranka. Guddoomiyahan ma laha awood xukun oo buuxda, balse wuxuu codkiisa afgariyaa fadhiyada *senate*-ka ee codbixintu simantahay *(tie-breaking vote)*.

Doorashada guddoomiyaha aqalka wakiillada waxay dhacdaa iyada oo musharraxa hela codadka ugu badan uu guuleysto, mana jirto xaddidaad wareegyo kala duwan ah haddii musharrax aqlabiyadda waayo.

- ⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[146] wuxuu xeerinayaa doorashada guddoomiyaha aqalka hoose *(Bundestag)* iyo guddoomiyaha Aqalka Sare *(Bundesrat):*
    - Guddoomiyaha *Bundestag* waxaa si toos ah u doorta xildhibannada Baarlamaanka, waxaana loo doortaa wareeg keliya, iyadoo musharraxa hela codka ugu badan uu guuleysto.
    - Guddoomiyaha *Bundesrat* waa ra'iisulwasaaraha mid ka mid ah gobollada Jarmalka (*Länder*), wuxuuna xilka haya muddo hal sano ah, kaddibna gobollada kale ayaa isku beddela.
    - Ma jiro wareegyo kala reebaya musharraxiinta, musharraxa hela codka ugu badan ayaa guulaysanaya, xitaa haddii aysan aqlabiyad buuxda gaarin.

Jarmalka, doorashada guddoomiyaha *Bundestag* waa mid degdeg ah oo aan lahayn wareegyo badan, halka guddoomiyaha *Bundesrat* uu yahay mid si dabiici ah loogu bedbeddelo gobollada.

---
[145] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 2aad iyo 3aad.
[146] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 40aad.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[147] wuxuu xeerinayaa habka doorashada guddoomiyaha Baarlamaanka:

- Waxaa si toos ah u doorta xubnaha Baarlamaanka, wuxuuna guuleystaa musharraxa hela aqlabiyadda codadka.
- Guddoomiyaha Aqalka Sare *(Rajya Sabha)* waa madaxweyne kuxigeenka Hindiya, oo si toos ah loogu doorto doorasho madaxbannaan.
- Doorashada guddoomiyaha badanaa waxay dhacdaa hal wareeg oo keliya, balse haddii codku u dhaxeeyo musharraxyo badan, wareeg kale ayaa lagu celin karaa.

Nidaamka Hindiya wuxuu muhiimad siinayaa in guddoomiyaha baarlamaanku uu yahay qof xildhibaannada dhexdiisa laga doortay, iyada oo doorashada Aqalka Sare lagu xalliyo in madaxweyne kuxigeenka uu yahay guddoomiyaha *(Rajya Sabha)*.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[148] wuxuu xeerinayaa doorashada guddoomiyaha gaarlamaanka:

- Guddoomiyaha waxaa dooranaya xildhibannada Baarlamaanka laftiisa.
- Guddoomiyaha wuxuu xilka hayaa muddo hal sano ah, kadibna waxaa la doortaa guddoomiye cusub.
- Doorashadu badanaa waxay dhacdaa hal wareeg, musharraxa hela codadka ugu badan ayaa guulaysta.

Switzerland waxay leedahay nidaam u gaar ah, kaas oo guddoomiyaha Baarlamaanka u oggolaanaya in uu shaqeeyo keliya muddo hal sano ah, si looga fogaado isku ururinta awoodda Baarlamaanka hal qof.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[149] wuxuu xeerinayaa:

- Guddoomiyaha aqalka wakiillada waxaa dooranaya xildhibannada Baarlamaanka.
- Doorashadu waxay dhacdaa hal wareeg oo keliya, musharraxa hela codka ugu badan ayaa guuleysta.
- Guddoomiyaha waxa uu leeyahay awood sare oo go'aaminaya shirarka Baarlamaanka iyo xiriirka hay'adaha kale ee dawladda.

Itoobiya waxay leedahay nidaam doorasho oo hal wareeg ah, kaas oo oggolaanaya in musharraxa hela codka ugu badan uu guuleysto iyada oo aan la marin wareegyo badan.

⇒ Dalalka federaalka ah waxay si kala duwan u nidaamiyaan doorashada guddoomiyaha Baarlamaanka, iyadoo ay jiraan nidaamyo kala duwan: Maraykanka, Jarmalka, Hindiya, iyo Itoobiya waxay doorashadoodu dhacdaa hal wareeg, musharraxa hela codka ugu badan ayaa guuleysta. Halka

[147] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 93aad iyo 89aad.
[148] Dastuurka Switzerland, Qodobka 152aad.
[149] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 56aad iyo 59aad.

Switzerland waxay dejisay xeer qeexaya in guddoomiyaha Baarlamaanka uu shaqeynayo keliya hal sano.

## Qodobka 92aad: Xilwaayidda Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka

Qodobka 92aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo la soo kordhiyay.

- **Faqradda 1aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysaa sababaha ay guddoomiyayaasha golayaasha Baarlamaanka iyo kuxigeennadooda xilka ku waayi karaan. Sababaha xilwaayidda waxaa ka mid ah geeri, xilgudasho la'aan joogto ah sababo jireed ama maskaxeed, istiqaalo loo gudbiyo golaha iyo xadgudub Dastuurka Federaalka.

- **Faqradda 2aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysa in xilkaqaadista guddoomiyaha ay soojeedin karaan saddex meelood meel (1/3) tirada guud ee golaha uu ka tirsanyahay.

- **Faqradda 3aad:** waa faqrad cusub oo tilmaamaysaa in guddoomiyaha iyo kuxigeenkiisa xilka looga qaadi akro coddayn saddex meelood laba (2/3) ee tirada guud ee golaha uu ka tirsan yahay.

Qodobkan waa qodob cusub oo si gaar ah u xeerinaya sababaha iyo habraaca xilwaayidda Guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka, waxayna xoojinaysaa isla xisaabtanka hoggaanka Baarlamaanka, wuxuuna dejinayaa hannaan cad oo baarlamaanku u mari karo xilkaqaadista guddoonka, taasoo muhiim u ah xasiloonida dawladeed.

### Cilmibaaris: Xilwaayidda Guddoonka

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[150] wuxuu qeexayaa in xilka guddoomiyayaasha aqalka wakiillada iyo Aqalka Sare laga qaadi karo si waafaqsan qodobbada sharciyeed ee uu baarlamaanku dejisto.

- Guddoomiyaha aqalka wakiillada *(Speaker of the House)* xilka lagama qaadi karo ilaa iyo inta xubnaha Baarlamaanka aysan cod u qaadin xilkaqaadistiisa. Xubnaha aqalka wakiillada waxay soojeedin karaan mooshin xilka looga qaadayo guddoomiyaha, waxaana looga baahan yahay aqlabiyadda codadka si loo xayuubiyo xilka.
- Guddoomiyaha Aqalka Sare *(President of the Senate)* waa madaxweyne kuxigeenka, wuxuuna xilkiisa waayi karaa keliya haddii uu iscasilo ama laga saaro xilka madaxweyne kuxigeenka.

Maraykanka, xilkaqaadista guddoomiyaha aqalka wakiillada waxay u baahan tahay cod aqlabiyad ah, waxaana suurtagal ah in guddoomiyaha xilka looga qaado mooshin laga keeno gudaha Baarlamaanka.

---

150 Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 2aad iyo 3aad.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[151] wuxuu xeerinayaa habka xilkaqaadista guddoomiyaha Baarlamaanka:

- Guddoomiyaha aqalka hoose *(Bundestag)* xilka lagama qaadi karo si sahlan, waxaana xilkaqaadistiisa u baahan tahay codbixin gaar ah oo la horkeeno Baarlamaanka. Mooshinka xilkaqaadista waa in uu haysto taageerada aqlabiyadda xildhibannada si loo guda galo codbixin rasmi ah.
- Guddoomiyaha Aqalka Sare *(Bundesrat)* waa mid si wareeg ah gobollada u hayaan, waxaana suurtagal ah in xilka laga qaado haddii gobolka uu matalayo uu xilkiisa waayo ama ay gobolladu is-rogeen.

Jarmalka, xilkaqaadista guddoomiyaha *Bundestag* waa arrin adag oo si taxadar leh loogu gudbiyo Baarlamaanka, taasoo ka hortageysa in si fudud loola wareego xilka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[152] wuxuu xeerinayaa habka xilkaqaadista guddoomiyaha Baarlamaanka:

- Guddoomiyaha Aqalka Hoose *(Lok Sabha)* waxaa xilka looga qaadi karaa codbixin Baarlamaanka dhexdiisa oo ay ansixiso aqlabiyadda xildhibannada.
- Guddoomiyaha Aqalka Sare *(Rajya Sabha)* waa madaxweyne kuxigeenka Hindiya, waxaana xilkiisa laga qaadi karaa haddii la rido xukuumadda ama uu iscasilo.
- Xilkaqaadistu waa in lagu xoojiyo codbixin ka dhacda Baarlamaanka oo ah saddex-meelood labo (2/3) sida Soomaaliya.

Nidaamka Hindiya wuxuu waajibinayaa in xilkaqaadista guddoomiyaha Baarlamaanka ay noqoto mid sharciyaysan oo leh taageero ballaaran oo Baarlamaanka ah.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[153] wuxuu xeerinayaa xilwaayidda guddoomiyaha Baarlamaanka:

- Guddoomiyaha wuxuu xilka hayaa muddo hal sano ah, waxaana xilka laga wareejin karaa haddii baarlamaanku uu go'aansado in uu doorasho cusub qabto ka hor dhammaadka muddadiisa.
- Haddii guddoomiyaha Baarlamaanka lagu helo xadgudub sharci ah, Baarlamaanka wuxuu qaban karaa codbixin si uu xilka uga saaro.

Switzerland waxay leedahay nidaam baarlamaan oo si joogto ah u bedbeddela hoggaanka, taasoo ka dhigan in xilkaqaadista guddoomiyaha ay tahay arrin caadi ah.

[151] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 40aad iyo 63aad.
[152] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 94aad iyo90aad.
[153] Dastuurka Switzerland, Qodobka 152aad.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[154] wuxuu xeerinayaa:

- Guddoomiyaha aqalka wakiillada waxaa xilka laga qaadi karaa haddii baarlamaanku uu u codeeyo mooshin ka dhan ah.
- Xilkaqaadistu waxay u baahan tahay aqlabiyadda xildhibannada si loo ansixiyo.
- Haddii guddoomiyuhu xadgudub sameeyo ama uu waayo kalsoonida Baarlamaanka, waxaa la furayaa habraac xilka looga qaadayo.

Itoobiya waxay ogolaatay nidaam xilkaqaadis ah oo ku saleysan kalsoonida Baarlamaanka, taasoo la mid ah nidaamyada federaalka ee kale.

⇒ ***Pakistan,*** Dastuurka (1973) wuxuu si faahfaahsan u xeerinayaa habka xilkaqaadista guddoomiyeyaasha Baarlamaanka federaalka, oo kala ah:

- Guddoomiyaha golaha qaranka *(Speaker of the National Assembly)*[155]: waxaa xilka looga qaadi karaa mooshin codbixin ah oo uu baarlamaanku qaado. Mooshinka xilkaqaadista waxaa la horgeeyaa golaha qaranka, waxaana looga baahan yahay aqlabiyad badh ah si loo aqbalo in mooshinka la guda galo. Kaddib, marka doodda la dhameeyo, waxaa loo baahan yahay cod aqlabiyad leh si xilka looga qaado.
- Guddoomiyaha golaha *senate*-ka *(Chairman of the Senate)*[156]*:* waxaa xilka looga qaadi karaa si la mid ah guddoomiyaha golaha qaranka, iyadoo loo maro mooshin lagu kalsoonaan waayo. Mooshinka waxaa keena xildhibannada, waxaana lagu ansixiyaa cod aqlabiyad leh. Xildhibaan kasta ama koox xildhibaano ah ayaa mooshinka keeni kara. Xilkaqaadista guddoomiyaha Baarlamaanka uma baahna cod saddex meelood laba (2/3) sida madaxweynaha ama xeerarka kale, balse waxa keliya ee loo baahan yahay waa aqlabiyad dhameystiran oo fudud *(simple majority)*.

## Qodobka 93aad: Kulammada Wadajirka Labada Gole

Cinwaanka Qodobka 93aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 57aad, cinwaankiisuna ahaa "Xilka Xeerdejinta ay Wadaagaan Labada Gole", waxaa laga dhigay "Kulammada Wadajirka ah ee Labada Gole".

- **Faqradda 1aad:** Faqraddan oo ahayn xarafka (a) ee qodobka 57aad asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyay dibu-siiqayn, waxayna xeerinaysaa in golayaasha Baarlamaanka yeelanayaan kulammo wadajir ah markii loo baahdo si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in kulammada wadajirka ah ee labada gole ee Baarlamaanka uu shirguddoominayo guddoomiyaha Golaha Shacabka, haddii uu maqanyahayna guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare. Faqraddan

[154] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 58aad iyo 59aad.
[155] Qodobka 53 ee Dastuurka Pakistan 1973
[156] Qodobka 60aad ee Dastuurka Pakistan 1973

waxay kale oo xeerinaysaa cidda shir-guddoominaysa kulammada wadajirka ah markii labada guddoomiye wada maqanyihiin.

## Natiijada Latashiyada:




- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa guntanka kulammada wadajirka ah ee labada gole.

- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in guddoomiyaha kulanka wadajirka ah ee labada gole uuna coddaynayn, marka laga reebo haddii codadku barbardhac noqdaan. Xaaladdaas, dhanka codka guddoomiyuhu aado ayay aqlabiyaddu raacaysaa.

- **Faqradda 5aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa arrimaha kulammada wadajirka ah ee labada gole loo qabanayo. Faqraddan waxaa ku jira nuxur kamid ah faqradda 1aad, xarafka (c) ee Qodobka 57aad ee asalka Dastuurka**.**

- **Faqradda 6aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in Madaxweynuhu uu guddoonka labada gole ka codsan karo fadhi wadajir ah.

- **Faqradda 7aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in xeer hoosaad wadajir ah ee labada gole lagu nidaaminayo habraaca kulammada wadajirka ah.

**Cilmibaaris: Kulammada Wadajirka Labada Gole**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[157] wuxuu xeerinayaa kulammada wadajirka ah ee labada aqal ee Baarlamaanka *(Joint Sessions of Congress),* waxaana si gaar ah loogu qabtaa arrimo khaas ah.

- Guddoomiyaha aqalka wakiillada *(Speaker of the House)* ayaa shirguddoomiyaha rasmiga ah ee fadhiyada wadajirka ah.
- Madaxweynaha wuxuu yeelan karaa fursad uu Baarlamaanka wadajirka ah la hadlo sanadkiiba hal mar *(State of the Union Address).*
- Kulammada wadajirka ah waxaa badanaa la qabtaa marka coddayn loogu baahdo waxka-beddelka mabaadi'da aasaasiga ah ama marka ay jiraan arrimo muhiim ah oo labada gole wada khuseeya.
- Codbixinta kulammada wadajirka ah waxay u dhacdaa iyadoo la raacayo nidaamka labada aqal, waxaana dhif ah in guddoomiyuhu coddeeyo.

Nidaamka Maraykanka wuxuu si gaar ah u xaddidayaa kulammada wadajirka ah, wuxuuna dejinayaa in madaxweynaha iyo hay'adaha kale ee dawladda ay codsan karaan shirar wadajir ah oo baarlamaanku iskugu yimaaddo.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[158] wuxuu xeerinayaa kulammada wadajirka ah ee labada aqal:

- Aqalka Hoose (*Bundestag*) iyo Aqalka Sare *(Bundesrat)* waxay isugu yimaaddaan shirar wadajir ah marka la xallinayo khilaafaadka ka dhasha sharciyada federaalka.
- Guddoomiyaha *Bundestag* ayaa shirguddoominaya kulammada wadajirka ah.
- Codbixinta fadhiyada wadajirka ah waxaa lagu go'aaminayaa aqlabiyadda, waxaana mararka qaar loo baahan karaa saddex meelood labo (2/3) haddii ay tahay arrin sharcidajineed oo waawayn.
- Marka ay timaado xaalado degdeg ah, madaxweynaha Jarmalka wuxuu codsan karaa kulan wadajir ah, si baarlamaanku u yeesho go'aan midaysan.

Jarmalka, kulammada wadajirka ah waa kuwo si gaar ah loogu xalliyo arrimaha khilaafaadka u dhexeeya labada gole, waxaana loo dejiyey hannaan qeexan.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[159] wuxuu xeerinayaa kulammada wadajirka ah ee Baarlamaanka:

- Kulanka wadajirka ah waxaa shirguddoominaya guddoomiyaha aqalka hoose *(Lok Sabha),* haddii uu maqnaado, guddoomiyaha Aqalka Sare *(Rajya Sabha)* ayaa la wareegaya.

[157] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 3aad iyo 5aad iyo Qodobka 2aad Qaybka 3aad.
[158] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 77aad iyo 83aad.
[159] Dastuurka Hindiya, Qodobka 108aad.

- Kulammada wadajirka ah waxaa loogu talagalay in lagu xalliyo khilaafaadka sharcidajineed ee labada gole u dhaxeeya, gaar ahaan marka la ansixinayo sharciyo ay kala aragti duwan yihiin.
- Marka codadka xildhibaanadu ay noqdaan barbardhac, guddoomiyaha shirka wuxuu leeyahay cod, taasoo xaqiijinaysa in kulanka uu yeesho go'aan rasmi ah.
- Madaxweynuhu wuxuu codsan karaa kulan wadajir ah si baarlamaanku uga doodo xaalado qaran oo muhiim ah.

Hindiya waxay leedahay nidaam wadajir ah oo si gaar ah loogu dabaqo marka sharciyada federaalka khilaaf yimaaddo, si Baarlamaanku u helo go'aan midaysan.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[160] wuxuu xeerinayaa kulammada wadajirka ah ee Baarlamaanka:

- Labada gole ee Baarlamaanka *(National Council & Council of States)* waxay yeelan karaan fadhiyo wadajir ah si ay uga wada hadlaan arrimaha qaran.
- Guddoomiyaha golaha qaranka ayaa shirguddoomiya kulammada wadajirka ah.
- Codbixinta fadhiyada wadajirka ah waxaa la go'aaminayaa iyadoo la isku geeyo codadka labada gole, waxaana la raacayaa nidaamka aqlabiyadda.
- Madaxweynuhu wuxuu codsan karaa kulan wadajir ah haddii ay jiraan xaalado degdeg ah, sida arrimaha amniga qaranka ama wax-kabeddelka sharciga federaalka.

Switzerland waxay si gaar ah u nidaamisay kulammada wadajirka ah ee Baarlamaanka, iyada oo xaqiijisay in guddoomiyaha golaha qaranka uu hoggaamiyo fadhiyadaas.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[161] wuxuu xeerinayaa:

- Guddoomiyaha golaha wakiillada ayaa shirguddoominaya kulammada wadajirka ah.
- Labada gole ee Baarlamaanka waxay isugu imaan karaan fadhiyo wadajir ah marka ay jirto xaalad sharcidajineed oo caqabado keentay, si loo go'aamiyo habka loo xallinayo.
- Codbixinta waxaa lagu xallinayaa aqlabiyadda, waxaana dhif ah in guddoomiyuhu cod afgariye ku yeesho.

Itoobiya waxay u isticmaashaa kulammada wadajirka ah si ay Baarlamaanka uga hesho go'aan midaysan arrimaha sharciyada.

[160] Dastuurka Switzerland, Qodobka 157aad.
[161] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 55aad iyo 57aad.

## Qodobka 94aad: Guddiyada Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 94aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo ahaa Qodobka 62aad asalka Dastuurka.

- **Faqradda 1aad:** waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub waxayna xeerinaysaa dhismaha guddiyada labada Aqal iyo guddiya joogtada ah.

- **Faqradda 3aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin. "Xeer-nidaamiye" waxaa lagu beddelay "xeer-hoosaad", sidoo kale "xil-fulintooda" waxaa lagu beddelay "xilgudashadoodda". Xeer hoosaadka wadajirka ah waxaa tilmaamaya Qodobka 94aad, Faqradda 7aad.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay shaqada Baarlamaanka, gaar ahaan marka la eego xeerdejinta iyo xallinta khilaafaadka sharcidajineed, maaddaama guddiyada wadaagga ahi ay doorwayn ka ciyaaraan isku xiridda Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare.

### Cilmibaaris: Guddiyada Baarlamaanka

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[162] wuxuu xeerinayaa guddiyada wadaagga ah ee labada gole ee Baarlamaanka *(Joint Committees of Congress),* kuwaas oo muhiim u ah isku xirka golaha wakiillada iyo s*enate*-ka.

- Guddiyada wadaagga ah waxay qabtaan howlaha baaritaanada sharcidajinta, waxayna gacan ka geystaan isku xirka labada aqal.
- *Joint Committees* waxay leeyihiin xubno laga soo kala xulo labada aqal, waxaana hoggaanka guddiga ay ku tiirsan tahay aqlabiyadda xisbiga talada haya.
- Guddiyadu kama qaybgalaan ansixinta sharciyada, balse waxay u adeegaan sidii hay'ad isku xirta labada gole.
- Haddii ay jirto xaalad muran sharci ah, waxaa la magacaabaa "*Conference Committee*" si ay xeer-hoosaad sharci ah uga gaaraan khilaafka labada aqal.

Maraykanka, guddiyada wadaagga ah waxay muhiim u yihiin isku xirka golaha wakiillada iyo senate-ka, waxayna inta badan ka shaqeeyaan sidii labada aqal u yeelan lahaayeen mowqif midaysan oo sharcidajineed.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[163] wuxuu xeerinayaa guddiyada wadaagga ah ee Bundestag (Aqalka Hoose) iyo Bundesrat (Aqalka Sare).

- Bundestag iyo Bundesrat waxay si wadajir ah u magacaabi karaan Guddiyada Wadaagga ah, si ay u xalliyaan murannada sharciyada federaalka.

---

[162] Dastuurka Maraykanka, (Joint Committees of Congress - Article I, Sections 2 & 3).
[163] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 77aad iyo 78aad.

- Xeer-hoosaad gaar ah ayaa nidaaminaya guddiyada wadaagga ah, waxaana laga filayaa in ay noqdaan kuwo ka madaxbannaan saameynta siyaasadeed ee xisbiyada.
- Marka sharci gaar ah uu u baahdo wadaxaajood labada aqal, waxaa la sameeyaa Guddi Wadajir ah si looga shaqeeyo isku raacid sharciyeed.
- Guddoomiye gaar ah looma magacaabo Guddiyada Wadaagga ah, balse waxaa hoggaaminaya xubin sare oo labada aqal laga soo magacaabay.

Jarmalka, guddiyada wadaagga ah waa kuwo si sharci ah loo dejiyey si ay Baarlamaanka uga caawiyaan xallinta khilaafaadka sharcidajineed ee labada aqal.

⇒ ***Hindiya*** Dastuurka[164] wuxuu xeerinayaa:

- Baarlamaanka Hindiya wuxuu leeyahay guddiyo wadajir ah *(Joint Parliamentary Committees)* oo ka shaqeeya howlaha sharcidejinta iyo xallinta khilaafaadka sharciyada.
- Guddiyada wadaagga ah waxaa magacaabaya guddoomiyaha *Lok Sabha* iyo guddoomiyaha *Rajya Sabha*, waxaana xeerhoosaad gaar ah loogu sameeyaa shaqadooda.
- Guddiyada wadaagga ah waxaa loo isticmaalaa xallinta murannada sharci ee labada aqal, baaritaanka musuqmaasuqa, iyo dejinta mabaadi'da siyaasadeed.
- Haddii ay jirto sharci u baahan in labada gole ay isku raacaan, waxaa la sameeyaa Guddiga Dhexdhexaadinta (Ad Hoc Joint Committee).

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xoog badan, waxaana guddiyada wadaagga ah loo adeegsanayaa sidii baarlamaanku u heli lahaa mowqif midaysan oo sharcidajineed.

⇒ ***Switzerland*** Dastuurka[165] wuxuu xeerinayaa:

- Guddiyada wadaagga ah ee Baarlamaanka *(Federal Assembly)* waxay qabtaan hawlo sharcidajin, baaritaan iyo l-talin siyaasadeed.
- Guddiyada waxay leeyihiin awood ay ku xalliyaan murannada sharci ee u dhexeeya labada gole.
- Xeerhoosaad gaar ah ayaa nidaaminaya shaqada guddiyada wadaagga ah, waxaana hoggaaminaya xubno labada gole ka mid ah.
- Haddii sharci gaar ah uu u baahan yahay wadaxaajood dheeraad ah, waxaa la sameeyaa guddi Wadajir ah oo ka shaqeeya isku raacidda sharciyada.

Switzerland waxay dejisay nidaam sharciyeed oo sugan, kaas oo guddiyada wadaagga ah ka dhigay hay'ado sharciyeysan oo muhiim u ah shaqada Baarlamaanka.

[164] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 105aad iyo 118aad.
[165] Dastuurka Switzerland, Qodobka 157aad.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[166] wuxuu xeerinayaa:

- Guddiyada wadaagga ah ee Baarlamaanka waxaa sameeya labada gole marka sharci federaal ah uu u baahan yahay in si midaysan loo xalliyo.
- Xeer hoosaad gaar ah ayaa nidaaminaya shaqada guddiyada wadaagga ah, waxaana hoggaaminaya xubno labada gole ka tirsan.
- Guddiyada wadaagga ah waxay u shaqeeyaan sidii hay'ad sharciyeysan oo u xilsaaran wadaxaajoodka sharciyada federaalka.

Itoobiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo si weyn ugu tiirsan guddiyada wadaagga ah, si loo hubiyo in sharciyada federaalka si hufan loo dejiyo.

## Qodobka 95aad: Guddiga Adeegga Baarlamaanka

Qodobka 95aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa mid cusub oo laga soo raray Qodobka 111D ee cutubka 10aad ee asalka Dastuurka. Cinwaanka qodobka waxba lagama beddelin.

- **Farqadda 1aad:** waxaa lagu sameeyay dib u qorid iyo siiqayn, waxayna xeerinaysaa in la dhisayo Guddiga Adeegga Baarlamaanka oo muddda uu jirayo ay la socoto muddada xilhaynta Baarlamaanka federaalka.

- **Faqradda 2aad:** waxay xeerinaysaa tirada xubnaha Guddiga Adeegga Baarlamaanka Federaalka iyo meelaha ay ka kala imaanayaan. Xubnaha faqraddan soojeedinayso waa shan (5) xubnood halka ay asalka Dastuurka ka ahayd sagaal (9) xubnood.

- **Faqradda 3aad:** waxay xeerinaysaa luminta xubinnimada Guddiga Adeegga Baarlamaanka iyo sababaha lahu weyn karo.

- **Faqradda 4aad:** waxay xeerinaysa mas'uuliyadda Guddiga Adeegga Baarlamaanka nuxurka waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay siiqatoosin iyo dib u qorid. Waxaa kale oo lagu soo kordhiyay xarfaha (b) oo tilmaamaysa diyaarinta kulammada wadajirka ah ee labada gole iyo xarafka (c) oo sheegaya la socodka iyo maaraynta kharashaadka ku baxa adeegyada Baarlamaanka.

- **Faqradda 5aad:** waa faqrad cusub oo tilmaamaysaa in xoghayaha guddiga uu noqonayo xoghayaha guud ee Golaha Aqalka Sare, halka uu kuxigeen u noqonayo xoghayaha guud ee Golaha Shacabka.

- **Faqradda 6aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysaa in Baarlamaanka federaalka Soomaaliya yeelanayo sanduuq miisaaniyadeed oo u gaar ah.

Qodobkani waa mid cusub oo laga soo raray Qodobka 111D ee cutubka 10aad ee asalka Dastuurka. Wuxuu xeerinayaa guddiga adeegga Baarlamaanka, oo ah hay'ad u xilsaaran maamulka iyo maaraynta arrimaha adeegyada Baarlamaanka, gaar ahaan dhinacyada maaliyadeed, shaqaalaha, iyo maaraynta kulammada Baarlamaanka.

[166] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 55aad iyo 59aad.

**Cilmibaaris: Guddiga Adeegga Baarlamaanka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[167] wuxuu xeerinayaa guddiyada maamulka ee aqalka wakiillada iyo senate-ka *(House Administration Committee & Senate Rules Committee),* kuwaas oo ka shaqeeya maaraynta adeegyada Baarlamaanka:

- Guddiga maamulka aqalka wakiillada *(House Administration Committee)* wuxuu mas'uul ka yahay maamulka miisaaniyadda, dhismaha, adeegyada shaqaalaha, iyo amniga aqalka wakiillada.
- *Senate Rules Committee* wuxuu u xilsaaran yahay maamulka guud ee *Senate*-ka, wuxuuna hagaa nidaamka sharcidejinta iyo maaraynta khayraadka aaarlamaanka.
- Labada gole waxay leeyihiin sanduuqyo maaliyadeed oo u gaar ah, mana jiraan hay'ado fulineed oo si toos ah u maamula miisaaniyadda Baarlamaanka.
- Xoghayeyaasha guud ee labada gole *(Clerks of the House & Senate Secretary)* waa kuwa maamula howlahaan, laakiin ma laha awood sharciyeed oo toos ah.

Maraykanka, guddiyada maamulka ee Baarlamaanka waxay si toos ah u maamulaan arrimaha dhaqaalaha, shaqaalaha, iyo maaraynta xarumaha Baarlamaanka, iyadoo baarlamaanku leeyahay madaxbannaani buuxda.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[168] wuxuu xeerinayaa hay'ad gaar ah oo loo yaqaan guddiga maamulka *Bundestag (Bundestagsverwaltung),* oo ka shaqeeya arrimaha maamulka Baarlamaanka:

- Guddigan wuxuu masuul ka yahay xeerhoosaadka shaqada, miisaaniyadda, iyo maamulka shaqaalaha Baarlamaanka.
- Guddoomiyaha Baarlamaanka *(Bundestag President)* waa mas'uulka ugu sareeya ee maareeya miisaaniyadda Baarlamaanka, wuxuuna la shaqeeyaa guddigan.
- Xildhibannada Baarlamaanka Jarmalka waxay helaan xasaanad gaar ah oo la xiriirta arrimaha maaliyadeed iyo adeegyada ay u baahan yihiin si ay shaqadooda u gutaan.
- Miisaaniyadda Baarlamaanka waxaa go'aamiya Baarlamaanka laftiisa, waana madaxbannaan oo laguma sameeyo faragelin siyaasadeed.

Jarmalka, guddiga maamulka Baarlamaanka wuxuu leeyahay awood buuxda oo uu kaga madaxbannaan yahay xukuumadda, wuxuuna dejinayaa xeerhoosaad gaar ah oo nidaamiya maaraynta Baarlamaanka.

[167] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybihiisa 5aad iyo 6aad.
[168] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 40aad & 48aad.

⇒ ***Hindiya*** Dastuurka[169] wuxuu xeerinayaa:

- Baarlamaanka wuxuu leeyahay Guddiga Adeegga Baarlamaanka oo u xilsaaran maaraynta miisaaniyadda, shaqaalaha, iyo howlaha xeerhoosaadka labada gole.
- Guddigan wuxuu u shaqeeyaa sidii hay'ad gaar ah oo hoos timaada Baarlamaanka, waana mid aan la kala diri karin inta baarlamaanku jiro.
- Xoghayaha Guud ee *(Lok Sabha and Rajya Sabha)* waa mas'uulka maamulka guud ee Baarlamaanka, wuxuuna la shaqeeyaa guddigan si loo sugo shaqada sharcidejinta.
- Miisaaniyadda Baarlamaanka waa mid madaxbannaan, waxayna baarlamaanku go'aansadaan kharashaadka lagu bixinayo.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo u madaxbannaan sidii loo maareyn lahaa miisaaniyadda iyo adeegyada Baarlamaanka, iyada oo xukuumadda aan awood u lahayn in ay si toos ah u farageliso.

⇒ ***Switzerland*** Dastuurka[170] wuxuu xeerinayaa:

- Labada gole ee Baarlamaanka waxay leeyihiin hay'ad maamul oo u gaar ah oo loo yaqaan "*Federal Assembly Administration*".
- Guddiga maamulka Baarlamaanka *(Parliamentary Services Committee)* wuxuu xilsaaran yahay maaraynta shaqaalaha, dhaqaalaha, iyo howlaha Baarlamaanka.
- Xoghayaha guud ee Baarlamaanka *(Secretary General of the Federal Assembly)* wuxuu maamulaa howlaha maalinlaha ah ee Baarlamaanka.
- Miisaaniyadda Baarlamaanka waa mid madaxbannaan, waxaana lagu maamulaa xeerhoosaad gaar ah.

Switzerland waxay dejisay nidaam sharciyeed oo si gaar ah u xakameynaya maamulka Baarlamaanka, iyadoo la ilaalinayo madaxbannaanidiisa.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[171] wuxuu xeerinayaa:

- Guddiga Adeegga Baarlamaanka wuxuu u xilsaaran yahay maamulka shaqaalaha, miisaaniyadda, iyo xafiisyada Baarlamaanka.
- Xoghayaha guud ee Baarlamaanka wuxuu la shaqeeyaa guddigan si loo hubiyo in shaqooyinka Baarlamaanka si sax ah u socdaan.
- Miisaaniyadda Baarlamaanka waxaa dejinaya xildhibannada, mana jirto faragelin xukuumadeed oo toos ah.

Itoobiya waxay u dejisay Guddiga Adeegga Baarlamaanka inuu noqdo hay'ad si buuxda uga madaxbannaan xukuumadda.

[169] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 98aad iyo 99aad.
[170] Dastuurka Switzerland, Qodobka 155aad.
[171] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 57aad iyo 60aad.

## Madaxa Saddexaad: Awoodaha Labada Gole Baarlamaanka Federaalka.

Cinwaanka Madaxa Saddexaad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga dhigay "Awoodaha Labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka". Asalka Dastuurka waxa uu ahaa "Madaxa Labaad: Golaha Shacabka Baarlamaanka Federaalka".

## Qodobka 96aad: Awoodaha u Gaarka ah Golaha Shacabka

Cinwaanka Qodobka 96aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 63aad. Ereyga "Xeerdejinta" waxaa lagu beddelay ereyada "u gaarka ah".

- **Faqradda 1aad** nuxurkeeda waxba laga beddelin, balse waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn iyo hagaajin waxayna xeerinaysaa awoodaha gaarka ah oo Golaha Shacabka:
    - ***Xarafka (a)*** wuxuu tilmaamayaa Kalsooni-siinta Ra'iisul Wasaaraha, Golaha Wasiirrada iyo Baarnaamijaka Xukuumadda ay tahay awood uu gaar u leeyahay Golaha Shacabka.
    - ***Xarafta (b)*** wuxuu tilmaamayaa xilkaqaadista Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada.
    - ***Xarafka (c)*** wuxuu tilmaamayaa awoodda Golaha Shacabka ee doorashada guddoomiyaha iyo ku-xigeennadiisa.
    - ***Xarafka (ð)*** wuxuu tilmaamayaa ansixinta Guddiga Ladagaalanka Musuqmaasuqa uu ansixinayo Golaha Shacabka.
    - ***Xarafka (e)*** wuxuu tilmaamayaa ansixinta magacaabista Guddiga Madaxabannaan ee Shaqaalaha Rayidka ah.
    - ***Xarafka (f)*** waxa uu tilmaamayaa in Golaha Shacabku gaar u leeyahay awoodda eedaynta Madaxweynaha.
    - ***Xarafka (g)*** waxa uu tilmaamayaa in awoodaha gaarka ah ee Golaha Shacabka ay ka mid tahay hawl kasta oo Dastuurka ama xeerarka kale ee dalku u xil saaraan.

## Natiijada Latashiyada




Qodobkan wuxuu xeerinayaa awoodaha gaarka ah ee Golaha Shacabka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 63aad ee Dastuurka, oo cinwaankiisu ahaa "Xeerdejinta Golaha Shacabka". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu si cad u qeexayaa in awoodaha Golaha Shacabka aysan keliya ahayn xeerdejineed, balse ay leeyihiin awoodo kale oo waawayn sida, ansixinta magacaabidda, xilkaqaadista iyo la xisaabtanka xukuumadda.

**Cilmibaaris: Awoodaha Golaha Shacabka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[172], wuxuu si cad u qeexayaa awoodaha *House of Representatives,* kuwaas oo ah:

- ***La xisaabtanka xukuumadda:*** Golaha wakiillada wuxuu leeyahay awood uu ku kormeero xukuumadda, wuxuuna samayn karaa baaritaanno sharcidajin ah.
- Xilkaqaadista madaxweynaha *(Impeachment), g*olaha wakiillada ayaa awood gaar ah u leh inuu soojeediyo eedaynta madaxweynaha, taasoo marka dambe *senate*-ka go'aan ka gaaro.
- ***Ansixinta biilasha dhaqaale iyo miisaaniyadda dawladda:*** Sharciyada maaliyadeed waxaa si gaar ah u ansixinaya golaha wakiillada, ka hor inta aysan *senate*-ka marin.
- ***Doorashada Madaxweynaha haddii ay dhacdo xaalad aan cadi ahayn:*** Haddii aan la helin musharrax madaxweynaha oo helay aqlabiyadda codadka *(Electoral College-ka),* golaha wakiillada ayaa dooranaya madaxweynaha.

Maraykanka, golaha wakiillada wuxuu leeyahay awood gaar ah oo la xiriirta la xisaabtanka xukuumadda, xilkaqaadista madaxweynaha, iyo ansixinta arrimaha dhaqaale.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka Jarmalka[173], wuxuu xeerinayaa awoodaha Aqalka Hoose *(Bundesta)*:

- ***La xisaabtanka xukuumadda iyo baaritaannada sharcidajinta:*** *Bundestag* wuxuu leeyahay awood gaar ah oo uu ku kormeero shaqada xukuumadda, wuxuuna samayn karaa guddiyo baaritaan ah.
- ***Xilkaqaadista ra'iisulwasaaraha (Chancellor):*** *Bundestag* wuxuu leeyahay awood uu ku ridi karo ra'iisulwasaaraha, iyada oo loo baahan yahay in baddelkiisa la doorto marka xilka laga xayuubiyo.
- ***Ansixinta miisaaniyadda qaranka:*** *Bundestag* ayaa leh awoodda kama dambaysta ah ee ansixinta miisaaniyadda dalka.
- ***Doorashada Guddoomiyaha Bundestag:*** Xildhibannada *Bundestag* ayaa iska dhex dooranaya guddoomiyaha iyo kuxigeennadiisa.

Jarmalka, aqalka hoose wuxuu leeyahay awooda sare ee la xisaabtanka xukuumadda iyo xilkaqaadista ra'iisulwasaaraha, taasoo u oggolaanaysa inay xukuumadda si adag ula xisaabtamaan.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[174], wuxuu xeerinayaa awoodaha aqalka hoose *(Lok Sabha):*

[172] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 2aad iyo 7aad.
[173] Dastuurka Jarmalka, Qodobbada 38aad iyo 67aad,
[174] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 75aad, 100aad iyo 110aad.

- ***La xisaabtanka xukuumadda:*** *Lok Sabha* wuxuu leeyahay awood uu ku baaro xukuumadda, isla markaana su'aalo weydiiyo xubnaha Golaha Wasiirrada.
- ***Xilkaqaadista ra'iisulwasaaraha iyo wolaha wasiirrada:*** *Lok Sabha* ayaa leh awoodda rasmiga ah ee ridaya xukuumadda haddii ay lumiso kalsoonida Baarlamaanka.
- ***Ansixinta miisaaniyadda qaranka iyo xeerarka dhaqaale:*** Sharciyada maaliyadeed waxay si gaar ah ugu horreeyaan *Lok Sabha.*
- ***Eedaynta Madaxweynaha*** *(Impeachment Motion): Lok Sabha* wuxuu leeyahay awood uu ku soojeediyo mooshin xilkaqaadis ah oo ka dhan ah madaxweynaha.

Hindiya waxay leedahay nidaam awood siiya aqalka hoose, gaar ahaan dhanka la xisaabtanka xukuumadda, ansixinta sharciyada dhaqaale, iyo xilkaqaadista xukuumadda.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[175], wuxuu xeerinayaa awoodaha golaha qaranka:

- ***Xilkaqaadista xubnaha xukuumadda:*** Golaha qaranka wuxuu leeyahay awoodda xilkaqaadista xubnaha sare ee xukuumadda haddii ay ku kacaan falal sharcidarro ah.
- ***La xisaabtanka dawladda iyo ansixinta miisaaniyadda:*** Golaha qaranka wuxuu leeyahay awood sharciyeed oo xakameynaya kharashaadka qaranka.
- ***Xeerarka siyaasadda federaalka:*** Golaha qaranka wuxuu leeyahay awood go'aan ka gaarista sharciyada federaalka ee muhiimka ah.

Switzerland waxay leedahay nidaam baarlamaan oo si gaar ah u xakameeya xukuumadda, isagoo leh awood sharciyeed oo xooggan.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[176], wuxuu xeerinayaa awoodaha golaha wakiillada:

- ***Xilkaqaadista Ra'iisul Wasaaraha:*** Golaha wakiillada wuxuu leeyahay awooda rasmiga ah ee ridaya ra'iisulwasaaraha haddii uu lumiyo kalsoonida Baarlamaanka.
- ***Ansixinta miisaaniyadda iyo xeerarka maaliyadeed:*** Golaha wakiillada wuxuu xakameeyaa dhaqaalaha dawladda.
- ***La xisaabtanka xukuumadda:*** Golaha wakiillada wuxuu awood u leeyahay inuu xukuumadda su'aalo ka weydiiyo waxqabadkeeda.

Itoobiya waxay leedahay nidaam awood siiya golaha wakiillada, gaar ahaan dhanka la xisaabtanka xukuumadda iyo go'aanka sharciyada dhaqaale.

175 Dastuurka Switzerland, Qodobbada 148aad iyo 157aad.
176 Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 55aad iyo 60aad.

Qodobka 64aad ee asalka Dastuurka waxaa loo raray Qodobka 82aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 65aad ee asalka Datuurka* waxaa loo raray Qodobka 91aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 66aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 83aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 67aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 68aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 88aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 69aad ee aslka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 96aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 70aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 86aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

## Qodobka 97aad: Awoodaha u Gaarka ah Golaha Aqalka Sare

Cinwaanka Qodobka 97aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga dhigay "Awoodaha Golaha Aqalka Sare u Gaarka ah". Asalka Dastuurka waxa uu ahaa Qodobka 71aad "Aqalka Saree e Baarlamaanka".

**Faqradda 1aad** waxay xeerinaysaa in Golaha Aqalka Sare uu matalo Dawlad Goboleedyada, waxayna taxaysaa awoodaha gaarka ah ee Golaha Aqalka Sare. Awoodahaas waxaa ka mid ah, ansixinta dhismaha Dawlad Goboleedyada; la xisaabtanka iyo korjoogtaynta Dawlad Goboleedyada; ansixinta iyo oggolaashaha faragelinta Dawlad Goboleedyada; ilaalinta midnimada federaalka iyo midnimada qaranka; khilaafka soo kala dhexgala Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada iyo Dawlad Goboleedyada dhexdooda, xil kaxayuubinta Madaxweynaha JFS; iyo fulinta xilalkii kale oo Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka u xilsaaraan.

Qodobkani waxa uu dejinayaa dhowr awood oo muhiim ah oo si gaar ah loogu xilsaaray Golaha Aqalka Sare:

a) ***Ansixinta dhismaha dawlad goboleedyada***: Golaha Aqalka Sare wuxuu leeyahay awood gaar ah oo uu ku ansixiyo dhismaha dawlad goboleedyo.

b) ***La xisaabtanka iyo korjoogtaynta dawlad goboleedyada***: Golaha Aqalka Sare wuxuu awood u leeyahay inuu kormeero hanaanka maamul ee dawlad goboleedyada si loo hubiyo in ay si sax ah u shaqeynayaan.

c) ***Ansixinta iyo oggolaanshaha faragelinta Dawlad Goboleedyada***: Haddii ay dhacdo in dawladda federaalka ay u baahato inay si toos ah u farageliso dawlad goboleedyada, Golaha Aqalka Sare ayaa leh awoodda ansixinta arrintaas.

d) ***Ilaalinta midnimada federaalka iyo midnimada qaranka***: Aqalka Sare wuxuu u xilsaaran yahay in uu hubiyo in federaalku u shaqeynayo si habsami leh oo aan wax khilaaf ah ka dhex dhalan dawlad goboleedyada iyo dawladda dhexe.

e) ***Xallinta khilaafaadka dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada***: Haddii khilaaf soo kala dhexgalo dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyada ama dawlad goboleedyadu dhexdooda ay is khilaafaan, Aqalka Sare ayaa loo arkaa inuu yahay hay'adda dhexdhexaadisa oo xalinta khilaafaadkaas loo igmaday.

***f) Xil kaxayuubinta Madaxweynaha Jambuuriyadda Federaalka.***

g) ***Ansixinta magacaabista*** Denjireyeyaasha iyo Taliyeyaasha Ciidanka.

h) ***Fulinta xilal kale oo uu Dastuurka iyo xeerarka kale u xilsaarayo***: Awoodaha Aqalka Sare waxaa lagu xoojin karaa xeerar kale oo sharciyeed.

**Cilmibaaris: Awoodaha Golaha Aqalka Sare**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[177], wuxuu si cad u qeexayaa awoodaha *senate*-ka, kuwaas oo si gaar ah uga duwan kuwa aqalka wakiillada:

- **Matalaadda gobollada** *(States Representation): Senate*-ka wuxuu matalaa gobollada (*States*), iyada oo gobolka kasta uu leeyahay laba *senatar*.
- ***Ansixinta heshiisyada caalamiga ah iyo magacaabidda saraakiisha sare:*** *Senate*-ka ayaa leh awood gaar ah oo uu ku ansixiyo heshiisyada caalamiga ah iyo magacaabidda saraakiisha sare sida garsoorayaasha maxkamadda Sare, wasiirrada, iyo safiirrada.
- ***Xallinta dacwadaha xilkaqaadista Madaxweynaha:*** Haddii golaha wakiillada uu codsado xilkaqaadista madaxweynaha (*impeachment*), *senate*-ka ayaa ah hay'adda go'aaminaysa.
- ***Xaqiijinta in gobolladu ay helaan xuquuq siman:*** *Senate*-ka wuxuu ilaalinayaa in gobolladu aysan lumin awooddooda siyaasadeed ee federaalka.

Maraykanka, *Senate*-ku wuxuu leeyahay awood gaar ah oo la xiriirta ansixinta heshiisyada, xisaabtanka xukuumadda, iyo ilaalinta xuquuqda gobollada.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[178], wuxuu xeerinayaa awoodaha Aqalka Sare (*Bundesrat*):

- ***Matalaadda Dawlad Goboleedyada*** *(Länder Representation): Bundesrat* wuxuu matalaa gobollada Jarmalka, wuxuuna si toos ah ugu metelaa hanaanka sharcidajinta.

[177] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 3aad iyo Qodobka 2aad, Qaybta 2aad.
[178] Dastuurka Jarmalka (Basic Law), Qodobka 50aad & 52aad.

- ***Ansixinta sharciyada federaalka:*** Sharciyada qaar ee la xiriira maamulka federaalka ma dhaqangeli karaan haddii uusan *Bundesrat* ansixin.
- ***Xallinta khilaafaadka dawladda federaalka iyo gobollada:*** *Bundesrat* wuxuu door muhiim ah ku leeyahay xalinta khilaafaadka federaalka iyo gobollada.
- ***La xisaabtanka dawladda federaalka:*** *Bundesrat* wuxuu awood u leeyahay in uu kormeero xukuumadda federaalka, isagoo uga wakiil ah gobollada.

Jarmalka, *Bundesrat* wuxuu si gaar ah ugu matalaa gobollada, wuxuuna hubiyaa in Dawladda Federaalka aysan faragelin ku samayn awoodaha gobollada.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[179], wuxuu xeerinayaa awoodaha Aqalka Sare (*Rajya Sabha*):

- ***Matalaadda gobollada*** *(States Representation): Rajya Sabha* wuxuu matalaa dawlad goboleedyada Hindiya, iyada oo gobol kasta uu leeyahay xildhibaano tiro go'an ah oo ku fadhiya kuraasta golaha.
- ***Ansixinta sharciyada federaalka:*** *Rajya Sabha* wuxuu door ku leeyahay ansixinta sharciyada, gaar ahaan kuwa la xiriira federaalka.
- ***Difaacida xasiloonida dawlad goboleedyada:*** *Rajya Sabha* wuxuu u adeegaa sidii hay'ad ilaalisa xuquuqda gobollada.
- ***Korjoogtaynta xukuumadda federaalka:*** *Rajya Sabha* wuxuu xaq u leeyahay in uu la xisaabtamo dawladda dhexe ee Hindiya.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo awood siiya Aqalka Sare si uu u ilaaliyo nidaamka federaalka iyo xuquuqda gobollada.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[180], wuxuu xeerinayaa awoodaha golaha *Cantons*-ka *(Council of States):*

- ***Matalaadda kantoonnada*** *(Cantonal Representation)*: Golaha *cantons*-ka wuxuu si toos ah u metelaa kantoonnada Switzerland, iyada oo mid kasta uu leeyahay laba wakiil.
- ***Xallinta khilaafaadka federaalka iyo kantoonnada:*** Golaha *cantons*-ka wuxuu qaabilsan yahay xalinta khilaafaadka siyaasadeed ee u dhexeeya federaalka iyo kantoonnada.
- ***Ansixinta sharciyada federaalka:*** Golaha *Cantons*-ka wuxuu leeyahay awood ansixineed oo la xiriirta sharciyada federaalka.

Switzerland waxay leedahay nidaam baarlamaan oo si gaar ah u xoojinaya matalaadda kantoonnada si ay xuquuqdooda u ilaaliyaan.

[179] Dastuurka Hindiya, Qodobka 80aad & 107aad.
[180] Dastuurka Switzerland, Qodobka 148aad & 156aad

*Qodobka 72aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 83aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 73aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 92aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 74aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 90aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 75aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

*Qodobka 76aad:* Go'aan- qaadashada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waa tiray.

*Qodobka 77aad:* Ka-qaybgalka Wasiirrada ee Fadhiyada Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka waa la tiray.

*Qodobka 78aad ee asalka Dastuurka* waxaa loo raray Qodobka 87aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

## Qodobka 98aad: Awoodaha Wadaagga ee Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka

- **Faqradda 1aad** waxay xeerinaysaa awoodaha wadaagga ah ee golayaasha Baarlamaanka.
    - ***Xarafka (a)*** waxa uu xeerinayaa in awoodaha wadaagga ah ay ka mid yihiin curinta, ansixinta, wax-kabeddelka xeerarka ama diidmada hindise xeer oo la horkeeno si waafaqsan habraaca xeer dejinta ee ku xusan Dastuurka.
    - ***Xarafka (b)*** wuxuu tilmaamayaa awoodda wadaagga ah ee ka qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka si waafaqsan habraaca wax-kabeddelka Dastuurka.
    - ***Xarafka (c)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta, diidmada ka bixidda heshiisyada xukuumaddu gashay ama heshiisyada caalamiga ah.
    - ***Xarafka (d)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta iyo magacaabidda Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Guddoomiyaha Maxkamadda Dastuurka, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo xubnaha kale ee Golaha Sare ee Garsoorka.
    - ***Xarafka (e)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddoomiyaha Bankiga Dhexe.
    - ***Xarafka (f)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.
    - ***Xarafka (g)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqul Insaanka.

- ***Xarafka (h)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka.

- ***Xarafka (i)*** wuxuu xeerinayaa la-xisaabtanka iyo korjoogtaynta hay'adaha Dawladda ee heer Federaal.

- ***Xarafka (j)*** wuxuu xeerinayaa ansixinta ama diidmada ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah iyo mid dagaal.

**Cilmibaaris: Awoodaha Wadaagga Labada Gole**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[181], wuxuu si cad u qeexayaa awoodaha wadaagga ah ee labada gole ee Baarlamaanka *(House of Representatives & Senate):*

- ***Curinta, ansixinta, wax-kabeddelka sharciyada:*** Labada gole waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan samaynta sharciyada, iyagoo awood u leh inay curiyaan, ansixiyaan ama diidaan sharciyada la horkeeno.
- ***Ka-qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka:*** Wax-kabeddelka Dastuurka waxaa si wadajir ah u sameeya labada gole, waxaana looga baahan yahay aqlabiyad sare si wax looga beddelo.
- ***Ansixinta iyo diidmada magacaabista Garsoorayaasha Sare:*** Golaha s*enate*-ka ayaa leh awood gaar ah oo uu ku ansixiyo ama diido magacaabidda garsoorayaasha maxkamadda sare.
- ***Ansixinta xaaladaha degdegga ah iyo dagaalka:*** Labada gole waxay wada ansixinayaan in dalka loo diyaariyo dagaal ama la geliyo xaalad degdeg ah, iyada oo awood gaar ah la siiyay *Congress*-ka in uu ansixiyo miisaaniyadda ciidanka iyo xaaladaha amniga qaranka.

Maraykanka, awoodaha wadaagga ah ee labada gole waxay xoojiyaan nidaamka is-xakamaynta Baarlamaanka iyo xukuumadda.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[182], wuxuu xeerinayaa awoodaha wadaagga ah ee aqalka hoose *(Bundestag)* iyo Aqalka Sare *(Bundesrat):*

- ***Sharcidejinta wadaagga ah:*** Labada gole waxay si wadajir ah u ansixiyaan sharciyada federaalka, iyagoo awood u leh inay ka doodaan, wax-kabeddelaan, ama diidaan sharciyada.
- ***Ka-qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka:*** Labada gole waxay si wadajir ah u ansixiyaan wax-kabeddelka Dastuurka, waxaana looga baahan yahay aqlabiyad sare saddex meelood labo si wax looga beddelo qodobbada muhiimka ah ee Dastuurka.

[181] Dastuurka Maraykanka, Article I, Section 7 & Article II, Section 2 & 3
[182] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 77aad & 79aad.

- ***Ansixinta xaaladaha degdegga ah:*** Labada gole waxay wada ansixinayaan xaalad degdeg ah haddii ay jirto khatar qaran ama xaalad dagaal.

Jarmalka, awoodaha wadaagga ah ee labada gole waxay muhiim u yihiin ilaalinta nidaamka federaalka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[183], wuxuu xeerinayaa awoodaha wadaagga ah ee Baarlamaanka:

- ***Curinta, ansixinta, wax-kabeddelka sharciyada:*** Labada gole waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan samaynta sharciyada, iyadoo sharciyada qaar ay si gaar ah u ansixiyaan *Lok Sabha ama Rajya Sabha*.
- ***Ka-qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka:*** Wax-kabeddelka Dastuurka waxaa si wadajir ah uga shaqeeya labada gole, waxaana looga baahan yahay aqlabiyad sare.
- ***Ansixinta xaaladaha degdegga ah iyo xaalada dagaal:*** Labada gole waxay wada ansixinayaan xaaladaha degdegga ah, iyadoo ay tahay in *Rajya Sabha* ansixiso tallaabooyinka degdegga ah ee dawladda.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo awoodda labada gole si siman u wadaagaya.

⇒ ***Switzerland.*** Dastuurka[184], wuxuu xeerinayaa awoodaha wadaagga ah ee Baarlamaanka:

- ***Curinta, ansixinta, wax-kabeddelka sharciyada:*** Labada gole waxay si wadajir ah uga shaqeeyaan sharcidejinta.
- ***Ka qaybgalidda wax-kabeddelka Dastuurka:*** Wax-kabeddelka Dastuurka waxaa si wadajir ah u ansixiya Baarlamaanka, waxaana looga baahan yahay codbixin dadweyne *(referendum)*.
- ***Ansixinta xaaladaha degdegga ah iyo xaaladaha dagaal:*** Baarlamaanka wuxuu wada ansixiyaa xaaladaha degdegga ah, isagoo awood gaar ah siinaya dawladda si ay u maamusho xaaladahaas.

Switzerland waxay leedahay nidaam baarlamaan oo awoodaha labada gole si siman u xakameynaya.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka (1999)[185], wuxuu xeerinayaa awoodaha wadaagga ah ee labada aqal ee Baarlamaanka federaalka *(National Assembly):*

[183] Dastuurka Hindiya, Qodobka 108aad & 368aad.
[184] Dastuurka Switzerland, Qodobka 148aad & 157aad.
[185] Dastuurka Nigeria (1999), Qodobbada 58aad iyo 59aad.

- ***Samaynta, ansixinta, iyo wax-kabeddelka sharciyada:*** Labada gole ee Baarlamaanka *(Senate & House of Representatives)* waxay si wadajir ah u ansixiyaan sharci kasta. Xeerarka cusub waxa laga bilaabaa midkood, waxaana laga ansixiyaa midka kale ka hor inta aan loo gudbin madaxweynaha.
- ***Ansixinta miisaaniyadda iyo xeerarka maaliyadeed:*** Labada Aqal ayaa si wadajir ah uga dooda kuna ansixiya miisaaniyadda dawladda, iyadoo xeerarka miisaaniyadeedka lagu billaabo *(House of Representatives)*.
- ***Ansixinta xaalado gaar ah,*** sida codka kalsoonida, ama joojinta qodob dastuuri ah, wuxuu u baahan yahay in labada Aqal si buuxda isugu raacaan go'aanka.

Nigeria waxay leedahay nidaam baarlamaan ah oo awood sharcidejin ah si siman ugu qeybiya labada Aqal, iyadoo midkoodna aanu kaligiis sharci dhaqan gelin karin.

⇒ ***Koofur Afrika,*** Dastuurka (1996)[186], wuxuu qeexayaa awoodaha sharcidejinta ee Baarlamaanka oo ka kooban: Aqalka Hoose (*National Assembly*) iyo Aqalka Sare *(NationalCouncil of Provinces):*

- ***Sharcidejinta guud:*** *(National Assembly)* wuxuu hayaa awood sharcidejin oo buuxda. Hase yeeshee, marka sharciyadu khuseeyaan arrimaha wadajirka u ah dawladda dhexe iyo gobollada *(Concurrent Functional Areas)*, waxaa lama huraan ah in ka qeyb qaato ansixinta.
- ***Wax-kabeddelka Dastuurka:*** Waxaa u baahan oggolaansho labada aqal, iyadoo mararka qaar ay u baahan tahay cod 2/3 ah ee aqalka hoose *(National Assembly)* iyo taageerada Aqalka Sare.
- ***Xaaladaha degdegga ah*** *(State of Emergency):* Labada aqal waxay si wadajir ah u ansixiyaan muddo kordhinta xaaladaha degdegga ah, iyadoo la raacayo Qodobka 37 ee Dastuurka.

Koonfur Afrika waxay leedahay nidaam iskaashi sharciyeed *(cooperative legislative process)*, halkaas oo awoodda sharcidejin ay si wadaag ah ugu baahsantahay labada gole marka laga hadlayo arrimaha gobollada iyo federaalka.

⇒ ***Pakistan,*** Dastuurka (1973)[187], wuxuu si cad u xeerinayaa awoodaha wadaagga ah ee golaha qaranka *(Majlis-e-Shura)*, oo ka kooban *(National Assembly iyo Senate):*

- ***Sharci* dejinta guud:** Xeer kasta wuxuu ka bilaaban karaa mid ka mid ah labada gole, wuxuuna u gudbaa midka kale si loo ansixiyo. Labada gole waa in ay si buuxda u wada oggolaadaan si sharci looga dhigo.

- ***Wax-kabeddelka Dastuurka:*** Waxaa lagu fulin karaa cod aqlabiyad ah oo ka timaada labada gole. Qodobka 239 wuxuu sheegayaa in wax-

[186] Dastuurka Koonfur Afrika (1996), Qodobka 44 iyo Jadwalka 4.
[187] Dastuurka Pakistan (1973), Qodobada 70aad, 71aad, iyo 239aad.

kabeddel kasta lagu sameeyo Dastuurka iyadoo laga helo cod aqlabiyad fudud *(simple majority)*, laakiin haddii uu saameynayo gobollada, waxaa loo baahan yahay oggolaansho dawlad goboleedyada.

- ***Ansixinta xaalado degdeg ah iyo sharciyada gaar ah*** *(Ordinances)*: Haddii ay jirto xaalad degdeg ah oo madaxweyne ku meel mariyo sharci *(ordinance)*, baarlamaanku wuxuu leeyahay awood uu ku ansixiyo ama diido.

Pakistan waxay leedahay nidaam baarlamaan labada gole ay si siman ugu lug leeyihiin sharcidejinta, iyadoo la ilaalinayo awood-wadaag iyo matalaadda gobollada.

## Qodobka 99aad: Korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka Federaalka

Qodobka wuxuu nidaaminayaa korjoogtaynta iyo baarintaanka Baarlamaanka Fedraalka.

- **Faqradda 1aad** waxay tilmaamaysaa in labada gole ee Baarlamaanka ay leeyihiin awood korjoogtayn iyo kormeer.

- **Faqradda 2aad**: Faqraddan waxay tilmaamaysa in mid kamid ah labada gole u yeeri karo wasiirrada, faqraddan waxay xeerinaysa habka laga rabo wasiirada inay uga qeyb galaan.

- **Faqradda 3aad** waxay nidaaminaysaa awoodaha baaritaan arrimaha la xiriira awoodaha goleyaasha iyo habdhaqanka mas'uuliyiinta dawladda.

- **Faqradda 4aad** waxay qeexaysaa ujeedooyinka baarintaaka oo ah in la helo xog ku saabsan khladaadka farasamo ee fulinta iyo hirgelinta xeerarka, iyo in helo xog ku saabsan musuqmaasuq iyo habacsannaan ee ka jira hay'adaha dawladda.

- **Faqradda 5aad** waxay tilmaamaysaa in howsha baaritaanka ay qaban karaan mid ka mid ah guddiyada labada gole ama guddi wadajir ah.

- **Faqradda 6aad** waxay xeerinaysaa awoodaha guddiga ee baaritaannada.

- **Faqradda 7aad** waxay nidaaminaysaa tallaabada laga qaadayo qofkii ama ha'yadii u hoggaansami weydo u yeeridda Baarlamaanka.

**Cilmibaaris: Awoodda Korjoogtaynta iyo Baaritaanka Baarlamaanka**

⇒ ***Kenya,*** Dastuurka wuxuu si cad u siinayaa Baarlamaanka awood sharci ah oo uu ku:

- Khasbi karo wasiirro, saraakiil dawladeed, shaqsiyaad gaar loo leeyahay, ama qof kasta oo kale inuu hortago una bixiyo marqaati.
- Heli karo dukumentiyo, heshiisyo, ama xisaabaad rasmi ah oo loo baahan yahay.
- Baaritaan sharci ah ku samayn karo qof ama hay'ad ku lug leh arrimo dadweyne ama masuuliyado dawladeed.[188]

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurku wuxuu Baarlamaanka siinayaa awood baaritaan iyo korjoogtayn. *Senate*-ka ama golaha wakiilladu waxay awood sharci ah u leeyihiin inay baaritaan ku sameeyaan hawlaha hay'ad ama masuul dawladeed oo xilkiisu yahay fulinta sharciyada dalka.[189] Sidoo kale, waxaa wasiir kasta waajib ku ah in uu hortago labada gole midkood si uu uga jawaabo su'aalo rasmi ah, haddii si sharci ah loogu yeero.[190]

⇒ ***Hindiya,*** Golaha Wasiirrada waxaa si wadajir ah korjoogtayn iyo la xisaabtan ugu leh Golaha Shacabka *(Lok Sabha),* taasoo aasaas u ah mabda'a mas'uuliyadda baarlamaanimo. Guddiyada Baarlamaanka inkastoo aan si toos ah uga muuqan Dastuurka waxay ku shaqeeyaan awood sharci ah oo ay bixiyaan xeerhoosaadyada iyo dhaqanka baarlamaaniga.[191]

⇒ ***Maraykanka***, Dastuurka waxa uu golaha wakiillada siiyay awoodda uu sharci ku dejin karo iyo inuu kormeero ama korjoogteeyo isticmaalka hantida dadweynaha.

Korjoogtayntu waxa ay ka dhalataa awoodda la micneeyay *(implied powers)*, waxaana sii xoojiyay go'aammo garsoor muhiim ah sida: *McGrain v. Daugherty (1927).*[192]

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka ama sharciga aasaasiga ah *(Grundgesetz),* waxa uu wasiirrada ku waajibinayaa inay hortagaan *Bundestag*-ga ama guddiyadiisa haddii si sharci ah loogu baahdo. Waxaa kale oo Baarlamaanka awood loo siiyay dhisidda guddiyo baarlamaan si loo hubiyo arrimo gaar ah oo khuseeya maamulka dawladda.[193]

---

[188] Dastuurka Kenya (2010), Qodobka 125aad
[189] Dastuurka Nigeria (1999), Qodobbada 88aad iyo 89aad
[190] Dastuurka Nigeria (1999), Qodobka 67aad, Faqradda 2aad.
[191] Dastuurka Hindiya, Qodobka 75aad, Faqradda 3aad
[192] Dasuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybaha 8aad iyo 9aad.
[193] Sharciga Aasaasiga ah ee Jarmalka, Qodonka 43aad iyo Qodobka 44aad.

## Qodobka 100aad: Heshiisyada Caalamiga ah

- **Faqradda 1aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysaa in Baarlamaanka federaalka uu ansixiyo ama diido heshiiyada ee ay xukuumadda federaalka gasho.

- **Faqradda 2aad:** waa faqrad cusub waxay xukuumadda federaalka faraysaa in ay Baarlamaanka federaalka ah ugu gudbiso heshiisyada caalamiga ah oo ay gasho muddo lixdan (60) maalmood gudahood ah. Sidoo kale, Baarlamaanka federaalka waa in uu ugu badnaan 120 maalmood gudahood ku ansixiyo ama diido.

- **Faqradda 2aad:** waa faqrad cusub waxay xeerinaysaa in heshiis caalami ah oo aan Baarlamaanka federaalku oggolaan uuna ka dhaqangeli karin geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobkani wuxuu qeexayaa nidaamka ansixinta heshiisyada caalamiga ah, isaga oo si cad u xusay in Baarlamaanka federaalka uu leeyahay awooda kama dambaysta ah ee ansixinta ama diidmada heshiisyada caalamiga ah ee ay xukuumaddu la gasho dawlado kale, ururo caalami ah, ama hay'ado shisheeye. Qodobkani waxa uu dejinayaa laba qodob oo muhiim ah:

a) Awoodda Baarlamaanka ee ansixinta ama diidmada heshiisyada caalamiga ah. Heshiisyada caalamiga ah ee ay xukuumaddu gasho ma dhaqangeli karaan ilaa iyo inta Baarlamaanka federaalka uu si rasmi ah u ansixinayo.

b) Waqtiga lagu gudbinayo laguna ansixinayo heshiisyada, xukuumadda federaalka waxaa la farayaa in ay Baarlamaanka u gudbiso heshiisyada caalamiga ah 60 maalmood gudahood, halka baarlamaankuna looga baahan yahay inuu go'aan ka gaaro heshiisyadaas 120 maalmood gudahood.

Qodobkani wuxuu xoojinayaa isla xisaabtanka dawladda, wuxuuna xaqiijinayaa in heshiisyada caalamiga ah lagu ansixiyo nidaam sharci ah oo daahfuran, halkii ay si gaar ah uga go'aan gaari lahayd xukuumadda oo aan wax kormeer ah la saarin.

**Cilmibaaris: Heshiisyada Caalamiga ah**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[194], wuxuu si cad u qeexayaa in *senate*-ka uu leeyahay awood gaar ah oo lagu ansixiyo heshiisyada caalamiga ah:

- Heshiisyada caalamiga ah waxaa gala madaxweynaha, laakiin ma dhaqangeli karaan ilaa ay *senate*-ku ansixiyaan.
- *Senate*-ka waa inuu ansixiyo heshiisyada caalamiga ah aqlabiyad saddex meelood labo (2/3) oo ah codbixinta xubnaha *senate*-ka.
- Madaxweynaha ma awoodo inuu si iskiis ah u saxiixo heshiis caalami ah oo ay la galaan dowlado kale ama hay'ado caalami ah iyada oo aan *senate*-ku oggolaan.

Maraykanka, heshiisyada caalamiga ah waxaa lagu ansixiyaa nidaam adag, iyadoo *senate*-ku uu leeyahay awood sare oo lagu hubinayo in heshiisyadu ay dan u yihiin qaranka.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[195], wuxuu xeerinayaa nidaamka ansixinta heshiisyada caalamiga ah:

- Madaxweynaha Jarmalka ayaa ah qofka rasmi ah ee u saxiixaya heshiisyada caalamiga ah.
- Heshiisyada caalamiga ah ee saameeya sharciyada federaalka waa in ay ansixiyaan labada gole ee Baarlamaanka *(Bundestag & Bundesrat)*.
- Haddii heshiiska uu saameynayo xuquuqda gobollada, Aqalka Sare (*Bundesrat*) waa inuu si gaar ah u ansixiyaa.
- Haddii heshiis caalami ah uusan saameynayn sharciyada gudaha, xukuumadda federaalka waxay ansixin kartaa iyada oo aan baarlamaanku ka doodin.

Jarmalka, Baarlamaanka iyo Aqalka Sare ayaa si wadajir ah uga shaqeeya ansixinta heshiisyada caalamiga ah, iyadoo lagu qiimeynayo saameynta ay ku leeyihiin sharciyada gudaha.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[196], wuxuu xeerinayaa in:

- Heshiisyada caalamiga ah waxaa saxiixa xukuumadda, laakiin Baarlamaanka ayaa leh awood uu ku sameeyo sharciyo la xiriira heshiisyadaas.
- Haddii heshiis caalami ah uu u baahan yahay in sharci gaar ah loo sameeyo, Baarlamaanka ayaa ansixinaya sharci cusub si heshiiskaas loo fuliyo.
- Madaxweynuhu wuxuu bixin karaa amar fulineed *(Executive Order)* oo lagu dhaqangelinayo heshiis caalami ah, haddii uusan saamayn ballaaran ku yeelan sharciga gudaha.

---

[194] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 2aad, Qaybta 2(2).
[195] Dastuurka Jarmalka (Basic Law), Qodobka 59aad.
[196] Dastuurka Hindiya, Qodobka 246aad iyo 253aad

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xaqiijinaya in heshiisyada caalamiga ah ay u baahan yihiin ansixinta Baarlamaanka haddii ay saamayn ku yeeshaan sharciyada gudaha.

⇒ ***Switzerland***, Dastuurka[197], wuxuu xeerinayaa:

- Heshiisyada caalamiga ah waxaa saxiixa golaha federaalka *(Federal Council)*, laakiin Baarlamaanka ayaa leh awood uu ku ansixiyo.
- Haddii heshiiska caalamiga ah uu yahay mid muhiim ah, dadweynaha Switzerland waa in ay u coddeeyaan *(Referendum)*.
- Baarlamaanka wuxuu xaq u leeyahay in uu diido ama wax-kabeddelo heshiis caalami ah haddii uu u arko in uusan dan u ahayn qaranka.

Switzerland waxay leedahay nidaam baarlamaan oo dadweynuhu door ku leeyihiin, iyada oo heshiisyada caalamiga ah ee waawayn lagu ansixiyo afti dadweyne.

⇒ ***Itoobiya***, Dastuurka[198], wuxuu xeerinayaa:

- Ra'iisulwasaaraha iyo madaxweynaha Itoobiya waxay saxiixaan heshiisyada caalamiga ah, laakiin ma dhaqangeli karaan ilaa Baarlamaanka uu ansixiyo.
- Heshiisyada caalamiga ah ee saamaynaya federaalka waa in ay ansixiyaan labada gole ee Baarlamaanka.
- Baarlamaanka wuxuu leeyahay 90 maalmood gudahood inuu ansixiyo ama diido heshiisyada caalamiga ah.

Itoobiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xaqiijinaya in heshiisyada caalamiga ah lagu ansixiyo hannaan sharciyeysan.

⇒ ***Nigeria***, Dastuurka[199], wuxuu xeerinayaa:

- Madaxweynaha ayaa saxiixa heshiisyada caalamiga ah, laakiin lama dhaqangelin karo ilaa uu Baarlamaanka federaalka *(National Assembly)* si rasmi ah u ansixiyo heshiiskaas.
- Labada aqal ee Baarlamaanka *(Senate iyo House of Representatives)* waa in ay si wadajir ah u meel mariyaan sharci si heshiiska u noqdo sharci dalka ka dhaqan gala *(domestication of treaties)*.
- Haddii aan heshiiska la ansixin, lama samayn karo tallaabo sharci ah oo lagu dhaqangelinayo dalka gudihiisa.

[197] Dastuurka Switzerland, Qodobka 184aad iyo 166aad.
[198] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 55aad & 74aad.
[199] Dastuurka Federaalka Nigeria (1999), Qodobka 12aad.

Nigeria waxay leedahay nidaam sharciyeed oo qeexaya in heshiisyada caalamiga ah ay dhaqangalayaan keliya marka uu baarlamaanku sharci u sameeyo, taasoo muujinaysa ilaalinta madaxbannaanida sharcidejinta.

⇒ ***Pakśitan,*** Dastuurka (1973)[200], wuxuu xeerinayaa:

- Madaxweynaha ama Ra'iisulwasaaraha ayaa magaca u saxiixa heshiisyada caalamiga ah, iyagoo matalaya dawladda federaalka.
- Dastuurka ma waajibinayo in Baarlamaanka *(Majlis-Al-Shura)* si gaar ah u ansixiyo heshiis kasta, balse waxaa jira caado dastuuri ah oo lagu dhaqmo oo ah in heshiisyada muhiimka ah sida kuwa difaaca, dhaqaalaha, ama xuduudaha la horgeeyo Baarlamaanka si loo helo taageero siyaasadeed ama ansixin rasmi ah haddii loo baahdo.
- Baarlamaanku *(Majlis-Al Shura)* wuxuu saamayn ku leeyahay dhaqangelinta heshiisyada, haddii heshiis u baahan yahay sharciyo cusub ama miisaaniyad dheeraad ah, waxaa khasab ah in baarlamaanku uu ansixiyo.

Ma jiro qodob gaar ah oo sheegaya waajibka ansixinta Baarlamaanka, balse waxaa dhaqan u ah in la raadiyo oggolaansho sharciyeed.

⇒ ***Koofur Afrika,*** Dastuurka (1996)[201], wuxuu xeerinayaa:

- Madaxweynaha ayaa saxiixa heshiisyada caalamiga ah, isaga oo matalaya dawladda qaranka.
- Heshiis kasta oo caalami ah ma dhaqangeli karo ilaa laga ansixiyo Baarlamaanka, gaar ahaan aqalka hoose *(National Assembly),* iyadoo Aqalka Sare laga rabo ansixin haddii heshiisku saameeyo arrimaha gobollada.
- Waxaa kale oo qasab ah in Baarlamaanka u beddelo heshiiska sharci maxalli ah *(domestic law),* haddii la rabo in lagu dhaqmo gudaha dalka.

Koonfur Afrika waxay leedahay nidaam bcdaarlamaan xooggan oo kaalin muuqata ku leh sharciyeynta heshiisyada caalamiga ah, taasoo hubinaysa la xisaabtanka dawladda.

## Madaxa Afaraad: Xeerdejinta Baarlamaanka

Madaxan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 6aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

## Qodobka 101aad: Hindise Xeereed

Cinwaanka Qodobka 101aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 78aad, "Sharcidejin" waxaa lagu beddelay "Hindise Xeer"

[200] Dastuurka Pakistan (1973), Qodobbada 90aad iyo 97aad.
[201] Dastuurka Koonfur Afrika (1996), Qodobka 231aad.

- **Faqradda 1aad:** Nuxurka Faqradda 1aad ee qodobkan waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay siiqatoosin iyo dib u habayn ayadoo la mideeyay xarfaha (b) iyo (c) si loo kulmiyo nuxurkooda. Faqraddan waxa ay xeerinaysaa waxa noqon kara Hindise xeer oo ay kamid yihiin wax-kabeddelka Dastuurka; xeer cusub ama dib-u-eegis lagu sameeyo xeer hore. Waxa la tiray ereyada "aan la xiriirin miisaaniyadda sanadlaha" oo ku jirtay xarfaha (b) iyo (c) ee asalka Dastuurka".

- **Faqradda 2aad:** waxay xeerinaysaa in hindise xeer uu ka billaaban karo mid kasta oo ka mid ah labada gole ee Baarlamaanka si waafaqsan awoodaha labada gole ee Xeerdejinta oo ku xusan Qodobbada 104aad iyo 105aad ee Dastuurka.

- **Faqradda 3aad:** Faqraddan waa la tiray nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 2aad ee isla qodobkan.

Qodobkani wuxuu qeexayaa habraaca hindise xeer qabyo ah, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 78aad ee Dastuurka, oo cinwaankiisu ahaa "sharcidejin". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu xoogga saarayaa nidaamka sharcidejinta, isagoo dejinaya hannaan sharciyeed oo qeexaya.

Waa maxay hindise xeer? Qodobkani wuxuu qeexayaa in hindise xeer uu noqon karo: Wax-kabeddelka Dastuurka; Xeer cusub oo la dejiyo; Dib-u-eegis lagu sameeyo xeer hore; Xeer aan la xiriirin miisaaniyadda sanadlaha ah; iyo Arrimaha kale ee u baahan sharci gaar ah ama korjoogtayn sharciyeed.

Hindise xeer wuxuu ka billaaban karaa mid kasta oo ka mid ah labada gole, Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare labaduba waxay soojeedin karaan hindise sharciyeed, iyadoo la raacayo awoodaha xeerdejinta ee ay leeyihiin, sida ku xusan Qodobbada 104aad iyo 105aad ee Dastuurka.

Habraaca xeerdejinta. Qodobkani wuxuu hubinayaa in sharciyada cusub lagu dejiyo hannaan sharciyeed oo waafaqsan nidaamka federaalka, iyadoo labada gole ay ka qaybqaadanayaan.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay nidaamka Baarlamaanka, wuxuuna xaqiijinayaa in sharcidejinta lagu hago hab farsamo oo sharciyeysan, halkii ay noqon lahayd mid aan nidaam lahayn.

**Cilmibaaris: Hindise Xeereed**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[202], wuxuu si cad u qeexayaa habraaca hindise sharciyeed:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka wakiillada ama *senate*-ka, hindise sharciyeed wuxuu ka billaaban karaa mid ka mid ah labada gole.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda iyo cashuuraha waa in ay ka yimaaddaan aqalka wakiillada. Tani waxay xaqiijinaysaa in sharciyada dhaqaale ee saameeya dadka ay ka yimaaddaan wakiillada tooska ah ee shacabka.
- *Senate*-ka iyo aqalka wakiillada labaduba waxay ka doodi karaan, wax-kabeddeli karaan, ama diidi karaan sharci kasta, waxaa loo baahan yahay in labaduba ansixiyaan sharciyada ka hor inta aan madaxweynaha loo gudbin.
- Madaxweynuhu wuxuu diidi karaa sharci (*veto*), laakiin baarlamaanku wuxuu dib-u-ansixin karaa haddii ay helaan aqlabiyad sare (2/3) oo labaduba aqal cod u qaadaan.

Maraykanka, nidaamka sharcidejinta wuxuu si adag u kala qeexayaa doorka labada gole iyo madaxweynaha, iyadoo si gaar ah loo xakameynayo sharciyada la xiriira dhaqaalaha.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[203], wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa soojeedin kara xukuumadda federaalka aqalka hoose, *(Bundestag)*, ama Aqalka Sare *(Bundesrat)*.
- Haddii hindise sharciyeed uu saameeyo gobollada *(Länder)*, *Bundesrat* waa in uu si gaar ah u ansixiyo.
- Sharciyada caadiga ah waxaa ansixiya *Bundestag*, iyadoo *Bundesrat* uu yeelan karo cod haddii ay saameynayaan federaalka.
- Xukuumadda federaalka waxay si gaar ah u soo gudbin kartaa hindise sharciyeed haddii ay tahay arrin muhiim u ah qaranka.

Jarmalka, nidaamka sharcidejinta wuxuu si gaar ah ugu kala saarayaa sharciyada federaalka iyo kuwa gobollada, isagoo xaqiijinaya in Aqalka Sare uu si gaar ah uga qayb qaato sharciyada federaalka.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[204], wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka hoose *(Lok Sabha)* ama Aqalka Sare *(Rajya Sabha)*.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda waa in ay ka yimaaddaan *Lok Sabha*. Tani waxay xaqiijinaysaa in sharciyada dhaqaale ee saameeya shacabka ay ka yimaaddaan aqalka hoose.

[202] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1, Qaybta 7aad.
[203] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 76aad & 77aad.
[204] Dastuurka Hindiya, Qodobka 107aad & 108aad.

- Haddii labada gole ay isku khilaafaan sharci, waxaa la qabanayaa kulan wadajir ah oo Baarlamaanka *(Joint Session)* si loo xalliyo khilaafka.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xaqiijinaya in sharciyada ay si siman uga wada qaybqaataan labada gole.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[205], wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa soojeedin kara xukuumadda federaalka, Baarlamaanka, ama dadweynaha *(referendum)*.
- Labada gole waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sharciyada cusub.
- Haddii hindise sharciyeed uu yahay mid waawayn, waxaa loo baahan yahay codbixin dadweyne (*referendum*) si loo ansixiyo.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo dadweynaha awood weyn siinaya, iyada oo sharciyada qaar loo baahan yahay in si toos ah loogu codeeyo.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[206], wuxuu xeerinayaa:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara Baarlamaanka ama xukuumadda federaalka.
- Haddii sharci uu saameeyo gobollada, baarlamaanku waa inuu kala tashado dawlad goboleedyada.
- Sharciyada dhaqaale waxaa si gaar ah looga ansixiyaa golaha wakiillada.

Itoobiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo xoogga saaraya in Baarlamaanka federaalka uu ansixiyo sharciyada, iyadoo gobollada lala tashanayo.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka[207] wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta ee Baarlamaanka federaalka:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara labada gole ee Baarlamaanka. *Senate* iyo *House of Representatives*. Hindisaha xeerku wuxuu ka billaaban karaa midkoodna, kaddibna waa in lagu ansixiyaa labada aqal si uu u noqdo sharci.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda iyo xeerarka dhaqaalaha waxaa looga baahan yahay in laga bilaabo aqalka hoose *(House of Representatives)*, iyadoo Baarlamaanka si wadajir ah u eegayo lana ansixinayo.
- Haddii madaxweynaha uu diido xeerka, Baarlamaanku wuxuu awood u leeyahay inuu dib u ansixiyo haddii labada gole ay helaan aqlabiyad laba meelood meel ah (2/3 majority), taas oo xeerka u dhigaysa mid dhaqan-galaya si toos ah.

---

[205] Dastuurka Switzerland, Qodobka 148aad & 156aad.
[206] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 55aad & 57aad.
[207] Dastuurka Nigeria, Qodobbada 58aad iyo 59aad.

Nigeria waxay leedahay nidaam baarlamaan oo labada aqal si siman uga shaqeeyaan sharcidejinta, inkastoo miisaaniyadda laga bilaabo Aqalka Hoose sida nidaamka Hindiya.

⇒ ***Pakistan,*** Dastuurka[208] wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta labada aqal ee Baarlamaanka federaalka:

- Sharciyada cusub waxaa laga billaabi karaa labada gole. *National assembly* ama senate, iyadoo midka kale laga rabo inuu ansixiyo si uu u noqdo xeer dhameystiran.
- Xeerarka la xiriira dhaqaalaha *(Money Bills)* waa in ay ka yimaaddaan aqalka hoose *(National Assembly*. *Senate*-ka looma oggola inuu curiyo ama wax-kabeddelo, balse wuxuu soojeedin karaa talo (*recommendation*) 14 maalmood gudahood.
- Haddii labada gole ay is khilaafaan, Dastuurka Pakistan ma oggola kulan wadajir ah *(Joint Session)* sida Hindiya, balse arrinta waxa loo xaliyaa iyadoo la ixtiraamayo mudnaanta golaha hoose gaar ahaan marka ay timaaddo miisaaniyadda.

Pakistan waxay leedahay nidaam baarlamaan labada gole ay si wadajir ah u shaqeeyaan, laakiin golaha hoose *(National Assembly)* wuxuu leeyahay awood gaar ah oo ku saabsan dhaqaalaha iyo miisaaniyadda.

⇒ ***Koofur Afrika,*** Dastuurka[209] wuxuu xeerinayaa nidaamka hindise xeerarka Baarlamaanka:

- Hindise sharciyeedka waxaa curin kara xildhibaan, wasiir, ama golaha wasiirrada, waxaana laga billaabi karaa aqalka hoose (*National Assembly)* ama golaha gobollada (*NCOP – Aqalka Sare*), iyadoo ay ku xiran tahay nooca sharciga.
- Xeerarka khuseeya arrimaha gobollada *(Schedule 4 subjects)* sida waxbarashada, deegaanka, iwm., waa in laga billaabaa (*NCOP)* ama la oggolaadaa si buuxda, waxayna u baahan yihiin wada shaqeyn labada gole ah.
- Xeerarka maaliyadeed iyo canshuuraha *(Money Bills)* waa in ay ka yimaaddaan *National Assembly* keliya, halka *NCOP* ay kaalin kooban ka qaadan karto.
- Haddii khilaaf yimaaddo, waxaa lagu xallinayaa guddi wadajir ah *(Mediation Committee)* oo ka kooban xubno ka socda labada gole, si loo gaaro heshiis sharciyeed.

[208] Dastuurka Pakistan, Qodobbada 70aad iyo 71aad.
[209] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 73aad, 76aad iyo 77aad.

Koonfur Afrika waxay leedahay nidaam sharcidejin aad u nidaamsan oo qeexaya saddex nooc oo sharci ah sida *(Bills 76, 77)*, iyadoo la xushmaynayo awoodda gobollada iyo waajibaadka labada aqal.

## Qodobka 102aad: Soo Bandhigidda iyo Curinta Hindise Xeereed

Cinwaanka Qodobka 102aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 80aad, "Curinta sharciyada" waxaa lagu beddelay "Soo Bandhigidda iyo Curinta Hindise xeereed".

- **Faqradda 1aad:** waxa ay xeerinaysaa cidda hindise xeereed horkeeni karta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka federaalka. Nuxurka faqraddan waxba lagama beddelin waxaana lagu sameeyay dib-u-habayn waxaana lagu kordhiyay ***Xarafka (c)*** oo tilmaamaysa in ugu yaraan toban kun (10,000) oo codbixiye ay hindise xeereed horkeeni karaan Golaha Shacabka Baarlamaanka federaalka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo nuxurka qayb kamid ah faqradda 2aad waxa uu ku jiray faqradda 1(b) ee asalka Dastuurka. Faqraddan waxa ay xeerinaysaa in xukuumadda federaalka oo keli ah soojeedin karto hindise xeer oo la xiriira miisaaniyadda sanadlaha ah.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa in hindisaha xeer oo dadweynuhu soojeediyo ayna kamid noqon karin arrimaha la xiriira canshuuraha iyo dakhliga dawladda.

- **Farqadda 4aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxay xeerinaysaa cidda hindise xeer horkeeni karta Golaha Aqalka Sare, waxaa laga soo kordhiyay xarafka (b) "ugu yaraan shan (5) senatar oo ka tirsan Golaha Aqalka Sare" nuxurkeedana waxba lagama beddelin.

- **Faqradda 5aad:** waa faqrad cusub waxayna tilmaamysaa in hindisuhu uu marayo saddex akhrin, waxayna xeerinaysaa in inta aan dooddda laga billaabin hindise xeer kasta ay ka baaraandegayaan guddiga khuseeya ee Baarlamaanka, isaga oo diyaarinaya warbixin.

- **Faqradda 6aad:** waa mid cusub oo timaamaysaa in golayaasha Baarlamaanka ay hindise xeer kasta ka doodayaan kaddibna u coddaynayaan.

Qodobkani wuxuu qeexayaa habka soo bandhigidda iyo curinta hindise sharciyeed, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 80aad ee asalka Dastuurka, oo cinwaankiisu ahaa "Curinta Sharciyada". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu xoojinayaa habraaca sharcidejinta, iyadoo la qeexay cidda sharci soojeedin karta, xeerarka la xiriira miisaaniyadda, doorka dadweynaha, iyo marxalad kasta oo hindise sharciyeed maro ka hor inta uusan sharci noqon.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay nidaamka sharcidejinta, wuxuuna xaqiijinayaa in sharciyada lagu dajiyo hannaan sugan oo sharciyeysan, isagoo si gaar ah u qeexaya cidda hindise xeereed hor keeni karta, sida loo eego iyo sida loo ansixinayo.

## Cilmibaaris: Curinta Hindise Xeereed

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[210] wuxuu si cad u qeexayaa habraaca sharcidejinta:

- Hindise sharciyeed waxaa curin kara aqalka wakiillada ama senate-ka, waxayna soojeedin karaan sharciyo, marka laga reebo sharciyada la xiriira miisaaniyadda oo laga rabo inay ka yimaaddaan aqalka wakiillada.
- Hindise sharciyeedka waxaa baaraya guddiyo gaar ah ka hor inta aan laga doodin. Tani waxay xaqiijinaysaa in sharciyada si qoto dheer loo falanqeeyo.
- Sharciyada la ansixiyo waxaa loo gudbiyaa madaxweynaha si uu u saxiixo ama u diido (*veto*). Madaxweynuhu wuxuu leeyahay awood uu ku diido sharci, balse baarlamaanku wuxuu dib ugu soo celin karaa cod aqlabiyad sare ah (2/3).
- Dadweynuhu toos uma curin karaan sharci, balse xildhibaanadu waxay soojeedin karaan sharci ay dadweynuhu codsadeen. Maraykanka ma jiro nidaam dadweyne si toos ah u keeni karo sharci Baarlamaanka hortiisa.

Maraykanka, nidaamka sharcidejinta wuxuu si adag u kala qeexayaa doorka labada gole iyo madaxweynaha, isagoo xaddidaya cidda sharci cusub la imaan karta.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[211] wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Hindise sharciyeed waxaa curin kara xukuumadda federaalka, aqalka hoose *(Bundestag)* ama Aqalka Sare (*Bundesrat*).
- Haddii hindise sharciyeed uu saameynayo dawlad goboleedyada, *Bundesrat* waa inuu si gaar ah uga doodo.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda waa in ay ka yimaaddaan xukuumadda Federaalka. Tani waxay xaqiijinaysaa in xukuumadda federaalka ay si sax ah u maamusho dhaqaalaha.
- Hindise sharciyeed waxaa marka hore baaraya guddiyada Baarlamaanka ka hor inta aan laga doodin.

Jarmalka, nidaamka sharcidejinta wuxuu si cad u qeexayaa cidda soojeedin karta sharci, isagoo dejinaya hannaan sugan oo hubinaya sharciyada la ansixinayo.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[212] wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka hoose *(Lok Sabha)* ama Aqalka Sare ama *(Rajya Sabha)*.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda waa in ay ka yimaaddaan *Lok Sabha.* Tani waxay xaqiijinaysaa in sharciyada dhaqaale ee saameeya shacabka ay ka yimaaddaan aqalka hoose.

[210] Dastuurka Maraykanka Article I, Section 7 & Article II, Section 3.
[211] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 76aad & 77aad,
[212] Dastuurka Hindiya, Qodobka 107aad & 110aad.

- Sharciyada la ansixinayo waxaa marka hore baaraya guddiyo gaar ah si loo hubiyo in sharciyada ay yihiin kuwo sax ah.

Hindiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo xaqiijinaya in sharciyada la dajiyo iyada oo la raacayo nidaam sharciyeysan.

⇒ ***Switzerland*** Dastuurka[213] wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa soojeedin kara xukuumadda federaalka, Baarlamaanka, ama dadweynaha (*referendum*).
- Sharciyada waawayn waxaa loo baahan yahay in lagu ansixiyo codbixin dadweyne (*referendum*).
- Sharciyada la ansixinayo waxaa marka hore baaraya guddiyada Baarlamaanka si loo hubiyo saxnimadooda.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo dadweynuhu door ku leeyihiin, iyada oo sharciyada qaar loo baahan yahay in si toos ah loogu codeeyo.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[214] wuxuu xeerinayaa:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara Baarlamaanka ama xukuumadda federaalka.
- Sharciyada dhaqaale waxaa si gaar ah looga ansixiyaa golaha wakiillada.
- Hindise sharciyeed waxaa marka hore baaraya guddiyada Baarlamaanka ka hor inta aan laga doodin.

Itoobiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo xakameynaya cidda sharci soojeedin karta iyo habka la raacayo.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurka[215] wuxuu xeerinayaa:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara labada gole ee Baarlamaanka *(Senate and House of Representatives)*. Xildhibaan kasta, wasiir, ama guddi rasmi ah ayaa hindise sharciyeed keeni kara.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda, canshuuraha iyo kharashaadka dawladda waxaa si gaar ah looga billaabaa aqalka hoose *(House of Representatives)*, balse waa in lagu ansixiyaa labada gole.
- Hindise sharciyeedka waxaa loo gudbiyaa guddi hoosaadyada Baarlamaanka si ay u baaraan, uga doodaan, una diyaariyaan warbixin sharaxaad leh ka hor inta aan la horgeyn golaha si loo coddeeyo.

Nigeria waxay leedahay nidaam sharcidejin oo labada aqal ay si siman uga shaqeeyaan, laakiin xeerarka dhaqaalaha wuxuu mudnaan gaar ah siyaa golaha hoose.

---

[213] Dastuurka Switzerland, Qodobka 148aad & 156aad.
[214] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 55aad & 57aad.
[215] Dastuurka Federaalka Nigeria, Qodobbada 58aad iyo 59aad.

⇒ ***Pakistan,*** Dastuurka[216] wuxuu xeerinayaa:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara labada aqal ee Baarlamaanka. *(National Assembly and Senate)*, iyadoo hindisaha sharciyeed laga billaabi karo midkoodna.
- Sharciyada dhaqaale iyo miisaaniyadeed *(Money Bills)* waa in si gaar ah looga bilaabaa (*National Assembly)*, waxaana *senate*-ka laga mamnuucay inuu curiyo ama wax-kabeddelo; wuxuu keliya ku leh talobixin (*recommendations*).
- Hindise sharciyeed kasta waxaa loo gudbiyaa guddiga Baarlamaanka *(Standing Committee)* ka hor inta aan loo horgeyn dood guud ama codbixin, taasoo xaqiijineysa in sharci kasta uu maro baaris dhab ah.

Pakistan waxay leedahay nidaam sharcidejin aad u nidaamsan, oo xeerinaya doorka gole kasta, gaar ahaan marka ay timaaddo xeerarka dhaqaalaha.

⇒ ***Koofur Afrika,*** Dastuurka[217] wuxuu xeerinayaa:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara xubin kasta oo Baarlamaanka ka tirsan, wasiir, ama golaha wasiirada, iyadoo ku xiran nooca sharciga *(public bill ama money bill)*.
- Sharciyada dhaqaalaha iyo canshuurta *(Money Bills)* waa in si gaar ah looga curiyaa Aqalka Hoose (National Assembly) iyadoo Aqalka Sare *(NCOP*) uu leeyahay saamayn xadidan.
- Hindise sharciyeed kasta waxaa loo gudbiyaa guddiyada Baarlamaanka, kuwaas oo baaraya, qabanaya dhageysiyo dadweyne, isla markaana diyaarinaya warbixin buuxda ka hor inta aan doodda Baarlamaanka lagu billaabin.

Koonfur Afrika waxay leedahay nidaam sharciyeed heer sare ah oo cadaalad ku dhisan, iyadoo sharcigu marayo habab baaraan degan oo la sugayo in dhammaan daneeyeyaasha laga talo geliyo.

## Qodobka 103aad: Xallinta Khilaafka ee Hindise Xeer

Qodobka 103aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 81aad oo cinwaankiisu ahaa "Go'aammo Siyaasadeed" waxaa laga dhigay "Xallinta Khilaafka ee Hindise Xeer" oo nuxurka qodobka ka turjumaysa.

- Faqradda 1aad: waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu daray qodobka 102aad ee doojeedinta.

- Faqradda 2aad: waa la tiray nuxurkeedama waxaa lagu daray qodobka 104aad ee Soojeedinta.

[216] Dastuurka Pakistan, Qodobbada 70aad iyo 73aad.
[217] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobbada 73aad, 75aad, 76aad iyo 77aad).

- **Faqradda 1aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxaa lagu sameeyay toosin iyo dib u habeyn, waxayna xeerinaysaa in haddii khilaaf xeer ka dhexdhasho labada gole in la dhisayo guddi wadajir ah si ay xal u gaaraan. Qaybta danbe ee faqradda 3aad waxaa laga dhigay faqrad 2aad ee hoos ku xusan.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo lagu xeeriyay nuxurka qayb kamid ah nuxurka Faqradda 3aad ee asalka Dastuurka, waxayna xeerinaysaa in dhexdhexaadinta loo marayo si waafaqsan mabda' iskaashiga si waafaqsan Dastuurka.

- Faqradda 4aad ee asalka Dastuurka waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu daray Qodobbada 104aad iyo 105aad ee Soojeedinta.

Qodobka 103aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya wuxuu xeerinayaa dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafka sharciyeed ee u dhexeeya labada gole ee Baarlamaanka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 81aad, oo cinwaankiisu ahaa "Go'aammo Siyaasadeed". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu xoogga saaraya habraaca sharciyeed ee xallinta khilaafaadka si loo hubiyo in nidaamka Baarlamaanka uu si hufan u shaqeeyo. Qodobkani waxa uu dejinayaa dhowr qodob oo muhiim ah:

a) Dhisidda guddi wadajir ah haddii khilaaf sharci ka dhex dhasho labada gole: Haddii uu khilaaf sharci ka dhex dhasho Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare, waxaa la dhisayaa guddi wadajir ah oo xal u raadinaya.

b) Dhexdhexaadinta iyo iskaashiga dawliga ah: Dhexdhexaadinta khilaafaadka waa in lagu xalliyo iyadoo la raacayo ruuxiga iskaashiga dawliga ah ee Dastuurka.

c) Nuxurka faqradaha la hagaajiyay: Faqraddan waxay dib u habayn ku samaynaysaa qaabkii hore, iyadoo nuxurka asalka Dastuurka lagu hagaajiyay si loo abuuro hanaan sharciyeed oo waafaqsan nidaamka Baarlamaanka.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay nidaamka federaalka, maaddaama uu dejinayo hab xeerinaya sida khilaafaadka sharciyeed ee labada gole loo xallinayo. Nidaamkani wuxuu hubinayaa in khilaafaadka Baarlamaanka aanay horseedin jahawareer sharciyeed, lagana gaaro xalka ku saleysan wadaxaajood iyo heshiis.

## Cilmibaaris: Xallinta Khilaafaadka Hindise Xeereed

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[218] wuxuu si cad u xeerinayaa habraaca xallinta khilaafaadka sharciyeed ee labada gole iyo hay'adaha kala duwan ee dawladda:

- Haddii golaha wakiillada iyo *senate*-ku isku khilaafaan sharci, waxaa la dhisaa "*Conference Committee*" oo ka kooban xubno labada gole laga soo xulay si ay xal uga gaaraan khilaafka sharciyeed.
- Haddii labada gole aysan heshiin karin, sharci cusub ayaa la soojeedin karaa ama waxaa loo baahan karaa in madaxweynaha arrinta kala dhexgalo.
- Maxkamadda Sare ee maraykanka *(Supreme Court)* waxay xallin kartaa khilaafaadka sharciyeed ee u dhexeeya goleyaasha dawladda, haddii ay jirto dood sharciyeed oo taagan.

Maraykanka, waxaa jira nidaam sharciyeed oo dheellitiran, iyadoo (*Conference Committee*) loo isticmaalo xallinta khilaafaadka sharcidejinta, halka maxkamadda sare ay xalliso khilaafaadka dastuuriga ah.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[219] wuxuu xeerinayaa nidaamka xallinta khilaafaadka sharciyeed ee u dhexeeya aqalka Hoose *(Bundestag)* iyo Aqalka Sare *(Bundesrat):*

- Haddii sharci laga doodo labada gole ay isku khilaafaan, waxaa la sameeyaa "Mediation Committee" oo isku keenaysa xubno labada gole ka tirsan si xal looga gaaro khilaafka sharciyeed.
- Haddii *Bundesrat* uu diido sharci uu ansixiyay *Bundestag*, waxaa la billaabayaa wadaxaajood rasmi ah oo ay hagaan guddiyo sharciyeed.
- Maxkamadda dastuuriga ah ee Jarmalka *(Federal Constitutional Court)* waxay leedahay awood xallinta khilaafaadka sharciyeed ee ka dhasha ismaandhaafka Baarlamaanka iyo xukuumadda.

Jarmalka, *(Mediation Committee)* ayaa loo adeegsadaa xallinta khilaafaadka sharcidejinta, iyadoo maxkamadda dastuuriga ah ay xaliso murannada sharci ee sare.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[220] wuxuu xeerinayaa habka xallinta khilaafaadka sharciyeed ee Baarlamaanka iyo hay'adaha dawladda:

- Haddii aqalka hoose *(Lok Sabha)* iyo Aqalka Sare *(Rajya Sabha)* ay isku khilaafaan sharci, waxaa la qabtaa kulan wadajir ah *(Joint Sitting of Parliament)* oo ay labada gole si wadajir ah uga doodaan arrinta.
- Guddoomiyaha *Lok Sabha* ayaa hoggaaminaya kulanka wadajirka ah, wuxuuna leeyahay cod go'aan ka gaaraya haddii ay barbardhac noqoto.
- Maxkamadda sare ee Hindiya *(Supreme Court of India)* waxay xallisaa khilaafaadka sharciyeed ee ka dhasha ismaandhaafka hay'adaha dawladda.

---

[218] Dastuurka Maraykanka, Article I, Section 7 & Article III, Section 2).
[219] Dastuurka Jarmalka (Basic Law), Qodobka 77aad & 93aad.
[220] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 108aad iyo 131aad.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xaqiijinaya in khilaafaadka sharciyeed lagu xalliyo kulammo wadajir ah, iyadoo maxkamadda sare ay go'aan ka gaarto murannada sharciyeed ee dastuuriga ah.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[221] wuxuu xeerinayaa habka xallinta khilaafaadka sharciyeed ee Baarlamaanka:

- Labada gole ee Baarlamaanka *(Federal Assembly)* waxay leeyihiin hanaan dhexdhexaadin rasmi ah haddii ay isku khilaafaan sharci.
- Maxkamadda Federaalka ee Switzerland *(Federal Supreme Court)* waxay leedahay awood xallinta khilaafaadka sharciyeed ee la xiriira dastuurka.
- Haddii sharci gaar ah uu u baahan yahay in la xalliyo muran, waxaa loo baahan yahay afti dadweyne (*referendum*) si loo go'aamiyo.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo u oggolaanaya Baarlamaanka inuu si toos ah uga doodo khilaafaadka sharciyeed, iyadoo maxkamadda federaalka ay xaliso murannada waawayn.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[222] wuxuu xeerinayaa:

- Haddii labada gole ee Baarlamaanka isku khilaafaan sharci, waxaa loo gudbinayaa maxkamadda sare ee federaalka si ay go'aan uga gaarto.
- Maxkamadda federaalka waxay go'aaminaysaa in sharci la isku hayo uu waafaqsan yahay dastuurka iyo xeerarka federaalka.
- Haddii muran sharciyeed uu jiro, Baarlamaanka wuxuu magacaabi karaa guddi dhexdhexaadin ah oo arrinta ka shaqeeya.

Itoobiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo awood siinaya maxkamadda federaalka si ay u xalliso murannada sharciyeed ee Baarlamaanka.

## Qodobka 104aad: Hindise xeereed Ka Billowday Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 104aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 82aad, waxaa ereyga "*sharci*" lagu beddelay "xeer", inta kale cinwaanka waxba lagama beddelin.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in hindise xeer kasta oo qabyo ah lana xiriira awoodaha gaarka ah ee dawladda federaalka iyo kuwa haraaga ah uu ka billaabanayo Golaha Shacabka.

- **Faqradda 2aad** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. Xarafka (b) ee faqraddan waxaa

[221] Dastuurka Switzerland, Qodobka 157aad & 189aad (Articles 157 iyo 189).
[222] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 55aad & 83aad (Articles 55aad iyo 83aad).

lagu daray "cidda marka hore soo curisay" oo aan asalka ku jirin. Faqradda waxay xeerinaysaa tallaabooyinka u furan marka Golaha Shacabka la horkeeno hindise xeer qabyo ah.

- **Faqradda 3aad** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka uu Golaha Aqalka Sare soo gaaro hindise xeer qabyo ah oo ka billowday Golaha Shacabka ay u furan tahay saddex tallaabo midkood. Tan koowaad, in uu hindisaha u ansixiyo sida loogu soo gudbiyay, kaddibna dib ugu celiyo Golaha Shacabka. Tan labaad, in uu wax-kabeddel sababaysan ku sameeyo, ka bacdina dib ugu celiyo Golaha Shacabka. Tan saddexaad oo ah in uu diido hindisaha xeerka uuna dib ugu diro Golaha Shacabka isaga oo raacinaya sababta diidmada.

- **Faqraddan 4aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. *"Sharci"* waxaa lagu beddelay *"Xeer"*. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in haddii Golaha Shacabka uu soo gaaro hindise xeereed oo markii hore golaha ka billowday uuna soo ansixiyay Golaha Aqalka Sare iyada oo aan wax laga beddelin, waxaa loo gudbinayaa madaxweynaha si uu u saxiixo, looguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

- **Faqradda 5aad**: oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 4aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dibuqorid iyo siiqatoosin.

Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka golaha shacbka soo gaaro hinside xeer oo golaha ka billowday oo Golaha Aqalka Sare wax ka soo beddelay in ay u furan tahay laba tallaabo midkood. Tan koowaad, in uu oggolaado wax-kabeddelka sidaasna ku ansixiyo hindisaha xeerka una diro madaxweynaha si uu u saxiixo. Tan labaadna waa in uu diido isbeddelada Golaha Aqalka Sare sameeyay isaga oo ku burinaya diidmadaas aqlabiyad saddex meelood laba tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka, ka bacdina u diro hindisaha xeerka madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

***Faqradda 5aad ee asalka Dastuurka*** waa la tiray nuxurkeeda waxaa lagu daray faqradda 5aad ee isla qodobkan.

Qwuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta marka hindise sharciyeed uu ka billowdo Golaha Shacabka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 82aad ee Dastuurka, oo cinwaankiisu ahaa "*Sharci*", balse hadda loo beddelay "*Xeer*". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu caddeynayaa sida sharciyada cusub loo curiyo, loo ansixiyo, iyo sida ay labada gole u wada shaqeeyaan marka ay ku heshiin waayaan hindise sharciyeed.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay nidaamka xeerdejinta, wuxuuna hubinayaa in sharciyada la ansixiyo iyadoo la raacayo nidaam sharciyeed oo hufan, si looga fogaado muran sharciyeed oo ka dhex dhasha labada gole.

**Cilmibaaris: Hindise Xeereed Ka Billowday Golaha Shacabka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[223] wuxuu si cad u xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka wakiillada ama *senate*-ka.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda iyo canshuuraha waa in ay ka yimaaddaan aqalka wakiillada si loo ilaaliyo in sharciyada dhaqaale ay ka yimaaddaan wakiillada shacabka.
- Marka hindise sharciyeed uu maro aqalka wakiillada, waxaa loo gudbinayaa senate-ka si ay uga doodaan, wax-kabeddelaan ama u ansixiyaan.
- Haddii *senate*-ku wax-kabeddelo sharci, aqalka wakiillada wuxuu haystaa laba doorasho:
  - In uu aqbalo wax-kabeddelka *senate*-ka, ama
  - In uu iska diido wax-kabeddelka , markaas oo guddi labada gole ah *(Conference Committee)* lagu dhisayo si ay xal uga gaaraan khilaafka sharciyeed.
- Haddii labada gole isku waafaqaan sharci, waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha si uu u saxiixo.

Maraykanka, nidaamka sharcidejinta wuxuu si adag u kala qeexayaa doorka labada gole iyo sida sharciyada loo ansixinayo.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[224] (*Basic Law*), wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara xukuumadda federaalka, aqalka hoose (*Bundestag)* ama Aqalka Sare (*Bundesrat*).
- Haddii sharci uu ka yimaaddo *Bundestag*, waxaa loo gudbinayaa *Bundesrat* si ay uga doodaan, wax-kabeddelaan ama u ansixiyaan.
- Haddii Bundesrat uu wax-kabeddelo sharci, Bundestag wuxuu haystaa laba doorasho:
  - In uu aqbalo wax-kabeddelka *Bundesrat, ama*
  - In uu iska diido wax-kabeddelka , markaas oo la dhisayo guddi dhexdhexaadin ah *(Mediation Committee)* si ay xal uga gaaraan.

Jarmalka, nidaamka sharcidejinta wuxuu dejinayaa hab rasmi ah oo xakameynaya sharciyada la ansixinayo.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[225] wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka hoose *(Lok Sabha)* ama Aqalka Sare *(Rajya Sabha).*
- Haddii *Lok Sabha* ay ansixiso sharci, waxaa loo gudbinayaa *Rajya Sabha* si ay uga doodaan, wax-kabeddelaan ama u ansixiyaan.

[223] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 7aad.
[224] Dastuurka Jarmalka (Basic Law), Qodobbada 76aad iyo 77aad.
[225] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 107aad iyo 108aad.

- Haddii labada gole isku khilaafaan sharci, waxaa la qabanayaa kulan wadajir ah oo Baarlamaanka *(Joint Session)* si loo xalliyo khilaafka.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xaqiijinaya in sharciyada la dajiyo iyada oo la raacayo nidaam sharciyeysan.

⇒ ***Switzerland***, Dastuurka Switzerland[226], wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Labada gole ee Baarlamaanka *(Federal Assembly)* waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sharciyada cusub.
- Haddii sharci gaar ah uu u baahan yahay in la xalliyo muran, waxaa loo baahan yahay afti dadweyne *(referendum)* si loo go'aamiyo.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo dadweynuhu door ku leeyihiin.

## Qodobka 105aad: Hindise Xeereed ka Billowday Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka

Cinwaanka Qodobka 105aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa ereyga "*Sharci*" lagu beddelay "*Xeer*", inta kale cinwaanka waxba lagama beddelin. Qodobkan asalka Dastuurka waxa uu ahaa Qodobka 83aad.

- **Faqradda 1aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysaa in hindise xeer kasta oo qabyo ah lana xiriira awoodaha xeerdejinta wadaagga ah uu ka billaabanayo Golaha Aqalka Sare.

- **Faqradda 2aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqatoosin. "*Sharci*" waxaa lagu beddelay "*Xeer*". Faqraddan waxay xeerinaysaa tallaabooyinka u furan Golaha Aqalka Sare marka la horkeeno hindise xeer qabyo ah oo golaha ka billowday oo kala ah in uu ansixiyo una gudbiyo Golaha Shacabka ama in uu diido kuna wargeliyo Golaha Shacabka iyo cidii curisay hindisaha xeerka. Waxaa farqaddan lagu soo kordhiyay "curiyaha hindisaha xeerka".

- **Faqradda 3aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka uu Golaha Shacabka soo gaaro hindise xeer qabyo ah oo ka billowday Golaha Aqalka Sare ay u furan tahay saddex tallaabo midkood. Tan koowaad, in uu hindisaha u ansixiyo sida loogu soo gudbiyay, kaddibna dib ugu celiyo Golaha Aqalka Sare. Tan labaad, in uu wax-kabeddel sababaysan ku sameeyo, ka bacdina dib ugu celiyo Golaha Aqalka Sare. Tan saddexaad oo ah in uu diido hindisaha xeerka uuna dib ugu diro Golaha Aqalka Sare isaga oo raacinaya sababta diidmada.

[226] Dastuurka Switzerland, Qodobbada 148aad iyo 156aad.

- **Faqradda 4aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn. "*Sharci*" waxaa lagu beddelay "*Xeer*". Faqraddan waxay tilmaamaysaa in haddii Golaha Aqalka Sare uu soo gaaro hindise xeer oo markii hore golaha ka billowday uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka iyada oo aan wax laga beddelin, waxaa goluhu u gudbinayaa madaxweynaha si uu u saxiixo, looguna soo saaro faafinta rasmiga ah.

- **Faqradda 5aad:** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 4aad xeerinaysaa in haddii hindise xeer oo ka billowday Golaha Aqalka Sare uu Golaha Shacabka wax-kabeddel ku sameeyo, Golaha Aqalka Sare waxaa u furan in uu muddo sagaashan (90) ku qaato labadan tallaabo midkood. Tan koowaad, in uu aqbalo wax-kabeddelka golaha shacabku sameeyay iyada oo la raacayo aqlabiyad fudud, ka dibna uu u gudbiyo hindisaha xeerka Madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah. Tan labaad oo ah in uu diido wax-kabeddelka kuna buriyo go'aanka Golaha Shacabka aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee Golaha Aqalka Sare, kaddibna hindisaha xeerka qabyada ah u gudbiyo madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah. Faqraddaha 5aad iyo 6aad ee asalka dastuurka waa la tiray.

Qodobkani wuxuu qeexayaa habka hindise xeer qabyo ah loo mariyo Golaha Aqalka Sare, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 83aad. Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu si cad u qeexayaa nidaamka sharcidejinta ee Golaha Aqalka Sare, isagoo qeexaya sida hindise sharciyeed uga billaabanayo Golaha Aqalka Sare, sida uu u maro Baarlamaanka, iyo sida loo ansixinayo ama loo diidayo.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay nidaamka federaalka, maaddaama uu dejinayo hab sharciyeed cad oo qeexaya sida sharciyada wadaagga ah loo maro Baarlamaanka, wuxuuna xaqiijinayaa in labada gole ay awood siman u leeyihiin xeerdejinta.

**Cilmibaaris: Hindise Xeereed Ka Billowday Golaha Aqalka Sare**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[227] wuxuu si cad u xeerinayaa habraaca sharcidejinta ee labada gole:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka wakiillada ama senate-ka.
- Sharciyada la xiriira miisaaniyadda iyo canshuuraha waa in ay ka yimaaddaan aqalka wakiillada si loo ilaaliyo in sharciyada dhaqaale ay ka yimaaddaan wakiillada shacabka.
- Marka hindise sharciyeed uu maro senate-ka, waxaa loo gudbinayaa aqalka wakiillada si ay uga doodaan, wax-kabeddelaan ama u ansixiyaan.
- Haddii labada gole isku waafaqaan sharci, waxaa loo gudbinayaa madaxweynaha si uu u saxiixo.

- Haddii ay isku khilaafaan sharci, waxaa la dhisayaa guddi dhexdhexaadin ah *(Conference Committee)* oo isku dhafan labada gole si xal looga gaaro khilaafka sharciyeed.

Maraykanka, nidaamka sharcidejinta wuxuu si adag u kala qeexayaa doorka labada gole iyo sida sharciyada loo ansixinayo.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[228] *(Basic Law),* wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka hoose (*Bundestag*), Aqalka Sare *(Bundesrat)* ama xukuumadda federaalka.
- Haddii sharci uu ka yimaaddo Aqalka Sare *(Bundesrat),* waxaa loo gudbinayaa *Bundestag* si ay uga doodaan, wax-kabeddelaan ama u ansixiyaan.
- Haddii *Bundestag* uu wax-kabeddelo sharci ka yimid *Bundesrat, Bundesrat* wuxuu leeyahay doorashooyin kala duwan:
  - In uu aqbalo wax-kabeddelka oo uu sharciyada ansixiyo.
  - In uu diido wax-kabeddelka oo uu dib ugu celiyo *Bundestag*.
  - In uu codsado in la qabto kulan dhexdhexaadin ah si xal loo gaaro.

Jarmalka, nidaamka sharcidejinta wuxuu dejinayaa hab rasmi ah oo xakameynaya sharciyada la ansixinayo.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[229] wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta:

- Sharciyada cusub waxaa curin kara aqalka hoose *(Lok Sabha)* ama Aqalka Sare *(Rajya Sabha).*

[227] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 7aad.
[228] Dastuurka Jarmalka (Basic Law), Qodobbada 76aad iyo 77aad.
[229] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 107aad iyo 108aad.

- Haddii *Rajya Sabha* ay sharci cusub soojeediso, waxaa loo gudbinayaa *Lok Sabha* si ay uga doodaan, wax-kabeddelaan ama u ansixiyaan.
- Haddii labada gole isku khilaafaan sharci, waxaa la qabanayaa kulan wadajir ah oo Baarlamaanka *(Joint Session)* si loo xalliyo khilaafka.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo xaqiijinaya in sharciyada la dajiyo iyada oo la raacayo nidaam sharciyeysan.

⇒ ***Switzerland***, Dastuurka[230] wuxuu xeerinayaa habraaca sharcidejinta:

- Labada gole ee Baarlamaanka *(Federal Assembly)* waa in ay si wadajir ah uga shaqeeyaan sharciyada cusub.

- Haddii sharci gaar ah uu u baahan yahay in la xalliyo muran, waxaa loo baahan yahay afti dadweyne *(referendum)*.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo dadweynuhu door ku leeyihiin.

## Qodobka 106aad: Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka

Cinwaanka Qodobka 106aad ee soojeedinta wax-kabeddelka oo asalka Dastuurka Qodobka 84aad "Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada" waxaa laga dhigay "Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka". "Sharciyada waxaa lagu beddelay "Xeerarka", halka "Xafidaadda" lagu beddelay "Kaydinta".

- **Faqradda 1aad:** Qodobkan oo ka koobnaa hal farqad waxaa laga dhigay laba faqradood. Faqradda 1aad waxay xeerinaysaa in xaafiiska garyaqaanka guud ee dawladda mas'uul ka yahay daabacaadda, xafidaadda, kaydinta iyo faafinta rasmiga ah.

- **Faqradda 2aad:** oo nuxurkeedu uu ku jiray faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waxay xeerinaysaa in labada xoghaye ee golayaasha Baarlamaanka federaalka mas'uul ka yihiin xafidaadda iyo kaydinta nuqullada xeerarka, qaraarrada iyo hadalqoraallada ay golayaashu ansixiyaan iyo in ay hubiyaan in xeerarka loo gudbinayo faafinta rasmiga ah ee jamhuuriyadda yihiin nuqullada saxda ah oo golayaashu ansixiyeen loona gudbiyay madaxweynaha Jamhuuriyadda.

Qodobkan wuxuu xeerinayaa habka kaydinta iyo faafinta xeerarka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 84aad ee Dastuurka, oo cinwaankiisu ahaa "Faafinta iyo Xafidaadda Sharciyada". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu xoogga saaraya habka xeerarka loo kaydinayo, loo xafidayo, iyo sida loo faafinayo. Qodobkani waxa uu dejinayaa dhowr arrimood oo muhiim ah:

**a)** Xaafiiska garyaqaanka guud ee dawladda waa mas'uulka daabacaadda, kaydinta, iyo faafinta rasmiga ah ee xeerarka. Qodobkani wuxuu xoojinayaa in xeerarka la ansixiyo si rasmi ah loo kaydiyo loona faafiyo, si looga fogaado sharci aan si rasmi ah loo caddeyn.

[230] Dastuurka Switzerland, Qodobbada 148aad iyo 156aad.

**b)** Labada xoghaye ee golayaasha Baarlamaanka federaalka waxay mas'uul ka yihiin xafidaadda iyo kaydinta nuqullada rasmiga ah ee xeerarka, qaraarrada, iyo hadalqoraallada Baarlamaanka. Tani waxay hubinaysaa in sharciyada la ansixiyo ay yihiin kuwa sax ah oo loo gudbinayo faafinta rasmiga ah.

**c)** Xoghayayaasha Baarlamaanka waa in ay hubiyaan in xeerarka la ansixiyay la gaarsiiyo madaxweynaha si uu u saxiixo looguna soo saaro faafinta rasmiga ah. Tani waxay xaqiijinaysaa in habraaca sharcidejinta la maro si waafaqsan nidaamka federaalka.

Qodobkani wuxuu muhiim u yahay ilaalinta nidaamka sharcidejinta, wuxuuna hubinayaa in xeerarka la ansixiyay si sax ah loo kaydiyo, loona daabaco, loona faafiyo.

## Cilmibaaris: Kaydinta iyo Faafinta Xeerarka

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[231] iyo (*Federal Register Act 1935*) waxay xeerinayaan habka kaydinta iyo faafinta sharciyada:

- Marka sharci la ansixiyo, waxaa loo gudbinayaa madaxweynaha si uu u saxiixo, kaddibna waxaa lagu daabacayaa *"Federal Register"* oo ah kaydka rasmiga ah ee sharciyada dawladda federaalka.
- Sharciyada cusub waxaa lagu faafinayaa mareegaha dawladda, waxaana la daabacayaa nuqullo rasmi ah oo dadweynuhu heli karo.
- *(Library of Congress iyo National Archives)* waxay kaydiyaan sharciyada rasmiga ah ee la ansixiyay si loo hubiyo taariikhda sharciyada.
- Sharciyada lama dhaqangelin karo ilaa ay si rasmi ah u soo baxaan oo ay daabacaan hay'adaha dawladda.

Maraykanka, nidaamka faafinta sharciyada wuxuu xoogga saarayaa daahfurnaan iyo helitaanka sharciyada, iyadoo la hubinayo in sharci kasta la kaydiyo oo la heli karo.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[232] *(Basic Law),* iyo nidaamka *Bundesgesetzblatt* waxay xeerinayaan faafinta sharciyada:

- Sharci kasta oo la ansixiyo waa in uu u gudbo madaxweynaha Jarmalka si uu u saxiixo, kadibna waxaa lagu daabacayaa "*Bundesgesetzblatt*" oo ah kaydka rasmiga ah ee sharciyada.
- Sharciyada lama dhaqangelin karo ilaa ay lagu daabaco *Bundesgesetzblatt* si dadweynuhu u heli karo.
- Sharciyada waxaa lagu kaydinayaa (*Archives-ka)* dawladda iyo *Bundestag Library*, si taariikhda sharciyada loo ilaaliyo.

Jarmalka, nidaamka kaydinta sharciyada wuxuu xoogga saaraya daabacaadda rasmiga ah iyo ilaalinta sharciyada si dadweynuhu u ogaado.

---

[231] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 7aad.
[232] Dastuurka Jarmalka (Basic Law), Qodobka 82aad.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[233] iyo faafinta rasmiga ah, wuxuu xeerinayaa nidaamka kaydinta sharciyada:

- Sharci kasta oo la ansixiyo waxaa lagu daabacayaa "*Gazette of India*" si uu si rasmi ah u noqdo sharci dhaqangal ah.
- Dastuurka Hindiya wuxuu farayaa in sharciyada rasmiga ah lagu kaydiyo xafiiska xoghayaha guud ee Baarlamaanka iyo maxkamadda sare ee Hindiya.
- Sharciyada lama dhaqangelin karo ilaa ay si rasmi ah u soo baxaan oo ay la wadaagaan dadweynaha.

Hindiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo xaqiijinaya in sharci kasta la kaydiyo oo dadweynuhu uu si rasmi ah u heli karo.

⇒ **Switzerland,** Dastuurka Switzerland[234] iyo *"Official Compilation of Federal"*, wuxuu xeerinayaa nidaamka kaydinta sharciyada:

- Sharciyada rasmiga ah waxaa lagu kaydinayaa "*Official Compilation of Federal Law*", oo ah kaydka sharciyada federaalka ee Switzerland.
- Haddii sharci la ansixiyo, waa in uu si rasmi ah uga soo baxaa daabacaadda dawladda kahor inta uusan dhaqangelin.
- Maxkamadda Sare ee Switzerland iyo golaha federaalka waxay kaydiyaan sharciyada si loo ilaaliyo.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo xoogga saaraya daahfurnaanta sharciyada iyo helitaankooda.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka Itoobiya[235] iyo *"Federal Negarit Gazette"*, wuxuu xeerinayaa nidaamka kaydinta sharciyada:

- Sharciyada cusub waxaa lagu kaydiyaa "*Federal Negarit Gazette*" oo ah buugga sharciyada Itoobiya.
- Sharciyada lama dhaqangelin karo ilaa ay si rasmi ah u soo baxaan oo dadweynuhu helo.
- Baarlamaanka federaalka iyo maxkamadda sare waxay kaydiyaan sharciyada si loo xafido taariikhda sharcidejinta.

Itoobiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo hubinaya in sharci kasta la kaydiyo oo si rasmi ah loo faafiyo.

---
[233] Dastuurka Hindiya, Qodobka 77aad.
[234] Dastuurka Switzerland, Qodobka 164aad.
[235] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 55aad

## Qodobka 107aad: Dhaqangalidda Xeerarka

Cinwaanka Qodobka 107aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 85aad. Ereyga "Sharciyada" waxaa lagu beddelay "Xeerarka". Qodobkan oo ka koobnaa hal faqrad waxaa laga dhigay lix faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waxa ay xeerinaysaa in xeer kasta oo Baarlamaanka federaalka ansixiyo uu madaxweynuhu ku saxiixo muddo soddon (30) maalmood gudahood ah.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in haddii uu madaxweynahu saxiixi waayo xeerka Baarlamaanka federaalku ansixiyay muddada cayiman, waa in uu ku soo celiyaa golihii u soo gudbiyay marka uu xeerku ka hor imaanayo Dastuurka ama xeerarka kale ee dalka; uuna xeerku soo marin habraaca xeerdejinta ee ku xusan Dastuurka ama uu xeerku ka soo horjeedo danaha qaranka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in haddii madaxweynaha Jamhuuriyaddu muddo soddon (30) maalmood gudahood ah ku saxiixi waayo ama dib ugu celin waayo golihii u soo gudbiyay sabab la'aan in xeerku noqonayo mid dhaqangal ah laguna soo saarayo Faafinta Rasmiga ah.

- **Faqradda 4aad**: waa mid cusub oo xeerinaysaa in xeerka madaxweynuhu ku soo celiyo golihii u soo gudbiyey, uu gole kasta oggolaan karo ama ku diidi karo soojeedinta Madaxweynaha ayagoo ku burinaya aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha golaha ay khusayso. Madaxweynhu waa in uu xeerkaas saxiixaa, laakiin haddii uuna ku saxiixin muddadaas cayiman xeerku wuxuu noqonayaa mid dhaqangal ah oo lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.

- **Faqradda 5aad**: waa mid cusub xeerinaysaa in Garyaqaanka Guud ee Dawladda uu u diro min hal nuqul oo ah asalka xeerka madaxweynuhu saxiixay xogahayayaasha labada gole ee Baarlamaanka si loo hubiyo sax ahaanshaha nuqulka madaxweynuhu saxiixay.

- **Faqradda 6aad**: waa mid cusub oo xeerinaysaa in xeerkasta oo madaxweynuhu saxiixo si waafaqsan Dastuurka laguna soo saaro faafinta rasmiga ah uu dhagangal noqonayo shan iyo toban (15) maalmood ka bacdi, taas oo ka billaabanaysa maalinta xeerka lagu soo saaro faafinta rasmiga ah.

Qodobkani wuxuu qeexayaa dhaqangalidda xeerarka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 85aad, oo cinwaankiisu ahaa "Dhaqangelidda Sharciyada".

Wuxuu si cad qodobkan u qeexayaa waqtiga sharciyada la dhaqangelinayo, doorka madaxweynaha iyo sida sharciyada loogu faafiyo faafinta rasmiga ah. Qodobkani waxa uu dejinayaa dhowr qodob oo muhiim ah:

a) Madaxweynaha Jamhuuriyadda waa in uu saxiixo sharci kasta oo Baarlamaanka federaalka ansixiyo muddo 45 maalmood gudahood ah. Tani waxay xoojinaysaa in sharciyada si rasmi ah loo dhaqangeliyo.

b) Haddii Madaxweynuhu diido inuu saxiixo xeerka, waa inuu dib ugu celiyo golihii u soo gudbiyay, isagoo bixiya sabab cad oo la xiriirta khilaaf Dastuuriga ah, habraaca sharcidejinta, ama dano qaran.

c) Haddii Madaxweynuhu muddo 30 maalmood ah aanuu saxiixin ama aanuu dib ugu celin Baarlamaanka, xeerka wuxuu si toos ah u dhaqangalayaa, laguna soo saarayaa faafinta rasmiga ah. Qodobkani wuxuu ka hortagayaa in madaxweynuhu xannibo sharciyada baarlamaanku ansixiyo, isagoo aan wax tallaabo ah ka qaadin.

d) Haddii Madaxweynuhu diido xeer uu baarlamaanku ansixiyay, baarlamaanku wuxuu burin karaa diidmadaas aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha golaha ay khusayso. Markaas, madaxweynuhu waa inuu xeerkaas saxiixo, hase yeeshee haddii uu ka gaabsado, xeerku wuxuu si toos ah u dhaqangalayaa.

e) Garyaqaanka guud ee dawladda waa inuu u diro nuqul rasmi ah oo sharci kasta oo la saxiixo xoghayeyaasha labada gole ee Baarlamaanka si loo xaqiijiyo sax ahaanshaha sharciyada.

f) Sharci kasta oo lagu daabaco faafinta rasmiga ah wuxuu dhaqangalayaa 15 maalmood kadib, laga bilaabo maalinta la faafiyo.

**Cilmibaaris: Dhaqangalka Xeerarka**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[236] wuxuu si cad u xeerinayaa sida sharciyada u dhaqangalayaan iyo doorka Madaxweynaha:

- Marka sharci la ansixiyo, waxaa loo gudbinayaa madaxweynaha si uu u saxiixo muddo 10 maalmood gudahood ah maalmaha shaqada oo keliya laga reebo.
- Haddii madaxweynuhu diido sharci (*veto*), waxaa la gudbinayaa Baarlamaanka si uu dib uga doodo.
- Haddii labada gole ee Baarlamaanka *(Senate & House of Representatives)* ay burinayaan diidmada madaxweynaha, waxay u baahan yihiin aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) si sharciyada ay si toos ah u dhaqangalayaan.
- Haddii Madaxweynuhu ka gaabsado saxiixiisa, sharciyada waxay si toos ah u dhaqangalayaan 10 maalmood kaddib haddii aanay fadhiga Baarlamaanka ka maqnaan.

Maraykanka, nidaamka sharcidejinta wuxuu xaddidayaa awoodda madaxweynaha ee xannibista sharciyada, wuxuuna hubinayaa in sharciyada la dhaqan-geliyo waqti cayiman gudahood.

[236] Dastuurka Maraykanka, Qodobka 1aad, Qaybta 7aad.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[237] *(Basic Law),* wuxuu xeerinayaa habka sharciyada loo dhaqangeliyo:

- Sharci kasta oo la ansixiyo waa in uu u gudbo Madaxweynaha Jarmalka si uu u saxiixo.
- Haddii Madaxweynuhu saxiixi waayo, waa in uu sabab caddeysan siiyo Baarlamaanka.
- Sharci kasta oo la ansixiyo waa in lagu daabaco kaydka sharciyada *(Bundesgesetzblatt Jarmal)* kahor inta uusan dhaqangelin.

Jarmalka, madaxweynaha ma xannibi karo sharci haddii Baarlamaanka uu cod aqlabiyad ah ku ansixiyo.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[238] wuxuu xeerinayaa nidaamka sharcidejinta:

- Marka sharci la ansixiyo, waxaa loo gudbinayaa madaxweynaha Hindiya si uu u saxiixo.
- Madaxweynuhu wuxuu sharciyada dib ugu celin karaa Baarlamaanka si loo eego dib-u-habayn.
- Haddii baarlamaanku dib u ansixiyo sharci la diiday, madaxweynaha waa inuu saxiixo.
- Sharci kasta oo la ansixiyo wuxuu dhaqan-galayaa marka uu ka soo baxo *(Gazette of India)* wargeyska rasmiga ah.

Hindiya waxay leedahay nidaam baarlamaan oo hubinaya in sharciyada la dhaqangeliyo iyada oo la ilaalinayo awoodaha Baarlamaanka.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[239] wuxuu xeerinayaa habka sharciyada loo dhaqangeliyo:

- Sharciyada waxaa lagu kaydinayaa *"Official Compilation of Federal Law"*, waxaana la daabacayaa kahor inta aysan dhaqangelin.
- Madaxweynaha Switzerland ma xannibi karo sharci uu baarlamaanku ansixiyay.
- Haddii sharci la ansixiyo, waxaa lagu soo saarayaa wargeyska rasmiga ah *(Feuille fédérale)*, kaddibna wuxuu dhaqangalayaa.

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo Baarlamaanka si gaar ah awood ugu siinaya in sharciyada ay si rasmi ah u dhaqangalaan.

---

[237] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 82aad
[238] Dastuurka Hindiya, Qodobbada 111aad iyo 112aad.
[239] Dastuurka Switzerland, Qodobbada 164aad iyo 189aad.

⇒ ***Itoobiya,*** Dastuurka[240] wuxuu xeerinayaa habka sharciyada loo dhaqangeliyo:

- Sharci kasta oo la ansixiyo waa in uu u gudbo madaxweynaha Itoobiya si uu u saxiixo.
- Haddii Madaxweynuhu diido sharci, baarlamaanku wuxuu burin karaa diidmada aqlabiyad saddex-meelood laba.
- Sharciyada lama dhaqangelin karo ilaa ay lagu daabaco "*Federal Negarit Gazette*".

Itoobiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo hubinaya in sharci kasta uu si rasmi ah u dhaqan-galo kadib marka uu maro habraaca sharcidejinta.

## Qodobka 108aad: Durid Xeer

Cinwaanka Qodobka 108aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 86aad, cinwaankiisa waxaa "Durid Sharci" lagu beddelay "Durid Xeer".

- **Faqradda 1aad**: waxaa lagu sameeyay siiqatoosin, waxaana lagu soo korhiyay 'Shareecada Islaamka, iyo danta qaranka". Waxa Ereyga "Sharci" lagu beddelay "Xeer". Faqraddan waxay xeerinaysaa in marka keli ah oo xeer dhaqangal ah la duri karo ay tahay haddii uu ka soo horjeedo Shareecada Islaamka, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka.

- **Faqradda 2aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin, waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo dib-u-habayn. Faqraddan waxay tilmaamaysaa cidda duri karta xeer maray habraacyada ku xusan cutubka 6aad.

- **Faqradda 3aad:** nuxurkeeda waxba lagama beddelin. Faqraddan waxay xeerinaysaa in xeerka la duray si waafaqsan faqradda 1aad iyo 2aad ee qodobkan la horgeyn karo Maxkamadda Dastuurka si ay go'aan uga gaarto.

- **Faqradda 4aad:** waxba lagama beddelin ee sideeda ayaa loo qaatay. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in haddii Maxkamadda jebiso duridda xeerka, kharashka ku baxay uu bixinayo dhinaca maxkamadda horgeeyey hindisaha duridda.

- **Faqradda 5aad**: waxba lagama beddelin sideeda ayaa loo qaatay. Faqraddan waxay tilmaamaysaa in habraaca loo marayo duridda iyo go'aan gaarista lagu xeerin doono Xeerka Nidaamka Garsoorka.

Qodobkani xeerinayaa duridda xeerarka, wuxuuna asal ahaan hore uga tirsanaa Qodobka 86aad, oo cinwaankiisu ahaa "Durid Sharci", hase yeeshee ereyga "Sharci" waxaa lagu beddelay "Xeer". Isbeddelka lagu sameeyay qodobkan wuxuu xoojinayaa habraaca lagula dagaallami karo sharciyada aan waafaqsaneyn Shareecada Islaamka iyo Dastuurka, isagoo qeexaya sida sharci loo duri karo, cidda awoodda u leh, iyo sida go'aanka looga gaarayo. Qodobkani waxa uu dejinayaa dhowr qodob oo muhiim ah:

[240] Dastuurka Itoobiya, Qodobbada 55aad iyo 74aad.

***a)*** Xeerarka waa la duri karaa keliya haddii ay ka hor imaanayaan Dastuurka. Faqradda 1aad waxay caddeynaysaa in xeer dhaqangal ah la duri karo oo keliya haddii uu si toos ah uga hor imaanayo Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka.

***b)*** Cidda awood u leh duridda xeerarka. Faqradda 2aad waxay qeexaysaa in xeer duriddiisa la marsiinayo habraacyada ku xusan cutubka 6aad ee Dastuurka, taasoo micnaheedu yahay in ciidamada garsoorka, hay'adaha dawladda, iyo xitaa shakhsiyaad gaar ah ay heli karaan awood ay ku su'aal geliyaan xeer aan waafaqsaneyn Dastuurka.

***c)*** Maxkamadda Dastuurka ayaa go'aan ka gaari doonta xeer la duray. Faqradda 3aad waxay xeerinaysaa in haddii xeer si sharci ah loo duray, arrintaas waxaa lagu horgeynayaa maxkamadda Dastuurka si ay u go'aamiso haddii xeerku la mid yahay Dastuurka iyo in kale.

***d)*** Haddii Maxkamadda jebiso duridda xeerka, kharashka waxa bixinaya cidda keenay dacwadda. Faqradda 4aad waxay tilmaamaysaa in haddii Maxkamaddu ay go'aamiso in xeerka la duray uu waafaqsan yahay Dastuurka, cidda keenay dacwadda ay bixinayso kharashka maxkamadda.

***e)*** Habraaca loo marayo duridda xeerarka waxaa xeerin doona Xeerka Nidaamka Garsoorka. Faqradda 5aad waxay tilmaamaysaa in dhammaan habraacyada maxkamadeynta iyo xeerarka lagu xalliyo duridda sharciyada ay tahay in lagu xeeriyo Xeerka Nidaamka Garsoorka, taasoo xaqiijinaysa in nidaamka garsoorka uu helo nidaam sharciyeed oo sax ah.

**Cilmibaaris: Durid Xeer**

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka[241] wuxuu xaqiijinayaa in Maxkamadda Sare *(Supreme Court)* ay awood u leedahay inay buriso sharci kasta oo ka hor imaanaya Dastuurka, iyadoo loo marayo nidaamka *"Judicial Review"* oo la xaqiijiyay markii ugu horreysay xukunkii caanka ahaa ee *Marbury v. Madison (1803).*

- Maxkamadda Sare ee Maraykanka waxay burin kartaa sharci kasta oo ay u aragto inuu ka hor imanayo Dastuurka.
- Sharciyada lama dhaqangelin karo haddii ay jebinayaan Dastuurka, waxaana laga yaabaa in maxkamadaha hoose ay xitaa sharciyada diidaan kahor inta aysan gaarin Maxkamadda Sare.
- Haddii qof, urur, ama xukuumad ay u aragto sharci mid aan waafaqsaneyn Dastuurka, waxa uu la xiriiri karaa maxkamadaha si sharci loo duro.

Maraykanka, nidaamka duridda sharciyada wuxuu xoogga saaraya awoodda garsoorka ee ilaalinta Dastuurka, isagoo siinaya Maxkamadda Sare awood ay ku buriso sharci aan waafaqsaneyn Dastuurka.

[241] Dastuurka Maraykanka, Article III & Marbury v. Madison, 1803.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[242] iyo *"Federal Constitutional Court"* wuxuu siinayaa Maxkamadda Dastuuriga ah *(Federal Constitutional Court - Bundesverfassungsgericht)* awoodda ay ku buriso sharci kasta oo ka hor imaanaya Dastuurka.

- Haddii sharci la duray, waxa uu si toos ah u tegayaa Maxkamadda Dastuuriga ah si loo baaro sharciyaddiisa.

- Maxkamaddu waxay burin kartaa sharci haddii ay caddeyso inuu jebinayo qodob ka mid ah Dastuurka Jarmalka.

- Waxaa jira nidaam sharciyeed oo qeexaya cidda sharci duri karta, sida Baarlamaanka, madaxweynaha, xukuumadda ama muwaadiniinta oo maxkamadda u dacwooda.

Jarmalka, nidaamka garsoorka wuxuu awood u leeyahay inuu ka hortago sharciyada aan waafaqsaneyn Dastuurka, isagoo sharciyeysan nidaam maxkamadeed oo sugan.

⇒ ***Hindiya,*** Dastuurka[243] iyo *"Supreme Court of India"* wuxuu xeerinayaa nidaamka duridda sharciyada:

- Maxkamadda Sare ee Hindiya waxay awood u leedahay inay buriso sharci kasta soojebinaya Dastuurka.
- Xeerarka, qawaaniinta iyo go'aannada dawladda waxaa lagu duri karaa maxkamadaha haddii ay ka hor imaanayaan xuquuqda dastuuriga ah ee dadweynaha.
- Sharciyada maxkamaddu buriso ma sii jiri karaan, waxaana loo baahan yahay in baarlamaanku mar kale sharci cusub dejiyo haddii loo baahdo.

Hindiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo xoojinaya awoodda garsoorka ee ilaalinta Dastuurka.

⇒ ***Switzerland,*** Dastuurka[244] iyo *"Federal Tribunal"*, wuxuu xeerinayaa nidaamka duridda sharciyada:

- Maxkamadda Federaalka ee Switzerland *(Federal Tribunal)* waxay burin kartaa sharci kasta oo jebinaya Dastuurka.
- Xeerarka waxaa si toos ah loogu horgeyn karaa Maxkamadda Dastuuriga ah si loo hubiyo waafaqsanaantooda Dastuurka.
- Dadweynaha waxay awood u leeyihiin inay sharci duraan iyagoo codsada afti dadweyne (*referendum*).

Switzerland waxay leedahay nidaam sharciyeed oo u oggolaanaya dadka iyo garsoorka inay burin karaan sharci aan waafaqsaneyn Dastuurka.

[242] Dastuurka Jarmalka, Qodobka 93aad.
[243] Dastuurka Hindiya, Qodobka 13aad.
[244] Dastuurka Switzerland, Qodobka 190aad.

⇒ **Itoobiya,** Dastuurka[245] iyo *"Council of Constitutional Inquiry"*, wuxuu xeerinayaa nidaamka duridda sharciyada:

- Maxkamadda Federaalka ee Itoobiya iyo golaha baarista Dastuuriga ah (*Council of Constitutional Inquiry*) waxay burin karaan sharci kasta oo aan waafaqsaneyn Dastuurka.
- Haddii sharci la duray, maxkamaduhu waa inay go'aan ka gaaraan in uu sharciyeysan yahay iyo in kale.
- Madaxweynaha iyo Baarlamaanka waxay sidoo kale awood u leeyihiin inay sharciyo ka horgeeyaan Maxkamadda Dastuuriga ah si loo baaro sharciyaddooda.

Itoobiya waxay leedahay nidaam sharciyeed oo u oggolaanaya sharciyada la horgeeyo maxkamadaha kahor inta aysan dhaqangelin.

### Jaantuska 2aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 6aad

Qodobbada cutubka lixaad waxaa lagu sameeyay siiqayn, qaabayn, toosin, ku daris, dhimis iyo wax-kabeddel. Waxaa la soo kordhiyay shan (5) Qodob iyo afartan iyo shan (45) faqradood; halka la tiray shan (5) qodob iyo sagaal (9) faqrafood.




[245] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 83aad.

# FAALLADA IYO SHARRAXAADDA

## SOOJEEDINTA WAX-KABEDDELKA CUTUBKA TODDOBAAD:
## MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA
## FEDERAALKA SOOMAALIYA

## Cutubka Toddobaad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cutubka toddobaad wuxuu ka koobanyahay kow iyo toban (11) qodob, oo ka billaabanaya ***Qodobka 109aad ilaa Qodobka 119aad,*** halka asala Dastuurka uu ka koobnaa toban (10) qodob. Waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay ***laba (2) qodob*** iyo ***labaadan iyo toddoba (27) faqradood***, oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray ***afar (4) faqradood*** oo ku jiray asalkii Dastuurka. Cutubkan todobaad arrimaha lagu soo kordhiyay waxaa ka mid ah:

- Xasaanadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka; iyo
- Soo Saarista Digreetooyin iyo ammaro.

Qoraalkan soo socda wuxuu faahfaahin ka bixinayaa wax-kabeddelka ku yimid cutubka 7aad, iyadoo la sheegayo nooca wax-kabeddelka lagu sameeyay, asbaabaha keenay wax-kabeddelka iyo cilmibaarista la sameeyay oo arrintaas la xiriirta (haddii ay jirto). Sidoo kale, waxaa kale oo warbixintan lagu xusayaa tusaalooyin laga soo qaatay dalal ka mid ah caalamka ee la xiriira arrimaha la lafagurayo si looga faa'iidaysto waayo aragnimada wanaagsan ee dalalka caalamka.

### Qodobka 109aad: Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 109aad, oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 87aad, waxba lagama beddelin. Qodobkan oo asalka Dastuurka ka koobnaa laba (2) faqradood waxaa lagu kordhiyay hal (1) faqrad cusub oo noqotay faqradda 2aad.

- **Faqradda 1aad** waxaa lagu sameeyay dib-u-habayn, oo waxaa laga dhigay hal farqad oo aan lahayn xarfo ka farcama. Nuxurkii ku jiray xarfaha kala duwan waxaa lagu ururiyey hal faqrad. "Ilaaliyaha iyo horumariyaha mabaadi'da asaasiga ah ee Dastuurka" waxaa lagu beddeley "ilaaliyaha Dastuurka". Waxaa faqraddan lagu kordhiyay "dammaanad qaadaha madaxbannaanida qaranka" oo ah mid aad u muhiim ah.

> Dalal badan ayaa dastuurradooda ku caddeeya in madaxweynuhu yahay dammaanad-qaadaha madaxbannaanida qaranka, waxaana kamid ah Rwanda[246],Guinea-Bissau[247], South Korea[248], Russia[249],Tunisia[250], France[251], Burkina Faso[252], Portugal[253] iyo Romania[254] iyo dalal kale. In dalal badan madaxweynaha ku magacaabeen dammaanad qaadaha madaxbannaanida waxa ay muujinaysaa muhimadda ay arrinkan leedahay, sababtaas ayaana keentay in lagu soo kordhiyo soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

[246] Dastuurka Rwanda 2003(dib-u-eegis lagu sameeyay 2015), qodobka 98aad.
[247] Dastuurka Guinea-Bissau 1984(dib-u-eegis lagu sameeyay 1996), Qodobka 62aad.
[248] Dastuurka South Korea (1948) Qodobka 66aad, Faqradda 2aad.
[249] Dastuurka Russia (1993), Qodobka 80aad, Faqradda 2aad.
[250] Dastuurka Tunisia (2014), Qodobka 72aad.
[251] Dastuurka France (1958), Qodobka 5aad.
[252] Dastuurka Burkina-Faso 1991(dib-u-eegis lagu sameeyay 2015), Qodobka 36aad.
[253] Dastuurka Portugal (1976), Qodobka 123aad.
[254] Dastuurka Romania, Qodobka 80aad, Faqradda 1aad.

- **Faqradda 2aad** oo ah faqrad cusub, waxayna tilmaamaysaa in madaxweynaha JFS uu Jamhuuriyadda ku matalayo gudaha iyo dibaddaba. Waddamo badan ayaa dastuurrdaooda ku caddeeyay in madaxweynaha matalo dalalkooda gudaha iyo dibadda. Dalalkaas waxaa kamid ah South Korea[255], Guinea-Bissau[256], Georgia[257], Russia[258], iyo Belarus[259].

- **Farqadda 3aad** oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxaa lagu sameeyay dib u siiqayn ayada oo aan nuxurka waxba laga beddelin, waxaana lagu kordhiyay "shareecada Islaamka". Sidoo kale, waxaa ereyga "shuruucda" lagu beddelay "xeerarka" iyada oo la waafajinayo ereyga "xeer" oo loo isticmaalay cutubyada 1aad ilaa 4aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo Baarlamaanka federaalku ansixiyay.

## Qodobka 110aad: Shuruudaha Doorashada Xilka Madaxwaynaha

Cinwaanka Qodobka 110aad oo ahaa Qodobka 88aad ee asalka Dastuurka waxaa lagu sameeyay qaabayn ayadoon nuxurka waxba laga beddelin. Qodobkan oo asalka Dastuurka ka koobnaa hal faqrad waxaa lagu kordhiyay hal faqrad, ayada oo lagu sameeyay dib u qorid iyo siiqayn.

- **Faqradda 1aad** oo xeerinaysa shuruudaha looga baahanyahay qofka loo dooranayo xilka madaxweynaha Jamhuuriyadda. Faqraddan oo asalka Dastuurka ka koobnayd shan (5) xarfood, waxa ay soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka noqotay laba iyo toban (12) xarfood oo waa la ballaariyay.

    - ***Xarafka (a)*** "Muwaaddin Soomaali, Muslim ah" waxaa lagu beddelay "Muwaaddin Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo Muslim ah".

    - ***Xarafka (b)*** ee Farqadda 1aad waa mid cusub oo la soo kordhiyay tilmaamaysana labada waalid ee musharraxa Madaxweynaha in ay muwaaddiniin Soomaali ah yihiin.

    - ***Xarafka (c)*** ee Faqradda 1aad ee qodobkan waxay tilmaamaysaa in da'da musharraxa madaxweyne aysan ka yaraan 40 sano. Xarafkan asalka Dastuurka waxa lagu kordhiyay "maalinta doorashada". Shuruudda da'da waxa ay la socotaa da'dii dhammaan dastuurradii dalku yeeshay ilaa yagleeliddii jamhuuriyaddii koowaad.

    - ***Xarafka (d)*** ee Faqradda 1aad ee qodobkan oo xeerinayay heerka aqoonta musharraxa oo hadda noqotay xarafka (c) waxaa lagu xiray ilaa heer jaamacadeed iyo khibrad hoggaamineed oo aan ka yarayn shan iyo toban (15) sano. Waayo aragnimada hoggaamineed waxaa loo arkay in ay muhiim tahay oo ayna musharraxa ku filnayn in uu haysto shahaado jaamacadeed laakiin loo baahan yahay in uu leeyahay khibrad ku filan.

---

[255] Dastuurka South Korea (1948) Qodobka 66aad, Faqradda 1aad.
[256] Dastuurka Guinea-Bissau 1984(dib-u-eegis lagu sameeyay 1996), Qodobka 62 (2)
[257] Dastuurka Georgia 1995(dib-u-eegis lagu sameeyay 2004), Qodobka 80aad.
[258] Dastuurka Russia (1993), Qodobka 80aad, Fqradda 4aad.
[259] Dastuurka Belarus, Qodobka 79aad.

- *Xarafka (e)* ee Faqradda 1aad oo ahayd xarafka (d) ee asalka Dastuurka oo tilmaamaysa in musharraxa madaxweynaha uu dhimirkiisu dhan yahay, waxaa lagu kordhiyay "horayna aan dhakhtar si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah". Ujeeddada loogu kordhiyay baahida in dhaqtar si rasmi ah u caddeeyo waa in la hubiyo in caddaynta fiyowga dhimirka uu qoray dhakhtar takhasus u leh arrinkan.

- *Xarafka (f)* ee faqradda 1aad ee oo ahayd xarafka (e) ee asalka Dastuurka waxay tilmaamaysaa in musharraxa madaxweyne uusan gelin fal-dambiyeed culus oo ay maxkamad xukuntay, waxaa lagu daray "madaxbannaan ugu xukuntay si kamadambays ah". Ujeeddada loogu kordhiyay qaybtan waxaa weeye in xukunka maxkamaddu noqdo kamadambays, sababtoo ah haddii xukunka ay weli ka furantahay rafcaan xukunkaas waa la burin karaa, go'aanna laguma salayn karo.

- Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay xarfaha g,h,i,j,k,l oo xeerinaya shuruudaha in uuna musharraxu qabin xaas ajnabi ah, xil ka-xayuubin horay loogu samayn, shuruudda degganashaaha dalka muddo shan sano ah, in uusan haysan karin dhalasho dal shisheeye, iyo ugu dambeyn soo bandhigidda hantida guurtada iyo ma guurtada.

## Natiijada Latashiyada






- **Faradda 2aad** oo ah mid cusub oo xeerinaysa soo sharraxidda musharraxa ee xisbi ama isbahaysi xisbiyo siyaasadeed. Faqraddan waxaa loo soo kordhiyay si loo waafajiyo Qodobka 54aad ee wax-kabeddelka Dastuurka oo Baarlamaanka Federaalku ansixiyay, kaas oo xeerinaya in xisbiyada siyaasadeed u tartamayaan hoggaanka Jamhuuriyadda Federaalka soomaaliya.

## Cilmibaaris: Shuruudaha Doorashada Xilka Madaxweynaha

⇒ ***Masar,*** Dastuurka dalka Masar mushararxa xilka madaxweynaha waa inuu noqdaa qof haysta jinsiyadda Masar, waalidiintiisuna yihiin Masriyiin, waxaana ka mamnuuc ah in isaga, waalidkiisa, ama xaaskiisa ay haysteen jinsiyad kale. Taas macnaheedu waa in aan loo oggolayn jinsiyad kale iyo in uu qabo xaas ajnabi ah.[260]

⇒ ***Malawi,*** dalka Malawi qofka isku sharraxaya jagada madaxweynennimada ama kuxigeenkiisa waa in uu yahay qof haysta jinsiyadda Malawi, waana in uuna daacad u ahayn dal shisheeye.[261]

⇒ ***Botswana,*** dalka Botswana, musharrax looma dooran karo xilka madaxweynaha haddii uuna ahayn muwaaddin Botswana ah, uuna buuxin shuruudaha xubnaha Baarlamaanka. Shuruudaha laga rabo xubanaha Baarlamaanka waxaa iyana ka mid ah in uuna daacad u ahayn awood ama dal shisheeye.[262]

⇒ ***Uganda,*** dalka Uganda, qofna looma dooran karo xilka madaxweynaha haddii uuna ahayn muwaaddin dalka Uganda. Sidoo kale, dalka wuxuu dastuurku si cad

260 Dastuurka Masar (2014) Qodobka 141aad.
261 Dastuurka Malawi 1994(din-u-eegis lagu sameeyay 2017), Qodobka 80aad, Faqradaha 6aad iyo 7aad(d).
262 Dastuurka Botswana, Qodobbada 61aad, 62aad, Faqradda 1aad iyo qodobka 33aad.

u mamnuucayaa labada jinsiyadood oo qofkii jinsiyad kale qaata waxa uu luminayaa tan Uganda. Sidaas daraadeed, qof jinsiyad shisheeye haysta looma dooran karo xilka madaxweynaha.[263]

## Qodobka 111aad: Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 111aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 89aad waxba lagama beddelin. Qodobkan wuxuu nidaaminayaa Habraaca Doorashada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ayadoo ay dooranayaan labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka.

## Natiijada Latashiyada




| Lr | Wadanka | Dastuurka | Muddo xileedka | Inta jeer oo dib loo dooran karo |
|---|---|---|---|---|
| 1. | Angola | 2010 | 5 | 2 |
| 2. | Benin | 1990 | 5 | 2 |
| 3. | Bostawana | 1997 | 5 | 2 |
| 4. | Burkinafaso | 2000 | 5 | 2 |
| 5. | Brundi | 2005 | 5 | 2 |
| 6. | Cameron | 2008 | 7 | Lama xaddidin |
| 7. | Cape Varde | 1990 | 5 | 2 |
| 8. | CAR | 2015 | 5 | 2 |
| 9. | Chad | 2005 | 5 | Lama xaddidin |
| 10. | Comoros | 2009 | 5 | 1 |
| 11. | Dimuqraadiga Congo | 2015 | 5 | 3 |

[263] Dastuurka Uganda 1995, qodobbada 15aad iyo 102aad.

| Lr | Wadanka | Dastuurka | Muddo xileedka | Inta jeer oo dib loo dooran karo |
|---|---|---|---|---|
| 12. | Codie Vore | 2000 | 5 | 2 |
| 13. | Djibouti | 2010 | 5 | Lama xaddidin |
| 14. | Equitorial Guine | 2011 | 7 | 2 |
| 15. | Eretria | 1997 | 5 | 2 |
| 16. | Ethiopia | 1995 | 6 | 2 |
| 17. | Gabon | 2023 | 7 | Lama xaddidin |
| 18. | Gambia | 1997 | 5 | Lama xaddidin |
| 19. | Ghana | 1992 | 4 | 2 |
| 20. | Guinea | 2010 | 5 | 2 |
| 21. | Guine-bissau | 1990 | 5 | 2 |
| 22. | Kenya | 2010 | 5 | 2 |
| 23. | Lesotho | 2009 | N/A | N/A |
| 24. | Liberia | 1984 | 6 | 2 |
| 25. | Madacasgar | 2010 | 5 | 2 |
| 26. | Malawi | 1995 | 5 | 2 oo isku xiga |
| 27. | Mali | 1992 | 5 | 2 |
| 28. | Morotania | 2006 | 5 | 2 |
| 29. | Mauritius | 1968 | 5 | Lama xaddidin |
| 30. | Mozambique | 2004 | 5 | 2 |
| 31. | Namibia | 1998 | 5 | 2 |
| 32. | Niger | 2010 | 5 | 2 |
| 33. | Nigeria | 1999 | 4 | 2 |
| 34. | Ruwanda | 2005 | 5 | 2 |
| 35. | Sao Tome e Principe | 2003 | 5 | 2 oo isku xiga |
| 36. | Senigal | 2008 | 7 | 2 |
| 37. | Seychelles | 1993 | 5 | 3 |
| 38. | Sierra Leone | 1991 | 5 | 2 |
| 39. | South Africa | 1996 | 5 | 2 |
| 40. | South Sudan | 2011 | 4 | Lama xaddidin |
| 41. | Sudan | 2005 | 5 | 2 |
| 42. | Swaziland | 2005 | N/A | N/A |
| 43. | Tanzania | 1992 | 5 | 2 |
| 44. | Togo | 2002 | 5 | Lama xaddidin |
| 45. | Uganda | 2005 | 5 | Lama xaddidin |
| 46. | Zambia | 1996 | 5 | 2 |
| 47. | Zambabwe | 2013 | 5 | 2 |

**Cilmibaaris: Doorashada Madaxweynaha**

Dalal badana ayaa dastuurradooda ku xeeriya in baarlamaanku yeelanayo awoodda doorashada madaxweynaha haddii musharraxiin helaan codad isku mid ah ama siman.

⇒ ***Koofur Kuuriya***, madaxweynaha waxaa si toos ah u doorta shacabka, laakiin laba qof ama in ka badan ay helaan tirada codadka ugu badan ee isku midka ah waxaa xilka madaxweynaha ku guulaysanaya qofka hela codka ugu badan fadhiga furan ee Golaha Shacabka oo ay ka soo qaybgaleen intooda badan xubnaha Golaha Shacabka.[264]

⇒ ***Maraykanka,*** haddii musharrax madaxweyne uusan helin aqlabiyadda codadka golayaasha doorashada *(Electoral College*), doorashadu ay u wareegayso golaha wakiillada. Gobolka kasta waxa uu leeyahay hal cod, waxaana doorashada loo qabanayaa saddexda musharrax ee ugu codka badan.[265]

⇒ ***Maraykanka,*** Madaxweynaha waxaa loo oggol yahay inuu xilka hayo ugu badnaan laba jeer (afar sano muddo xileedkiiba) muhiim ma ahan in ay isku xigaan iyo in ayna isku xigin. Taas macnaheedu waaa in aan qofna loo dooran karin xilka madaxweynaha in ka badan laba jeer, sidoo kale qof hayey xilka madaxweynaha muddo ka badan laba sano oo ka mid ah muddo xilkeed uu qof kale loo doortay, looma dooran karo xilka madaxweynaha wax ka badan hal jeer.[266]

⇒ ***Koofur Afrika,*** qofna ma qaban karo xilka madaxweynaha wax ka badan laba muddoxileed, hase yeeshee marka qof loo doorto buuxinta boos bannaan ee xilka madaxweynaha, muddada u dhexeysa doorashadaas iyo doorashada xigta ee madaxweynaha looma tixgelinayo muddoxileed rasmi ah. Mudda xileedyada muhiim ama ahan in ay isku xigaan ama kala go'an yihiin.[267]

⇒ ***Kenya,*** Madaxweynaha waxaa loo oggol yahay inuu xilka hayo ugu badnaan laba muddoxileed, ha ahaadaan kuwo isku xiga ama kala go'an.[268]

⇒ Waddamo badan ayaa doorashada madaxweynaha ku qabta hal wareeg oo lagu guulaysanayo aqlabiyad cod dheeri ah. Dalalkaas waxaa ka mid ah South Korea[269], Nigeria[270], Honduras[271], Gabon[272] iyo Togo[273] iyo dalal kale.

---

[264] Dastuurka Kuuriyada Koofureed (1948), qodobka 67aad.
[265] Dastuurka Maraykanka, Wax-kabeddelka 12aad. Sidoo kale fiiri: https://constitution.congress.gov/constitution/amendment-12/
[266] Dastuurka Maraykanka, Wax-kabeddelka 22aad ee Dastuurka Maraykanka (1951).
[267] Dastuurka Koofur Afrika, Qodobka 88aad, Faqradda 2aad.
[268] Dastuurka Kenya 2010, Qodobka 142aad.
[269] Dastuurka South Korea (1948), Qodobka 67aad. Faqradda 2aad ee qodobkan ayaa xeerinaya in haddii laba musharrax isku cod helaan lagu kala saarayo codka Baarlamaanka oo hal dheeri ah.
[270] Dastuurka Nigeria (1999), Qodobbada 133aad iyo 134aad.
[271] Dastuurka Jamhuuriyadda Honduras (1982), Qodobka 236aad.
[272] Dastuurka Gabon 1991(dib-u-eegis lagu sameeyay 2011), Qodobka 9aad, faqradda 2aad.

## Qodobka 112aad: Dhaarta Madaxweynaha

Cinwaanka Qodobkan oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 96aad oo noqday Qodobka 112aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wax isbeddel ahna laguma samayn ee sidiisa ayaa loo qaatay.

Madaxweynaha ku guuleysta doorashada waxaa la dhaarinayaa marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka, wuxuuna marayaa dhaartan:

Aniga oo ah ____________________________________________________________________, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan xilkayga u guto si daacad ah oo danta dalka, dadka iyo diintu ku jirto, ilaaliyo, dhawro, una hoggaansamo Dastuurka iyo xeerarka kale oo dalka u yaalla; difaacana madaxbannaanida, gobannimada iyo midnimada dalka; iyo inaan dadka Soomaaliyeed ku maamulo sinnaan, caddaalad iyo hufnaan.

## Qodobka 113aad: Xasaanadda Madaxweynaha

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 7aad kana hadlaya xasaanadda madaxweynaha, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** Waa faqrad cusub oo tilmaamaysa in uu Madaxweynahu leeyahay xasaanad inta uu xilka hayo oo aan la maxkamadayn karin.

- **Faqradda 2aad:** Waa faqrad cusub oo xeerinaysaa in aan Madaxweynaha lagu maxkamadayn karin hawlaha la xiriira waajibaadkiisa dastuuriga ah, haddii uusan gelin gabood fal la xiriira xuquuqda aadanaha.

**Cilmibaaris: Xasaanadda Madaxweynaha**

⇒ ***Soomaaliya,*** Dastuurkii 1960[kii] wuxuu madaxweynaha siiyay xasaanad aan loo haysan mas'uuliyad sharciyeed fal kasta oo uu ku guto waajibaadkiisa dastuuriga ah, marka laga reebo dembiyada la xiriira khiyaano qaran ama isku dayga in lagu xadgudbo nidaamka dastuuriga ah, sida uu dhigayo sharcigu.[274] Sidaas si la mid ah, dalal badan ayaa dastuurradooda ku xeeriyay in madaxweynaha dalku leeyahay xasaanad inta uu xilka hayo uuna gudanayo waajibaadkiisa dastuuriga ah.

⇒ ***Kenya***, Dastuurka[275] ayaa tilmaamaya in aan madaxweynaha lagu soo oogi karin dacwad ciqaab ama madani ah oo la xiriirta xil gudashadiisa dastuuriga ah in inta uu xilka hayo. Hase yeeshee, faqradda 3aad ee isla qodobkaas ayaa sheegaysa in

[273] Dastuurka Togo 1992(dib-u-eegis lagu sameeyay 2007), Qodobka 60aad.
[274] Dastuurka Soomaaliya 1960, Qodobka 76aad, faqradda 1aad.
[275] Dastuurka Kenya 2010, Qodobka 143aad.

ayna xasaanadda ka mid ahayn dacwadaha madaxweynuhu ku mutaysan karo dacwad caalami ah oo ku salaysan heshiis caalami ah oo dalku qayb ka yahay.

⇒ ***Ghana,*** Dastuurka[276] wuxuu sheegayaa in madaxweynaha wax dacwad ah lagu soo oogi karin inta uu xilka hayo, isla qodobkaas ayaa xeerinaya in madaxweynaha saddex sano kaddib dacwad lagu soo oogi karo arrimaha ka dhasha hawlaha uu shaqsi ahaan u qabtay oo aan la xiriirin hawlaha madaxweynaha.

⇒ ***France,*** Madaxweynaha wax dacwad ah lagu soo oogi karin hawlaha shaqadiisa la xiriira inta uu xilka hayo, laakiin bil kaddib markii uu xilka banneeyo la billaabi karo wixii dacwad ah.[277]

⇒ ***South Korea,*** Madaxweynaha laguma oogi karo dacwad ciqaab ah marka laga reebo khiyaano qaran iyo kacdoon hubaysan.[278]

⇒ ***Maraykanka,*** Dastuurka si cad uma siiyo madaxweynuha xasaanad ka dhan ah dacwadaha sharciga ah. Si kastaba ha ahaatee, fasiraadaha garsoorka ayaa aasaasay xasaanado gaar ah.

- Dacwaddii Nixon v. Fitzgerald (1982), maxkamadda sare waxay xukuntay in madaxweynuhu leeyahay xasaanad buuxda oo ka dhan ah magdhowga madaniga ah marka ay la xiriirto falalka rasmiga ah ee xafiiska.
- Dacwaddii Clinton v. Jones (1997), maxkamaddu waxay xukuntay in madaxweynuhu uusan lahayn xasaanad ka dhan ah dacwooyinka madaniga ah ee la xiriira ficilladii uu sameeyay kahor xilka ama kuwa aan khusayn waajibaadka rasmiga ah ee xafiiska.
- Dacwadaha ciqaabta, xukunka maxkamadda sare ee Trump v. United States (2024) wuxuu caddeeyay in madaxweynuhu leeyahay xasaanad buuxda marka ay timaado ficillada la xiriira waajibaadka rasmiga ah ee xafiiska, laakiin uusan lahayn xasaanad marka ay timaado ficillo aan la xiriirin hawshiisha dastuuriha ah ee madaxweynennimo.

- **Faqradda 3aad** waa faqrad cusub oo la soo kordhiyay oo sheegaysa in madaxweynaha xilka banneeya uu leeyahay maamuus khaas ah haddii aan lagu samayn xilkaxayuubin si waafaqsan Dastuurka. Nooca maamuuska, habraaca loo marayo waxaa faahfaahinaya xeer gaar ah oo Baarlamaanka federaalku soo saarayo.

[276] Dastuurka Ghana, Qodobka 57aad, faqradaha 5aad iyo 6aad.
[277] Dastuurka Farance 1958, Qodobka 67aad.
[278] Dastuurka South Korea, Qodobka 84aad.

## Qodobka 114aad: Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 114aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 90aad ee *"Xilka iyo Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya"* waxaa lagu soo koobay *"Awoodaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya".* Waxaa lagu kordhiyay faqraddan *"Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya".* Qodobkan wuxuu ka koobanyahay 13 faqradood oo inta badan cusub halka asalka Dastuurka uu ahaa hal faqrad oo ay ka farcamayeen xarfo badan.

- **Faqradda 1aad** waa faqrad cusub oo xeerinaysa in madaxweynuhu leeyahay awoodda magacaabidda Ra'iisulwasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

- **Farqadda 2aad** oo ahayd xarafka (b) ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin oo sideedii ayaa loo soo qaatay. Faqraddan waxa ay xeerinaysaa in madaxweynuhu yahay Taliyaha Guud ee Ciidanka Qalabka Sida.

- **Faqradda 3aad** oo ah mid cusub oo xeerinaysa inuu inuu Madaxweynaha awood u leeyahay ku dhawaaqaa doorasho xilligeeda laga soo hormariyey.

- **Faqaradda 4aad** waa nuxurka xarfo ka mid ah qodobka 90aad ee asalka Dastuurka oo la isku ururiyey ayadoo siineysa Madaxweynaha awood ah inuu magacaabo xilalkana ka qaado xilalka ku xusan faqradaan si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka, kaddib marka ay soo dhammaadaan habraacyada kale ee ku xusan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda, sida ansixinta Baarlamaanka iyo soojeedinta Golaha Wasiirrada.

- **Faqradda 5aad** waa xarafkii (j) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka waxaana lagu sameeyay wax-kabeddel iyo toosin, waxaana lagu kordhiyay "si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya."

- **Faqradda 6aad** waa xarafkii (m) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay "warqadaha aqoonsiga ka guddoomaa".

- **Faqradda 7aad** waa xarafkii (f) ee asalka Dastuurka oo lagu sameeyay siiqayn iyo dib-u-habayn. Faqraddan waxay xeerinaysaa in madaxweynuhu saxiixo ama celiyo hindiseyaasha xeer oo uu u soo gudbiyo Baarlamaanka federaalka si waafaqsan habraaca ku xusan Dastuurka.

- **Faqradda 8aad** waa xarafkii (q) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka oo loo qoray hab qaanuuni ah lana gaabiyey. Faqraddan waxa ay tilmaamaysaa awoodda madaxweynaha ee saxiixidda heshiisyada caalamiga ah ee uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

- **Faqradda 9aad:** waa xarafkii (a) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Waxaa "si waafaqsan sharciga" lagu beddelay "si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.".

- **Faqradda 10aad** waxay koobaysaa nuxurka xuruufta (g), (h) iyo (i) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Waxaana la tiray "furaa Golaha Shacabka", ayada lagu daray in uu furayo sanadkiiba hal mar sida ku xusan cutubka 6aad.

- **Faqradda 11aad**: waa xarafka (n) ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Wuxuu "guddoonsiiyaa" waxaa lagu beddelay "wuxuu bixiyaa abaalmarinta xushmadda qaranka".

- **Faqradda 12aad:** waa xarafkii "p" ee Qodobka 90aad ee asalka Dastuurka. Faqraddan waxaa lagu sameeyay dib u qorid kooban. Waxaa "Guddiga Adeegga Garsoorka" lagu beddelay "Xeerilaaliyaha Qaranka si waafaqsan habyaacyada ku xusan Dastuurka iyo xeerarka kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya."

- **Faqradda 13aad** waa faqrad cusub oo tilmaamaysa in madaxweynuhu fuliyo dhammaan hawlaha kale ee Dastuurka ee xeerarka dalku u xil saaraan.

## Qodobka 115aad: Soo Saarista Digreetooyinka

Qodobkan waa qodob cusub oo lagu soo kordhiyay soojeedinta wax-kabeddelka cutubka 7aad, wuxuuna ka kooban yahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad** waxay xeerinaysaa awoodda madaxweynaha in uu digreetooyin iyo amarro soo saaro kuwaas oo khuseeya awoodaha u gaarka ah dawladda federaalka.

- **Faqradda 2aad** waa mid cusub oo tilmaamaysa in digreeyinka iyo amarrada madaxweynaha ay ka hirgelayaan dhammaan geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo xeerinaysa in digreetooyinka iyo amarrada madaxweynaha ayna marna ka hor imaan karin Dastuurka iyo xeerarka federaalka. Ujeeddada faqraddan waa in la xaddido awoodda soo saaridda dikreetooyinka iyo amarrada madaxweynaha oo la ilaaliyo kala qaybsanaanta awoodaha qaybaha dawladda, isla markaana xeerarka Baarlamaanka federaalku soo saaro loo aqoonsado kuwo aan dikreeto madaxweyne khilaafi karin.

Digreetooyinka madaxweynaha waa go'aamo rasmi ah oo uu soo saaro madaxweynaha si uu u dhaqangeliyo ama u fuliyo xeerar jira, ama si degdeg ah loogu xaliyo arrimo muhiim ah oo khuseeya maamulka dawladda. Marka la eego nidaamyada dastuur ee dunida, digreetooyinka noocan ah waxay u kala baxaan badanaa laba qaybood oo waawayn:

- ***Digreetooyin Fulineed*** *(Administrative/Executive Decrees):* Kuwani waa digreetooyin uu madaxweynaha ama ra'iisulwasaaruhu soo saaro si uu u nidaamiyo fulinta sharciga, u maareeyo hay'adaha dawladda, ama u dejiyo xeerar lagu dhaqmo gudaha laanta fulinta. Waxay leeyihiin saamayn maamul laakiin ma abuuraan sharci cusub.

- ***Digreetooyin Sharciyeed ama Ku-meelgaadh ah*** *(Legislative or Provisional Decrees):* Kuwani waa digreetooyin leh xoog sharci oo kumeelgaadh ah oo uu madaxweyne soo saari karo marka xaalad degdeg ah timaaddo. Waxa madaxweynaha loo

oggolyahay inuu soo saaro digreetooyin leh awood sharciyeed, balse ay khasab tahay in baarlamaanku dib-u-eego oo ansixiyo muddo cayiman gudahood.

Waxaana digreetooyinka madaxweynuhu yihiin hab fulineed oo muhiim u ah maamulka dawladda, balse awooddooda iyo xadka ay gaadhi karaan uu go'aamiyo Dastuurka dalkaas, isla markaasna awoodda baarlamanka uu leeyahay in uu ogolaado ama uu diido, maxkamadda sare iyo maxkamadda Dastuuriga ahna yeeshaan awoodda burinta go'aanada ama amarrada ku xusan digreetooyinkaas. Dalalka badankood dastuurka waxay ku xaddidaan in digreetooyinka aanay ku xadgudbin sharciga, dastuurka, xuquuqda muwaaddiniinta ama nidaamka sharciga si loo ilaaliyo nidaamka dawladeed iyo sarraynta sharciga.

**Cilmibaaris: Digreetooyinka Madaxweynaha**

Dalal badan ayaa dastuurradoodu madaxweynaha siiyaan awoodda soo saaridda dikreetooyin iyo amarro. Dalalkaas waxaa ka mid ah Algeria[279], Argentina[280], Turkiye[281] iyo dalal kale oo badan.

⇒ ***Koonfur Afrika,*** Dastuurka[282] ma siinayo madaxweynaha awood uu ku soo saaro digreeto madaxweyne leh xoog sharci. Madaxweynaha wuxuu ku shaqeeyaa latashi golaha wasiirrada wuxuuna soo saari karaa digreetooyin ama xeerar keliya haddii uu sharcigu u idmo. Wuxuu oggol yahay xaalad degdeg ah marka nolosha qaranku halis gasho, balse waa in la ansixiyo oo la kormeeraa Baarlamaanka. Tallaabo kasta waa inay waafaqsanaataa dastuurka iyo xuquuqda aasaasiga ah.

⇒ ***Masar,*** Madaxweynaha wuxuu soo saari karaa dikreeto (*Decrees that have the force of law)*[283] oo leh awood sharci markii uuna jirin kalfadhi Baarlamaanka, waana in uu muddo 15 maalmood gudahood dikraatadaas ku horgeeyaa Baarlamaanka.

⇒ ***Nigeria,*** Madaxweynaha Nigeria wuxuu soo saari karaa amaro fulineed *(executive orders)*[284]si uu u dhaqangeliyo shuruucda jira, balse ma abuuri karo sharci cusub. Xilliyada xaaladda degdegga ah, wuxuu heli karaa awood ballaaran oo uu ku faragelin karo maamulka gobollada, si loo soo celiyo nidaamka iyo amniga. Si kastaba, waa inuu si degdeg ah uga codsadaa Baarlamaanka ansixinta digreetadaas, waxaana xaddidan muddada ay shaqaynayso.

⇒ ***Barasil,*** Madaxweynaha Brazil wuxuu soo saari karaa tallaabooyin ku-meelgaar ah oo isla markiiba dhaqan gala, balse waa in si degdeg ah loo horgeeyo Golaha Qaranka si loo ansixiyo muddo 60 maalmood gudahood (oo la kordhin karo hal

---

[279] Dastuurka Algeria 2020, Qodobka 146aad oo lala akhrinayo 156aad.
[280] Dastuurka Argentina 1853 (dib-u-eegis lagu sameeyay 1983 iyo 1994), Qodobka 99aad.
[281] Dastuurka Turkiye 1982 (dib-u-eegis lagu sameeyay), Qodonka 104aad.
[282] Dastuurka South Africa Qodobka 37aad
[283] Dastuurka Masar 2014, Qodobka 156aad,
[284] Dastuurka Nigeria Qodobada 5aad iyo 305aad

mar)[285]. Looma oggola in tallaabooyinkaas lagu taabto arrimo ciqaabeed, doorasho, ama nidaamka garsoorka. Dastuurku wuxuu u oggolaanayaa Madaxweynaha inuu soo saaro digreetooyin fulineed oo lagu dhaqan gelinayo sharciyada, balse aan wax ka beddeli karin. Haddii aan la ansixin, tallaabadaasi way dhacaysaa[286].

⇒ ***Pakistan,*** Xeerarka ku-meelgaar ah ee lagu soo saaro waxay shaqaynayaan 120 maalmood ilaa baarlamaanku ansixiyo ama kordhiyo[287]. Waxaa loo adeegsadaa xaaladaha degdegga ah ee u baahan jawaab degdeg ah. Madaxweynaha waxaa la siiyay awood uu ku soo saaro digreetooyin gaar ah xilliyada halista qaranka, balse ficilladiisa waxaa kormeera Baarlamaanka iyo maxkamadaha dastuuriga ah[288].

⇒ ***Hindiya,*** Madaxweynaha Hindiya, isagoo ku shaqeynaya talada Golaha Wasiirrada, wuxuu ku dhawaaqi karaa Xaalad Qarameed, Xaalad Dawlad-goboleed, ama Xaalad Maaliyadeed[289]. Inta lagu jiro xaaladahan, Madaxweynaha wuxuu soo saari karaa digreetooyin leh xoog sharci oo ay caadiyan Baarlamaanku lahaan lahaayeen. Si kastaba, waa in Baarlamaanka ansixiyo, waxaana maxkamaduhu awood u leeyihiin inay dib u eegaan si loo hubiyo in xaaladdu ahayd mid dastuuri ah.

⇒ ***Maraykanka,*** Awoodda fulinta Madaxweynaha[290], waxaa la siiyay awoodaha la xiriira magacaabista, ciidanka, iyo siyaasadda dibadda. Madaxweynaha waxaa lagu waajibiyay "inuu hubiyo in shuruucda si daacad ah loo fuliyo."

Dastuurka Maraykanka si toos ah uma bixiyo awood lagu soo saaro *Digreeto Madaxweyne*. Si kastaba ha ahaatee, Madaxweynaha wuxuu soo saari karaa amarro fulineed *(executive orders)* oo ka dhasha awoodihiisa dastuuriga ah iyo kuwa uu Congress u wakiishay. Amaradani waxay khuseeyaan laanta fulinta oo keliya, mana abuuri karaan sharci cusub ama ma burin karaan sharci jira. Maxkamaduhu waxay baabi'in karaan amar kasta oo ka baxsan awoodda uu dastuurku siiyay Madaxweynaha.

⇒ ***Kuuriyada Koonfureed:*** Madaxweynaha wuxuu soo saari karaa digreetooyin lagu dhaqangelinayo shuruucda, balse waa inay si buuxda ugu waafaqaan sharciga[291], wuxuu u oggolaanayaa inuu soo saaro digreetooyin degdeg ah oo leh awood sharci marka xaalad dhaqaale degdeg ah jirto, isagoo waajib ku ah inuu isla markiiba u gudbiyo Baarlamaanka si loo ansixiyo. Wuxuu oggol yahay tallaabooyin degdeg ah xilliyada dagaalka ama qalalaasaha, balse Baarlamaanka ama Maxkamadda Dastuuriga ah ayaa awood u leh inay baabi'iyaan haddii ay jebiyaan dastuurka.

---

285 Dastuurka Brazil Qodobka 62aad
286 Dastuurka Brazil Qodobka 84aad
287 Dastuurka Pakistan Qodobka 89aad
288 Dastuurka Pakistan Qodobka 232aad
289 Dastuurka Hindia Qodobbada 352aad, 356aad iyo 360aad.
290 Dastuurka Maraykanka Qodobka II, Qaybihiisa 1aad, 2aad iyo 3aad
291 Dastuurka South Korea Qodobbada 75aad, 76aad iyo 77aad.

> ⇒ ***Somaaliya:*** Dastuurka[292] Madaxweynaha ayaa awood u leh in uu soo saaro degreeto iyadoo la raacayo codsiga golaha wasiirada, waxaana shan maalmood gudahood laga billaabo taarikhda daabacaaddooda loo gudbinayaa golaha Baarlamaanka si ay ugu beddelaan sharci.

## Qodobka 116aad: Muddada Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 116aad oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 91aad waxba lagama beddelin.

- Faqradda 1aad: "Muddo afar (4) sano" waxaa laga dhigay "muddo shn (5) sano", sidoo kale waxaa la tiray "sida ku xusan qodobka 96 ee Dastuurka"

- Faqradda 2aad: waa mid cusub waxay tilmaamaysaa in aan qofna loo dooran karin xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in ka badan laba muddo xileed oo xiriir ah.

## Qodobka 117aad: Eedaynta iyo Maamuus Kaxayuubinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 117aad oo ahaa Qodobka 92aad ee asalka Dastuurka waxaa la tiray ereyada "Maxkamadeynta iyo Maamus kaqaadista", waxaana lagu beddelay "Eedaynta iyo Maamuus kaxayuubinta".

- **Faqradda 1aad:** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo dib u qoris. Waxaa la beddelay oo lagu soo kordhiyay in Golaha Shacabka u soojeedin karo eedeynta Madaxweynaha ayadoo la raaciyay sababaha lagu soo eedayn karo Madaxweynaha.

- **Faqradda 2aad** waa mid cusub oo lagu qeexayo falka khiyaanada qaran oo ay soo hoos galayaan falalka ku xusan xarfaha "a, b, iyo c" ee isla faqraddan.

- **Faqradda 3aad** waxay ahayd faqradda 2aad ee asalka Dastuurka oo tilmaamaysa in habraaca hindisaha soojeedinta eedaynta ay soojeedin karaan saddex dalool hal dalool xubnaha Golaha Shacabka. Dhammaan waxaa meesha laga saaray kaalinta maxkamadda ayadoo awooddaas la siiyay Golaha Aqalka Sare. Sidaas darteed waxaa la tiray *"Maxkamadda Dastuuriga ayaa galaysa dhageysiga eedeyntu inay sal leedahay".*

- **Faqradda 4aad** waa mid cusub waxay faahfaahinaysaa muddada Golaha Shacabka laga rabo in uu go'aan uga gaarayo eedaymaha loo soojeediyey Madaxweynaha.

- **Faqradda 5aad:** waa mid cusub waxayna xeerinaysaa in go'aanka soojeedinta eedaymaha Madaxweynaha ku ansaxayo codadka saddex meelood laba (2/3) tirada

[292] Dastuurka Soomaaliya 1960, Qodobka 63(2)

guud ee Golaha Shacabka oo kaddib loo gudbinayo Golaha Aqalka sare muddo saddex (3) maalmood ah.

- **Faqradda 6aad** waa mid cusub waxay tilmaamaysaa kaalinta Golaha Aqalka Sare iyo muddada uu ka doodayo go'aanka eedeynta ee uu Golaha Shacbku u soo gudbiyey.

- **Faqradda 7aad** waa mid cusub waxay xeerinaysa in Golaha Aqalka Sare uu leeyahay go'aanka kama dambaysta ah ee maamuus ka xayuubinta Madaxweynaha uuna ku ansaxayo oggolaashaha saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Aqalka Sare. Sidoo kale waxay xeerinaysaa in Guddoomiyaha kulanka uu ku dhawaaqayo go'aanka maamuus kaxayuubinta.

- **Faqradda 8aad** waa mid cusub waxay dhigaysaa in haddii Golaha Aqalka sare uu u codeeyo go'aanka Golaha Shacabka ee maamuuska ka xayuubinta Madaxweynaha si waafaqsan Faqradda 7aad ee qodobkan in uu xilkissa weynayo. Laakiin haddii Golaha Aqalka sare diido go'aanka maamuus ka xayuubinta in Madaxweynuhu sii wadanayo muddo xileedkiisa.

- **Faqradda 9aad** waa mid cusub waxay caddaynaysa inta ay socoto habka eedaymaha uu Madaxweynuhu sii gudanayo waajibaadkiisa ayada oo aan wax u dhimeyn maamuuskiisa iyo mansabkiisa madaxweynennimo.

- **Faqradda 10aad** waa mid cusub waxay nidaaminaysaa waxyaabaha ka reebban Madaxweynaha inta uu socdo habraaca eedaymihiisa

***Faqradda 3aad ee asalka Dastuurka waa la tiray***, nuxurkeedana waxaa lagu daray faqradaha qodobkan.

***Faqradda 4aad ee asalka Dastuurka waa la tiray,*** nuxurkeedana waxa lagu daray Qodobka 118aad ee soojeedinta.

**Cilmibaaris: Xil-kaxayuubinta Madaxweynaha**

Dalal badan ayaa leh qaab dastuuri ah oo qeexaya nidaamka xilkaqaadis laba aqal leh, halkaas oo aqalka hoose billaabo eedaynta iyo habka xilkaqaadista madaxweynaha, halka Aqalka Sare *(senate)* ama aqal u dhigma uu dhagaysto eedaymaha, go'aanna ka gaaro fadhiga dhageysiga qabsado oo go'aamiyo xil ka qaadista.[293]

⇒ ***Dalka Maraykanka,*** Aqalka Wakiillada ayaa billaaba eedaynta xilkaqaadista una codeeya, hase yeeshee Aqalka Sare *(Senate)* ayaa iska leg go'aanka xilkaxayuubinta. [294]

[293] https://www.repository.law.indiana.edu/cgi/viewcontent.cgi?params=/context/ijcd/article/1033/&path_info=A_Taxonomy_of_Impeachment_Methods_Used_Worldwide.pdf
[294] Dastuurka Maraykanka, Article I, Section 2, Clause 5; Article I, Section 3, Clauses 6–7;

⇒ ***Dalka Kenya,*** Aqalka Hoose ayaa billaaba habraaca xilkaqaadista, go'aanna soo saaraya, marka la ansixiyo waxaa loo gudbinayaa *Senate*-ka si uu go'aanka kamadambaysta ah ee xilkaqaadista.[295]

⇒ ***Dalka Nigeria,*** Golaha Wakiilladu waxay billaabaan xilkaqaadista, kaddib *Senate*-ku waa inuu sameeyaa baaritaan, go'aanna ka gaaraa.[296]

***Qodobka 93aad ee asalka Dastuurka*** nuxurkiisa waxaa lagu daray Qodobka 119aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

## Qodobka 118aad: Kusimaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 94aad ee asalka Dastuurka oo noqday Qodobka 118aad ee wax-kabeddelka Dastuurka sidiisa ayaa loo qaatay.

- **Faqradda 1aad** waxaa lagu kordhiyay oo keliya "Haddii guddoomiyuhu maqanyahay waxaa kusime madaxweyne noqonayaa guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare".

- **Faqradda 2aad:** Waxaa lagu sameeyey siiqa toosin.

## Qodobka 119aad: Bannaanaanta Xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya

Cinwaanka Qodobka 95aad ee asalka Dastuurka oo noqday Qodobka 119aad ee wax-kabeddelka Dastuurka sidiisa ayaa loo qaatay. Qodobkan oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 95aad oo ka koobnaa afar (4) faqradood wuxuu soojeedinta wax-kabeddelka noqday toddoba (7) faqradood.

- **Faqradda 1aad** waa mid cusub oo qeexaysa sababaha uu ku bannanaan karo xilka madaxweynaha oo ay ka mid yihiin: xilkaxayuubin, geeri, iscasilaad oo uu qoraal ahaan ugu gudbiyo guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare, haddii xilka laga xayuubiyo si waafqsan Dastuurka, iyo xilgudasha la'aan joogta ah sababo maskaxeed ama jireed oo uu caddeeyay dhakhtar caafimaad oo la aqoonsanyahay.

- **Faqradda 2aad** waa mid cusub oo xeerinaysa habraaca in guddoomiyaha Aqalka Sare uu warqadda iscasilaadda madaxweynaha u gudbinayo Maxkamadda Sare iyo xaqiijinta dhab ahaanta warqadda iscasilaadda.

- **Faqradda 3aad** ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa nuxurkii faqradda 1aad ee asalka Dastuurka waxaana lagu kordhiyay in guddoomiyaha Golaha Shacabka uu sii ahaanayo sii-haye inta madaxweyne laga dooranayo.

[295] Dastuurka Kenya 2010, Qodobka 145aad.
[296] Dastuurka Nigeria 1999, Qodobka 143aad.

## Natiijada Latashiyada




- **Faqradda 4aad** waa mid cusub oo xeerinaysa haddii uu iscasilo kusimaha madaxweynaha ama si buuxda oo joogto ah awood u waayo in uu guto waajibaadkiisa in Guddoomiyaha Aqalka Sare xilka madaxweynennimada sii haynayo.

- **Faqradda 5aad** waa mid cusub oo arrimaha Siihaya Madaxweynuhu qaban karin oo ka reebban.

  Faqradda 2aad ee Asalka Dastuurka waa la tiray, nuxuurkeedana waxaa loo raray faqradda 1aad ee isla qodobkan ee soojeedinta wax-kabeddelka.

- **Faqradda 6aad** waa mid cusub oo xeerinaysa in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu dooranayo madaxweynaha cusub ee beddelaya.

  Faqradda 3aad ee asalka Dastuurka waa la tiray nuxuurkeedana waxaa lagu daray faqradda 6aad ee isla qodobkan ee soojeedinta wax-kabeddelka.

- **Faqradda 7aad:** oo ahayd faqradda 4aad ee asalka Dastuurka waxba lagama beddelin ee siiqayn ayaa lagu sameeyay.

***Qodobkan 96aad ee Asalka Dastuurka*** waxaa loo raray Qodobka 112aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka.

### Jaantuska 3aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 7aad

Qodobbada cutubka toddobaad waxaa lagu sameeyay siiqayn, qaabayn, toosin, ku daris, dhimis iyo wax-kabeddel xagga nuxur axkaamta ah. Waxaa la soo kordhiyay laba (2) qodob iyo labaatan iyo toddoba (27) faqradood waxaana la tiray afar (4) faqrafood.



# FAALLADA IYO SHARRAXAADDA

## SOOJEEDINTA WAX-KABEDDELKA CUTUBKA SIDDEEDAAD: XUKUUMADDA

## Cutubka Siddeedaad: Xukuumadda

Cutubka siddeedaad wuxuu ka koobanyahay ***toban (10) qodob*** oo ka bilaabanaya ***Qodobka 120aad ilaa Qodobka 129aad,*** halka asalka Dastuurka oo ka koobnaa isla ***sideed (8) qodob***, waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay ***laba (2) qodob*** iyo ***sagaal (9) faqradood*** oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray ***laba (2) faqradood*** oo ku jiray asalkii Dastuurka. Cutubkan toddobaad arrimaha lagu soo kordhiyay waxaa ka mid ah: Xilwaayidda xubnaha golaha wasiirrada; iyo codka xilkaqaadidda ra'iisulwasaaraha iyo golaha wasiirrada.

Cinwaanka Qodobka 97aad ee asalka Dastuurka oo ahaa ***"Laanta Fulinta"*** waxaa soojeedinta wax-kabeddelka laga dhigay Qodobka 120aad ***"Xukuumadda".***

## Qodobka 120aad: Golaha Wasiirrada

***Faqradda 1aad ee asalka Dastuurka*** waa la tiray nuxurkeeda waxaa lagu daray qodobkan faqradihiisa.

- **Faqradda 1aad** ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa tiray "Golaha Wasiirradu waa hay'adda fulinta maamulka ugu sarreeysa Dawladda Federaalka".

### Cilmibaaris: Golaha Wasiirrada

⇒ ***Hungry,*** Golaha Wasiirrada waxa ay ka koobanyihiin ra'iisulwasaaraha iyo wasiirrada. Ra'iisulwasaaraha waxa uu leeyahay awood uu ku magacaabo hal ra'iisul Wasaare kuxigeen ama ka badan isaga oo isticmaalaya dikreeto.[297]

⇒ ***United Kingdom,*** Ra'iisulwasaaraha waxuu magacaabi karaa ra'iisulwasaare kuxigeen, inkasta oo jagadani aanay si rasmi ah u jirin, haddana waxaa loo magacaabaa wasiir sare oo ka tirsan xukuumadda. Waa caado, laakiin ma jiro qodob dastuuri ah oo sidaan qoraya.[298]

⇒ ***Malaysia,*** waxay leedahay Ra'iisulwasaare kuxigeen inta badan tan iyo markii ay xorriyadda heshay. Ra'iisulwasaare ayaa dooran kara inuusan magacaabin ra'iisulwasaare kuxigeen. Xafiiska ra'iisulwasaare kuxigeen ma aha mid ku qoran Dastuurka Malaysiya. Isla markaana, ra'iisulwasaare ayaa magacaabi kara in ka badan hal ra'iisulwasaare kuxigeen sida horayba u dhacday dhowr goor.[299] Ra'iisulwasaare kuxigeenka waxaa loo magacaabaa mid ka mid ah wasiirrada muhiimka ah.[300]

---

[297] Dastuurka Hungry 2011 (dib-u-eegis lagu sameeyay 2016), Qodobka 16aad.
[298] https://www.gov.uk/government/ministers/deputy-prime-minister--3#:~:text=Current%20role%20holder,-The%20Rt%20Hon&text=Angela%20Rayner%20was%20appointed%20Secretary,under%2DLyne%20in%20May%202015.
[299] Dastuurka Malaysia 1957(dib-u-eegis lagu sameeyay 2007) , Qodobka 43aad; fiiri iyadana:
[300] https://media.un.org/photo/en/asset/oun7/oun7122453

- ⇒ ***Czek Republic,*** xukummadda waa hay'adda ugu sarraysa ee awoodda fulinta. Xukuumaddu waxay ka koobantahay ra'iisulwasaaraha, ra'iisulwasaare kuxigeenno iyo wasiirro. Madaxweynaha Jamhuuriyadda ayaa magacaaba ra'iisulwasaaraha, waxaana iyadoo ku salaysan soojeedinta ra'iisulwasaaraha, magacaabi doonaa xubnaha kale ee xukuumadda oo loo xilsaari doonaa maaraynta wasaaradaha ama xafiisyada kale.[301]

- ⇒ ***India,*** In kasta oo xilka ra'iisulwasaare kuxigeenku aanu ahayn xil Dastuurka ku xusan, haddana dalka India waxa uu lahaa ra'iisulwasaare kuxigeen waqti dheer.[302] Madaxweynaha ayaa magacaaba ra'iisul wasaaraha, xubnaha kale ee golaha wasiirrada waxaa magacaaba isla madaxweynaha talobixinta ra'iisulwasaaraha kaddib.[303]

- ⇒ ***Ethiopia,*** Dastuurka Itoobiya waxa uu abuurayaa xilka ra'iisulwasaare kuxigeenka oo mas'uul ka ah fulinta hawlaha iyo mas'uuliyadaha gaar ah ee ra'iisulwasaaraha uu u xil saaro. Inta uu ra'iisulwasaaruhu maqanyahay isaga ayuu matalaa isagoo ka shaqaynaya sidii uu u socon lahaa maamulka iyo go'aannada dawladda. [304]

## Natiijada Latashiyada




- **Faqradda 2aad** waa mid cusub waxay tilmaamaysaa in Ra'iisul Wasaarahu magacaabayo xilkana ka qaadi karo Ra'iisul Wasaare kuxigeen/kuxigeenno,

[301] Dastuurka Czek Republic 1993(dib-u-eegis lagu smaeeyey 2013), Qodobbada 67aad iyo 68aad.
[302] https://www.studyiq.com/articles/list-of-deputy-pm-of-india/
[303] Dastuurka India, Qodobka 75aad, Faqradda 1aad.
[304] Dastuurka Ethiopia, Qodobka 75aad

Wasiirro, Wasiir kuxigeenno iyo Wasiiru Dawlayaal, kaddib marka uu helo oggolaanshaha Madaxweynaha.

- **Faqradda 3aad** waxaa lagu xeeriyay nuxurkii qayb ka mid ah faqradda 2aad ee asalka Dastuurka waxaana lagu kordhiyay "waxayna ku shaqeynayaan barnaamijka xukuumadda ee uu ansixiyo Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya".

***Faqradda 4aad ee asalka Dastuurka*** waa la tiray nuxurkeedana waxaa lagu xeeriyay Qodobka 120aad ee soojeedinta.

⇒ ***South Africa,*** Madaxweyne kuxigeenka iyo wasiirrada ayaa mas'uul ka ah awoodaha iyo hawlaha fulinta oo madaxweynuhu u igmaday. Sida ku cad Dastuurka. Xubnaha golaha wasiirrada waa inay si wadajir ah iyo si shaqsi ah uga jawaabaan Baarlamaanka marka ay adeegsanayaan awoodahooda iyo marka ay fulinayaan hawlaha ay dawladda u xilsaareen. Xubnaha golaha wasiirrada waa inay u hoggaansamaan Dastuurka, isla markaana bixiyaan warbixino buuxa oo joogto ah oo ku saabsan arrimaha ay gacanta ku hayaan.[305]

⇒ ***France,*** Dastuurka Faransiiska waxa uu xeerinayaa in golaha wasiirrada uu mas'uul ka yahay xaqiijinta fulinta siyaasadaha dawladda iyo hawlaha fulinta ee dawladda.[306]

⇒ ***Italy,*** Wasiirradu waxay si wadajir ah mas'uul uga yihiin howlaha golaha wasiirrada, waxaana si shaqsi ah mas'uul uga yihiin shaqooyinka wasaaradahooda. Golaha wasiirrada Talyaaniga ayaa mas'uul ka ah hoggaaminta hawlaha fulinta iyo hirgelinta siyaasadda dawladda.[307]

⇒ ***Ethiopia,*** Golaha wasiirrada waxuu ka koobanyahay ra'iisulwasaaraha iyo wasiirro uu magacaabo ra'iisul wasaaraha, waxaana uu mas'uul ka yahay hirgelinta siyaasadda dawladda.[308]

## Qodobka 121aad: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada

Qodobkan wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 98aad balse soojeedinta wax-kabeddelka dastuur waxa uu noqday Qodobka 121aad, cinwaanka qodobkna waxba lagama beddelin. Soojeedinta qodobkan waa saddex (3) faqradood si la mid ah asalka Dastuurka.

- **Faqradda 1aad** waxay xeerinaysaa shuruudaha laga doonayo ra'iisalwasaaraha oo asalka Dastuurka ahayd laba shuruudood oo ah: in da'diisu aysan ka yarayn 40 sano; iyo in aqoontiisu gaarsiisantahay heer jaamacadeed oo soojeedinta wax-kabeddelka

---

[305] Dastuurka Koofur Afrika, Qodobka 92aad.
[306] Dastuurka Faransiiska 1958, Qodobka 20aad.
[307] Dastuurka Talyaaniga, Qodobka 95aad.
[308] Dastuurka Itoobiya, Qodobka 74aad.

ah xarfaha (b) iy (c). Faqraddan waxaa lagu soo kordhiyay shuruudaha kale oo ku xusan xarfahan hoose:

- ***Xarafka (a)*** In uu yahay muwaaddin Soomaaliyeed oo muslim ah;
- ***Xarafka (d)*** In labadiisa waalid ay yihiin muwaaddiniin Soomaaliyeed;
- ***Xarafka (e)*** In uusan qabin xaas ajnabi ah;
- ***Xarafka (f)*** In lagu yaqaanno dhaqan suubban mujtamaca dhexdiisa;
- ***Xarafka (g)*** In uu si joogto ah u deggenaa dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ugu yaraan saddex sano;
- ***Xarafka (h)*** In uu dhimirkiisu dhanyahay, horayna aan dhakhtar si rasmi ah ugu caddayn xanuun dhimirka ah;
- ***Xarafka (i)*** In uusan haysan jinsiyad dal kale ama uu ka tanasulo kaddib magacaabistiisa; iyo
- ***Xarafka (j)*** In uu u soo gudbiyo xogta guud ahaan hantidiiisa oo ay ku jirto guurto iyo maguurtaba.

**Cilmibaaris: Shuruudaha Xubinnimada Golaha Wasiirrada**

Dastuurada ama shuruucda jinsiyadaha ee dalal badan ayaa mamnuucaya in *(Madaxweyne Kuxigeenka iyo/ama Ra'iisul Wasaaraha)* ay haystaan jinsiyad labaad, oo ay ku jiraan Algeria, Cape Verde, Chad, Jabuuti, Masar, Guinea-Equatorial, Gambia, Ghana, Kenya, Mozambique, Senegal, Togo, iyo Uganda. Dalka kale ee qaarkood, ka reebidda noocan ah waxaa lagu tilmaamaa xeerarka doorashooyinka.[309]

⇒ ***Dalka Kenya,*** qof aan muwaaddin Kenyan ahayn looma dooran karo, loomana magacaabi karo xil dawladeed. Sidoo kale, xubnaha ciidammada difaaca ma haysan karaan dhalasho ajnabi ah. Waxaa dhalasho loo oggolyahay garsoorayaasha, xubnaha guddiyada iyo qof dhalasho laga siiyay dal kale oo aan awoodin in uu ka noqdo xeerarka dalkaas darteed.[310]

⇒ ***Dalka Chad***, shuruudda laga rabo musharraxa madaxweynaha waxaa ka mid ah in haysto jinsiyadda Chad oo uu ku helay dhalasho ahaan, labadiisa waalid yihiin muwaadiniin Chad u dhashay, uusanna haysan dhalasho ajnabi ah.[311]

309 https://muse.jhu.edu/pub/362/oa_monograph/chapter/1760704.
310 Dastuurka Kenya (2010), Qodobka 78aad.
311 Dastuurka Chad (2018), Qodobka 67aad.

⇒ ***Dalka Algeria,*** musharraxa madaxweynaha waxaa in uusan haysan ama qaadan dhalasho ajnabi, oo uu yahay muwaaddin haysta dhalashada asalka ah ee Algeria, waana in uu caddeeyo in labadiisa waalid ay asal Aljeeriyaan ah.[312]

⇒ ***Dastuurka Ghana,*** waxa uu xeerinayaa in jagooyin ay ka mid yihiin Safiirka, Taliyaha Ciidammada, Xoghayaha Golaha Wasiirrada, Agaasimaha Hay'adda Socdaalka iyo jagooyin kale aan loo magacaabi karin qof haysta jinsiyad labaad oo wehlisa tan Ghana.[313]

## Natiijada Latashiyada




[312] Dastuurka Algeria (2020), Qodobka 91aad.
[313] Dastuurka Ghana 1992 (dib-u-eegis lagu sameeyay 1996), Qodobka 8aad, Faqradda 2aad.




- **Faqradda 2aad** waxaa lagu sameeyay dib u qorid sidoo kale waxay tilmaamaysa in isla shuruudihii faqradda 1aad laga rabo xubnaha golaha wasiirrada marka laga reebo xarfaha (b) oo noqonaysa soddon sano; xarafka (c) oo noqonaysa (5) sano iyo xarfaha (e) iyo (i).

- **Faqradda 3aad** waxay xeerinaysaa waxyaalaha ka reebban xubnaha golaha wasiirrada muddada ay xilka hayaan ayaa ahayd faqraddii 2aad ee asalka Dastuurka

  - ***Xarafka (a)*** waxaa laga saaray "aan ahayn xilka xildhibaannimada Golaha Shacabka"; iyo
  - ***Xarafka (∂)*** nuxurkiisa waxaa lagu biiriyey xarafka (c).

## Qodobka 122aad: Xilwaayidda Xubinaha Golaha Wasiirrada

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 8aad ee soojeeidnta wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waxay tibaaxayaa sababaha golaha wasiirrada ay xilkooda ku weyn karaan oo ay ka mid tahay: geeri, iscasilaad qoraal ah, xil gudasho la'aan sababo maskaxeed, eedayn khiyaano qaran iyo ku xadgudub culus oo dastuuri ah ama xeerarka kale ee dalka. Faqraddan nuxurkeeda waxaa laga soo qaatay qodobka 97aad faqradda 4aad ee asalka Dastuurka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub waxayna tilmaamaysaa in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay u baahantahay kalsoonida Golaha Shacabka haddii uu isbeddel ku yimaado kala bar in ka badan xubnaha Golaha Wasiirrada.

**Cilmibaaris: Xilwaayidda Xubnaha Golaha Wasiirrada**

Dalal badan ayaa dastuurrada ku xeeriya xilwaayidda xubnaha golaha wasiirrada. Tusaale:

⇒ ***Dalka Kenya,*** xubnaha golaha wasiirrada waxaa laga qaadayaa xilka haddii lagu helo in ay ku xadgudbeen Dastuurka ama ay sameeyeen dambiyo waawayn iyo sababo kale.[314]

⇒ ***Dalka Faransiiska,*** Madaxweynaha ayaa xilka ka qaadi kara ka ra'iisulwasaaraha, waxaana ra'iisulwasaaruhu isna xilka ka qaadi karaa xubnaha golaha wasiirrada haddii ay jiraan sababo, sida awood darro, musuqmaasuq, ama xadgudubyo kale oo dastuuri ah.[315]

⇒ ***Dalka Turkiga,*** Madaxweynaha ayaa awood u leh inuu xilka ka qaado ra'iisulwasaaraha iyo wasiirrada sababo la xiriira awooddarro, iscasilaad, ama haddii ay xadgudub ku sameeyaan waajibaadka dastuuri ah.[316]

## Qodobka 123aad: Waajibaadka Golaha Wasiirrada

Cinwaanka Qodobka 99aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 123aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ereyga *"xilalka"*, waxaa lagu beddelay *"waajibaadka"*

- ***Xarafka (a)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn ayadoo lagu kordhiyay *"iyaga oo ku dhaqaynaya aragtida iyo hagidda Madaxweynaha."*, waxayna nidaaminaysaa dejinta iyo hirgelinta siyaasadda guud.

- ***Xarafka (b)*** ee soojeedinta waa nuxurkii xarfaha (c) iyo (d) ee asalka Dastuurka waxaana lagu sameeyay toosin, wuxuuna nidaaminayaa diyaarinta hindise xeereedka.

- ***Xarafka (c)*** ee soojeedinta waa nuxurka xarafka (b) ee asalka Dastuurka waxayna xeerinaysaa dejinta xeernidaamiyeyaasha.

- ***Xarafka (d)*** ee soojeedinta waa nuxurka xarfaha (g) iyo (h) ee asalka Dastuurka, waxaana lagu sameeyay faahfaahin dheeraad ah, oo ah soojeedinta magacaabidda iyo xilkaqaadista denjireyeyaasha, taliyeyaasha iyo hay'adaha kale ee madaxabannaan.

- ***Xarafka (e)*** ee soojeedinta waa mid cusub oo xeerinaysa wadaxaajood ka heshiisyada caalamiga ah.

- ***Xarafka (f)*** waxaa lagu sameeyay siiqatoosin, waxayna xeerinaysaa dhaqangelinta xeerarka uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka.

---

[314] Dastuurka Kenya 2010, Qodobka 152aad, Faqradda 6aad.
[315] Dastuurka France 1958, qodobka 8aad.
[316] Dastuurka Turkiga 1982 (dib-u-eegis lagu sameeyay 2017), Qodobka 104aad.

- ***Xarafka (g)*** ee soojeedinta waa mid cusub, waxayna nidaamineysaa soojeedinta golaha wasiirrada xaalad degdeg ah iyo dagaal.

- ***Xarafka (h)*** ee soojeedinta waa nuxurkii xarafka (i) ee asalka Dastuurka oo toosin lagu sameeyay.

## Qodobka 124aad: Xilka iyo Awoodaha Ra'iisul Wasaaraaha

Cinwaanka Qodobka 100aad ee asalka Dastuurka oo ah Qodobka 124aad ee wax-kabeddelka Dastuurka waxaa ereyga *"awoodda"* laga dhigay *"awoodaha"*, ayadoo la tiray *"xilka"*.

- ***Xarafka (a)*** waa mid cusub oo la soo kordhiyay oo tilmaamaya in ra'iisulwasaarahu matalo golaha wasiirrada, uuna shirguddoomiyo.

- ***Xarafka (b)*** wuxuu nidaaminayaa magacaabidda iyo xilkaqaadidda xubnaha golaha wasiirada.

- Waxaa la tiray xarafka (c) ee asalka Dastuurka oo ku saabsanaa kalsooni siinta Golaha Shacabka ee golaha wasiirrada.

- ***Xarafka (c)*** waa mid cusub oo tilmaamaya mas'uuliyadda iskuxirka hawlaha wasaaradaha iyo xafiisyada dawladda.

- ***Xarafka (d)*** waa mid cusub oo lagu nidaaminayo saxiixidda go'aannada golaha wasiirrada;

- ***Xarafka (e)*** waa mid cusub oo lagu xeerinayo adkaynta xiriirka iyo iskaashiga xukuumadda federaalka iyo xukuumadaha dawlad goboleedyada;

- ***Xarafka (f)*** waa mid cusub oo tilmaamya in Ra'iisalwasaarahu uu xilsaaranyahay horumarinta iyo sare u qaadidda maamulwanaagga; iyo

- ***Xarafka (g)*** waa xarafka (d) ee asalka Dastuurka waxaana lagu xeeriyay in Ra'iisalwasaaraha laga rabo in u fuliyo hawlaha kale uu u xilsaaray madaxaweynaha si waafaqsan Dastuurka ama xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

## Qodobka 125aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Ra'iisulwasaare Kuxigeenka

Cinwaanka Qodobka 101aad ee asalka Dastuurka oo hadda ah Qodobka 125aad waxba lagama beddelin.

## Qodobka 126aad: Awoodaha iyo Waajibaadka Wasiirka, Wasiiru Dawlaha iyo Wasiir Kuxigeenka.

Cinwaanka Qodobka 102aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 126aad, waxaa ereyga *"Xilka"* lagu beddelay *"Waajibaadka"*

- **Faqradda 1aad:** Nuxurkiisa waxba lagama beddelin oo sideeda ayaa loo qaatay. Waxaa la tiray "si shakhsi ah".

- **Faqradda 2aad:** Faqraddan siiqo toosin ayaa lagu sameeyay, waxaana lagu soo kordhiyay "wuxuuna yahay kusimaha wasiirka marka uu maqanyahay".

- **Faqradda 3aad:** Faqraddan nuxurkeeda waxba lagama beddelin waxaa lagu sameeyay dib-u-siiqayn.

- **Faqradda 4aad** waa mid cusub waxayna tilmaamaysa haddii Wasiir xilka laga qaado ama uu xilka banneeyo sababo kale awgeed in Wasiir Kuxigeenka uu siihaynayo xilka inta laga soo magacaabayo wasiir cusub.

## Qodobka 127aad: Dhaarta Golaha Wasiirrada

Qodobkan wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 104aad, balse soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa laga dhigay Qodobka 127aad. Qodobkan dib-usiiqayn ayaa lagu sameeyay.

Xubnaha Golaha Wasiirrada waxaa dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Federaalka, waxayna marayaan dhaarta soo socota:

Aniga oo ah________________________________________________________________, waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan si dhab ah daacad ugu noqdo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; dhawrana una hoggaansamo Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka dalka; uguna adeego xilka la ii magacaabay dadka iyo dalka si sharaf, xilkasnimo, hufnaan iyo isla-xisaabtan ku jirto, aniga oo ilaalinaya sirta hawsha la igu aaminay.

## Qodobka 128aad: Xil-kaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 8aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka, wuxuuna ka kooban yahay afar (4) faqradood.

- **Faqradda 1aad** waa mid cusub waxay xeerinaysaa soojeedinta xil-kaqaadista Ra'iisalwasaaraha iyo wasiirrada.

## Cilmibaaris: Xilkaqaadidda Ra'iisul Wasaaraha iyo Golaha Wasiirrada

⇒ ***Faransiiska,*** Madaxweynaha ayaa magacaaba ra'iisulwasaaraha, xilkana ka qaada marka uu soo gudbiyo iscasilaaddiisa. Golaha Shacabka wuxuu awood u leeyahay in uu kalsoonida kala noqdo xukuumadda.[317]

⇒ ***Koofur Kuuriya,*** Baarlamaanka waxa uu soojeedin karaa talo ku saabsan xilkaqaadista ra'iisulwasaaraha ama xubin ka tirsan golaha xukuumadda. Talo soojeedintan waxaa samayn kara saddex meelood meel (1/3) ama ka badan xubnaha guud ee Baarlamaanka, waxaana lagu ansixin doonaa cod aqlabiyad hal dheeri ah ee xubnaha Baarlamaanka.[318]

⇒ ***Koofur Afrika,*** Baarlamaanka ayaa codka kalsoonida u qaadi kara madaxweynaha iyo xubnaha kale ee golaha wasiirrada. Haddii baarlamaanku cod aqlabiyad ah kalsoonida kala noqdo golaha xukuumadda oo aan madaxweynuhu ku jirin waa in madaxweyuhu dib u magacaabaa golaha. Hase yeeshee haddii baarlamaanku kalsooniga kala noqdo madaxweynaha, madaxweynaha iyo xubnaha kale ee golaha wasiirrada iyo wasiir kuxigeennada waa inay iscasilaan.[319]

⇒ ***Uganda,*** xubin kasta oo ka tirsan golaha wasiirrada waxaa laga qaadi karaa xilka iyadoo Baarlamaanka uu codsado. Talo ku saabsan kaqaadista xilka waxaa soojeedin kara ugu yaraan saddex meelood meel (1/3) xubnaha Baarlamaanka, go'aankuna waa in lagu ansixiyaa cod aqlabiyad ah ee xubnaha Baarlamaanka.[320]

- **Faqradda 2aad** waa mid cusub waxay tilmaamaysaa muddada guddoonka golaha shacabku ay golaha wasiirrada ku horgaynayaan Golaha Shacabka si ay uga doodaan.

- **Faradda 3aad** waa mid cusub oo xeerinaysa in Golaha Shacabka go'aan ugu gaarayo hindisaha xilkaqaadista ugu badnaan muddo 15 maalmood ah ayadoo cidda uu hindisaha khuseeyo la siinayo fursad uu isku difaaco Golaha Shacabka hortiisa.

- **Faqradda 4aad** waa mid cusub oo xeerinaysa habraaca hindisaha xilkaadista iyo magacaabista Ra'iisalwasaaraha iyo Golaha Wasiirrada.

---

317 Dastuurka Faransiiska 1958, Qodobbada 8, 49aad iyo 50aad.
318 Dastuurka Koofur Kuuriya, Qodobka 63aad.
319 Dastuurka Koofur Afrika, Qodobka 102aad.
320 Dastuurka Uganda 1995, Qodobka 118aad.

## Qodobka 129aad: Xukuumadda Xilgaarsiinta

Ciwaanka Qodobka 103aad ee asalka Dastuurka oo hadda noqday Qodobka 129aad waxba iskama beddelin. Qodobkan wuxuu asalka Dastuurka ahaa hal (1) faqrad, balse soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka wuxuu noqday laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** dib u siiqayn ayaa lagu sameeyay, laakiin nuxurka isbeddel laguma samayn, waxayna xeerinaysaa in xukuumaddu fulinayso waajibaadkeeda caadiga ah.

- **Faqradda 2aad:** faqraddan waxaa lagu xeeriyay arrimaha ka reebban xukuumadda xilgaarsiinta:

    - ***Xarafka (a)*** in xukuumaddu aysan geli karin heshiisyo caalami ah.

    - ***Xarafka (b)*** in aysan soojeedin karin magacaabidda iyo xilkaqaadista xilalka sare ee dawladda.

    - ***Xarafka (c)*** in aysan soo gudbin karin hindise xeereed.

    - ***Xarafka (d)*** in aysan qaadan karin go'aano abuuri kara qalalaase siyaasadeed.

    - ***Xarafka (e)*** in aysan jaangoynkarin qiimaha badeecadaha iyo mushaharaadka.

    - ***Xarafka (f)*** in aysan soojeedin karin afti-dadweyne iyo ku dhawaaqidda xaalad degdeg ah iyo mid dagaal.

## Cilmibaaris: Xukuumadda Xilgaarsiinta

Xukuumadda xilgaarsiinta waa qayb muhiim ah oo ka mid ah nidaamka dawladnimo ee casriga ah, gaar ahaan marka la joogo marxaladaha kalaguurka, doorashada ama isbeddelka xukuumadda. Ujeeddadeedu waa in la hubiyo in maamulka dawladdu uusan istaagin, isla markaana aysan dhicin faragelin siyaasadeed oo saamaysa hannaanka doorashada ama xukuumadda cusub ee imaanaysa.

Dalalka adduunka waxay u maareeyaan xukuumadda xilgaarsiinta siyaabo kala duwan, qaarkood waxay ku qeexaan dastuurkooda, halka qaar kale ay ku tiirsan yihiin dhaqan siyaasadeed, ama sharci oo xaddida awoodda xukuumadda sii shaqaynaysa.

Marka la qeexayona, xukuumadda xilgaarsiinta *(caretaker government)* waa xukuumad sii shaqaysa inta u dhexeysa dhammaadka xukuumaddii hore iyo dhismaha xukuumadda cusub, ama marka baarlamaan la kala diro, ama doorasho markay dhammaato. Inta lagu jiro muddadan, badanaa xukuumaddu waxay:

- Fulisaa oo keliya hawlmaalmeedka aan hakad geli karin.
- Ka fogaataa go'aamo waawayn oo siyaasadeed ama dhaqaale.
- Ilaalisaa joogtaynta maamulka iyo xasilloonida kalaguurka.
- Shaqadeeda ku saleeysaa xaddidaado sharci iyo dhaqan dawladnimo.

Dal walba heerka uu ku nidaamiyo xukuumadda xilgaarsiinta way ku kala duwanyihiin, qaarkood waxay leeyihiin qodobo dastuur oo cad, halka qaar kale ay ku tiirsan yihiin dhaqanka, curfiga iyo nidaamka siyaasadeed.

⇒ **Maraykanka,** Dastuurka Maraykanku ma laha qodob xaddida awoodaha madaxweynaha xilliga kalaguur ah. Madaxweynaha ayaa haynaya awoodihiisa oo dhan ilaa 20[ka] Jannaayo ee xilwareejinta[321]. Maraykanka ma laha nidaam si gaar ah u xaddida awoodaha xukuumadda xilliga kalaguurka, sababtoo ah waa nidaam madaxweyne oo leh muddo xukun oo go'an. Madaxweynuhu wuxuu hayaa dhammaan awoodihiisa dastuuriga ah, ilaa maalinta rasmiga ah ee xilwwareejinta.

Nidaamka dawladeed ee la xisaabtanka iyo heelitirka awoodda *(Check and Balance)* ayaa keenaya in madaxweynuhu ka fogaado go'aamo waawayn marka waqtigu ka dhammaanayo, haddana sharci ahaan wax xannibaad ahi ma jiraan. Sidaa darteed, Maraykanka si buuxda uma adeegsado fikradda xukuumad xilgaarsiinta, maaddaama awoodaha madaxweynuhu aanay isbeddelin inta lagu jiro kalaguurka

[321] Datuurka Maraykanka, Wax-kabeddelka 20aad

⇒ ***Koonfur Afrika,*** Madaxweynaha xilka ayuu sii haya ilaa mid cusub la dhaariyo, sidoo kale golaha wasiirrada ayaa sii haynaya xilka si ku-meelgaar ah ilaa xukuumad cusub la magacaabo[322].

Koonfur Afrika waa nidaam isku dhafan oo u dhexeeya baarlamaan iyo madaxweyne. Marka la doorto baarlamaan cusub, xukuumaddii hore waxay sii haynaysaa xilka ilaa madaxweynaha cusub magacaabo golaha wasiirrada. Inkasta oo aan si rasmi ah loogu naanaysin "xukuumad xilgaarsiineed," haddana nidaamka iyo dhaqanka dawladnimo waxay abuuraan xaalad ay xukuumadda sii shaqaynaysaa ku koobnaanayso hawlaha maalinlaha ah.

Xukuumaddu waxay iska ilaalisaa samaynta go'aamo siyaasadeed oo waawayn, gaar ahaan kuwa saamayn dhaqaale ama siyaasadeed yeelan kara, si loo ilaaliyo xasilloonida xilliga kalaguurka.

⇒ ***Nigeria,*** Dastuurku ma nidaamiyo xukuumad xilgaarsiineed, balse wuxuu tilmaamayaa in Madaxweynaha awoodihiisa uu haynayo ilaa xil-wareejinta[323].

Nigeria, oo ah nidaam madaxweyne leh muddo xukun oo go'an, ma laha wax qodob sharci ah oo nidaamiya xukuumadda xilgaarsiinta. Sidaas darteed, madaxweynaha waqtigu ka dhammaanayo wuxuu sii hayaa awoodihiisa oo dhan illaa madaxweynaha cusub xilka la wareego.

Dhaqan ahaan, waxaa laga fishaa inuu ka fogaado tallaabooyin waawayn ama go'aanno cusub oo saamayn fog leh, laakiin filashadaas sharci ahaan kuma tiirsana. Taasi waxay ka dhigan tahay in mararka qaarkood xukuumadda waqtigeedu dhammaanayo ay qaado go'aamo culus, maaddaama aanay jirin nidaam sharci oo awoodaha xaddida xilligaas.

⇒ ***Kenya,*** Dastuurka[324] wuxuu dhigaya in madaxweynaha ku jira xilli kala-guur uusan:

- Magacaabi karin ama cayrin karin saraakiisha ugu sarreeya.
- Saxiixi karin heshiisyo masiiri ah ama siyaasado cusub.
- Bixin karin abaalmarinno ama samayn karin tallaabooyin siyaasadeed oo waawayn.

Kenya waxay leedahay nidaam aad u qeexan oo si toos ah u xaddidaya awoodaha xukuumadda xilgaarsiinta. Inta lagu jiro muddada kalaguurka, madaxweynaha iyo xukuumaddiisu waxay ku koobnaadaan hawlaha dawladda ee lagama maarmaanka ah, sida bixinta mushaharka, ilaalinta adeegyada guud, iyo fulinta waajibaadka sharci ee sii socconaya.
Waxaa sharci ahaan mamnuuc inay magacaabaan ama ceyriyaan saraakiil sare, inay saxiixaan heshiisyo waawayn oo caalami ah, ama inay abuuraan siyaasado cusub oo

[322] Dastuurka Koofur Afrika, Qodobbada 88(2) iyo 94aad
[323] Dastuurka Nigeria, Qodobada 135aad iyo 136aad
[324] Dastuurka Kenya, Qodobka 134aad.

masiiri ah. Tani waxay damaanad qaadaysaa in xukuumadda tagaysa aysan saamayn ku yeelan maamulka cusub ama hannaanka doorashada.

⇒ ***Faransiiska,*** Dastuurku[325] madaxweynaha xilka haya ayaa sii shaqaynaya ilaa mid cusub la dhaariyo. Dastuurku ma xaddido awoodaha xukuumadda kalaaguurka.

Faransiisku ma laha qodob sharci oo si cad u xaddida awoodaha xukuumadda kalaguurka. Madaxweynaha awoodihiisu ma yaraadaan, waxaana u bannaan inuu sii wato magacaabis ama go'aan qaadasho ilaa xilligii rasmiga ahaa ee xilwareejinta. Hase yeeshee, dhaqanka siyaasadeed ee Faransiiska ayaa aad ugu xoog badan, waxayna xukuumadda ku dhiirrigelisaa inay ka fogaato go'aamo waawayn xilliga kalaguurka.

⇒ ***Jarmalka,*** Dastuurka[326] waxay Kanzalarka iyo wasiirradu sii hayaan xilka si xilgaarsiineed *(geschäftsführend)* ilaa xukuumad cusub la dhiso.

Jarmalka waxay leedahay nidaamka ugu nidaamsan ee xukuumadda xilgaarsiinta, wuxuuna si cad u dhigaya in Kanzalarka iyo wasiirradu ay sii hayaan xilka si xilgaarsiineed (*geschäftsführend*) ilaa la magacaabo xukuumad cusub.

Xukuumadda xilgaarsiinta waxay ku koobnaanaysaa hawlaha lagama maarmaanka ah, iyadoo aan qaadi karin go'aamo waawayn oo siyaasadeed, dhaqaale ama qorshayn ah. Nidaamkani wuxuu muhiim u yahay Jarmalka, gaar ahaan marka wadahadallada lagu dhiso xukuumadda *(coalition negotiations)* ay qaataan waqti dheer. Sidaas darteed, dawladdu way shaqaysaa laakiin awoodo cusub oo waawayn ma adeegsan karto.

## Jaantuska 4aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 8aad

Qodobbada cutubka siddeedaad waxaa lagu sameeyay siiqayn, qaabayn, toosin, ku daris, dhimis iyo wax-kabeddel xagga nuxur axkaamta ah. Waxaa la soo kordhiyay laba (2) Qodob iyo sagaal (9) faqradood; halka la tiray laba (2) faqrafood.




[325] Dastuurka France Qodobka 7aad
[326] Dastuurka Jarmalka (Grundgesetz) Qodobka 69(3):

# FAALLADA IYO SHARRAXAADDA

## SOOJEEDINTA WAX-KABEDDELKA CUTUBKA SAGAALAAD: GARSOORKA

## Cutubka Sagaalaad: Garsoorka

Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka wuxuu Heshiiska Hannaanka Federaalaynta Garsoorka oo ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka ku sameeyay falanqayn dhammaystiran, ayadoo heshiiskan lagu dhafay soojeedimaha wax-kabeddelka cutubka 9aad ee Garsoorka. Heshiiska ayaa lagu faahfaahiyay:

- ⇒ Hannaanka Garsoorka dalka oo noqonaya "Hannaanka Isku-dhafka ah";
- ⇒ Mabaadii'da Garsoorka;
- ⇒ Qaabdhismeedka Maxkamadaha Dalka;
- ⇒ Xeerka Nidaamka Garsoorka;
- ⇒ Dhismaha Golaha Sare ee Garsoorka;
- ⇒ Awoodaha ay kala yeelanayaa maxkamadaha;
  - o Maxkamadda Dastuurka;
  - o Maxkamadda Sare ee Federaalka;
  - o Maxkamadda Sare ee Dawlad Goboleedyada;
  - o Maxkamadaha Racfaanka Dawlad Goboleedyada;
  - o Maxkamadaha Darajada Koowaad;
- ⇒ Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
- ⇒ Habraaca Magacaabiska xubnaha garsoorka; iyo
- ⇒ Dhaqaalaha Garsoorka.

Cutubka sagaalaad wuxuu ka koobanyahay ***labaatan iyo shan (25) qodob*** oo ka bilaabanaya ***Qodobka 130aad ilaa Qodobka 154aad***, halka asalka Dastuurka oo ka koobnaa ***sideed (8) qodob,*** waxaa xusid mudan in lagu soo kordhiyay ***labaatan (20) qodob*** iyo ***siddeetan (80) faqradood*** oo cusub oo aan ku jirin asalka Dastuurka. Waxaa la tiray ***saddex (3) Qodob*** oo asalkii Dastuurka ku jiray.

Cutubkan waxaa loo kala qaybiyay afar madax oo kala ah: (a) Madaxa 1aad: Qodobbo Guud; (b) Madaxa 2aad: Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka; (c) Madaxa 3aad: Xeer-ilaalinta Guud; iyo (d) Madaxa 4aad: Maamulka Garsoorka. Cutubkan sagaalaad arrimaha lagu soo kordhiyay waxaa ka mid ah:

- Dhismaha Maxkamadda Sare iyo awoodaheedda;
- Dhismaha Maxkamadda Dastuurka iyo awoodaheeda;
- Dhismaha Maxkamadda Kore oo ay yeelanayaan Dawlad Goboleedyada;
- Maxkamadda Racfaanka Dawlad Goboleedyada;
- Garsoorka Ciidamadda;
- Dhismaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud;
- Maamulka Garsoorka; iyo
- Sanduuq maaliyadeed oo u gaar ah garsoorka.

Qoraalkan soo socda wuxuu faahfaahin ka bixinayaa wax-kabeddelka ku yimid cutubka sagaalaad, iyadoo la tilmaamayo nooca wax-kabeddelka lagu sameeyay, asbaabaha keenay wax-kabeddelka iyo cilmibaarista uu Guddiga Madaxabannaan sameeyay oo arrintaas la xiriirta (haddii ay jirto) iyo sidoo kale, tusaalooyin laga soo qaatay dalal ka mid ah caalamka ee la xiriirta axkaamtaas.

## Madaxa Koowaad: Qodobbo Guud

Magaca Cutubka soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waxaa lagu soo koobay "Garsoorka" halka uu asalka Dastuurka ka ahaa " Awoodda Garsoorka".

Madaxan waa mid cusub oo nidaaminaya qodobbo guud iyo mabaadii'da iyo madaxbannaanidda garsoorka.

## Qodobka 130aad: Mabaadi'da Garsoorka

Qodobkan waa qodob cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad, wuxuuna ka koobanyahay saddex faqradood.

- **Faqradda 1aad:** Faqraddan oo ahayd faqradda 1aad ee qodobka 105aad ee Asalka waa la ballaariyay nuxurkeeda, waxaana lagu kordhiyay in awoodda garsoorka ay ka timaaddo shacabka, mas'uuliyadda gaarka ah ee fulintana ay saarantahay maxkamadaha iyo xaafiiska xeer-ilaaliyaha guud.

- **Faqradda 2aad:** oo ah faqrad cusub waxay nidaaminaysaa mabaadi'da hagaysa hay'adaha garsoorka marka ay xilkooda gudanayaan.

- **Farqadda 3aad:** oo ah faqrad cusub waxay xeerinaysaa in hannaanka dadban ee xallinta khilaafaadka in uusan ka hor imaan karin Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee Dalka. Sidoo kale xuquuqda iyo xorriyaadka aas-aasiga ah ee Dastuurka aysan ku xadgudbin.

***Qodobka 105aad ee Asalka Dastuurka waa la tiray,*** wuxuuna xeerinayay Awoodda Garsoorka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya. Faqrdda 1aad nuxurkeeda waxaa lagu daray Qodobka 130aad ee soojeedinta, halka faqradda 2aad lagu daray Qodobka 133aad ee soojeedinta oo faahfaahinaya qaabdhismeedka Maxkamadaha.

## Qodobka 131aad: Madaxbannaanida Garsoorka

Cinwaanka Qodobka 131aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahaa Qodobka 106aad waxba lagama beddelin.

- **Faqradda 1aad:** Nuxurkeeda waxba laga beddelin, waxaa lagu daray *"ayadoo aanay jirin wax faragelin ah"* sidoo kale Ereyga "Sharcidejinta" waxa lagu beddelay "Xeerdejinta". Nuxurka qaybta dambe ee faqradda asalka ahayd "Xubnaha garsoorku waxay u hoggaansamayaan oo keliya sharciga" waxaa lagu daray faqradda 2aad ee soojeedinta.

- **Faqradda 2aad:** Waa mid cusub oo xeerinaysa in garsoorku u hoggaansamayo oo keliya Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka.

- **Faqradda 3aad:** Waa mid cusub oo xeerinaysa in aan garsoorka iyo hawlwadeennadiisa cidina faragelin ku samayn karin marka ay gudanayaan waajibaadkooda.

- **Faqradda 4aad:** Waa mid cusub oo tilmaamaysa in garsoorku leeyahay madaxbannaani maamul iyo mid maaliyadeedba.
- **Faqradda 5aad:** Waa mid cusub oo looga gol-leeyahay in loo sinnaado xeerka, loona hoggaansamo fulinta go'aannada, ammarrada, qaraarrada iyo xukunnada ka soo baxa maxkamadaha.

- **Faqradda 6aad:** Faqraddan waa faqradda 2aad ee asalkii Dastuurka, waxaana lagu sameeyay siiqayn. "Garsooraha" waxaa lagu beddelay "xubin ka tirsan garsoorka". Sidoo kale, waxaa la tiray "garsoorennimo", oo waxaa lagu soo koobay "gudashada xilkiisa".

- **Faqradda 7aad:** Farqaddan waa faqradda 3aad ee asalka Dastuurka oo lagu sameeyay dib u habeyn habka siiqada ah, waxaana la faahfaahiyey nuxurkeeda.

- **Faqradda 8aad:** Waa mid cusub oo tilmaamaysa in sida keliya oo go'aan garsoor lagu duri karo ay tahay sida xeerku dhigayo.

- **Faqradaha 9aad:** Waa mid cusub oo sababta loogu soo kordhiyay ayaa ah in aan si fudud oo aan xeer ku qotomin loo beddelin garsoorayaasha, xilkana looga qaadin.

**Cilmibaaris: Madaxbannaanida Garsoorka**

Madaxbannaanida garsoorku waxay leedahay dhawr qaybood oo isku xiran oo u shaqeeya si wadajir ah nidaamyada dastuuriga ah. Madaxbannaanida hay'adeed waxay khusaysaa sida awoodda garsoorka loogu wareejiyo maxkamadaha iyo xeer-ilaalinta iyo sida loo xaddido faragelinta fulinta ama sharcidejinta. Madaxbannaanida shaqsiga waxay khusaysaa garsoorayaasha iyo xeer-ilaaliyayaasha oo haya xilka garsoorka, waxaana ku jira sugnaanta muddada xilka, ilaalinta mushaarka iyo xaddidaadda kala wareejinta ama ka qaadista xilka.

Madaxbannaanida go'aan qaadashada waxay khusaysaa awoodda garsooraha ee ku saabsan in uu kiiska ku xukumo si waafaqsan sharciga iyo caddeynta iyada oo aan loo saarin tilmaam ama cadaadis dibadeed oo uu ka madaxbannaanyahay faragelin garsoorka dhexdiisa ah. Madaxbannaanida maamul iyo maaliyadeed waxay khusaysaa awoodda lagu maamulo nidaamka maxkamadaha, miisaaniyadda iyo shaqaalaha, badanaa iyadoo loo marayo gole adeeg garsoor ama hay'ad kale si loo yareeyo faragelinta tooska ah ee hay'adaha kale ee dawladda. Waxaan hoos ku tilmaamaynaa sida dalalka qaar arrinka madaxbannaanida garsoorka ugu nidaamiyaan dastuurrada ugana ilaaliyaan hay'adaha garsoorka saameynta siyaasadeed.

⇒ ***Dalka Maraykanka,*** Qodobka IIIaad qaybtiisa 1aad ee Dastuurka Maraykanka waxa uu awoodda garsoorka u dejiyaa maxkamadaha federaalka, waxa uu garsoorayaasha siinayaa muddada xil haynta inta ay ku jiraan "dhaqan

wanaagsan", waxaana uu ka ilaaliyaa mushaarkooda in la dhimo. Ka qaadista xilku waxay raacdaa habraaca xil ka qaadista ee ku jira Qodobka IIaad qaybtiisa 4aad.

⇒ ***Dalka Hindiya,*** Dastuurka[327] wuxuu amrayaa kala soocidda garsoorka iyo fulinta, sidoo kale Dastuurka wuxuu nidaamiyaan magacaabista iyo ka qaadista xilka garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadaha Sare iyada oo loo marayo hab sharciyeed oo u baahan aqlabiyad gaar ah oo labada gole ah. Dastuurka wuxuu xaddidayaan doodaha Baarlamaanka ee ku saabsan garsoorayaasha. Qodobada 129aad iyo 215aad waxay maxkamadaha sare siinayaan awood ciqaabeed oo ku saabsan ku xadgudubka maxkamadda.

⇒ ***Dalka Jarmalka,*** Qodobka 92aad ee Axdiga Aasaasiga ah waxa uu awoodda garsoorka u wareejiyaa maxkamadaha federaalka iyo kuwa *Länder*-ka. Qodobka 97aad waxa uu dhigayaa in garsoorayaashu madaxbannaan yihiin oo ay ku xiran yihiin oo keliya sharciga. Qodobka 98aad waxa uu qeexayaa habraacyada anshax marinta iyo ka qaadista xilka, oo ay ku jirto in arrinta loo gudbin karo Maxkamadda Dastuuriga ee Federaalka.

⇒ ***Dalka Koofur Afrika,*** Qodobka 165aad waxa uu awoodda garsoorka u dhiibay maxkamadaha wuxuuna mamnuucayaa faragelinta. Garsoorayaasha waxaa lagu magacaabaa Qodobka 174aad iyada oo ay ku lug leedahay Guddiga Adeegga Garsoorka. Qodobka 176aad waxa uu sugayaa mushaarka garsoorayaasha wuxuuna nidaaminayaa muddada xilka.

⇒ ***Dalka Kenya,*** Qodobka 159aad waxa uu awoodda garsoorka u dejiyaa maxkamadaha. Qodobka 160aad waxa uu sheegayaa in garsoorku ku xiran yahay oo keliya Dastuurka iyo sharciga, isla markaana aan garsoorayaal lagu faragelin karin. Qodobada 163aad ilaa 168aad waxay nidaamiyaan qaabdhismeedka maxkamadaha, magacaabidda, muddada xilka iyo ka qaadista xilka, iyada oo Guddiga Adeegga Garsoorku leeyahay kaalin aasaasi ah.

⇒ ***Dalka Nigeria,*** Qodobka 6aad waxa uu awoodda garsoorka siinayaa maxkamadaha federaalka iyo kuwa dawlad goboleedyada. Guddiga Qaranka ee Garsoorka, oo lagu aasaasay Qodobka 153aad iyo Jadwalka Saddexaad, wuxuu soojeediyaa magacaabista wuxuuna maareeyaa anshax marinta. Qodobada 271aad iyo 292aad waxay nidaamiyaan magacaabista iyo ka qaadista xilka garsoorayaasha federaalka iyo kuwa dowlad goboleedyada, iyaga oo u baahan taageero sharcidejineed.

[327] Dastuurka Hindiaya, Qodobka 50aad, Qodobbada 127aad – 217aad, Qodobka 121aad iyo 211aad,

## Qodobka 132aad: Habka Dacwad Qaadista Maxkamadaha

Nuxurka cinwaanka Qodobka 132aad oo asalka Dastuurka oo ahaa Qodobka 107aad waxba lagama beddelin, keliya waxaa lagu kordhiyay ereyga "Maxkamadaha".

- **Farqadda 1aad:** Waa mid cusub oo ka hadlaysa in qof kasta uu xaq u leeyahay in uu u dacwoodo maxkamadaha iyadoon lagu takoorayn duruufihiisa gaarka ah.

- **Faqradda 2aad:** Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad, dib-usiiqayn ayaa lagu sameeyay, waxaana lagu soo kordhiyay: "midda guud, anshax wanaagga iyo badqabka, tacaddiyada haweenka iyo sababo kale oo uu garsooruhu go'aamin karo".

- **Faqradda 3aad:** ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxba lagama beddelin, waxayna xeerinaysaa in fursad isku mid ah la siiyo dhinacyada.

- **Faqradda 4aad:** Waa mid cusub oo caddeynaysa in go'aanka maxkamadda aan la daahin karin sabab suurtagal ah la'aanteed.

- **Faqradda 5aad:** Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 3aad waxaa lagu kordhiyay eray "maangal iyo lagu bixiyo qoraal".

- **Faqradda 6aad:** Waa mid cusub oo tilmaamaysa in la oggaysiiyo dhinacyada go'aanka la gaaray, sidoo kale la keydiyo.

- **Faqradda 7aad:** Waa mid cusub oo tilmaamaysa in xukun ama go'aan kasta yeesho racfaan si waafaqsan sharciga.

## Madaxa Labaad: Maxkamadaha Jamhuuriyadda Federaalka

Madaxan waa mid cusub wuxuu xeerinayaa axkaamta la xiriirta maxkamadaha sida qaabdhismeedka iyo awoodaha maxkamadaha.

## Qodobka 133aad: Qaabdhismeedka Maxkamadaha Dalka

Cinwaanka Qodobka 133aad ee soojeedinta wuxuu asalka Dastuurka ahaa Qodobka 108aad, ereyga "Qaabka" waxaa lagu beddelay "Qaabdhismeedka".

Guddiga Madaxabannaan ee Dastuurka wuxuu halkaan kusoo bandhigayaa sooyaalka Garsoorka Soomaaliya si uu akhristuhu u helo fahan dheeraad ah oo ku aadan hannaaanka Garsoorka:

**Cilmibaaris: Taariikh Kooban ee Garsoorka Soomaaliya**[328]

Garsoorka Soomaaliya waxaa uu soo maray marxalado kala duwan, amase waxaa la dhihi karaa dawladda Soomaaliya ay hadba heer maraysey. Heer kastana waxaa jiray Dastuur iyo xeerar la socda xilligaas. Waxaan shaki ku jirin in uu heerba heerkii ka horreeyey wax-kabaddelay, isla markaana ay jiraan waxyaalo heerka dambe uu ka shidaal qaato heerkii ka horreeyay ilaa intii laga soo gaarayay waqtigii u dhexeeyey 2004-2012. Haddaba, qaybaha soo socda waxaa lagu soo bandhigi doonaa taariikhda garsoorka oo u kala qaybsan seddexdii marxaladood oo ay Soomaaliya soo martay.

**Nidaamkii Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii Kowaad (1960-1969)**

Dastuurka 1960 kii wuxuu si kooban u tilmaamay awoodaha, madaxbannaanida garsooridda[329], asagoo qeexay Maxkamadda Sare[330] in ay tahay tan ugu sarraysa maxkamadaha Jamhuuriyaddda. Dastuurkii 1960 kii waxa kale oo uu tilmaamay in xeer[331] lagu soo saarayo qaabdhismeedka iyo awoodaha makamadaha. Xeerka Nidaamka Garsoorka ee 1962 wuxuu mideeyay Makamadaha dalka iyadoo la dhisay garsoor hannaan midaysan ah oo u qaabeysan sida soo socotaa[332]:

- Maxkamadaha Degmooyinka;
- Maxkamadda Gobollada;
- Maxkamadda Racfaanada; iyo
- Maxkmadda Sare.




Islamarkaasna, wuxuu dhisay xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud oo ka kooban xeer-ilaaliyaha guud iyo kuxigeenno[333].




[328] Cimibaaris laga jeediyey Shirweynaha Garsoorka 2023, Mogadisho Soomaaliya.
[329] Dastuurka Jamhuuriyadda Soomaaliya 1960, Qodobada 92-93
[330] Dastuurka 1960, Qodobka 94
[331] Dastuurka 1960, Qodobka 94(2)
[332] Xeerka Nidaamka Garsoorka oo soo baxay 12 June 1962 (Sharci Lr. 3), Qodobka 1aad
[333] Xeerka Nimaamka Garsoorka 1962, Qodobka 7aad

**Nimaadka Garsoorka iyo Marxaladdii Jamhuuriyaddii 2aad (1969-1991)**

Dastuurkii 1979 kii wuxuu dhisay nidaamka garsoor hannaan midaysan, qodobka 97[334] ayaa sidatan u qeexay "Garoorka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waa mid midaysan". Maxkamadaha uu dhisay Dastuurka 1979[335] waa Maxkamadda Sare, Maxkamadaha Rafcaanka, Maxkamadaha Gobollada[336], Maxkamadaha Degmooyinka, Guddiyada Garsoorka ee goobaha shaqada iyo Maxkamadaha Ciidammada Qalabka Sida. Dhinaca xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud wuxuu tilmaamay in Xafiisku uu ka kooban yahay Xeer-ilaaliyaha Guud iyo ku xigeenno Xeer-ilaaliye[337]. Sidoo kale, Qoqobka 109 ee Dastuurkii 1990 ay si cad ayuu u qeexay in Garsoorka Jamhuuriyaddu yahay mid midayasan, asagoo si too toos u qeexay in xafiiska Xeer-Ilaalinta guud uu yahay hay'ad garsoor oo midaysan[338].

**Nidaamkii Garsoorkaa iyo Jamhuuriyaddii 3aad (2000-2022)**

Muddo dheer oo aanay dawlad rasmi ah ka shaqaynin Soomaaliya kaddib, waxaa la dhisay dawladdii KMG ahayd ee lagu heshiiyey magaalada Carta ee dalka Jabbuuti. Axdi Qarameedkii lagu dhisay dawladda waxaa uu u gogol xaarey in la dhiso dawladda fedaraal ah[339]. Axdigii federaalka KMG ee dhisay Dawladdii Fadaraalka KMG ah wuxuu dhigay garsoor federaal KMG ah oo qaabdhismeedka maxkmadauhuu uu ka kooban yahay[340]:

- Maxkamadda Sare ee kumeelgaarka ah;
- Maxkamadda Racfaanka ee ku meel gaarka ah, iyo
- Maxkamadaha kale ee sharcigu dhiso.

Sidoo kale, waxa uu dhisay xafiiska xeer-ilaaliyaha guud in uu ka kooban yahay Xeer-ilaaliyaha Guud ee heer federaal iyo Xeer-ilaaliyeyaasha Dawlad Goboleedyada iyo degmooyinka[341]. Dastuurka KMG ah ee 2012 wuxuu qeexayaa dhismaha maxkamadaha saddex heer oo kala ah:

- Maxkamadda Dastuurka;
- Maxkamadaha heer Dawlad Federaal; iyo
- Maxkamadaha heerka dawladaha xubinta ka ah dawladda federaalka. Maxkamadda ugu sarraysa dalka ee heer federaal waa Maxkamadda Sare ee Federaalka, iyadoo dawladaha xubinta ka ah dawladda federaalka iyaguna yeelanayaan Maxkamad Sare ee heer dawladaha xubnaha ka ah federaalka oo iyaga u gaar ah.

---

[334] Dastuurka 1979, Qodobka 79aad
[335] Dastuurka 1979, Qodobka 100aad
[336] Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay baxay 2/8/1974(Sharci Lr.34), Qodobka 6aad
[337] Dastuurka 197, Qodoba 103aad, iyo Xeerka Nidaamka Garsoorka ee soo baxay baxay 2/8/1974(Sharci Lr.34), Qodobka 14
[338] Dastuurka 1990, Qodobka 112
[339] Axdigii KMG ah ee 2000, Qodobka 38(8)
[340] Axdiga Federaalka KMG ah ee 2004, Qodobka 60aad
[341] Axdigii 2004, Qodobka 64

Cutubka sagaalaad ee Dastuurka KMG ah si faahfaahsan uma qeexin qaabdhismeedka maxkamadaha iyadoo aan lagaba hadlin faahfaahin ku aaddan xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka. Sidoo kale, qodobka 120aad[342] ayaan sheegin in laanta gaarsoorka lagu nidaaminayo dastuurrada dawlad goboleedyada wuxuu tilmaamay in dhismaha laamaha sharcidejinta iyo fulinta ee maamullada dawladaha xubinta ka ah dawladda federaalka lagu nidaaminayo dastuurrada maamul goboleedyada. Soomaaliya waxa ay qaadatay nidaamka federaalka balse weli waxaa ka jira gaabis badan oo dhinaca qeexidda federalaynta hay'adaha dawladda sida Maxkamadaha iyo Xeer-ilaalinta.




- **Faqradda 1aad:** Faqraddan waxaa la baddelay nuxurkii asalka Dastuurka. Waxayna si fiican u kala qeexaysaa qaabdhismeedka Maxkamadda Dalka ee Nidaamka isku dhafka ah oo ku salaysan heshiiskii Hannaanka Federaalaynta Garsoorka oo la gaaray bishii Diseember 2022.

**Noocyada Hannaanka Federaalaynta Garsoorka**

Nidaamyada federaalaynta garsoorka waa ay kala duwan yihiin, waxaana jira saddex hannaan oo dalalka federaalka intooda badan ay kala adeegsadaan oo kala ah:[343] hannaanka garsoorka midaysan *(Unified Judicicary Structure)*, hannaaka isbar-bar socda *(Dual Judiciary Structure)*; iyo hannaaka isku dhafka ah *(Integrated Judiciary Structure)*. Ma jiro hannaan adduunku isku raacsan yahay in uu ka wanaagsan yahay kuwa kale, mana jiro hannaan la dhihi karo midkaan ayaa ku habboon dal walba, balse xaaladaha iyo duruufaha dalka ayaa kallifa in uu doorto nooca hannaan ee ugu habboon, ayadoo la eegayo arrimaha soo socda:

- Awoodaha maxkamadaha;
- Madaxbannaanida hay'adaha garsoorka;
- Maamulka hay'adaha garsoorka;
- Magacaabista garsooreyaasha iyo xeer-ilaaliyeyaasha;
- Mas'uuliyadda maaliyadeed ee garsoorka.

Cilmibaaristaani waxa ay soo bandhigaysaa saddexda hannaan sida ay u shaqeeyaan iyo qaar ka mid ah wadammada adeegsada, si aan u helno hannaanka ugu habboon dalka Soomaaliya.

[342] Dastuurka KMG ah, 2012
[343] Commentary on the 2012 Somali Provisional Constitution, Max Planc Foundation for International Peace and the Rule of law (MPFPR), June 2014-June 2016, bogga 140.

**Hannnaanka Garsoorka Midaysan** ***(Unified Judiciary System)***

Hannaankani wuxuu dhisayaa hay'ado garsoor midaysan oo awood u leh dhammaan in ay galaan dacwadaha ikhtisaas ka ay u leeyihiin ayadoo aan loo eegeyn xeer, deegaan iyo awood kale toona. Nidamakani wuxuu isku xirayaa maxkamadaha dhammaan heerarka oo la mid ah sida dalalka aan ahayn federaalka, wuxuuna la mid yahay nidaamkii soo jireenka ahaa ee Soomaaliya lahayd.




Qaabdhismeedka hannaanka maxkamdaha midaysan wuxuu ka koobnaanayaa, Maxkamadda Sare oo ahaaneysa maxkamadda ugu sarraysa oo cabasho loo qaadanayo aan ka ahayn arrimo dastuureed, Maxkamadaha Racfaanka (oo ku yaal magaalo madaxyada Dawlad Goboleedyada), iyo maxkamadaha darajada koowaad oo ka kooban maxkamadaha gobollada iyo degamooyinka.

⇒ ***Koonfur Afrika:*** waa dal leh hannaan federaal ah, wuxuuna adeegsadaa hannaanka garsoorka midaysan, wuxuu leeyahay Maxkamadda Dastuurka, Maxkmadda Sare ee arrimaha racfaanka aan ka ahayn arrimaha Dastuurka, Maxkamadda kore, maxkamadaha majistaraydyada iyo maxkamadaha kale ee dalka. Dhammaan garsooreyaasha *Koonfur Afrika* waxaa laga maamulaa lagana soo magacaabaa heer federaal[344].

Hannaankani midaysani aad buu u sahlan yahay oo si fudud loo fahmi karo, waana ka kharash yar yahay labada hannaan ee kale, waxaana si fudud loo fulinayaa dhammaan shuruucda iyo xeerarka kala duwan ee dalka. Wareesiyadii lala yeeshay dadka xog-ogaalka wuxuu tilmaamayaa in hannaanka garsoorka midaysan uusan ahayn mid ka shaqaynaya dalka Soomaaliya iyadoo la eegayo duruufaha, marxaladda siyaasadeed iyo dastuur ee dalku marayo.

**Hannaanka Is-barbar socda** ***(Dual Judiciary structure)***

Hannaankani wuxuu dhisayaa nidaam ah in dalku leeyahay laba heer maxkamadood taas oo ah in maxkamadaha federaalku ay galayaan shuruucda faderaalka halka maxkamadaha dawlad goboleedyadu ay galayaan shuruucda dawlad goboleedyada oo keliya. Xukuumadda Faderaalku waxa ay mas'uul ka tahay dhisidda iyo maamulka maxkamadaha federaalka, halka dawlad goboleedyadu ay ka mas'uul yihiin dhisidda iyo maamulka maxkamadaha dawlad goboleedyada oo keliya. Golaha Sare ee Garsoorka wuxuu maamulaya hay'adaha garsoorka ee heer federaal oo keliya, halka dawlad goboleed kastaa uu u baahan yahay in uu dhisto Gole Garsoor oo maamula hay'adahooda garsoor.

[344] Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 166aad

Waxa aad mooddaa in Dastuurka KMG ah[345] uu tan ku dhisay marka uu ka hadlayey si kooban maxkamadaha kala saaran ee saddex heer oo ah in Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ay leedahay Maxkamadda Sare iyo Maxkmad Dastuur halka ay dawlad goboleedka kasta yeelanayso Maxkamad Sare. Hannaankani waxaa adeegsada wadamo ay ka mid yihiin Maraykanka iyo Australia, Itoobiya, Argentina.

⇒ ***Dawladda Maraykanka:*** Dalka Maraykanku wuxuu leeyahay laba Maxkamadood oo ah heer federaal iyo heer dawlad goboleed ah. Sida ka muuqata jaantuska kore, heer federal waxaa ka jira maxkamadda sare, maxkamadaha racfaanka iyo maxkamdaha hoose, waxa ayna awood u leeyihiin dacwadaha federaalka ah ayagoo adeegsanaya xeerarka iyo shuruucda federaalka ah. Dhinaca kale, dawlad goboleeyadu waxa ay leeyihiin maxkamad sare, maxkamadaha racfaanka iyo maxkamadaha hoose, waxayna awood u leeyhiin garsooridda dacwadaha xeerarka heer dawlad goboleed.

Inkastoo hannaankani uu leeyahay faa'iidooyinka ay ka mid tahay in uu yareenayo khilaafaadka awoodeed (ikhtisaas) ee fulinta shuruucda iyo waliba maamulidda hay'adaha garsoorka oo uu heer kasta maamulanayo garooreyaashiisa. Hase yeeshee, wuxuu leeyahay cillado badan oo ay ka mid tahay in loo baahanayo dhaqaale iyo howlwadeenno aad u badan, wuxuuna abuuri kara khilaaf iyo tartan u dhexeeya maxkamadaha heer federaal iyo heer dawlad goboleed maaddaama ay weli wada dabaqayaan shuruucdii dalka oo aan weli la federaalayn. Tusaale ahaan, dawladda federaalka waxa ay yeelanaysaa maxkamado iyo xafiisyo xeer ilaalin oo heer federaal iyo kuwo heer dawlad goboleed ah, taas oo macnaheedu yahay in la helo garsooreyaal, xeer-ilaaliyeyaal iyo hawlwadeeno kale oo ka hawlgala dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka oo dhan, intaas oo ay sii dheer tahay in dawlad goboleed kasta ay leedahay garsooreyaal, xeer-ilaaliyeyaal iyo hawlwadeeno ka hawlgala dhammaan gobollada iyo dagmooyinka dawlad goboleedka.







[345] Dastuurka Federaakha KMG ah,2012, Qodobka 108aad

**Hannaanka Isku dhafka ah *(Integrated Judiciary System)***

Hannaankani wuxuu abuuarayaa nidaam dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyadu ay ku wadaagayaan garsoorka, taas oo ka dhigan in maxkamadaha hoose ay awood u leeyihiin in ay galaan dhammaan dacwadaha federaalka iyo kuwa dawladaha xubnaha ka ah dawladda federaalka ah, ayagoo adeegsanaya xeerarka dawladda federaalka ah iyo xeerarka dawlad goboleedkaba, dalkuna waxaa uu yeelanaya Maxkamad Sare oo loo soo qaato racfaanada la xiriira dacwadaha federaalka.

Ujeeddada hannaankani waa in la helo mas'uuliyado ay wadaagayaan Xukuumadda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyada oo la xiriira maamulka garsoorka iyadoo uu jirayo hal nidaam garsoor oo keliya kaas oo maxkamadaha siinaya awoodo cad iyo habka loo qaadanayo rafcaanka. Nidaamkaan waxaa adeegsada wadamo ay ka mid yihiin Nigeria, Canada, Germany iyo India.

- ⇒ ***Dalka Jarmalka,*** Dawladda Fadaraalku waxa ay maamushaa maxkmadaha heer federaal sida Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare, halka dawlad goboleedyadu ay maamulaan maxkamadaha hoose oo ay ka mid yihiin Maxkamadaha Racfaanka[346].

**Hannaanka Garsoorka ee ku Habboon Soomaaliya**

Dalka Soomaaliya in uu doorto nooca ugu habboon garsoor waa in la tixgaliyaa xaaladda siyaasadeed, dhaqaale, amni iyo sharci ee dalku ku jiro. Si loo helo hannaanka ugu habboon ee garsoor, waxaa halkaan ku soo bandhigaynaa heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran ee 2022 iyo Heshiiskii Jowhar 2018, Mawqifkii XFS 2018 iyo soojeedintii guddiyada Dastuurka, ayadoo la soo koobayo nuxurkooda iyo weliba soojeedintooda.

**Heshiiskii Jowhar**

Muddo dheer kaddib oo aan weli la federalayn garsoorka dalka, dawladda federaalka iyo dawlad goboleedyadu waxa ay heshiis ku gaareen magaalada Jowhar 2018, heshiiskaas oo nuxurkiisu ahaa[347]:

Heshiisku wuxuu qeexay in nooca ugu habboon Soomaaliya uu yahay hannaanka isku dhafka ah, taas oo ahayd arrinta ugu muhiimsan ee kasoo baxday heshiiskii Jowhar. Heshiisku wuxuu dhisay qaabdhismeed ah in dalku yeelanayo hal Maxkamad Dastuur, Maxkamad Sare ee heer federal, Maxkamad Sare ee dawlad goboleed, Maxkamadaha Racfaanka iyo Maxkmadaha Darajooyinka Kowaad. Maxkamadaha Gobolka Banaadir waxa ay ahaanayaan sida hadda ay yihiin ilaa inta go'aan laga gaarayo maqaamka caasimadda.

---

[346] Commentary on the 2012 Somali Provisional Constitution, Max Planck Foundation for International Peace and the Rule of law (MPFPR), June 2014-June 2016, bogga 141.

[347] Heshiiska Siyaasadeed ee Hannaanka Caddaaladda iyo Asluubta Soomaaliya ee lagu gaaray Magaalo Madaxda Jowhar ee Dawlad Goboleedka Hirshabeelle, 23-24 Janaayo 2018 (Heshiiska Jowhar)

Heshiisku wuxu abuuray laba Gole garsoor oo gooni kala ah heer federaal iyo heer dawlad goboleed. Heshiisku wuxuu dhisayey laba xafiis Xeer-ilaalin oo heer federaal iyo heer dawlad goboleed, ayadoo Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranku uu xafiisyo ku yeelanayo dawlad goboleedyada asagoo mas'uul ka ah dhammaan dacwadaha federaalka ah.

Heshiiska Jowhar waxaa ku xayndaaban cillado farsamo iyo mid sharci oo la xiriira fulintiisa oo ay ka mid tahay in heshiis farayey dhisidda laba gole maamul oo isbarbarsocda, ayadoo garsooraha maxkamahada hoose ay awood u leeyihiin in ay galaan dacwacdaha federaalka iyo kuwo dawlad goboleed balse maamulka iyo magacaabista hay'adaha garsoorka wuxuu ka dhigaya mid mugdi badan ka jiro.

**Mawqifka XFS ee Hannaanka Garsoorka 2018**

Cilladahaas soo baxay dartood ee fulinta heshiiskii Jowhar waxa ay kalliftay in golaha wasiirrada 6dii bishii Agoosto 2018 ay soo saareen Mawqifika XFS ee Hannaanka Gasrsoorka, ayadoo goluhu uu xoojiyey in hannaanka ugu habboon Soomaaliya uu yahay midka isku dhafka ah. Goluhu wuxuu ku sameeyay heshiiskii Jowhar wax-kabaddel ay ka mid yihiin[348]:

a) In dalku leeyahay Hal Maxkamad Dastuur.

b) In qaabdhismeedka maxkamaduhu uu noqdo hal maxkamad sare oo heer federaal ah, maxkamadaha racfaanka heer dawlad goboleed oo ah maxkamadda ugu sarraysa ee heer dawlad goboleed, maxkamadaha gobollada iyo degmooyinka.

c) In la dhiso hal Gole Adeeg Garsoor oo maamulaya hay'adaha garsoorka ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed, halka heshiiskii Jowhar uu dhisay laba gole adeeg garsoor oo kala ah heer federaal iyo heer dawlad goboleed.

**Soojeedintii Guddiyadii Dib-u-eegista Dastuurka:**
Guddiga La Socodka ee Dib-u-eegista Dastuurka iyo Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka waxa ay soojeediyeen arrimaha soo socda[349]:

a) Hannaanka Isku Dhafka ah ayaa ah nooca ugu habboon dalka.
b) Qaab-dhismeedka Maxkamadaha oo loo nidaamiyay Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadda Sare ee Federaalka, Maxkamadaha Sare ee Dowlad Goboleedka iyo Maxkamadaha Hoose oo gelaya dacwadaha heer kasta.
c) Golaha Sare ee Garsoorka oo ah hal gole oo ay ka mid yihiin Guddoomiyeyaasha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dowlad Goboleedyada iyo xubno kale oo ka socda bulsaha iyo ururka Qareennada.

[348] Mawqifka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya eek u aaddan Heshiiska Jowhar ee soo baxay 2018.
[349] Warbixintii Guddiyada Dastuurka ee 2021.

**Heshiiskii Golaha Wadatashiga Qaran**

Madaxda Golaha Wadatashiga Qaran (GWQ) wuxuu gaaray Heshiiska Hannaanka Federaalaynta Garsoorka 28 December 2022. Heshiiskan oo ah kii ugu muhiimsanaa ee garsoorka wuxuu ka koobanyahay arrimaha soo socda[350]:

a) Nidaamka garsoorka dalku wuxuu noqonayaa hannaanka isku-dhafka oo ah mid isku xiraya garsoorka dalka.
b) Qaabdhismeedka maxkamadaha oo loo nidaamiyay Maxkamadda Sare ee Federaalka, Maxkamadda Dastuurka, Maxkamadaha Sare ee Dawlad Goboleedka, Maxkamadaha Racfaanka iyo maxkamadaha darajada 1aad oo gelaya dacwadaha heer kasta.
c) Golaha Sare ee Garsoorka oo ah hal gole oo ka kooban in ka badan 22 xubnood, oo ay ka mid yihiin Guddoomiyeyaasha Maxkamadda Sare, Maxkamadda Dastuurka, Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Guddoomiyeyaasha Maxkamadaha Sare ee Dawlad Goboleedyada iyo xubno kale oo ka socda bulsaha iyo ururka Qareennada.

**Nooca ugu habbnoon Dalka Soomaaliya**

Kaddib wareesiyadii iyo fallaanqeyntii dukumentiyada muhiimka ah, waxaan u aragnaa in nooca garsoorka isku dhafka ah uu yahay midka ugu habboon Soomaaliya sababahan awgood:

a) Heshiiskii Jowhar ee u dhexeyey XFS iyo DXDF, mawqifkii XFS ee 2018 iyo soojeedintii guddiyadii dib-u-eegista Dastuurka waxa ay dhammaan soojeediyeen in la qaato hannaanka garsoorka isku-dhafka ah.

b) Dhaqangelinta iyo hirgelinta shuruucda dalka hadda jira oo ay sahlan tahay in ay maxkamadaha ku dabbaqaan si fudud dhammaan deegaannada dalka.

c) Beekhaaminta dhaqaale iyo yaraynta culaysyada maaliyadeed ee ku dhici kara labada heer ee dawladnimo, iyadoo la eegayo xaalladda dhaqaale ee dalka oo ay Soomaaliya tahay dal sabool ah, loomana baahnaanayo in la dhiso maxkamado cusub oo waxa hawlgalayaa maxkamadaha hadda jira.

d) Hannaankani wuxuu meesha ka sarayaa khilaaf iyo tartan u dhexeeya hay'adaha garsoorka, ayagoo awood u leh in ay dabbaqaan xeerarka federaalka iyo kuwo dawlad goboleedyada.

e) Hannaanka maamul oo wadaagga oo leh isla xisaabtan iyo korjoogtayn.

[350] Heshiiska Hannaanka Federaalaynta Garsoorka ee 2022.

**Natiijada Latashiyada:**




- **Faqradda 2aad:** Waa faqrad cusub oo reebaysa in la dhiso maxkamado gaar ah sharci la'aan.

***Qodobka 109aad ee asalka Dastuurka waa la tiray*** maaddaama si faahfaahsan loogu nidaamiyay howlqabadka maxkamadaha qodobbada soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka ee soo socda. Sidoo kale, qodobbadaas waxaa lagu tilmaamay awoodda iyo ikhtisaaska maxkamad kasta heer federaal iyo heer dawlad goboleedba.

***Qodobka 109A ee asalka Dastuurka*** waxaa loo raray Qodobka 149aad ee isla cutubkan oo dhisaya Golaha Sare ee Garsoorka.

## Qodobka 134aad: Maxkamadda Sare ee Federaalka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Garsoorka, wuxuuna faahfaahinayaa awoodda iyo ikhtisaaska Maxkamadda Sare ee Federaalka, wuxuuna ka koobanyahay sideed (8) faqradood oo dhammaantood cusub.

- **Faqradda 1aad:** waa faqrad cusub oo tilmaamaysa in Maxkamadda Sare ee federaalka ay awooddeeda gaarsiisan tahay dhammaan geyiga Soomaaliya.

- **Faqradda 2aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysa in maxkamadda sare xarunteedu tahay magaalada Muqdisho, balse fadhiyadeeda ay ku qabsan karto meel kasta oo ka mid ah dalka.

- **Farqadda 3aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysa in maxkamadda sare ee federaalku u xilsaaran tahay xaqiijinta ku dhaqanka sharciga, iyo hubinta in xeerarka si midaysan loo dhaqangeliyo.

- **Faqradda 4aad:** waa faqrad cusub oo siinaysa maxkamadda sare awoodda soo saaridda hageyaal, habraacyo awaamiir iyo tafsiir sharci.

- **Faqaradda 5aad:** waa faqrad cusub oo xeerinaysaa in go'aannada maxkamadda sare ee federaalka yihiin kamadambays, ayna khasab tahay in loo hoggaansamo.

- **Faqradda 6aad:** waa faqrad cusub waxayna xeerinaysaa in Maxkamadda Sare ka koobantahay Guddoomiyaha iyo siddeed garsoore..

- **Faqradda 7aad:** waa faqrad cusub oo faahfaahinaysaa awoodaha iyo ikhtisaaska ay Maxkamadda Sare ee Federaalka.

- **Faqradda 8aad**: waa faqrad cusub oo nidaaminaysaa awoodaha rafcaan ee maxkamadda sare ee federaalka. Waxayna leedahay ikhtisaaska racfaannada laga soo qaato xukunnada iyo go'aannada maxkamadaha kore ee arrimaha dacwadaha federaaliga ah iyo arrimaha la xiriira dacwadaha taabanaya xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ee aadamaha iyo dacwadaha ganacsi ee dabeecad caalami leh iyo kuwa qiimahoodu aadka u sarreeyo.

***Qodobka 109B ee asalka Dastuurka*** waxaa loo raray Qodobka 135aad ee isla cutubkan oo lagu dhisay Maxkamadda Dastuurka.

## Qodobka 135aad: Maxkamadda Dastuurka

Qodobka 135aad ee soojeedinta wax-kabeddelka Dastuurka waa Qodobbada 109B iyo 109C ee asalka Dastuurka oo la isku daray.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub waxayna xeerinaysaa aasaasidda Maxkamadda Dastuurka oo xarunteedu noqonayso Muqdisho, kana kooban Guddoomiye iyo afar (4) garsoore.

- **Faqradda 2aad:** Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 1aad waxaa lagu sameeyay dib-usiiqayn.

    - ***Xarafka (a)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo toosin, waxaayna xeerinaysaa fasiraadda Dastuurka Federaalka, Dastuurrada dawlad goboleedyada iyo xeerarka kale ee dalka.

    - ***Xarafka (b)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo toosin, waxayna xeerinaysaa dhagaysiga iyo go'aan ka gaarista murannada u dhexeeya hay'adaha dawladda;

    - ***Xarafka (c)*** waxaa lagu sameeyay siiqayn iyo toosin, waxayna xeerinaysaa dib-u-eegista iyo go'aan ka gaarista waafaqsanaanta dastuuriga ah ee hindisa xeereedka la soojeediyay

    - ***Xafarka (d)*** waxaa lagu sameeyay toosin, waxaana lagu xeeriyay go'aan ka gaaridda xadgudubyada xuquuqaha iyo xorriyadaha Dastuurka ee muwaaddinka;

- *Xarafka (e)* waa mid cusub oo xeerinaysa go'aan ka gaaridda dacwadaha la xiriira Dastuurka ee looga soo gudbiyay maxkamadaha kale;

- *Xarafka (f)* waa mid cusub oo xeerinaya burinta xeerarka iyo go'aannada maamul ee aan waafaqsanayn shareecada Islaamka iyo Dastuurka;

- *Xarafka (g)* waa mid cusub oo xeerinaya hubinta ansaxnimada hannaanka wax-kabeddelka Dastuurka, aftida dadweynaha iyo ku dhawaaqidda natiijada aftida;

- *Xarfka (h)* ee soojeedinta oo asalka Dastuurka ahaa xarafka (e) waxaana laga tiray "iyo waajibaadka ay kala leeyihiin"

- *Xarafka (i)* waa mid cusub oo xeerinaysa awoodaha kale ee ku xusan Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo xeerarka kale ee dalka.

- **Faqradda 3aad:** Faqraddan oo asalka Dastuurka ahayd faqradda 2aad waxaa lagu sameeyay siiqayn, iyadoo loo qoray hab ka kooban sidii hore nuxurkiina aan waxba laga tagin.

**Dhismaha Maxkamadda Dastuurka**

Dastuurku waa sharciga ugu sarreeya oo ay muhiim tahay in xeerarka iyo shuruucda dal ay waafaqsan yihiin. Haddaba, doodda yaa awood u leh in uu buriyo ama qaado dacwadaha Dastuurka waxaa jira laba hannaan oo dalalku ay kala adeegsadan. Tan kowaad oo ah hannaanka awooddu leedahay hal maxkamad waxaana loo yaqaan *(Centralised/European model)* oo macnaheedu yahay in awoodda dacwadaha Dastuurka la xiriir ay leedahay oo keliya hal maxkamad oo ah tan ugu sarraysa[351]. Tan labaad oo ah hannaanka baahsan *(Decentralised model)*, waana in dhammaan maxkamadaha ay wood u leeyihiin in ay dhagaystaan dacawadaha Dastuurka, ayadoo ay jirayso racfaan looga qaadanayo maxkamdda ka sarraysa.[352] Sidoo kale, dalalka federaalka ah intooda badan waxa ay leeyihiin maxkamad sare oo awood u leh in ay qaaddo dhammaan dacwadaha Dastuurka iyo kuwo kalaba, halka dalalka qaar ay leeyihiin Maxkamad Dastuur oo gooni ah, ayadoo ay jirto maxkamad sare oo aan awood u laheyn arrimaha Dastuurka sida Koonfur Afrika.

Dastuurkii 1960kii wuxuu dhisayey Maxkamad Sare oo leh awoodda garsooridda dacwada Dastuurka ayadoo isku baddelaysa Maxkamad Dastuur[353], iyadoo lagu soo darayo xubno dheeraad ah. Dastuurkii 1979 kii wuxuu dhisayay Maxkamad Dastuur oo xubnaheedu ka kooban yihiin Garsooreyaasha Maxkamadda Sare oo ay kaabayaan xubno dheeraad oo uu magacaabayo Madaxweynuhu[354]. Dastuurkii 1990 kii wuxuu dhisayey Maxkamad Sare oo isu baddelaysa Maxkamad Dastuur oo lagu soo kaabayo xubno dheeraad ah[355]. Axdigii

[351] Noocaan waxaa aad u adeegsadan dalalka Yurub iyo wadamo kale
[352] Nidaamkan waxaa adeegsada Maraykanka iyo dalalka xiriirka taariikhiga ah la leh hannaaka sharci ee loo yaqaan (Anglo-American legal tradition), marka laga reebo dalal uu ka mid yahay Koonfur Afrika oo leh Maxkamad Dastuurka oo gaarh ah.
[353] Dastuurka Soomaaliya (1960), Qodobbada 98aad iyo 99aad
[354] Dastuurka Soomaaliya (1979), Qodobka 107aad
[355] Dastuurka Soomaaliya (1990), Qodobka 114aad

Federaalka KMG ah wuxuu awood dhammaystiran u siiyay Maxkamadda Sare dhegaysiga iyo go'aan ka gaarista khilaaf kasta oo saameynaya Axdiga Federalka Ku-meelgaarka ah iyo shuruucda kale[356]. Shareecada ka sokow, Dastuurka JFS waa sharciga dalka ugu sarreeya, dastuurada DXDF iyo xeerarka kale oo dhan waxaa khasab ah in ay waafaqsan yihiin, haddii kale waa waxba kama jiraan[357]. Markii ugu horreesay taariikhda Soomaaliya, Dastuurka KMG ahi ayaa si buuxda u faray asaasidda Maxkamada Dastuurka oo gaar ah asagoo qeexay xubnaheeda iyo awoodaheeda, balse ilaa hadda lama dhisin sababo badan awgood oo ay ka mid yihiin mid siyaasadeed, sharci iyo dhaqaalaba[358].

**Dhisidda Maxkamadda Dastuurka ee ku habboon Soomaaliya.**

Maaddaama cilmibaaristani ay soojeedisay in hannaanka ugu habboon uu yahay nooca isku dhafka ah, taas macnaheedu yahay in dhammaan dacwadaha heer dawlad goboleed ku dhammaanayaan dawlad goboleedka ay khuseyso, halka dacwadaha heer federaal oo kooban ay u soo gudbayaan Maxkamadda Sare ee DFS.Cilmibaaristani waxa ay soojeedinaysaa in Maxkamadda Sare ee DFS lagu daro awoodaha dacwadaha Dastuurka loona baahneen dhisidda Maxkamad Dastuur sababahan hoos ku xusan[359].

1) Dhismaha Maxkamad cusub oo dastuur oo aan shaqo badan qabaneyn waxa uu keeni karaa culays dhaqaale, sharci iyo farsamo;
2) Dacwadaha badankoodu waxa ay ka bilaaban doonaan kuna dhammaan doonaan DXDF, taas oo ka dhigan in dacwado kooban oo federaal in racfaan loogu qaadanayo Maxkamadda Sare ee heer Federaal;
3) Taariikhdii soojireenka ahayd ee Soomaaliya oo dhammaan dastuuradii iyo Axdiyadii waxa ay qeexeen Maxkamadda Sare oo awood u leh dhammaan dacwadaha Dastuurka, ayagoo ku kala duwan sida loo soo magacaabayo xubnaha ku soo biiraya Maxkakmadda sare kolka ay isku baddalayso Maxkmad Dastuur.
4) Dalalka federaalka intooda badan waxa ay leeyihiin Maxkamad Sare oo keli ah oo awood u leh dacwadaha dastuuriga iyo kuwa aan ahayba. Tusaale, Ethiopia, Nigeria, India, Pakistan, Brazil, Mexico, USA, Canada, Australia iyo Switzerland, dhammaan dalalkan oo ah kuwo federaal ah, waxa ay leeyihiin maxkamado ka garsoora nooc kasta oo dacwad oo sharcigu awood u siiyay oo ku jiraan kuwa dastuuriga ahi.

[356] Axdigii Federaalka KMG, Qodobka 60aad
[357] Dastuurka Soomaaliya (2012), Qodobka 4aad.
[358] Dastuurka Soomaaliya (2012), Qodobka 109(B)
[359] Dhismaha Garsoor Federaal ah oo ay khuburo sharci diyaariyeen, 2022.

## Natiijada Latashiyada:




## Qodobka 136aad: Maxkamadaha Kore

Qodobkan waa mid cusub oo xeerinaya Maxkamad Kore oo ay yeelanayaan dawlad goboleedyada, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa in dawlad golobeed kasta yeelanayo Maxkamad Kore oo xarunteedu tahay caasimadda dawlad goboleedka, waxayna noqonaysaa hay'adda garsoor ee ugu sarraysa dawlad goboleedkaas.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo xeerinaysa ikhtisaaska Maxkadda Kore ee dawlad goboleedka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo lagu nidaamin doonaa garsoorka caasimadda qaabka uu noqonayo.

## Qodobka 137aad: Maxkamadda Racfaanka ee Dawlad Goboleedka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahayn hal (1) faqrad oo tilmaamaysa awoodda Maxkamadaha Rafcaanka ee Dawlad Golbeedyada.

## Qodobka 138aad: Maxkamadaha Darajada Kowaad

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahayn hal (1) faqrad oo lagu dhisay heshiiskii "Hannaanka Federaalaynta Garsoorka" oo Golaha Wadatashiga Qaranka gaareen 2022, oo lagu qaatay nidaamka garsoorka isku dhafan, taas macnaheedu yihiin in maxkmadaha darajada koowaad ay leeyihiin ikhtisaas federaali ah iyo mid heer dawlad goboleed ah.

## Qodobka 139aad: Garsoorka Ciidammada

Qodobkan waa mid cusub oo ka kooban hal (1) isla markaana xeerinaya in Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya uu soo saarayo xeer gaar ah oo lagu nidaaminayo garsoorka ciidammada.

## Qodobka 140aad: Habraaca Magacaabista Garsooreyaasha iyo Kaaliyeyaasha

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay afar (4) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa habraaca lagu magacaabayo guddoomiyaasha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa magacaabidda garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Maxkamadda Dastuurka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa habraaca loo marayo magacaabidda guddoomiyayaasha Maxkamadda Kore ee Dawlad Gololeedyada.

- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in Golaha Sare ee Garsoorka uu magacaayo garsooreyaasha kale.

## Qodobka 141aad: Dhaarta Garsoorka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay afar (4) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa habraaca lagu dhaarinayo Guddomiyayaasha Maxkamadda Sare, Maxkamadda Dastuuriga iyo cidda goobjoogga ka noqonaysa xilliga ka dhaarinayo.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa dhammaan garsoorayaasha kale in lagu hor dhaarinayo Guddoomiyaha Garsoorka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa dhammaan garsoorayaasha kale in lagu hor dhaarinayo Madaxweynaha Garsoorka.

- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa dhaarta ay marayaan saraakiisha garsoorka dhammaantood inta ayna hawlgelin, waxa ay marayaan dhaartan

Aniga oo ah_______________________________________________________________,
waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan si daacad ah u guto waajibaadkayga; dhawrana una hoggaansamo Dastuurka iyo xeerarka dalka; inaan u fuliyo xilkayga si madax-bannaan oo dhexdhexaad ah; go'aannadaydana ku gaaro si aan lahayn cabsi, eex, siyaaasad, nin-jeclaysi ama saamayn kale; iyo inaan ku shaqeeyo danaha caddaaladda

iyo sarraynta sharciga oo keliya, ilaaliyana sharafta, hufnaanta iyo madaxbannaanida garsoorka dalka.

## Qodobka 142aad: Muddada Xil Haynta iyo Da'da Hawlgabka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa da'da saraakiisha garsoorku ku geli karaan hawlgabnimo.
- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa xilliga hawlgabnimada ee Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Garsoorayaasha Maxkamadda Sare iyo Guddoomiyayaasha Maxkamadaha Kore ee Dawlad Goboleedyada.
- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa muddada xilhaynta ee guddoomiyaha iyo garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka.

## Qodobka 143aad: Xilwaayidda Garsooraha

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay sagaal (9) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa xilwaayidda garsooraha.
- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa halka ay ka bilaaban karto xil ka qaadista garsooraha.
- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in cabashada laga gudbinayo garsooraha ay noqoto mid qoraal ah oo xeer iyo xaqiiq ku qotonta.
- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo faahfaahinaysaa habraaca cabashada ka dhanka ah saraakiisaha garsoorka iyada oo kala saaraysa marka cabashadu khusayso guddoomiyayaasha maxkamadaha iyo markii ay ku aaddan tahay garsoorayaasha kale.
- **Faqradda 5aad:** waa mid cusub oo waajibinaysaa in garsooraha shaqo joojinta lagu sameeyay helayo xuquuqdiisa ilaa go'aan kamadambays ah laga gaarayo.
- **Faqradda 6aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in go'aanka daahid la'aan iyadoo la raacayo habraaca guddiga iyo xeerarka khuseeya arrrinka.
- **Faqradda 7aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in madaxweynaha iyo goluhuba ay go'aankooda ku salaynayaan talada guddiga, talooyinkoodaha hirgelinayaan.
- **Faqradda 8aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in garsooraha go'aanka golugu saameeyey in ay furan tahay rafcaan uu u qaadan karo Maxkamadda Sare ee dalka.

- **Faqradda 9aad:** waa mid cusub oo sharraxaysaa marka uu dhaqangalayo go'aanka golaha.

## Madaxa Saddexaad: Xeer-Ilaalinta Guud

Madaxan waa mid cusub wuxuu  xeerinayaa dhismaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka.

## Qodobka 144aad: Dhismaha Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub dhisaysa Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo faahfaahinaysaa inta uu ka koobanyahay Xaafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee labada heer dawladeed.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa xarunta  Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo awoodda in uu xarumo shaqo ku yeelan karo meel kasta oo dalka kamid ah.

## Qodobka 145aad: Magacaabista iyo Xil Ka Qaadsita Xubnaha Xafiiska Xeer-ilaalinta

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa habraaca magacaabista iyo xilwaayidda Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in magacaabista, xil ka qaadista iyo dhaartaba in loo marayo habraac lamid ah kan garsoorayaasha Maxkamadda Dastuurka iyo Maxkamadda Sare ee Federaalka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo lagu nidamiyey habraaca loo marayo magacaabidda xeer-ilaaliyayaasha Dawlad Goboleedyada iyo wakiilladooda.

## Qodobka 146aad: Madaxbannaanida Xafiiska Xeer-ilaalinta

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa madaxbannaanida Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee hawlaha maamul iyomaaliyadeed.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud madaxbannanyahay oo uu u hoggaansmayo keliya Dastuurka xeerarka dalka.

## Qodobka 147aad: Xilka iyo Awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Guud ee Qaranka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay afar (4) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud mas'uuliyad ka saarantahay ilaalinta sharciga iyo difaacidda xuquuqda shacabka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo lagu xeeriyay awoodaha xafiiska xeer-ilaaliyaha guud.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo lagu xeeriyay mas'uuliyadda Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in Xeer-ilaaliyuhu soo saari karo xeer-nidaamiyeyaal.

## Qodobka 148aad: Awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Dawlad Goboleedka.

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa awoodaha Xafiiska Xeer-ilaalinta Dawlad goboleedyada.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka uu igman karo xeer-ilaaliyeyaasha dawlad goboleedka oogista dawadaha ciqaabta ee federaalka.

## Madaxa Afaraad: Maamulka Garsoorka

Madaxan waa mid cusub wuxuu dhisaya Golaha Sare ee Garsoorka oo ah hay'adda nidaaminayo Maamulka Garsoorka.

**Cilmibaaris: Maamulka Garsoorka: Golaha Sare ee Garsoorka**

Maamulka Garsoorka ee dalalka adduunka qaar waxaa maamula Golaha Adeegga Garsoorka sida Sudan[360], qaar kalana waxaa maamula maxkamada ugu sareysa ee dalka sida Uganda[361], ama hay'adada fulinta sida Koonfur Afrika[362].

Inta badan Dastuuradii iyo Axdiyadii Soomaaliya yeelatay iyo dastuurrada Somaliland[363], Puntland[364], Jubbaland[365], Hirshabeelle[366], Koonfur Galbeed[367] iyo Galmudug[368], Golaha Sare ee Garsoorka ayaa leh awoodda maamulka ee Garsoorka.

Dhisidda Gole Sare ee Garsoor oo ka madaxbannaan awoodaha laanta sharcidejinta, laanta fullinta iyo hay'ad kasta oo kale wuxuu laf-dhabar u yahay xaqiijinta garsoor leh dhex-dhexaadnimo, hufnaan, madaxbannaani iyo isla-xisaabtan. Goluhu wuxuu masu'uul ka yahay maamulka hay'adaha garsoorka oo ay ka mid yihiin shaqo qorista, ruqseynta iyo dallacsiinta xubnaha garsoorka.

Dalalku waa ku kala duwan yihiin dhismaha golaha garsoorka. Dalalka qaar waxa ay leeyihiin hal gole garsoor halka qaar kale ay leeyihiin laba gole garsoor ee labada heer ah, ayagoo hadba ku saleeynaya nooca hannaan garsoor ee dalkaas doortay sida hannaanka garsoorka midaysan, kan isku dhafka ah iyo kan is-bar-bar socda. Sidoo kale, dalalku waxa ay ku kala duwan yihiin meelaha ay ka kala imaanayaan xubnaha golaha.

Dastuurka Dawladda Talyaaniga[369] wuxuu dhisayaa Golaha Sare ee Garsoorka oo ka kooban: seddex ku imaanaya xafiisyo oo kala ah Madaxweynaha Talyaaniga, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka, halka 2/3 xubnuhu ay ka imaanayaan hay'adaha garsoorka oo iska dhex dooranaya, halka barlamanaaka labadiisa aqal ay si wadajir ah u dooranayo 1/3 ee Golaha oo ka imaanaya bareyaal sharci iyo qareenno leh 15 sano oo khibrad ah.

⇒ **Koofur Afrika,** Golaha Sare ee Garsoorku wuxuu kooban yahay[370]:
- Garoorka oo ay ka imaanayaan Guddooomiyaha Maxkamadda Dastuurka, Guddoomiyaha Maxkamadda Sare iyo hal Guddoomiye Maxkamadeed.
- Aqalka 1aad ee barlamaanku wuxuu u xilsaarayaa lix ka mid ah xildhibannada oo ay seddex ka mid ah yihiin mucaaradka, halka Aqalka 2aad uu u xilsaaranayo afar xubood oo aqaalkiisa ka mid ah.

360 Dastuurka Suudan ee 2005
361 Dastuurka Uganda, Qodobka 128 iyo 133
362 Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 178
363 Dastuurka Somaliland, qodobka 108
364 Dastuurka Puntland, Qodobbada 101-102
365 Dastuurka Jubaland, Qodobbada 60,61 iyo 72
366 Dastuurka Hirshabeelle, Qodobka 61
367 Dastuurka Koofur Galbeed, Qodobka 70(1)
368 Dastuurka Galmudug, Qodobka 79
369 Dastuurka Dawladda Talyaaniga, Qodobka 104
370 Dastuurka Koonfur Afrika, Qodobka 178

- Kadib soojeedinta ururada qareennnada iyo sharci yaqaannada, madaxweynuhu wuxuu magacaabaya labo qareen, laba sharci yaqaan iyo hal bare sare ee sharciyada ah.
- Madaxweynaha Koonfur Afrika wuxuu magaabayaa afar xubnood oo dheerad ah kadib marka uu la tashado hogaanka xisbiyada mucaaradka ah.

⇒ **Golaha Sare ee Garsoorka Soomaaliya,** Xeerka Nidaamka Garsoorka wuxuu dhisayaa Gole Sare ee ka kooban: Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ahna Gudoomiyaha Golaha, Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka, Xubnaha Maxkamadda Sare, 3 xubnood oo ay soo doortaan barlamaanku[371].




**Dastuurka KMG** ah wuxuu farayaa dhisidda Golaha Adeegga Garsoorka oo maamulaya hay'adaha garsoorka ee heer federaal kana kooban sagaal xubnood sida ka ka muuqata jaantuskan hoose[372]:

[371] Xeerka Nidaamka Garsoorka, 1962, Qodobdada 27 iyo 28
[372] Eeg qodobada 119(A), 111(a) ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobada 5 iyo 6 ee Sharciga Dhisida Golaha Adeegga Garsoorka




⇒ Golaha uu dhisay Dastuurka iyo sharciga lagu dhisay golaha ma ahan mid ku habboon dalka Soomaaliya marka la eego xubnaha uu ka kooban yahay oo ay ku jiraan laba garsoore oo keliya[373], iyo awoodaha la siiyayba. Intaas waxaa dheer, waxaa jira mugdi ku aaddan kaalinta uu ku leeyahay maamulidda garsoorka, sida ku cad qodobada 119(A), 111(a) ee Dastuurka KMG ah. Dhanka kale, Heshiiskii Jowhar wuxuu soojeediyey dhisidda laba gole ee labada heer dawladnimo, taas oo ka hor imaanaysa hannaanka la isku raacay ee ah nooca isku dhafka ah ee garsoorka.

## Qodobka 149aad: Dhisidda Golaha Sare ee Garsoorka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub dhisaysa Golaha Sare ee Garsoorka; iyo
- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa madaxabannaanida Golaha.

## Qodobka 150aad: Xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay saddex (3) faqradood.

[373] Inta badan dalalku xubnaha Golaha Garsoorku waxa ay ka yimaaddaan garsoorka. Tusaale, Dalka Kenya (eeg Qodobka 171), hay'adaha Garsoorka waxaa ka yimid lix asagoo Goluhu uu ka kooban yahay 11 xubnood, sidoo kale, Dalka Talyaaniga: 2/3 ee Golaha waxa ay ka yimaadeen hay'adaha Garsoorka.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka, waxayna ku dhisantahay Heshiiskii Hannaanka Federaalaynta Garsoorka oo Golaha Wadatashiga Qaran gaareen 2022.

## Natiijada Latashiyada:




- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in Guddoomiyaha Maxkamadda Sare uu yahay Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in Goluhu yeelanayo xeer-hoosaad ugaar ah oo aan ka hor imaanayn Dastuurka iyo Xeeraka Dalka.

**Qodobka 151aad: Shuruudaha iyo Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka**

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay laba (2) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa shuruudaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka.

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo qeexaysa awoodaha Guddoomiyaha Golaha Sare ee Garsoorka.

## Qodobka 152aad: Waajibaadka Golaha Sare ee Garsoorka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay hal (1) faqrad oo qeexayaa waajibaadka Golaha Sare ee Garsoorka, waxaana laga soo qaatay heshiiska Hannaanka Federaalaynta Garsoorka ee 28kii Diseembar 2022.

## Qodobka 153aad: Sanduuqa Garsoorka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay shan (5) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa dhismaha sanduuqa garsoorka oo aad ugu muhiim ugu ah Garsoorka. Inta badan, dalalka caalamka waxay xaqiijiyaan madaxabannaanida garsoorka gaar ahaan maaliyaddiisa, sidaas darteed waxaa la dhisa Sanduuq Garsoorka. *(Best Practice from most of the EAC countries countries including Kenya and Uganda).*

- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysaa in sanduuq loo adeegsanayo oo keliya kharashaadka maamul ee garsoorka.

- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo qeexaysaa diyaarinta miisaaniyadda Garsoorka iyo ugudbinta Goleyaasha Baarlamanka.

- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa in Sanduuq Garsoorka lagu shubayaa qoondada garsoorka.

- **Faqradda 5aad:** waa mid cusub waxayna tilmaamaysa in Xeer Baarlamaanka Federaalka soo saaro lagu faahfaahinayo maamulka Sanduuq Garsoorka..

**Cilmibaaris: Sanduuqa Garsoorka**

⇒ **Dastuurka Ciraaq**[374], wuxuu si toos ah u tilmaamayaa in Garsoorku leeyahay sanduuq garsoor oo uu Golaha Sare ee Garsoorku soo diyaarinayo miiasaaniyadda Garsoorka, una gudbinayo Baarlamaanka.

⇒ **Dastuurka Kenya**[375]**:** wuxuu xeerinaya dhisidda Sanduuq Garsoorka oo Golaha Sare ee Garsoorka u diyaarinayo miisaaniyadda Garsoorka loona gudbinayo Baarlamaanka, kadibna lagu shubo qoondada garsoorka Sanduuqa.

⇒ **Dastuurka Uganda**[376]**,** wuxuu qeexayaa si loo helo madaxbannaanida garsoorka in la dhiso Sanduuq Garsoorka oo Golaha Sare ee Garsoorka oo laga bixinayo dhammaan kharashaadka Garsoorka.

⇒ **Dastuurka Ghana**[377]**,** wuxuu sheegaya ahmiyadda madaxabnaanida garsoorka iyo sido kale madaxbannanida maaliyadeed ee Gasoorka oo si gaar ah ugu madaxabananaanadaan kharashaad garsoorka.

---

[374] Qodobka 91aad ee Dastuurka Ciraaq (2005)
[375] Qodobka 173 ee Dastuurka Kenya (2010)
[376] Qodobka 128 ee Dastuurka Uganda (1995)
[377] Qodobka 127 ee Dastuurka Ghana

## Qodobka 154aad: Fadhiyada Golaha Sare ee Garsoorka

Qodobkan waa mid cusub oo lagu soo kordhiyay cutubka 9aad ee Dastuurka, wuxuuna ka koobanyahay shan (5) faqradood.

- **Faqradda 1aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa in xubnaha Golaha Sare ee Garsoorka ay shirayaa 3 biloodba halmar.
- **Faqradda 2aad:** waa mid cusub waxayna qeexaysaa in Guddoomiyhu uu shirka iskuhu yeeri karo, haddii u maqanyahayna waxaa isugu yeeri karo Guddoomiye kuxigeenka.
- **Faqradda 3aad:** waa mid cusub oo tilmaamaysa kooramka fadhiyada Golaha oo ah kala bar.
- **Faqradda 4aad:** waa mid cusub oo qeexaysaa xarunta shirka Golaha.
- **Faqradda 5aad:** waa mid cusub oo xeerinaysaa codaynta golaha iyo habka go'aanka lagu gaarayo.

## Jaantuska 5aad: Natiijooyinka Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubka 9aad

Qodobbada cutubka sagaalaad waxaa lagu sameeyay siiqayn, qaabayn, toosin, ku daris, dhimis iyo wax-kabeddel xagga nuxur axkaamta ah. Waxaa la soo kordhiyay labaatan iyo qodob (20) iyo sideetan (80) faqradood; halka la tiray saddex (3) qodob.



## JADWALKA 2A: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLADDA FEDERAALKA

1) Ilaalinta iyo difaaca Dastuurka Qaranka.
2) Ilaalinta midnimada dalka iyo madaxbannaanidiisa.
3) Aftida Dastuurka Qaranka.
4) Arrimaha dibadda iyo xiriirrada dublomaasiyadeed ee caalamiga.
5) Axdiyada Caalamiga ah iyo heshiisyada laba dhinaclaha ah ee lala galayo dowladaha iyo hay'adaha caalamiga ah.
6) Arrimaha jinsiyadda iyo socdaalka.
7) Siyaasadda ilaalinta Diinta iyo Awqaafta.
8) Ilaalinta xuquuqda iyo xurriyadaha uu Dastuurku Federaalka dammaanad qaaday.
9) Diiwaangelinta iyo Aqoonsiga Qaran ee Dadweynaha.
10) Siyaasadda diiwaangelinta dhalashada, dhimashada, guurka iyo furiinka.
11) Siyaasadda guud Arrimaha Xisbiyada iyo doorashooyinka dalka.
12) Maamulka doorashooyinka (hal guddi oo maamula doorashooyinka seddaxda heer).
13) Siyaasadda qaran ee arrimaha dhulka, badda iyo hawada.
14) Ilaalinta xuduudaha dhulka, badda iyo hawada.
15) Diiwaangelinta iyo ilaalinta xuquuqda hal-abuurka *(Copy right)*.
16) Shaqaalaha rayidka ee heer federal.
17) Siyaasadda qaran ee mihnadleyaasha iyo ruqsadahooda. Dhaqaalaha.
18) Halbeegyada la xiriira cabiraadda iyo miisaanka.
19) Qorshaha qaran ee horumarinta dhaqaalaha.
20) Siyaasadda lacagta.
21) Go'aaminta ilaha dakhliga, soosaarista canshuuro ugaar ah DFS iyo dajinta, ansixinta iyo maamulidda miisaaniyadda guud ee Federaalka.
22) Istatistikada Qaranka.
23) Wabiyada isku xiraya laba DXDF ama ka badan ama ka imaanaya dibadda xudduudaha gayiga qaranka.
24) Siyaasadda iyo shuruucda ganacsiga dibadda.
25) Maalgashiga Caalamiga.
26) Siyaasadda guud ee tamarta iyo biyaha.
27) Dekadaha iyo garoomada diyaaradaha caalamiga.
28) Waddooyinka isku xira labo DXDF ama ka badan.
29) Siyaasadda gaadiidka dhulka, badda iyo cirka.
30) Maamulka duulista hawada iyo gaadiidka badda.
31) Boostada, Koodka Soomaaliya ee (252), Koodka Internet-ka *(.SO)*, astaynta mowjadaha maqal iyo maqal-aragga, Siyaasadda Ammaanka Internet-ka *(Cyber Security)*, ilaalinta xogta *(Data protection)* iyo siyaasadda isgaarsiinta iyo warfaafinta.
32) Difaaca Qaranka iyo Cidanka Xoogga Dalka.
33) Dhisidda Boliis Federaal ah iyo Sirdoonka Qaranka.
34) Soo celinta amniga iyo xasilloonida marka DXDF ay la soo gudboonaadaan qalalaase ka baxsan awooddooda marka ay DF iyo DXDF ay khuseyso ka heshiiyaan.
35) Habraacyada nidaamiya hubka fudud iyo saanadda ee gaarka loo leeyahay.
36) Golaha Sare ee Garsoorka, Maxkamadda Sare ee federaalka, Maxkamadda Dastuurka iyo xeer-ilaalinta guud ee qaranka.
37) Maxkamadda ciidamada galabka-sida ee heer federaal.
38) Siyaasadda qaran ee caafimaadka.

39) Siyaasadda tayadhawrka agabka, dawooyinka iyo cuntada.
40) Arrimaha qaxootiga, magangeliyo doonka iyo barakacayaasha.
41) Siyaasadda daryeelka bulshada.
42) Nidaaminta iyo maamulka xarumaha qaran sida:
    a) Matxafyada.
    b) Maktabadaha.
    c) Tiyaatarrada iyo garoomada ciyaaraha.
43) Siyaasadda qaran ee waxbarshada dalka, hannaanka dejinta manhajka iyo imtixaannada shahaaddada dugsiga sare.
44) Siyaasadda qaran ee tacliinta sare, tiknoolijiyada iyo hay'adaha cilmibaarista.

## JADWALKA 2B: AWOODAHA WADAAGGA AH

1) La-dagaallanka nabaadguurka, ilaalinta deegaanka iyo duurjoogta
2) Arrimaha shaqaalaha dawladda iyo shagaalaha gaarka ah.
3) Horumarinta iyo kobcinta awoodaha maamullada dowladaha hoose.
4) Warfaafinta.
5) Gargaarka iyo maaraynta musiibooyinka.
6) Ilaalinta ilaha iyo kaydka biyaha.
7) Horumarinta xannaanada xoolaha.
8) Qorshaha horumarineed ee waxbarashada iyo illaalinta tayadeeda.
9) Arrimaha kheyraadka dabiiciga ah.
10) Arrimaha dalxiiska.
11) Goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah ee qaranka
12) Beeraha iyo waraabka.
13) Kalluumaysiga iyo khayraadka badda.
14) Nidaaminta ganacsiga u dhexeeya DXDF.
15) Ka hortagga faldambiyeedyada abaabulan.
16) Arrimaha Xabsiyada.
17) Tallaalka iyo ka hortagga cudurrada faafa
18) Ilaalinta tayada iyo korjoogtaynta adeegyada caafimaadka.
19) Tayaynta kuliyadaha caafimaadka, iskuullada kalkaaliyayaasha iyo xirfadleyda caafimaadka.
20) Arrimaha daryeelka qoyska iyo dadka baahiyaha gaarka ah qabo.

## JADWALKA 2C: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLAD GOBOLEEDKA

1) Soo saaridda iyo ku dhaqanka dastuur iyo shuruuc u gaar ah DXDF oo aan ka hor imaanayn Dastuurka iyo Shuruucda Federaalka.
2) Maamulka doorashooyinka heer DXDF iyo heer deegaan (hal guddi oo maamula doorashooyinka seddaxda heer)
3) Dejinta siyaasad dhuleed ee DXDF.
4) Hirgelinta istiraatiijiyadaha gargaarka iyo maaraynta musiibooyinka.
5) Taabbagelinta siyaasadda dowladaha hoose
6) Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta reer miyiga.
7) Soo-saarista iyo hirgelinta shuruucda shaqaalaha rayidka DXDF.
8) Diyaarinta iyo hirgelinta qorshaha horumarinta dhaqaalaha ee DXDF
9) Qorsheynta iyo hirgelinta mashaariicda horumarineed ee DXDF

10) Ururinta canshuuraha iyo ilaha dakhliga gaarka u ah DXDF
11) Diyaarinta iyo maamulidda miisaaniyadda DXDF
12) Diiwaangelinta shirkadaha ka shaqeeya DXDF.
13) Taaba-gelinta siyaasadda beeraha, waraabka iyo cilmibaarista.
14) Garoomada diyaaradaha ee maxalliga.
15) Diiwaangelinta iyo bixinta taarkada iyo ruqsadda gadiidka
16) Rugsadda gaari wadista.
17) Dhisidda iyo dayactirka waddooyinka DXDF.
18) Maamulka warfaafinta iyo isgaarsiinta DXDF.
19) Dhisidda iyo maamulidda ciidanka booliska DXDF/daraawiishta
20) Dhisidda, tayaynta iyo tababarka ciidanka ilaalada deegaanka
21) Maxkamadda Sare, Maxkamadda Racfaanka iyo Maxkamadda Darajada Kowaad ee DXDF, iyo xafiiska Xeer-ilaalinta DXDF.
22) Nidaaminta iyo korjoogtaynta isbitaallada iyo goobaha caafimaad
23) Nidaaminta iyo maamulka xarumaha DXDF sida:
    a. Maktabadaha,
    b. Matxafyada,
    c. Beeraha Nasashada,
    d. Xarumaha hiddaha dhaqanka,
    e. Dalxiiska iyo xeebaha.
    f. Tiyaatarrada iyo Garoomada ciyaaraha
24) Taabbagelinta siyaasadda gaxootiga, magangeliyo doonka iyo barakacayaasha.
25) Bixinta adeegyada tamarta iyo biyah.
26) Siyaasadaha DXDF ee diiwaangelinta dhalashada, dhimashada iyo guurka iyo bixinta warqadaha aqoonsiga.
27) Qorshaha horumarineed iyo baahinta waxbarashada dugsiyada hoose, dhexe iyo sare.
28) Imtixaanaadka iyo shahaaddada dugsiyada hoose/ dhexe.
29) Maamulidda dugsiyada sare iyo macaahidda farsamada gacanta.

## JADWALKA 2D: AWOODAHA U GAARKA AH DAWLADAHA HOOSE

1) Isku-duwidda iyo habsami u socodka howlaha maamulka degmada.
2) Naqshadaynta degmada, ruqsadaha dhul bixinta iyo dhismooyinka.
3) Qorsheynta iyo fulinta mashaariicda horumarinta dhaqaalaha Degmada.
4) Dhawrista deegaanka.
5) Maamulka goobaha iyo astaamaha taariikhiga ah e degmada
6) Horumarinta dalxiiska.
7) Uruurinta canshuuraha iyo ilaha dakhliga gaarka u ah Dowladaha Hoose.
8) Bixinta shatiyada goobaha ganaciga.
9) Suuqyada iyo kawaannada.
10) Kalluumeysiga maxalliga.
11) Nidaaminta iskaashatooyinka.
12) Nidaaminta gaadiidka dadweynaha.
13) Dhisidda, dayactirka iyo iftiiminta waddooyinka.
14) Maamulidda amniga iyo xasiloonida Degmada.
15) Ilaalinta anshaxa iyo asluub wanaagga dadweynaha.
16) Kobcinta daryeelka caafimaadka asaasiga ah.
17) Horumarinta Isbitaallada hooyada iyo dhallaanka.

18) Goobaha adeegyada caafimaadka sida farmashiyada iyo adeegga ambalasyada.
19) Nadaafadda iyo fayadhowrka deegaanka sida qashinka, wasakhda iyo sunta IWM
20) Kormeerka tayada cuntada, hoteelada, maqaayadaha iyo guryaha dadweynaha.
21) Nidaaminta Xabaalaha.
22) Adeegyada xannaanada xoolaha
23) Horumarinta iyo tayaynta arrimaha dab-demiska
24) Korjoogtaynta adeegyada korontada iyo biyaha
25) Horumarinta dhalinyarada iyo Isboortiga
26) Maamulka arrimaha dhaqanka, beeraha nasashada iyo xeebaha.
27) Arrimaha daryeelka qoyska iyo dadka baahiyaha gaarka qabo
28) Diiwaangelinta dhalashada, dhimashada, guurka, furiinka iyo bixinta waraagaha sugnaanta dhalashada.
29) Taakuleynta qaxootiga iyo barakacayaasha si waafaqsan shuruucda dalka.
30) Maamulka waxbarashada ee dugsiyada hoose, dhexe lyo sare
31) Waxbarashada dadka waawayn.
32) Fulinta Siyaasadda Dhiirigelinta waxbarashada Islaamka ee asaasiga ah sida dugsiyada qur'aanka iyo masaajidda.

GMDHD

ICRIC